Agoosto 5, 2025 Doorashada Hordhaca iyo Gaarka ah

## Degmada King

# Buug-yaraha Rasmiga ah ee Codbixiyeyaasha Deegaanka

codeyn!

Warqaddaada codbixinta waxay imaan doontaa ugu dambeyn Julaay 21

206-296-VOTE (8683) | kingcounty.gov/elections

King County Elections

codeyn!

# Warqad ka socota Agaasimaha



Codbixiyeyaasha iyo Asxaabta Qaaliga ah,

Xagaa Farxad Leh! Taasi micnaheedu waxay tahay maalmo dheer, qorax iyo wakhtigii codeynta! Sannadkan, waxaad dooran doontaa wakiillo ku aaddan xafiisyada maxalliga ah sida degmada iyo golaha magaalada, guddiyada dugsiga, iyo guddiyada degmada dab-damiska. Xafiisyadan ayaa qaabeeya bulshadeena - go'aamada ku saabsan dugsiyada, jardiinooyinka, guryaha, gaadiidka dadweynaha iyo waddooyinka, maktabadaha, isbitaalada, iyo waxyaabo kale oo badan ayaa lagu sameeyaa halkan heerka maxalliga ah.

Waxaa jira musharaxiin badan oo u tartamaaya inay idinku matalaan xafiisyadan. Waxay noqon kartaa mid culus inaad ogaato cidda u tartamaysa iyo halka ay taagan yihiin marka loo eego aragtidooda. Meesha ugu fiican ee laga bilaabo waa halkan – eeg dhammaan waxa ku jira buug-yarahaan oo akhri bayaannada ay qoreen musharaxiinta laftooda.

Tani waa fursaddaada inaad isticmaasho mid ka mid ah aaladaha ugu aasaasiga ah ee ku jira sanduuqaaga aaladaha dimuqraadiyadda – codkaaga. Akhriso. Buuxi goobaabinta ee dookhaaga ah. Soo celi warqaddaada codbixinta ugu dambeyn Agoosto 5-da. Iska dhig mid la maqlo.

Haddii aad u baahan tahay caawinaad, kooxda Doorashooyinka ayaa adiga halkan kuu jooga. Naga soo wac lambarka 206-296-VOTE (8683) ama iimeel noogu soo dir ciwaanka elections@kingcounty.gov.

Codeyn wacan,




Julie Wise

*Fiiro Gaar ah. Nala wadaag sawirkaaga codeynta barta @kcelections!*



**Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawino!**




206-296-VOTE (8683)
1-800-325-6165
TTY Relay: 711

elections@kingcounty.gov

kingcounty.gov/elections

**Uma codeyn doontid wax walba oo ku jira buug-yarahaan codbixiyeyaasha. Ka eeg warqaddaada codbixinta tartannada iyo cabbirrada sharciga.**

# Mawduucyada


### Macluumaadka Guud

Is diiwaan geli si aad u codeyso ..... 4
Qof Walba Codkiisa Waa Muhiim ..... 5
Sida loo codeeyo ..... 6
Xarumaha codbixinta ..... 7
Goobaha sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ..... 8
Safarka Warqadda Codbixinta ..... 10
Raad-raac warqaddaada codbixinta ..... 11
Waajibaadyada xafiisyada ee doorashadan ..... 12
Hantidhawrada iyo Ilaalinta Tayada ..... 14
Khariiradda Degmooyinka Sharci Dejinta ee 2024 ..... 15
Khariiradda Degmooyinka Golaha Degmada King ee 2022 ..... 24

### Gobolka

Degmada Sharci Dejinta Lr. 33 ..... 16
Degmada Sharci Dejinta Lr. 34 ..... 19

### Degmada

Degmada King ..... 20
Golaha Degmada Lr. 5 ..... 25
Golaha Degmada Lr. 7 ..... 28

### Magaalooyinka

Magaalada Auburn ..... 30
Magaalada Burien ..... 33
Magaalada Federal Way ..... 36
Magaalada Kent ..... 38
Magaalada Lake Forest Park ..... 42
Magaalada Milton ..... 43
Magaalada Renton ..... 45
Magaalada Seatac ..... 47
Magaalada Seattle ..... 50
Magaalada Tukwila ..... 63

### Dugsiyada

Degmada Dugsiga Highline Lr. 401 ..... 65
Degmada Dugsiga Kent Lr. 415 ..... 67
Degmada Dugsiga Northshore Lr. 417 ..... 71
Degmada Dugsiga Seattle Lr. 1 ..... 77
Degmada Dugsiga Tukwila Lr. 406 ..... 85

### Degmada Ujeeddada Gaarka

Degmada Biyaha iyo Bullaacadda ee Lakehaven ..... 86

### Cabbirrada Sharciga

Degmada King ..... 90
Magaalada Seattle ..... 92
Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412 ..... 94
Degmada Isbitaalka Dadweynaha Lr. 2 ..... 96

### Tusmada Musharaxa

Tusmada Musharaxa ..... 107


## Ka Bilow Deegaanka!

**Codkaaga wuxuu muhiim u yahay bulshadaada.**



Sannadaha tirada kisiga ah, codbixiyeyaasha Degmada King sida adigoo kale ah waxay sameeyaan dookhooda ku saabsan doorashooyinka maxalliga ah. Eeg Bogga 12 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan doorarka kala duwan ee ku jira warqadda codbixinta doorashadaan.

**Musharaxiinta u tartamaaya xafiis gaar ah waxay yeelan doonaan astaanta Waajibaadka Xafiiska oo ku kor taal bayaanka musharaxa.**



1

## Yaa is diiwaan gelin kara?

**Si aad isku diiwaan geliso oo aad uga codeyso Washington, waa inaad tahay:**

- Muwaadin Mareykan ah,
- Degane sharci ahaan ku nool gobolka Washington,
- Ugu yaraan 18 sanno jir ah maalinta doorashada,*
- Aan laga mamnuucin codeynta amar maxkamad awgeed,
- Qof aan lagu haynin xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington xukun dambi-weyn oo ka dhacay Washington awgeed iyo,
- Aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federaal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa.




*Haddii aad tahay 16 ama 17 jir, waxaad isku diiwaan gelin kartaa kan **Codbixiyaha Mustaqbalka** ahaan oo si toos ah ayaa laguu diiwaan gelinayaa oo aad u helaysaa warqad codbixin marka aad u qalanto.

2

## Sidee baan isku diiwaan geliyaa?

### Oonleenka

Booqo **VoteWA.gov** si aad oonleenka isaga diiwaan geliso. Is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashadaan Hordhaca ayaa la heli karaa ilaa iyo **Julaay 28**.

### Boostada

Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta **kce.wiki/VoterReg**. Boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Doorashooyinka Degmada King waa inay foomka **helaan** ugu dambeyn **Julaay 28**.

### Shakhsi ahaan

Shakhsi ahaan isaga diiwaan geli Xarunta Codbixinta ilaa iyo 8 p.m. Maalinta Doorashada, Agoosto 5. Ka hel saacadaha iyo goobaha Xarunta Codbixinta Bogga 7, iyo barta **kingcounty.gov/elections**



## Booqo Xarunta Codbixinta

**Codbixiyeyaasha u baahan caawinaadda waxay isticmaali karaan cutubka codeynta ee la heli karo si ay uga caawiyaan inay ku codeeyaan si qarsoodi ah oo sugan. Shaqaalaha Xarunta Codbixinta ayaa diyaar ah inay:**

- diiwaan geliyaan codbixiyeyaasha cusub,
- cusboonaysiiyaan macluumaadka codbixiyeyaasha hore u jira,
- daabacaan warqad codbixin beddelaad ah iyo bakhshadda soo celinta,
- ka jawaabaan su'aalo.

# Qof Walba Codkiisa Waa Muhiim



Haddii aad maxkamad u sugayso si laguu xukumo, xabsi ugu jirto xukun dambi-yar awgeed, ama aadan hadda xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn awgeed, **waad codeyn kartaa.**



## 1. Is diiwaan geli.

Iska diiwaan geli oonleenka halka **VoteWA.gov** si aad u codeyso ama ka wac Doorashooyinka Degmada King taleefanka **206-296-VOTE (8683)** si aad u codsato foomka diiwaan gelinta codbixiyaha. Buuxi foomka oo boostada ugu dir **King County Elections, 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057.**

**!** **Xuquuqdaada codeynta ayaa si toos ah laguugu soo celinayaa markii aad dhammaysato xukunkaaga xabsiga, laakiin waa inaad is diiwaan gelisaa!**



## 2. Hel warqaddaada codbixinta.

Waxaad ciwaanka xarunta xabsiga u qoran kartaa sida ciwaankaaga boostada ahaan, ama qof aad jeceshahay ayaa sidoo kale kuu soo gudbin kara warqaddaada codbixinta.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka warqaddaada codbixinta, naga soo wac taleefanka **206-296-VOTE (8683)**. Waxaan la shaqeyn doonaa adiga iyo xarunta xabsiga si aan warqaddaada codbixinta kuu siino.




## 3. Soo celi warqaddaada codbixinta.

Uma baahnid istaambo si aad warqaddaada codbixinta u soo celiso. Waxaa loo baahan yahay inay lahaato shaabadda boostada oo ah Maalinta Doorashada ama ka hor, sidaa darteed waxaan kugula talinaynaa inaad u codeyso sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah si aad u xaqiijiso inay gaarto boostada wakhtigii loogu talagalay oo loogu dhufto shaabadda boostada.

Doorashooyinka Degmada King  ayaa halkan u jooga in ay ku caawiyaan. Naga soo wac 206-296-VOTE (8683) inta u dhexeysa 8:30 a.m. iyo 4:30 p.m., Isniin ilaa iyo Jimco. Waxaan aqbalnaa wicitaannada ka yimaada xarunta xabsiga iyo shaqaalaha ayaa loo tababaray inay caawiyaan dhammaan codbixiyeyaasha.

# Sida loo codeeyo!

1. Akhri bayaannada ku qoran buug-yarahaan ee ku saabsan tartannada aad u codeynayso.

2. Buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga adigoo isticmaalaaya qalin midab kasta ah.

3. Saxiix bakhshaddaada. Saxiixaagu waa inuu u dhigmo saxiixa aan ku hayno diiwaankaaga diiwaan gelinta codbixiyaha si warqaddaada codbixinta loo tiriyo.

4. Warqaddaada codbixinta wakhti hore soo celi. Haddii aad isticmaalayso sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti hore codeey.

5. Raad-raac warqaddaada codbixinta. Booqo kce.wiki/TrackMyBallot ama isku qor helitaanka digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/BallotAlert. Kuwani waa hababka ugu wanaagsan ee lagu ogaado in warqaddaada codbixinta la tiriyay oo codkaaga la maqlay.

## Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (OBMP) waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan. Waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, gaar ahaan kuwa indhooleyaasha ah ama uu araggoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadaystaan.

### Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag halka **kingcounty.gov/elections/obmp.**
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Oonleenka ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay,

AMA

- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah loo calaamadeeyay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, halka sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada.

Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacayso warqaddaada codbixinta.

**Haddii aad u baahan tahay caawinaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan la xiriir xafiiskeena halka 206-296-VOTE (8683).**

## Booqo Xarun Codbixin si aad u hesho caawinaad shakhsi ahaan ah

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa diyaar u ah inay kaa caawiyaan is diiwaan gelinta si aad u codeeyso oo aad u hesho warqad codbixin ilaa iyo Maalinta Doorashada. Shaqaalo tababaran iyo qalab gaar ah ayaa diyaar u ah si loo caawiyo codbixiyeyaasha naafada ah in ay dhiibtaan warqad codbixin qarsoon, oo madax banaan.

<table>
<tr><th colspan="2">Goobaha</th><th>Saacadaha Shaqada</th></tr>
<tr><td>Renton</td><td>Doorashooyinka Degmada King<br>919 SW Grady Way, 98057</td><td>Maalmaha shaqada, Julaay 16 – 25,<br>8:30 a.m. – 4:30 p.m.<br><br>Maalmaha shaqada, Julaay 28 – Agoosto 1,<br>8:30 a.m. – 6:00 p.m.<br><br>Sabti, Agoosto 2,<br>10:00 a.m. – 4:00 p.m.<br><br>Isniin, Agoosto 4,<br>8:30 a.m. – 6:00 p.m.<br><br>Maalinta Doorashada, Agoosto 5,<br>8:30 a.m. – 8:00 p.m.</td></tr>
<tr><td>Bellevue</td><td>Xarunta Bulshada ee Crossroads<br>16000 NE 10th St, 98008</td><td rowspan="5">Sabti, Agoosto 2,<br>10:00 a.m. – 4:00 p.m.<br><br>Isniin, Agoosto 4,<br>8:30 a.m. – 6:00 p.m.<br><br>Maalinta Doorashada, Agoosto 5<br>8:30 a.m. – 8:00 p.m.</td></tr>
<tr><td>Federal Way</td><td>Federal Way City Hall (Aqalka Magaalada)<br>33325 8th Ave S, 98003</td></tr>
<tr><td>Kenmore</td><td>Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada)<br>18120 68th Ave NE, 98028</td></tr>
<tr><td>Kent</td><td>Kambaska Green River College ee Kent<br>417 Ramsay Way Ste 112, 98032</td></tr>
<tr><td>Seattle</td><td>Xarunta Dhacdada ee Lumen Field / Tiyaatarka WAMU<br>800 Occidental Ave S, 98134<br><br>Ku yaal Xarunta Dhacdada ee Lumen Field ee uuna gelitaankeedu yahay Occidental Ave S iyo S Royal Brougham Way.</td></tr>
</table>

Dhammaan baarkinnada Xarumaha Codbixinta waa bilaash MARKA LAGA REEBO Xarunta Dhacdada ee Lumen Field /Tiyaatarka WAMU.

Booqo **kce.wiki/sanduuqyada** si aad u hesho liiska dhammaan sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta ee la heli karo doorashadaan. Dhammaan sanduuqyada lagu rido waxay xirmaan markay tahay 8 p.m. oo gaw ah Maalinta Doorashada.

**Auburn**

Maktabadda Auburn, 1102 Auburn Way S, 98002
Auburn Park & Ride, 101 15th St NE, 98001
Xarunta Bulshada Muckleshoot, 17432 SE 392nd St, 98092

**Bellevue**

Maktabadda Bellevue, 1111 110th Ave NE, 98004
Xarunta Ganacsiga ee Crossroads (albaabka koonfurta), 15600 NE 8th St, 98008
Maktabadda Newport Way, 14250 SE Newport Way, 98006
* North Bellevue Community Center (Xarunta Bulshada ee Waqooyiga Bellevue), 4063 148th Ave NE, 98007

**Black Diamond**

Maktabadda Black Diamond, 24707 Roberts Dr, 98010

**Bothell**

Maktabadda Bothell, 18215 98th Ave NE, 98011
*Sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ee hore u yaalay halka Aqalka Magaalada Bothell ayaa waxaa loo guuriyay Maktabadda Bothell.*
University of Washington - Dhismaheeda Bothell (u dhaw Xarunta Hawlaha & Madadaalada), 18220 Campus Way NE, 98011

**Burien**

Maktabadda Boulevard Park, 12015 Roseberg Ave S, 98168
Fagaaraha Magaalada Burien (geeska 5th Ave SW iyo SW 152nd St), 480 SW 152nd St, 98166

**Carnation**

Maktabadda Carnation, 4804 Tolt Ave, 98014

**Covington**

Maktabadda Covington, 27100 164th Ave SE, 98042

**Des Moines**

* Highline College (albaabka laga soo galo ee ka soo horjeeda 27th Ave), 2400 S 240th St, 98198

**Duvall**

* Duvall Police Department (Waaxda Booliiska Magaalada Duvall) - Jardiinka Depot, 26225 NE Burhen Way, 98019

**Enumclaw**

Maktabadda Enumclaw, 1700 1st St, 98022

**Fall City**

Maktabadda Fall City, 33415 SE 42nd Pl, 98024

**Federal Way**

Maktabadda Federal Way 320th, 848 S 320th St, 98003
Federal Way City Hall (Aqalka Magaalada Federal Way), 33325 8th Ave S, 98003
* Safeway – Star Lake, 28810 Military Rd S, 98003

**Issaquah**

Issaquah City Hall (Aqalka Magaalada Issaquah), 130 E Sunset Way, 98027

**Kenmore**

Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada Kenmore), 18120 68th Ave NE, 98028

**Kent**

Maktabadda Kent Panther Lake, 20500 108th Ave SE, 98031
Kent YMCA, 10828 SE 248th St, 98030
Regional Justice Center (Xarunta Caddaalad Goboleedka) u dhaw albaabka laga galo baarkinka, 401 4th Ave N, 98032

**Kirkland**

Maktabadda Kingsgate, 12315 NE 143rd St, 98034
Kirkland City Hall (Aqalka Magaalada Kirkland), 123 5th Ave, 98033

**Lake Forest Park**

Lake Forest Park City Hall (Aqalka Magaalada Lake Forest Park), 17425 Ballinger Way NE, 98155

**Maple Valley**

Suuqa Cuntada Hobart, 20250 276th Ave SE, 98038
* Dhismaha Degmada Dugsiga Tahoma, 25720 Maple Valley-Black Diamond Rd SE, 98038

**Mercer Island**

Mercer Island Community & Event Center (Xarunta Bulshada & Dhacdada Mercer Island), 8236 SE 24th St, 98040

**Newcastle**

Newcastle City Hall (Aqalka Magaalada Newcastle), 12835 Newcastle Way, 98056

**Normandy Park**

Normandy Park Towne Center (Fagaaraha Magaalada Normandy Park), 19901 1st Ave S, 98148

**North Bend**

Maktabadda North Bend, 115 E 4th St, 98045

**Pacific**

Maktabadda Algona-Pacific, 255 Ellingson Rd, 98047

**Redmond**

* Redmond City Hall (Aqalka Magaalada Redmond), 15670 NE 85th St, 98052
* Redmond Community Center at Marymoor Village (Xarunta Bulshada ee Redmond ee Xaafadda Marymoor), 6505 176th Ave NE, 98052
* Redmond Ridge Park & Ride (Corner of NE Cedar Park Cres and Redmond Ridge Drive NE) 98053

**Renton**

Maktabadda Fairwood, 17009 140th Ave SE, 98058
* Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, 98057
* Powell Avenue, 725 Powell Ave SW, 98057
  *Sanduuqa warqadda codbixinta wuxuu yaalaa goob laba baloog u jirta Doorashooyinka Degmada King si fudud ayaana lagu tagi karaa wakhtiyada uu taraafik jaamka jiro.*
* Xarunta Caafimaadka Dadweynaha Renton, 3201 NE 7th St, 98056

**Sammamish**

Sammamish City Hall (Aqalka Magaalada Sammamish), 801 228th Ave SE, 98075
CUSUB South Sammamish Park & Ride, 3015 228th Ave SE, 98075

### SeaTac

Angle Lake Transit Station (Saldhiga Gaadiidka ee Angle Lake), 19955 28th Ave S, 98188

Maktabadda Valley View, 17850 Military Rd S, 98188

### Shoreline

Maktabadda Shoreline, 345 NE 175th St, 98155

Shoreline Park & Ride, 18821 Aurora Ave N, 98133

### Snoqualmie

Maktabadda Snoqualmie, 7824 Center Blvd SE, 98065

### Tukwila

* Tukwila Community Center (Xarunta Bulshada Tukwila), 12424 42nd Ave S, 98168

Tukwila Justice Center, 15005 Tukwila International Blvd, 98188

### Vashon

Maktabadda Vashon, 17210 Vashon Hwy SW, 98070

### Woodinville

Woodinville City Hall (Aqalka Magaalada Woodinville), 17301 133rd Ave NE, 98072

Maktabadda Woodinville, 17105 Avondale Rd NE, 98072

## Sanduuqyada Seattle

### Ballard

Ballard Branch Library, Geeska NW 57th St and 22nd Ave NW, 98107

### Beacon Hill

Maktabadda Beacon Hill, 2821 Beacon Ave S, 98144

Kambaska Xaafadda NewHolly, 7054 32nd Ave S, 98118

### Broadview/Greenwood

Maktabadda Broadview, 12755 Greenwood Ave N, 98133

### Bryn Mawr-Skyway

Maktabadda Skyway, 12601 76th Ave S, 98178

### Capitol Hill

Seattle Central College (geeska waqooyi bari ee Broadway-Edison Building), 1701 Broadway, 98122

### Central District

Garfield Community Center (Xarunta Bulshada Garfield), 2323 E Cherry St, 98122

CUSUB 12th & Cherry, 1223 E Cherry St, 98122

### Chinatown/International District

Uwajimaya, 713 6th Ave S, 98104

### Columbia City

Rainier Community Center (Xarunta Bulshada Rainier), 4600 38th Ave S, 98118

### Crown Hill

Safeway – Crown Hill, 8340 15th Ave NW, 98117

### Downtown

Sanduuqa King Street (Kingdome Deli horteeda), Geeska 2nd Ave S iyo S King St, 98104

### Fremont/Wallingford

Waterway 19 Park (ku dhegan Jardiinka Gas Works), 2119 N Northlake Way, 98103

### Green Lake/Phinney

Green Lake Community Center (Xarunta Bulshada Green Lake), 7201 E Green Lake Dr N, 98115

### Lake City

Maktabadda Lake City, 12501 28th Ave NE, 98125

### Magnolia

* Jardiinka Magnolia, 1461 Magnolia Blvd W, 98199

### Northgate

North Seattle College (Baarkinka soo booqdaha koonfurta ka soo gal dhinaca N 95th St), 9600 College Way N, 98103

### Queen Anne

* Maktabadda Seattle Pacific University, 310 W Bertona St, 98119

### Rainier Valley

Rainier Beach Community Center (Xarunta Bulshada Rainier Beach), 8825 Rainier Ave S, 98118

### Sand Point/Laurelhurst

* Jardiinka Magnuson – Dhismaha 406, 6344 NE 74th St, 98115

### South Lake Union

South Lake Union, 310 Terry Ave N, 98109

### South Park

Maktabadda South Park, 8604 8th Ave S, 98108

### University District

Kambaska University of Washington, Hoolka Schmitz (albaabka dhanka Waqooyi NE 41st St), 1410 NE Campus Pkwy, 98195

### Uptown

Suuqa Magaalo Weynta ee Queen Anne, Geeska 1st Ave N iyo Mercer St, 981099

### West Seattle/Delridge

Isgoyska Alaska, Geeska SW Alaska St iyo 44th Ave SW, 98116

Maktabadda High Point, 3411 SW Raymond St, 98126

CUSUB Isgoyska Jardiinka Morgan, 6401 California Ave SW, 98136

South Seattle College (halka laga galo ee dhismaha the Robert Smith), 6000 16th Ave SW, 98106

### White Center

Maktabadda White Center, 1409 SW 107th St, 98146

* *Sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta adigoo gaariga saaran*

# Safarka Warqaddaada Codbixinta





Qiyaas ahaan saddex asbuuc ka hor Maalinta Doorashada, Doorashooyinka Degmada King waxay dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan boostada ugu diraan warqadaha codbixinta iyo buug-yaraha codbixiyeyaasha. Codbixiyeyaashu waxay awoodaan inay buuxiyaan, saxiixaan, oo ay ku soo celiyaan warqaddooda codbixinta wakhti kasta ka hor wakhtiga kama dambeysta ah ee Maalinta Doorashada.

*Safarka wuu bilaabmay!*

## 1 Waxaan helnaa oo iskaan-gareynaa bakhshaddaada warqadda codbixinta

Mashiinkeena kala soocidda warqadaha boostada ayaa iskaan-gareeya bakhshaddaada warqadda codbixinta oo sawirka saxiixaaga u dira kooxda xaqiijinta saxiixa.



## 2 Waxaan xaqiijinaa saxiixaaga

Saxiixa ku qoran bakhshaddaada soo celinta ayaa waxaa la barbar dhigaa kan ku jira faylka diiwaan gelintaada codbixiyaha.

Haddii **saxiixyadaada ay isku dhigmaan**, warqadda codbixinta waa la ansixiyaa oo loo gudbiyaa furitaanka.

Haddii **saxiixaaga uu maqan yahay** ama **uusan u dhigmin** diiwaankaaga diiwaan gelinta, warqadda codbixinta waa la xujeeyaa. Waxaan kula soo xiriiri doonaa si aan u xallino arrinta ka hor inta aan warqadda codbixinta la furin.

*Ka hor 8 p.m. Maalinta Doorashada*


Saxiix oo warqaddaada codbixinta ku soo celi boostada ama sanduuqa lagu rido ugu dambeyn 8 p.m. Maalinta Doorashada!

Warqadaha codbixinta ee lagu soo celiyo boostada waa inay lahaadaan shaabadda boostada oo ah ugu dambeyn Maalinta Doorashada.





## 3 Waxaan furnaa oo si muuqaal ah u baarnaa warqaddaada codbixinta

Shaqaale tababaran ayaa warqaddaada codbixinta ka soo dhex saara bakhshadda iyo galka amniga. Halkan ayaa ah barta codeyntaada looga sooco aqoonsigaaga. Warqadda codbixinta ayaa markaas si muuqaal ah loo baaraa si loo hubiyo in la iskaan-gareyn karo.





## 4 Waxaan iskaan-gareynaa warqaddaada codbixinta si loo tiriyo codeynta

Marka la diyaariyo in la iskaan-gareeyo, warqaddaada codbixinta waxay martaa mashiinada iskaanka. Suurad ayaa lagu keydiyaa nidaam ammaan ah oo xiran ilaa 8 p.m. Habeenka Doorashada.



## 5 Waxaan tirinaa warqaddaada codbixinta

Isla markii 8 p.m. ka dib Habeenka Doorashada, waxaan isku darnaa natiijooyinka oo aan ku soo dhejinnaa webseedkeena si ay dhammaan u arkaan. Natiijooyinka ayaa la cusboonaysiiyaa maalin kasta oo ah maalmaha shaqada saacaddu markay tahay 4 p.m. ilaa iyo inta laga shahaadaynaayo doorashada.




## Raad-raac warqaddaada codbixinta tallaabo kasta oo ay kaga jirto hannaanka!

Iska qor barta **kce.wiki/BallotAlerts** si aad u hesho qoraallo taleefan ama iimeel inta warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo.



# Isku Qor Inaad Hesho Digniimaha Warqadda Codbixinta!

Waxaad ogaan doontaa halka warqaddaada codbixinta ay marayso inta lagu jiro tallaabo walba oo hannaanka ah, laga bilaabo marka boostada lagu soo diro ilaa iyo marka laga tiriyo halka Xarunta Guud ee Doorashooyinka. Digniimaha warqadda codbixinta waa sida ugu dhaqsaha badan ee aad ku ogaan karto inay arrin ka jirto dhinaca saxiixaaga. Hubi in codkaaga la maqlo – Isku qor maanta inaad hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Markaad doorato, waxaad diyaar u noqon doontaa inaad hesho ogeysiisyada doorashadaan iyo doorashooyinka mustaqbalka. Waad iska bixin kartaa wakhti kasta oo aad u baahato.




**Raad-raac warqaddaada codbixinta oo isku qor si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/TrackMyBallot**




## Aaway warqaddayda codbixinta?

Booqo **kce.wiki/TrackMyBallot** si aad oonleenka uga raad-raacdo ama aad isugu qorto inaad hesho digniimaha warqadda codbixinta oo aad ku heli doonto iimeel ahaan ama/iyo fariin qoraal taleefan.




## Agabyada lagu heli karo 7 luqadood!

Waxaad heli kartaa warqadaha codbixinta, agabka codeynta, iyo isgaarsiinta oo ah afka Ingiriiska, Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, iyo Fiyatnamiiska.

Ka buuxi foomka codsiga oonleenka barta **kce.wiki/languages** oo waxaad xafiiskeena ka heli doontaa dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqaddii dookhaaga ah.

## GOBOLKA




Mushahar (2025):
**$61,997**


Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Senatarka Gobolka

Senatka Gobolka iyo Golaha Wakiillada ee Gobolka ayaa waxay isku noqdaan laanta sharci dejinta ee dowladda Gobolka. Waxay leeyihiin mas'uuliyad siman oo ah dejinta sharciyada, canshuur ku soo rogidda iyo ururinta canshuuraha, iyo ka gorgortanka mudnaanta miisaaniyadda Gobolka.

Waxaa jira 49 Senatarro Goboleed iyagoo sidoo kale mas'uul ka ah ansixinta magacaabisyada uu sameeyo guddoomiyaha.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Sharci Dejinta*




Mushahar (2025):
**$61,997**

Adeeg ah muddo-xilleed 1-sanno wakhtigeedu weli dhammaanin


### Wakiilka Gobolka

Senatka Gobolka iyo Golaha Wakiillada ee Gobolka ayaa waxay isku noqdaan laanta sharci dejinta ee dowladda Gobolka. Waxay leeyihiin mas'uuliyad siman oo ah dejinta sharciyada, canshuur ku soo rogidda iyo ururinta canshuuraha, iyo ka gorgortanka mudnaanta miisaaniyadda Gobolka.

Waxaa jira 98 Wakiillo Goboleed. Laba xubnood ayaa laga soo doortaa mid kasta oo ka mid ah 49-ka Degmooyinka Sharci Dejinta ee Gobolka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada Sharci Dejinta*

## DEGMADA




Mushahar (2025):
**$296,028**

Adeeg ah muddo-xilleed gaaban iyo mid buuxda 3-sanno

### Madaxa Fulinta

La shaqeeya Golaha Degmada ee ku aaddan hirgelinta sharciga. Wada hawl-maalmeedka dowladda hoose ee degmada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha Degmada King*[1]




Mushahar (2025):
**$183,312**

Adeeg ah 3 sanno

### Xubinta Golaha Degmada

Dejiya siyaasado oo hirgeliya sharciyo, horumariya oo ansixiya miisaaniyadda degmada, iyo kormeera adeegyada degmada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada golaha ee Degmada King*[1]

## MAGAALADA



Mushahar (2025):
**Kala duwan magaalo ahaan**

Adeeg ah 4 sanno

### Duqa Magaalada

La shaqeeya golaha magaalada ee ku aaddan hirgelinta sharciga. Wada hawl-maalmeedka dowladda hoose ee magaalada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*



Mushahar (2025):
**Kala duwan magaalo ahaan**

Adeeg ah 4 sanno

### Xubinta Golaha Magaalada

Ansixiya miisaaniyadda magaalada, horumariya sharciyada iyo siyaasadaha, iyo kormeera adeegyada dadweynaha.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*



Salary (2025):
**$224,492**

Adeeg ah 4 sanno

### Qareenka Magaalada Seattle

Wuxuu u shaqeeyaa sida qareenka magaalada wuxuuna dacweeyaa dambiyada heerka magaalada.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha magaalada*

## DEGMADA DUGSIGA



Mushahar (2025):
**Mushahar sannadeed ma jiro**


Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Agaasimaha Degmada Dugsiga

Dejiya siyaasadaha dugsiyada, bixiya kormeerka hawlgallada nidaamka dugsiga, oo wakiilna ka ah danaha bulshada ee ku aaddan arrimaha waxbarashada dadweynaha.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada dugsiga*[2]

## DEGMADA UJEEDDADA GAARKA AH




Mushahar (2025):
**Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Degmada Bullaacadda/Biyaha Wasakhda

Kormeera degmada bullaacadda si uu u joogteeyo xarumaha, loo daboolo baahiyaha biyaha, loona buuxiyo shuruudaha deegaanka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*



Mushahar (2025):
**Mushahar sannadeed ma jiro**

Sannadaha adeegga ayaa kala duwan

### Guddoomiyaha Isbitaalka Dadweynaha

Kormeera hawlaha isbitaalka bixiyana adeegyo lagu horumarinayo caafimaadka.

*Waxaa soo doorta codbixiyeyaasha gudaha degmada*


## Ku Saabsan Doorashada Hordhaca ee Washington

Tartan walba, waxaad u codeyn kartaa hal musharax kasta oo liiska ku jira.

Labada musharax ee hela codadka ugu badan ee Doorashada Hordhaca ayaa u gudbi doona Doorashada Guud.

Musharax kasta oo u tartamaaya xafiis xisbinimo loo doorto ayaa laga yaabaa inay sheegtaan xisbi siyaasadeed oo ayaga dookhooda yahay. Dookha musharaxa micnaheedu ma aha in musharaxaas uu xisbiga soo magacaabay ama uu xisbiga taageero ka haysto, ama uu xisbigu ansixiyay ama musharaxaas xiriir la leeyahay.

Wax dheeraad ah oo ku saabsan Doorashada Hordhaca ee Labada Ugu Sareeya ka baro halka **sos.wa.gov/elections.**




*[1]Sannadkii 2022, codbixiyeyaasha ayaa ansixiyay Wax Ka Beddelka Lr. 1 ee Sharciga Degmada King, taasoo u guurisay tartankan sannadaha dhabanka ah. Doorashadaan ka dib, tartankan waxaa lagu go'aamin doonaa sannadaha dhabanka ah oo aan lagu go'aamin doonin sannadaha kisiga ah. Sidaa darteed, qofka la doorto sannadka 2025 ayaa xilka hayn doono 3 sanno.*

*[2]Marka ay dhacayso Doorashada Hordhaca, tartannada Degmada Dugsiga Seattle ayaa waxaa ka codeeya codbixiyeyaasha ku nool gudaha degmada agaasimaha. Marka ay dhacayso Doorashada Guud, dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan ee Seattle ayaa ka codeyn kara dhammaan tartannada Degmada Dugsiga Seattle.*

## Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku tabarruceyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo deegaanka:
**Guddiga Kashifaadda Dadweynaha**
www.pdc.wa.gov
Lambarka Lacag La'aanta 1 (877) 601-2828

CODBIXIYAHA
★ MUSTAQBALKA ★

# Hore isku diiwaan geli si aad u codeyso.

Haddii aad tahay ugu yaraan 16 jir, waxaad wakhti kasta hore iskaga diiwaan gelin kartaa oonleenka ama boostada si aad u codeyso.

Waxaanu hayn doonaa diiwaan gelintaada oo aan si toos ah kuugu soo diri doonaa warqad codbixin markii aad u qalanto inaad codeyso.

# Hantidhawrada iyo Ilaalinta Tayada

Kooxdeenu waxay fuliyaan tijaabooyin dhowr ah ka hor, inta lagu jiro, iyo ka dib doorashooyin kasta si loo hubiyo in codadkiina loo tirinaayo si sax ah.

### Tijaabinta Caqli-galnimada & Saxnaanta

Waxa la qabtaa qiyaastii saddex toddobaad ka hor doorashada, tijaabada Caqli-galnimada & Saxnaanta waxay isticmaashaa warqado codbixin tijaabo ah iyo xirmooyin natiijooyin la filanaayay sii loo hubiyo in qalabka xisaabinta uu codadka u akhrinaayo si sax ah.


### Hantidhawrka Dufcadda Kala Sooca Lahayn

Khamiista ku xigta Maalinta Doorashada, waxaan si kala sooc la'aan ah u soo xulanaa lix dufcadood oo aan ku tirinaa gacanta si loo hubiyo in qalabka xisaabinta uu u sii wado akhrinta codadka sidii loogu talagalay.

### Hantidhawrka Xaddidaada Khatarta

Waxaa la qabtaa inta u dhexeysa Maalinta Doorashada iyo shahaadaynta, nidaamkan hantidhawrku waxa uu hubiyaa warqado codbixin tusaale ah oo aan kala sooc lahayn si loo gaaro kalsoonida xisaabeed ee natiijooyinka doorashada.

# Degmooyinka Sharci Dejinta



**Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta xaqiiqda saxda ah ee bayaannada musharaxa iyo cabbirka.**

## Senatarka Gobolka

### Tina L. Orwall



(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 409-3038
tina.orwall@gmail.com
www.electtinaorwall.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Senatarka Gobolka; Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Caafimaadka & Daryeelka Muddada Dheer; Xeerarka, Adeegyada Aadanaha, Guriyeynta iyo Guddiga Wadajirka ah ee Arrimaha Halyeeyadii Hore iyo Militariga. Wakiilkii Hore ee Gobolka; Afhayeenka Ku Meel Gaarka; Isku-Duwaha Golaha Sharci-dejiyeyaasha Qaranka ee Arrimaha Halyeeyadii Hore iyo Militariga.

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Xiriiriye Jaamacadeed ee UW (Affiliate Faculty) oo leh waayo-aragnimo labaatan sanno ah ee caafimaadka habdhaqanka, la-talinta, iyo qorista deeqaha, la shaqeynta dowladda iyo ururada si aan si wanaagsan ugu adeego bulshadeena.

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Hawlaha Bulshada & Shahaado Jaamacadeedka Cilmi-nafsiga ee ka socota UW

**Adeegga Bulshada:** Ururka Ganacsiga ee Kent, Guddiga Bulshada Hawlgabka ee Judson Park, Golaha Saameynta ee United Way, Guddiga Ka Hortagga Is-dilidda ee Halyeeyga Hore, Kooxda Guriyeynta Qoysaska Dhaqamada Kala Duwan ee Albaabada Furan.

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan kuugu adeego Senatka Gobolka, halkaas oo aan ku dhisay diiwaankayga hoggaaminta sharci dejinta oo aan horumariyay sharciyada si wax looga qabto baahiyaha guryaha iyo caafimaadka habdhaqanka iyadoo la maalgelinayo badqabka dadweynaha, gaadiidka iyo waxbarashada gaarka ah. Waxaan u doodaa halyeeyadii hore iyo qoysaska militariga waxaanan sannadkan ka shaqeeyay si aan bulshada uga ilaaliyo waxyeellada isticmaalka AI ee aan la xakamayn. Waxaan ku faanayaa sharciyada sannadkan ee ilaaliya dadka waayeellada ah ee xusuusta daryeelka, ardayda ku sugan xarumaha dugsiga, iyo mulkiileyaasha guryaha ee la tacaalaaya sidii ay guryahooda u sii haysan lahaayeen.

Sida xirfadle shaqaalaha bulshada ahaan, ilaalinta dadka nugul ee Washington had iyo jeer waxay ahayd diiraddayda, oo ay ku jiraan kuwa ka badbaaday kufsiga, rabshadaha hubka, iyo is-dilidda. Iyada oo ay jaritaannada federaalku ay khatar ku tahay barnaamijyada ee qoysaska halganka ku jira, waxaan kaga jawaabay sharci maalgeliya 988, bixiya caymiska qalabka caawiya maqalka ee cusub, kordhiya badqabka bulshada iyo ilaalinta dhiirigelinta macallinka ee uu Guddiga Shahaadeeyay, iyo kuwo kale oo badan.

Haddii aan helo codkaaga, waxaan sii wadi doonaa ka shaqeynta guriyeynta la awoodi karo, daryeel caafimaad oo dhammaystiran, yareynta wasakheynta garoonka diyaaradaha, helitaanka luqadda ee gudaha dugsiyada, helitaanka daryeelka carruurta ee qoysaska shaqeeya iyo helista xalalka cimilada.

# Wakiilka Gobolka Jagada Lr. 1

## Kevin Schilling



(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 948-0381
kevin@electkevinschilling.com
electkevinschilling.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Duqa Magaalada Burien 2024 - Hadda; Golaha Magaalada Burien 2019 - Hadda

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Agaasimaha Arrimaha Dowladda ee Ururka Ilkaha Gobolka Washington, Agaasimaha Siyaasadda ee Xildhibaan Derek Kilmer, Baadariga Dhallinyarada iyo Da'yarta ee St. Francis of Assisi Parish iyo Dugsiga, Karaaniga Cuntada UFCW, iyo Shaqaale Makhaayad

**Waxbarashada:** Dugsiga St. Francis of Assisi, Dugsiga Sare ee Raisbeck Aviation, Washington State University, Dugsiga Dhaqaalaha ee London, Dugsiga Harvard Kennedy ee Maamuleyaasha Sare ee Gobolka iyo Dowladda Hoose

**Adeegga Bulshada:** Jawaabta Degdegga ah ee AmeriCorps ee COVID-19, Guddiga Siyaasadda Ururka Ganacsiga ee Seattle-ta Weyn, Guddiga Arrimaha Sharci-dejinta ee Isbahaysiga Rugta Ganacsiga ee South Sound, Golaha Seattle Opera BRAVO, Wiilasha Kacaanka Mareykanka

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan hagaajiyo waxa ka burbursan Washington—monoboliyada shirkadeed iyo siyaasiyiin aan waxba la socon oo xannibay *xalalka caqligalka ah ee badqabka, hoy la'aanta, iyo waxa la awoodi karo*. Waxaan ahay musharax keliya ee leh rikoor la xaqiijiyay oo ku saabsan si guul leh wax uga qabashada mudnaantaada. Sida Duqa Magaalada Burien ahaan, waxaan ku hoggaamiyey ficil: caawinaadda in dadka laga soo kaxeeyo waddooyinka oo guryo la geeyo, balaarinta adeegyada daaweynta, xoojinta amniga dadweynaha, iyo dheelitirka miisaaniyadda iyadoo aan dhaqaalaha kobcinaayay.

Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan ka dhigo Washington mid la awoodi karo oo aan abuurro fursad. Waa wakhti aan dadka Washington dhigi lahayn jagada hore oo aan dowladda ka dhigno mid run ahaantii idiin shaqeyso. *Waxaa taageeray Xildhibaan Adam Smith, Guddoomiye Dave Upthegrove, iyo Hey'adaha Ururka Shaqaalaha.*

## Darryl Jones



(Doorbida Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 208-2856
DarrylJonesFromKent@gmail.com
darryljonesfromkent.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Waxaa la ii doortay sida Sarkaalka Guddiga Xaafadda ee Degmada Sharci-dejinta 33aad. Khibrad uma lihi xil la soo doortay oo intaas dhaafsiisan. Laakiin, waxaan leeyahay khibrad aan ka helay natiijada mas'uuliyiinta la soo doortay oo u codeeyay ka soo horjeedka rabitaanka dadka ee loo doortay inay matalaan.

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Maamulaha shirkad qalab waara oo caafimaad, tababaraha koox caafimaad goboleed, iibiye ka tirsan warshadaha dheemanka iyo adeegga macaamiisha ee daryeelka caafimaadka, guryaha, teknolojiyada, soo dhawweynta iyo warshadaha bangiyada.

**Waxbarashada:** California State University Hayward, taqasus weyn Sayniska Kombuyuutarka, taqasus yar Xisaabta

**Adeegga Bulshada:** Wax ku baray ardayda dugsiga kadib maktabad dadweyne iyo mashruuc guri dadweyne.

**Bayaanka:** Siyaasadda ka hor xisbiga. Sida Dimuqraadi ahaan, xisbigaagu wuxuu ku guuleystay 60% kuraasta. Ma ku faraxday markii mid ka mid ah Dimuqraadiga iga soo horjeeda uu u codeeyay in la burburiyo Xeerka Sharciga Xuquuqda Waalidka isagoo haa ugu codeeyay HB1296? Isla kaas iga soo horjeeda ayaa sidoo kale u codeeyay inuu xuquuqdaada wax ka beddelka 2aad ee ah inaad hubka qaadato uu ka dhigo mudnaan (HB1163).

Wuxuu khiyaameeyay dadkii soo doortay isagoo u codeeyay sharciyadaas. Haddaad i doorataan, waxaan taageerayaa waxay dadku rabaan, ee ma aha fikraddayda gaarka ah, siduu isaguba sameeyay. Olympia ayaa xadday dhoola caddeynteena. U codee Darryl Jones oo aan soo ceshano farxadeena.

# Wakiilka Gobolka Jagada Lr. 1

## Edwin Obras

(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)



(206) 265-0335
info@edwinobras.org
edwinobras.org

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wakiilka Gobolka, Degmada 33aad Jagada 1aad, La magacaabay 2024

**Khibrad Xirfadeed Kale:** 25+ sanno ku jiray adeegyada aadanaha; Ku-xigeenka Agaasimaha Qaybta, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Seattle; Guddoomiyaha Guddiga, Jaaliyadda Filibiinka ee Seattle.

**Waxbarashada:** M.P.A., Northeastern University; B.A. (Shahaadada Jaamacadda), University of Washington.

**Adeegga Bulshada:** Guddoomiyihii hore, Guddiga La-talinta Adeegyada Aadanaha ee SeaTac; u doode guryo la awoodi karo, xuquuqda shaqaalaha, iyo badbaadada dadweynaha.

**Bayaanka:** Siyaasiyiin badan oo dhaqameed ayaa noqday kuwo raaxo u arka xaaladda hadda jirta. Gobolkeenu wuxuu noqday mid aan la awoodi karin, hoy la'aanta ayaa si aad ah u kordhaysa iyo maamulka Trump ayaa wuxuu oo keliya xaaladaha ka sii dhigayaa mid sii xun. Kalfadhiga ugu horeeyay, waxaan u halgamay in aan kor u qaado mushaharka iyo hagaajinta xaaladaha shaqada. Waxaan xaddiday kororka kirada. Waxaan hoggaamiyey oo dhisay guryo la awoodi karo. Waxaan ku sii dhisi doonaa rikoorkaan: Maalgelinta waxbarashada K-12, gaadiidka iyo maalgashiga gaadiidka dadweynaha, daryeelka ilmaha la awoodi karo, si degdeg ah u dhisa guryo, iyo aan taageero ganacsiyadeena yaryar. Waxaa taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka, Ururka Waxbarashada Washington, Ficilka Ilaalinta Washington, Waalidnimada Qorsheysan, FairVote, Tina Orwall, Mia Gregerson, Mohamed Egal, John Boyd, Sarah Moore iyo qaar kaloo badan...

!

Doorashooyinka Degmada King ma waafajiyaan, wax kama beddelaan, ama dib u eegis kuma sameeyaan bayaannada musharaxiinta iyo cabbirka warqadda codbixinta xaalad kasta oo lagu jiro.

Dhammaan bayaannada waa tarjumaadda erey iyo erey ee dhabta ah, oo ah bayaannada ay soo gudbiyeen musharaxa, guddiga, ama maamulka, laguna dhammeeyay wakhti xaddidan. Sababtaas awgeed, bayaannada la tarjumay ayaa laga yaabaa in meelaha qaarkood aysan kaga caddeyn maxaa yeelay isticmaalka luqadda, fikradaha, iyo sharaxaadda ayaa ku kala duwan luqadaha.

## Senatarka Gobolka

### Emily Alvarado



(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 745-2010
emily@emilyalvarado.com
emilyalvarado.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wakiilka Gobolka (2023-2025); Senatarka Gobolka (loo magacaabay 2025)

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Hoggaamiye urur aan faa'iido doon ahayn oo dhisaya guryo iyo daryeel carruur oo tayo leh oo la awoodi karo; Agaasimihii hore ee Xafiiska Guryaha ee Seattle oo maalgeliyay $290 milyan si looga hortago barakaca, taageeridda adkeysiga cimilada, dhisidda guryo taageero ah oo loogu talagalay deriska hoy la'aanta ah, ilaalinta kiraysteyaasha, iyo balaarinta lahaanshaha guryaha; qabanqaabiye Waalidnimada Qorsheysan oo abaal marin ku guuleystay; Qareen

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda, Scripps College (summa cum laude); JD (Shahaadada Sharciga), University of Washington School of Law (Aqoonyahan Sharciga Adeegga Dadweynaha ee Gates)

**Adeegga Bulshada:** Xubin Guddigii hore, Isbahaysiga Guriyeynta Dakhliga Hoose ee Washington; xubin hore, Guddiga Haweenka Seattle; Qareenka Mutadawac, Ururka Qareennada ee Latino-ga ee Rugta Sharciga ee Bulshada Washington; Waalidka PTA ee labo arday oo Dugsiga Dadweynaha Seattle

**Bayaanka:** Waa mudnaan inaan kugu matalo Senatka Gobolka. Sida u doode nolosheeda oo dhan ee guryaha la awoodi karo iyo fursadda dhaqaalaha ahaan, waxaan keenay khibrad qoto dheer iyo rikoor la xaqiijiyay oo ah keenitaanka natiijooyin.

Sida Senatarkaaga ahaan, waxaan horey u socodsiiyay arrimaha muhiimka ah: dugsiyo dadweyne oo tayo sare leh, guryo la awoodi karo, iyo helitaanka daryeelka carruurta iyo daryeelka caafimaadka. Waxaan ku faanayaa inaan hormuud ka noqday siyaasado wax ka qabta qiimaha nolosha oo sareeya anigoo balaarinaya ilaalinta kiraysteyaasha, shaqaalaha, iyo macaamiisha.

Waxaan sii wadi doonaa inaan riixo dib-u-habeynta si aan uga dhigo lahaanshaha guriga mid la awoodi karo, horumarinta natiijooyinka waxbarashada carruurta, iyo xoojinta shabakadda badqabka bulshada ee dhallinyarada iyo waayeellada. Dhammaanteen waxaan mudannahay adeegyo dadweynaha oo la isku halayn karo, waxaanan sii wadi doonaa u doodista dakhliga iyo maalgashiga loo baahan yahay si aan bulshooyinkeena uga dhigno kuwo caafimaad qaba oo ammaan ah.

Waxaad igu kalsoonaan kartaa inaan u istaago dimuqraadiyaddeena iyo xuquuqdeena madaniga ah, xorriyadda taranka, dib u habeynta hubka caqligalka, iyo ficilka cimilada. Waxaa iga go'an inaan ka dhigo dowladda inay u shaqeyso dadka—maaha kuwo wata dano gaar ah. Had iyo jeer waxaan u dagaalami doonaa mustaqbalka halkaas oo qof kastaa uu helo fursad uu ku horumaro. Waxaa sharaf ii ahaan lahayd inaan kasbado taageeradaada sii socota. *Waxaa taageeray: Waalidnimada Qorsheysan, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, Ururka Kalkaaliyeyaasha Gobolka Washington, iyo qaar kaloo badan.*

## Wakiilka Gobolka Jagada Lr. 1

### Brianna K. Thomas



(Doorbida Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 321-9890
brianna4the34th@gmail.com
www.briannathomas.org

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Waxaa loo magacaabay Golaha Sharci-dejinta Janaayo 2025. Musharax Golaha Magaalada Seattle 2015, 2021

**Khibrad Xirfadeed Kale:** 15+ sanno oo adeeg dadweyne ah oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn: La-taliyaha Sare ee Shaqaalaha ee Xafiiska Duqa Magaalada, Madaxa Shaqaalaha ee Guddoomiyaha Golaha Magaalada Seattle, Madaxa Shaqaalaha ee Xafiiska Kormeeraha Guud, Agaasimaha Ololaha ee Haa! ee ku aaddan Seatac.

**Waxbarashada:** University of Washington, Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda 2010

**Adeegga Bulshada:** U adeegtay guddiyada Working Washington (Washington-ta Shaqeynaysa), Seattle City Club (Naadiga Magaalada Seattle), Golaha Kaniisadda ee Seattle-ta Weyn, the Washington Bus (Baska Washington), Fuse Washington, Kutlada Siyaasadeed ee Haweenka ee NW, Machadka Mustaqbalka Dimuqraadiga, Degmada Sharci-dejinta 34aad iyo Xarunta Adeegga Degdegga ah ee Bartamaha Magaalada.

**Bayaanka:** Waxaan aaminsanahay in loo dagaalamo dadka shaqeeya, guryo la awoodi karo, badqabka bulshada, iyo barwaaqada la wadaago. Halkan gudaha degmada sharci-dejinta 34-aad, waxaan nasiib u leenahay inaan leenahay derisyo weli isha ku haya midba midka kale oo ka qayb qaata hagaajinta bulshadeena. Laga soo bilaabo Vashon ilaa Delridge, White Center ilaa Pioneer Square dadka bulshadaan ayaa ahmiyad siiya. Waxaan ku weydiisanayaa taageeradaada sababtoo ah waxaan ogahay sida ay muhiimka u tahay in la keeno xaqiiqo iyo adkaysi si loo hubiyo in qof kasta oo 34-aad ah uu cod ku leeyahay Olympia, iyada oo aan loo eegin luqadda ama xaafaddooda. Waxaa taageeray: Golaha Shaqaalaha ee Gobolka, Mashiinisteyaasha, iyo One America Votes (Hal Ameerika way Codeysaa).

# Madaxa Fulinta

## John Wilson



(206) 488-1143
john@electjohnwilson.com
electjohnwilson.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Cilmiga Adabka, Saxaafadda iyo Cilmiga Siyaasadda (Laba Taqasus), University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Loo doortay Qiimeeyaha Degmada King (2015-Hadda)

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Madaxa Fulinta si aan wax uga qabto arrimaha ugu muhiimsan: dambiyada, guryaha, iyo canshuuraha.

Badqabka dadweynaha iyo la dagaalanka dambiyada waa inay noqdaan mudnaanta ugu sareysa! Nasiib darro, ma aysan jirin sannado badan. *Dilalka ayaa kordhay 59%* shantii sannadood ee la soo dhaafay, iyo dad badan ma dareemayaan inay ammaan ku yihiin xaafadahooda. Nidaamkeena caddaaladda dambiyada—ayaa ah ku dhawwaad 80% miisaaniyadda degmada—ayaa buux dhaafay oo khatar ahaan si buuxda loo maal gelin. Horraantii sannadkan, Degmada King waxay wajahaysey *$150 milyan oo lacag yaraan ah* oo ka dhashay kharashgareynta xad-dhaafka ah ee Golaha Degmada iyo maamul xumada miisaaniyadda. Golaha sharci dejinta ayaa bixiyey ilo cusub oo dakhli ah, taas oo ka hortagtay jaris lacag qoto dheer oo curyaamin lahaa adeegyada qaar ka mid ah aagagga.

Waxaan ka dhabeyn doonaa in dakhligan cusub loo isticmaalo si gaar ah adeegyada badqabka dadweynaha: booliiska, difaacyada dadweynaha, dacwad-oogeyaasha, xabsiyada dadka waaweyn iyo dhallinyarada, iyo maxkamadaha. Intaa waxaa dheer, waxaan dib u eegi doonaa miisaaniyadda si aan u helno keyd aan ku maalgelino badqabka dadweynaha. Waligey ma taageerin in booliiska laga jaro kharashka ama xabsiga dhallinyarada la xiro. *Bulsho ammaan ah waa bulsho kobcaysa*; haddii kale, waxaan ku fashilmaynaa carruurteena, waayeelladeena, iyo kuwa ugu nugul.

Waxaan shaqada keeni doonaa *garasho caadi ah*, waxaan soo jeedin doonaa *miisaaniyado ku saleysan mudnaanta* oo ku baxa xadkooda, waxaanan sii wadi doonaa shaqada lagu yareynayo canshuuraha si *looga dhigo mid ay awoodi karaan mulkiileyasha guryaha iyo kuraystayaa inay ku noolaadaan* Degmada King. Waxaan ka dagaalamay Olympia si waayeellada loogu helo canshuur dhimmis ay si weyn u mudan yihiin.

Waligey ma noqon ilaaliyaha xaaladda hadda jirta. Uma tartamayo ciwaan ama jaranjaro kale. Xitaa waxaan soo jeedin doonaa *xadka muddo xilleedka ee Madaxa Fulinta* sababtoo ah tani waa shaqo ay tahay inaad gasho, wax qabato, oo aad ka baxdo.

Si wadajir, waxaan ka dhigi karnaa Degmada King *mid ammaan ah*, mid *la awoodi karo*, iyo *meel wanaagsan oo lagu noolaado*. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Amiya Ingram



kingcountycounts@amiyaforkingcounty.org
www.amiyaforkingcounty.org

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga : Injineernimada Cilmiga Sayniska Kombuyuutarka

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Barnaamijka

**Bayaanka:** Maanta waxay u taagan tahay maalinta xisaabtanka. Anagoo ah codbixiyeyaasha waxaan haysanaa fursad aan ku hirgelin karno hoggaan cusub, fikrado cusub, iyo qiyaam cusub ee gudaha dowladdeena hoose. Waxaan aragnay go'aanno lagu gaarayo iyadoo lagu saleynayo xiriirka ururada waxaana ku wadnay ololaheenna si madax-banaan oo aan lahayn wax xiriir xisbi ah ama maalgelin, taa beddelkeeda waxaa taageeray mutadawaciin iyo codbixiyeyaasha.

Aniga qudhaydu waxaan u shaqeeyay Waaxda Difaaca Mareykanka, Bank of America, iyo Microsoft waxaanan bulshada ku deeqay in ka badan $12,000. Waxaan kuu sheegi karaa liis guulo ah si aad kalsooni iigu qabto, laakiin taa beddelkeeda waxaan rabaa inaan iftiimiyo waajibaadka aan dareemayo ee ah inaan u tartamo xafiiskan anigoo ah shakhsi aan lahayn wax xiriir siyaasadeed. Waxaan keenaa aragtida haweeney ka tirsan dadka shaqeeya, ganacsade, aasaasaha, iyo saaxiib. Waxaan rabaa inaan diiradda saaro inaan noqdo codka dadka aan haysan lacag ama awood, laakiin weli ku nool dhulka oo la kulma cawaaqibka go'aannada la gaaro.

Hoggaankayga hoostiisa waxaan abuuri doonaa meel xorriyad iyo caddaalad loogu talagalay qof walba, Meel loogu talagalay DJS, Meel loogu talagalay Dhakhaatiirta, Meel loogu talagalay Booliiska, Meel loogu talagalay Injineerada, Meel loogu talagalay Carruurta, Meel loogu talagalay Hooyooyinka, Meel loogu talagalay Muslimiinta, Meel loogu talagalay Budhiistaha, Meel loogu talagalay Masiixiyiinta, Meel loogu talagalay Eetiyiistiga, Meel loogu talagalay kuwa aan hoy lahayn, Meel loogu talagalay kuwa hodanka ah, Meel loogu talagalay Isaga, Meel loogu talagalay Iyada, Meel loogu talagalay Ayaga, Meel loogu talagalay Ayaga, Meel loogu talagalay *dhammaan*. Degmada King xisaabta ayay ku jirtaa, Nagu soo dar! Ma kugu xisaabtami karnaa?

# Madaxa Fulinta

## Claudia Balducci



info@claudiabalducci.com
claudiabalducci.com

**Waxbarashada:** J.D. (Shahaadada Sharciga), Columbia University School of Law; B.A. (Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka), Providence College

**Shaqo iyo Xirfad:** Hadda: Xubin Golaha Degmada. Hore: Duqa Magaalada Bellevue, Agaasimaha Xabsiyada Degmada, Qareen.

**Bayaanka:** Degmadeena waxay wajahaysaa caqabado degdeg ah ee ku aaddan waxa la awoodi karo, amniga, iyo caafimaadka dabeecadda, waana inaan difaacnaa dhaqaalaheena iyo xuquuqdeena ku aaddan weerarrada federaalka. Wakhtigaan wuxuu u baahan yahay hoggaan la xaqiijiyay– iyo ficil. Niyad wanaag ma dhisi doonto guryo, shaqooyin ma abuuri doonto, mana caawin doonto dadka nugul. Waxaan keeni doonaa diiwaan raad-raac aan lala mid ahayn iyo aragtiyo cusub– oo ku saleysan waayo-aragnimada hoggaamiye caddaalad dambiyeedka, hooyo, Xubin Golaha iyo Duqa Magaalada ee hore– halka xafiiska Madaxa Fulinta Degmada. *Waxaan si aan daal ku jirin ugu shaqeyn doonaa adiga, qoysaskeena, iyo bulshadeena*.

Waxaan ahay musharaxa keliya ee tartankan ee soo gudbiyay guriyeynta– kumanaan guryo ah oo loogu talagalay dadka shaqeeya iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo, iyo hoy degdeg ah oo leh daryeel dhammaystiran. *Sida Madaxa Fulinta ahaan, waxaan raadin doonaa siyaasado isbeddel ah oo dedejiya fursadaha guryaha.*

Waxaan bixiyaa khibrad toos ah oo ku saabsan amniga dadweynaha iyo taageero joogto ah oo labadaba habab xisaabtan iyo naxariis leh. Waxaan ogahay waxa loo baahan yahay si loo ilaaliyo dadweynaha, loo yareeyo rabshadaha hubka, loo ilaaliyo dadka ka badbaaday weerarrada iyo xadgudubyada, loona soo celiyo nolosha ay waxyeeleeyeen balwadaha. *Sida Madaxa Fulinta ahaan, waxaan maalgelin doonaa shaqaalaha iyo adeegyada loo baahan yahay si loo hagaajiyo amniga bulshada.*

Sida codka hoggaaminaaya ee gobolka ee ku saabsan balaarinta tareenka fudud, amniga gaadiidka, iyo hagaajinta dadka lugaynaya iyo baaskiillada, waxaa iga go'an faa'iidooyinka dhaqaale iyo cimilo ee gaadiid wax ku ool ah. Waxaan u ololeeyay hawada nadiifka ah iyo biyaha, deegaanka iyo jardiinooyinka. *Sida Madaxa Fulinta ahaan, waxaan ku dhisi doonaa diiwaankayga hoggaaminta gaadiidka iyo deegaanka.*

Waxaan u adeegsan doonaa waayo-aragnimadayda qareennimo iyo u heellanaantayda caddaaladda si aan ula dagaalamo xadgudubyada maamulka Trump, anigoo ilaalinaya kala duwanaanshaha naga dhigaaya kuwo xooggan. Waxaan noqon doonaa haweeneydii ugu horeysay ee loo doorto Madaxa Fulinta Degmada xilli weeraro ay ku sii socdaan xuquuqda taranka.

Waxaan ahay musharaxa keliya ee Madaxa Fulinta ee ay taageereen isbahaysi ganacsi iyo shaqaale– Mashiiniisteyaasha751, Ururka Shaqaaleyaasha242, Hawlwadeennada Gaadiidka587, SEIU925 shaqaalaha safka hore, iyo in ka badan. Degmada King & Dimuqraadiyiinta Degmada, kooxaha gaadiidka & deegaanka, Duqooyin Magaalo & Sharci-dejiyeyaasha waxay isku raaceen inaan noqon doono hoggaamiye aan la loodin karin, oo wax ku ool ah. Waxaan ku weydiisanayaa codkaaga.

## Bill Hirt

Sawir lama soo gudbin

(425) 747-4185
wjhirt2014@gmsil.com
stopeastlinknow.blogspot.com

**Waxbarashada:** Iowa State University Aeronautical Engineering (Injineernimada Hawada) BS iyo MS

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawlgabay kadib 36 sannadood oo uu ka shaqeynayay Boeing

**Bayaanka:** Sannadkan waxaan buuxinayaa in aan isticmaalo Buug-yaraha Codbixiyeyaasha bayaanka Musharaxa ee Madaxa Fulinta Degmada si aan uga faalloodo walaacyada ku saabsan Sound Transit oo isticmaalaya oggolaanshaha codbixiyeyaasha ee Soo Jeedinta 1aad sannadkii 2016 si ay u kharash gareeyaan $54B inta u dhexeysa 2017 iyo 2041 ee kordhinta ST3 si ay u kharash gareeyaan $150B inta u dhexeysa 2017 iyo 2046 iyo in ay deegaanka uga tagaan $18B oo deyn ah.  Kordhinta ST3 ee tareennada fudud ee afar-gaariga ah oo loo qorsheeyay in ay maraan jidka I-5 iyo Buundada I-90 ma laha awood ay ku soo jiitaan rakaab ku filan si loo yareeyo ciriiriga saacadaha ugu badan ee shaqada waxayna ku kacayaan kharash aad u badan si loo shaqeeyo saacadaha aan ugu badnayn.

ST waxay kharash garaysay oo sii wadi doontaa in ay kharash gareyso boqolaal milyan oo doolar oo ku saabsan kordhinta tareennada fudud ee ka baxsan UW iyo SeaTac iyo buundada I-90 oo aan waxba ka qaban ciriiriga soo gala Seattle. Waxay sii xumeeyaan dhibaatooyinka awoodda iyo kharashka labadaba iyagoo doorbidaya in ay isticmaalaan tareennada fudud si ay u beddelaan waddooyinka baska ee soo gala magaalada.

Soo bandhigidda Isku-Xirka Lynnwood ee 2024 waxay muujisay in bixinta fursad ay rakaabku ku helaan tareennada fudud aysan dammaanad qaadi karin in loo helo rakaab. 80,000 deganeyaasha ku nool hal mayl gudihiisa ee saldhigyada Isku-Xirka waxay keeneen 6643 Maarso 2025 rakaabka Lynnwood; intooda badan waxay ahaayeen rakaabkii hore ee baska oo waddooyinkoodii lagu joojiyay mid ka mid ah saldhigyada.


Rakaabkaas oo sidoo kale shaki gelinaaya in kordhinta Ballard iyo West Seattle ilaa Sodo ay u qalanto kharashka lagu qodayo tannalka labaad oo hoos mara Seattle ama lagu dhisayo buundo labaad oo Duwamish Waterway ah.   Joojinta labada isku-xir waxay badbaadin lahayd ku dhawwaad $20B iyo toban sanno oo carqalad ah inta lagu jiro dhismaha.

Tusaalaha ugu dambeeyay ee habka guddiyada ST ee ku aaddan ST3 waa miisaaniyadda 2025 ee ay ansixiyeen Maarso.  Waxay faahfaahinaysaa miisaaniyadda shaqaalaha oo ah $957.5 M oo loogu talagalay 1572 jagooyin, oo ay ku jiraan 194 "madaxyada fulinta". Haddana, waxay lacag siiyaan kuwo kale in ay dhammaystiraan naqshadaynta iyo dhismaha nidaamka gaadiidka, iyo kuwo wada dayactirka tareennada fudud iyo basaska, iyagoo muujinaya xiiso badan oo horumarinta gaadiidka ku salaysan iyo guryaha la awoodi karo halkii laga yareyn lahaa ciriiriga.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

## Madaxa Fulinta

### Don L Rivers



(206) 606-3116
Electdonlrivers@gmail.com
www.votedonlrivers.com

**Waxbarashada:** Green River CC. Daraasaadka Dhaqaalaha Adduunka Arrimaha Ganacsiga. Golaha Ka Hortagga Dambiyada Qaranka.

**Shaqo iyo Xirfad:** Ka hawlgabay King County Metro

**Bayaanka:** Adduun si sii kordhaysa u kala qaybsan oo khilaafyo badan leh, baahida loo qabo midnimo hadda ayay kasii daran tahay. Marka aan taaganahay marxaladda adag ee fursadaha iyo caqabadaha, waxaan ku faraxsanahay inaan soo bandhigo musharaxnimadayda Madaxa Fulinta ee Degmada King. Himiladaydu waa inaan kobciyo bulsho ah in cod walba la maqlo, walaac walba la xalliyo, iyo qof walba uu dareemo inuu ka tirsan yahay. Si wadajir ah, waxaan ku dhisi karnaa mustaqbal ifaaya ee Degmada King anagoo adeegsanayna iskaashi, naxariis, iyo ujeeddo wadaag.

### Derek Chartrand



(425) 417-9758
derekforkingcounty@gmail.com

**Waxbarashada:** UC Berkeley; Diablo Valley College; Bellevue College; Dugsiga Sare ee Lake Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Sare ee Wax Soo-saarka Isgaarsiinta Taleefanka/Warshadaha Deegaanka. Madaxweynihii Hore ee Washington Trucking Association

**Bayaanka:** Waxaan ku faanayaa inaan ahay musharaxa keliya ee ku jira warqadda codbixinta oo haysta taageerada rasmiga ah ee Xisbiga Jamhuuriga isla markaana u adeegaya sidii halbeeg-qaadaha GOP-ga ee tartankan. Dadka waxay i taageeraan sababtoo ah waxay ogyihiin inaan aad uga walaacsanahay canshuuraha, qiimaha nolosha, dambiyada, iyo hoy la'aanta. Waxaan ku jirnaa xaalad aad uga sii xun mid kasta oo ka mid ah meelahaan marka loo eego markii la doortay Madaxa Fulinta Degmada ee ugu dambeeyay. Hoggaankayga hoostiisa, wax badan ayaan ka sii wanaajin doonaa. Caqli-gal Caadi ah oo leh Naxariis.

Ma ogtahay in hoggaamiyeyaasha Degmada ay kordhiyeen canshuurahaaga ku dhawwaad 50% tobankii sannadood ee la soo dhaafay? Ma aaminsan tahay inaad ka helayso adeegyo 50% ka wanaagsan degmada marka loo eego 10 sannadood ka hor? Iyada oo adeegyada muhiimka ah aan la bixinayn, jawaabtu waa si cad Maya.

Marka lagu daro hoos u dhigidda kharashaadka, waa inaan mudnaanta dib u siinnaa miisaaniyadda Degmada qiyaas ahaan $20 bilyan si aan si buuxda u maalgelino ciidanka sheriff-ka, dacwad-oogaha iyo adeegyada kale ee caddaaladda dambiyada halkii aan ku dhaqmi lahayn fikrado aan macquul ahayn sida xiritaanka xabsiyada degmada iyo sii deynta dambiileyaasha rabshadaha wada ee gudaha bulshadeena. Waa inaan samaynaa horumar macno leh oo ku saabsan dambiyada rabshadaha iyo balwadaha daroogada ee gudaha Degmada King.

Marka la i doorto, waxaan dejin doonaa heer bini'aadannimo oo ku saabsan ka saarista teendhooyinka dadka hoy la'aanta ah waxaana hirgelin doonaa heerkaas. Tirakoobyadu waxay muujinayaan in Seattle ay noqotay waddo xiran oo loogu talagalay dadka hoy la'aanta ah ee Mareykanka. Ma aha wax lala yaabo sababtoo ah Degmada King waxay ku bixisaa Malaayiin abaartimentiyo hal qof keliya degan yahay, halka aan dhisi lahayn hoy wadajir ah oo ku kacaaya qayb yar oo kharashka ah. Iyada oo la adeegsanayo hoyga wadajirka ah waxaan dadka hoy la'aanta dejin karnaa gudaha waxaana meesha ka saari karnaa teendhooyinka foolxumada iyo khatarta leh ee banaanka.

Waxaan u adeegsan doonaa waayo-aragnimadayda maamulka ee labada waaxood ee gaarka loo leeyahay iyo kuwa aan faa'iido doonka ahayn si aan u xakameeyo Degmada King oo aan ugu soo celiyo mid ka mid ah meelaha ugu wanaagsan ee Mareykanka lagu noolaado laguna shaqeeyo. Si wadajir ah ayaan Isbeddel ku samayn karnaa!

# Madaxa Fulinta

## Rebecca Williamson



(206) 323-1755
swpcampaignwa@gmail.com
www.themilitant.com

**Waxbarashada:** Waayo-aragnimo shan iyo labaatan sanno ee ururka shaqaalaha iyo halganno kale ee xoojiya heerka shaqaalaha.

**Shaqo iyo Xirfad:** Hoggaamiyaha tareenka xamuulka/beddelaha iyo xubin ka tirsan SMART Transportation Division Union (Ururka Shaqaalaha ee Qaybta Gaadiidka).

**Bayaanka:** Qalalaasaha sii xumaanaya ee nidaamka raasamaaliga ayaa sii xoojinaya isku dhacyada u dhexeeya dabaqadaha xukuma adduunka oo dhan, taas oo noo soo dhawweynaysa hurinta nukliyeerka iyo dagaalkii saddexaad ee adduunka. Xoogsatada oo keliya oo awoodda qaata ayaa hubka ka dhigi kara taliyayaasha boqortooyada oo tan joojin kara!

Waxaan ku nool nahay waddan u kala qaybsan dabaqad oo ay maamulaan dabaqad yar oo qoysas bilyaneer ah oo soo marta xisbiyadooda Dimuqraadiga iyo Jamhuuriga. Dadka shaqeeyaa waxay u baahan yihiin inay ka go'aan labadaba, oo ay dhisaan dhaqdhaqaaq madax banaan si aan isaga difaacno weerarrada kaabayaasha ee mushaharkayaga iyo xaaladaha nololeed. Xisbi siyaasadeed oo kacaan ah ayaa loo baahan yahay inuu hoggaamiyo malaayiin si ay ugu dagaallamaan awoodda shaqaalaha, si loo dhiso bulsho ku salaysan wadajirka aadanaha.

Waxaan taageersanahay dhammaan hababka dhisaya wadajirka, kalsoonida, iyo awoodda dagaalka ee dadka shaqeeya si aan u difaacno danahayaga, waxaanan ka soo horjeedaa hababka wax u dhimmaya wadajirka noo dhexeeya oo kor u qaadaya ku tiirsanaanta nidaamkan eyga-cunaaya-eyga.

U dagaalan barnaamijka hawlaha dadweynaha ee federaalku maalgeliyo si malaayiin loogu shaqeeyo dhismaha mushaharka ururka shaqaalaha iyo dayactirka kaabayaasha, dugsiyada, jardiinooyinka, guryaha la awoodi karo iyo isbitaalada; usbuuc shaqo oo gaaban oo aan lahayn hoos u dhac mushahar si looga hortago shaqo ka joojinta; iyo shaqaaluhu inay xakameeyaan wax soo saarka si ay u dammaanad qaadaan badbaadada shaqada iyo ilaalinta deegaanka!

Ka soo horjeedidda *dhammaan* weerarrada ka dhanka ah xorriyadda cibaadada iyo hadalka ee dastuuriga ah; xorriyadda saxaafadda, ururka, iyo isu imaatinka; nidaamka caddaaladda; iyo xorriyadaha kale ee loo baahan yahay oo *ay isticmaalaan* kuwa xoogsadayaasha!

Dhisitaanka taageerada halganka shaqada ee mushaharka sare iyo jadwalka shaqada ee u oggolaanaya qoyska wakhti iyo madadaalada! Cafiska dadka soo galootiga—mideeya dhammaan dadka shaqeeya! La dagaalama nacaybka Yahuudda oo difaaca xaqa Israa'iil ay u leedahay in ay jirnaato si ay u noqoto mid Yuhuudda gabaad u ah marka ay sii kordheyso weerarrada Yuhuudda ka soo horjeeda ee adduunka oo dhan! Mareykanka oo ka baxay Bariga Dhexe! Difaac madax banaanida Ukraine! Ciidamada Mareykanka iyo hubka nukliyeerka oo laga saaro Yurub! Ku biir Xisbiga Shaqaalaha Hantiwadaaga!

## Girmay Zahilay



campaign@electgirmay.com
electgirmay.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Franklin, Stanford University, University of Pennsylvania (J.D. Shahaadada Sharciga), Shahaadada Ganacsiga ee Dugsiga Wharton

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha, Golaha Degmada King; Guddiga Sound Transit; Qareen Hore, PerkinsCoie

**Bayaanka:** Waxaan ku faanayaa inay i taageereen Guddoomiyaha Gobolka Bob Ferguson, Xildhibaan Pramila Jayapal, Xeer Ilaaliyaha Guud Nick Brown, Dimuqraadiyiinta Degmada King, iyo ururada shaqaalaha badan iyo hoggaamiyeyaasha ganacsiga. Waxaan kasbaday taageeradooda sababtoo ah rikoodhkayga aan lala barbardhigi karin cid kale iyo aragtidayda cad ee mustaqbalka Degmada King.

Dad badan ayaa wax walba si sax ah u samaynaya haddana weli dib u dhacaya. Kadib tobanaan sanno oo ballanqaadyo fashilmay iyo qorshe aan isbeddel lahayn, dhammaanteen waan niyad jabsanahay. Waxaan samayn karnaa si ka wanaagsan. Ka madaxa fulinta ahaan, waxaan si joogto ah diiradda u saari doonaa isla xisaabtanka. Doolar kastaa oo canshuur ah waa inuu keenaa bulshooyin ammaan ah, caafimaad qaba, oo la awoodi karo.


Dareenkaas degdegga ah ee aan qabo wuxuu ka yimid waayo-aragnimadayda nololeed. Waxaan ku soo barbaaray Koonfurta Seattle anigoo ay i korisay hooyo keliya ka dib markii qoyskeena uu ku yimid qaxooti ahaan. Waxaan la kulanay hoy la'aan, waxaan ku noolayn guryaha dadweynaha, waxaana ku tiirsanayn kaararka raashinka. Waan ogahay sida ay u adag tahay in la daboolo baahiyaha nolosha. Maanta, waxaan ahay nin xaasle ah iyo aabbe ku korinaaya isla qoyskiisa halkan. Taasi waa waxa i wada sidii aan dowladda uga dhigi lahaa mid si ka wanaagsan ugu shaqeysa qof walba.

Khibraddaas ayaa sidoo kale igu hoggaamisay nolol adeeg ah. Waxaan ka shaqeeyay Aqalka Cad ee Maamulka Obama, waxaan ka shaqeeyay sharciga ee halka shirkadaha ugu sareeya ee qaranka, waxaan hoggaamiyey dadaallada siyaasadda ka dhanka ah saboolnimada, waxaanan aasaasay oo maamulay urur qaran oo waxbarashada dhallinyarada ah. Waxaan xirfadayda shaqo ku kharash gareeyay balaarinta fursadaha iyo keenista natiijooyinka.

Ka Guddoomiyaha Golaha ahaan, waxaan hoggaamiyey shaqada si loo maalgeliyo xarumo cusub oo daryeelka xaaladaha degdegga ah si wax looga qabto dhibaatada balwadda, ansixinta sharciyada ka hortagga ka saarista guryaha si kumanaan qof guryaha ay ugu sii jiraan, abuurista istiraatijiyadda ka hortagga rabshadaha hubka ee Degmada King, iyo maalgelinta kumanaan unug oo guryo la awoodi karo. Kuwani waa xalal dhab ah.

Ka Madaxa Fulinta ahaan, waxaan si toos ah u wajihi doonaa caqabadaha ugu waaweyn—soo afjaridda hoy la'aanta si degdeg ah, hagaajinta amniga dadweynaha, difaacidda xuquuqda taranka, balaarinta daryeelka la xiriira balwadda, wax ka qabashada isbeddelka cimilada, iyo ka caawinaadda ganacsiyada yaryar inay kobcaan. Haddii aad diyaar u tahay hoggaan wax ku ool ah, sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

# Degmooyinka Golaha Degmada King



# Golaha Degmada Lr. 5

## Angela Henderson



(206) 395-5621
angela.henderson001wa@gmail.com

**Waxbarashada:** Knapp Sch. of Biz (Dugsiga Ganacsiga ee Knapp), Clover Park Vo-Tech, Intl. Masonry Inst., Cortiva, CTE Ed., WWMI

**Shaqo iyo Xirfad:** Bricklayers and Allied Craftworkers Local 1 (Ururka Shaqaalaha Farsamo Yaqaannada 1 ee Bricklayers iyo Allied) WA-AK Wakiilka Goobta

**Bayaanka:** Angela Henderson waxay deganayd Washington muddo dheer, waa hooyo leh afar carruur ah, afarna ayeeyo u ah, oo ah bulukeeti dhige go'aan adag ee ururka shaqaalaha oo leh in ka badan 30 sannadood oo waayo-aragnimo ah. Waxay nolosheeda ku qaadatay inay u dagaalanto qoysaska shaqeeya, u dooda xuquuqda shaqaalaha, horumarinta shaqaalaha, iyo hagidda—labadaba goobta shaqada iyo bulshada dhexdeeda.

Angela hadda waxay u adeegtaa sidii Guddoomiye Ku-xigeenka Farsamo Yaqaannada Bricklayers & Allied Ururka Shaqaalaha 1 WA/AK, iyo ahna haweeneydii ugu horeysay ee Noqota Wakiilka Xeebta Galbeed ee Ururka Caalamiga ah ee Farsamo Yaqaannada Bricklayers & Allied. Waxay sidoo kale guddoomisay Guddiga Haweenka waxayna ku jirtaa Golaha Madaxa Fulinta, halkaas oo ay hoggaamiso dadaallada lagu horumarinayo tababarka, badbaadada, iyo helitaanka shaqooyin wanaagsan oo dhammaan shaqaalaha helaan. Waxay xubin ka tahay Guddiga Maamulka Wadajirka ah ee Sound Transit, beddelka Northwest Building Trades, waxayna ka shaqeysaa Golaha Tababarka iyo Shaqaalaha ee Gobolka Washington, iyadoo sidoo kale xubin ka ah guddiga hoose ee helitaanka daryeelka carruurta ee shaqaalaha farsamada.

Angela waa mid firfircoon oo ka tirsan AFL-CIO, Isbahaysiga Ururka Shaqaalaha Madowga, iyo Machadka A. Philip Randolph. Waxay si xoog leh u taageertaa badbaadada dadweynaha, dugsiyada amniga leh ee carruurta, iyo ka jawaabeyaasha hore ee ilaaliya bulshadeena. Waxay sidoo kale dib ugu soo celisay iyada oo loo maraayo Habitat for Humanity, abaabulka shaqaalaha, iyo u doodista bulshada.

Hadda, Angela waxay u tartamaysaa Golaha Degmada King ee Degmada 5aad si ay u keento isla xisaabtan iyo hufnaan dowladda hoose. Waxay ogtahay waxa ay ka dhigan tahay in la halgamo oo la dhiso—waxayna aaminsan tahay in qof walba uu mudan yahay helitaanka guri la awoodi karo, daryeel caafimaad, iyo fursad. Angela waxay keenni doontaa, cod degan oo daacad ah miiska—ku saleysan shaqo adag, ma aha siyaasado.

## Ryan McIrvin



(425) 306-4444
ryan@ryanmcirvin.com
www.ryanmcirvin.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka ee Siyaasadda, Falsafadda, Dhaqaalaha, iyo Isgaarsiinta, Western Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada Renton; Agaasimaha Xiriirka Dowladda iyo Bulshada, UW Bothell

**Bayaanka:** Ryan waa Xubinta Golaha Magaalada Renton ee saddex muddo-xilleed, markii ugu horeysay la doortay 2015, oo leh 20 sanno oo khibrad adeegga dadweynaha ah, siyaasadda goboleedka, iyo u doodista bulshada. Sida qof asal ahaan ka soo jeeda Koonfurta Degmada King, Ryan wuxuu ku nool yahay Renton isaga iyo xaaskiisa iyo laba gabdhood. Sida hoggaamiye goboleed ahaan, Ryan wuxuu mudnaanta siiyay badqabka dadweynaha, guryo la awoodi karo, helitaanka gaadiidka, ilaalinta deegaanka, iyo fursadaha dhaqaale.

Wuxuu hoggaamiyey dadaallada lagu hirgelinayo kamaradaha jirka lagu xirto ee booliiska wuxuuna taageeray siyaasadaha kor u qaada amniga bulshada iyada oo loo maraayo isla xisaabtan naxariis leh. Wuxuu sidoo kale ka tirsan yahay Guddiga Maamulka ee Maamulka Dab-damis Goboleedka ee Renton. Halka UW Bothell, Ryan wuxuu hoggaamiyaa xiriirka dowladda iyo bulshada, isagoo u doodaya horumarinta shaqaalaha iyo ballaarinta helitaanka waxbarashada sare, gaar ahaan ardayda jiilka koowaad iyo qoysaska shaqeeya.

Oo ah qof u ololeeya koriinka la sii wadi karo, Ryan wuxuu ku jiraa dhowr guddi oo Degmada King ah oo qaabeeya siyaasadda guryaha iyo gaadiidka ee goboleedka, oo ay ku jiraan Guddiga Gaadiid Goboleedka, Guddiga Guryaha La Awoodi Karo, iyo Golaha Qorsheynta Maareynta Koritaanka.

Oo ah orodyahan, baaskiil wade, iyo u doode deegaanka, Ryan wuxuu ku jiraa guddiga Issaquah Alps Trails Club, oo ah urur aan faa'iido doon ahayn oo u heellan ilaalinta iyo ballaarinta helitaanka dhulka dadweynaha. Wuxuu taageeray dib-u-soo-celinta dooxooyinka iyo deegaanka salmonka iyo isku xirka shabakada jardiinooyinka iyo jidadka goboleed isagoo ka shaqeynaya Golaha La-talinta Gobolka ee Eastrail.

Ryan wuxuu keenaa hab hoggaamineed oo ah wada shaqeyn, ka mid noqosho, oo waxqabad ku jihaysan oo ku saleysan khibrad qoto dheer oo goboleed iyo ballanqaad nololeed oo Koonfurta Degmada King. Wuxuu diiradda saarayaa keenista natiijooyin dhab ah isagoo ballaarinaya fursadaha, xoojinaya xaafadaha, iyo dhisaya mustaqbalka halkaas oo qof walba uu ku barwaaqoobi karo.

Waxaa taageeray: Dimuqraadiyiinta Degmada King; Xoghayaha Gobolka Steve Hobbs; Wakiillada Gobolka Steve Bergquist iyo My-Linh Thai; Duqa Magaalada Renton Armondo Pavone; Ku-xigeenka Duqa Magaalada SeaTac Iris Guzmán; Xubnaha Golaha Magaalada Renton Ruth Pérez iyo Ed Prince; Xubnaha Golaha Magaalada Kent Marli Larimer; Xubnaha Golaha Magaalada Tukwila Verna Seal iyo Hannah Hedrick; Guddiga Agaasimeyaasha Degmada Dugsiga Kent Tim Clark iyo Andy Song; Guddiga Agaasimeyaasha Degmada Dugsiga Renton Pam Teal iyo Dr. Avanti Bergquist; iyo kuwo badan!

## Golaha Degmada Lr. 5

### Kim-Khanh Van



electkimkhanhvan@gmail.com
www.ElectKimKhanhVan.com

**Waxbarashada:** Juris Doctor (Shahaadada Sharciga) , University of Dayton; shahaadooyinka Jaamacadda Cilmiga Bulshada and LSJ, University of Washington, Shahaadada Hoggaaminta Dowladda Hoose ee AWC

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareenka Socdaalka iyo Dacwad-Oogaha, Xubin Golaha Renton, Mulkiilaha Ganacsi Yar

**Bayaanka:** Ka qaxooti reer Vietnam ahaan, qoyskaygu waxay u yimaadeen Mareykanka ayagoo raadinaya mustaqbal wanaagsan. Anigoo ku koray guryo dadweyne ah, waxaan iska maalgeliyay waxbarashada, waxaanan noqday qofkii ugu horeeyay ee qoyskayga ka qalin jebiyay jaamacad. Bulshadaydu waxay igu dhiirigelisay inaan dabagalo xirfad qareen socdaal ahaan, anigoo noloshayda u huray ilaalinta qiyaamka dimuqraadiyadda.

Waxaan si sharaf leh ugu soo shaqeeyay Golaha Magaalada Renton muddo lix sannadood ah. Waxaan ahay mulkiilaha ganacsi yar, waxaan aasaasay Hey'ada Booliiska Renton, waxaanan difaacay xuquuqda muhaajiriinta iyo qaxootiga. Waxaan sidoo kale ahay Rotaariyan, Madaxweynaha Naadiga Kiwanis ee Renton, hooyo Scouts ah, iyo Dimuqraadi noloshayda oo dhan.

Degmadeenu waxay mudan tahay hoggaan u heellan shaqo adag oo fahmaya muhiimadda fursadda. Waxaan u isticmaalay jagadayda la doortay inaan la shaqeeyo hoggaamiyeyaasha goboleedka oo aan u maray Isbahaysiga Degmada King ee Ka Soo Horjeedka Nacaybka iyo Cunsuriyadda, iyo Guddiga Magdhawga Afrikaanka Mareykanka ee Seattle-Degmada King.

Ka xubinta guddiga Hey'da Kulliyadda Farsamada ee Renton ahaan, waxaan ballaariyay barnaamijyada tababarka iyo shaqo-barashada. Golaha magaalada, waxaan maalgeliyay saraakiisha iyo ka jawaabeyaasha caafimaadka maskaxda, waxaan bilaabay Unuga Ilaalada Bartamaha Magaalada iyo Guddiga Sinnaanta, waxaanan taageeray maxkamadaha bulshada. Waxaan sidoo kale taagnaa leemanka shaqo joojinta ee Mashiinisteyaasha Boeing, shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo dukaamada raashiinka, waxaanan taageeray Kordhi Mushaharka (Raise The Wage).

*Aniga ayaa ah musharaxa keliya ee tartankan ay taageereen Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta 33aad.*

Wakhtiyadaan halista ah, Degmada King waa inay ku saleysnaataa amniga, fursadda, iyo hufnaanta. In ka badan labaatan sannadood oo waayo-aragnimo iyo adkaysi ah, mar walba waxaan naftayda ka dhigay mid ay bulshada ula xisaabtami karaan waxaanan u dagaalami doonaa waxa adiga muhiimka kuu ah. Taageerooyinka: IAM 751; ATU; Senatarrada Saldaña, Dinghra iyo Das (hore); Wakiillada Donaghy iyo Stearns; Duqa Magaalada SeaTac Egal; Xubnaha Golaha Kaur, Boyd, Abdi, Simpson, Lovell iyo Sibonga (hore); Guddoomiyeyaasha Isbitaalka Polintan, Miller, iyo Berkley; Xubin Golaha KC Gossett (hore); Agaasimaha Guddiga Dugsiga Hodge (hore); Ayan Musse; Mark St. Peter; Sandra Bensley; halyeeyadii hore; ka jawaabeyaasha hore.

### Steffanie Fain



(253) 237-3361
steffanie@steffaniefain.com
www.steffaniefain.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sharciga ee Seattle University, Macalester College, Dugsiyada Dadweynaha Seattle

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen Daryeelka caafimaadka iyo shaqaaleynta; Xubin Guddiga Harborview Medical Center (tan iyo 2015)

**Bayaanka:** Dadka ku nool Koonfurta Degmada King ayaa niyad jabsan—aniguna sidoo kale. Nidaamka ma shaqeynayo, gaar ahaan amniga dadweynaha, hoy la'aanta, iyo awoodda wax iibsiga. Sida qareen, hoggaamiye aan faa'iido doon ahayn, iyo waalid ahaan, waxaan keenayaa tobanaan sanno oo waayo-aragnimo ah oo ku saabsan dhisidda is-afgarad iyo gaarista natiijooyin—anigoo ka saramaraya kala qaybsanaanta oo diiradda saaraya yoolalka wadaagga ah.

Tan iyo 2021, waxaan u adeegay sida Guddoomiyaha Guddiga Harborview—oo ka hagaya isbitaalka Degmada King dhibaatooyin is-dul saarnaa ee caafimaadka dadweynaha iyo maaliyadda. Nidaamka caafimaadka habdhaqanka waa uu jabay—iyo hagaajintiisu waxay u baahan tahay hab goboleed oo leh hoggaan khibrad leh iyo iskaashi la aasaasay.

Bulshadeena waxay u baahan tahay wax ka badan niyad wanaag—waxaan u baahanahay u doode xooggan oo leh geesinimo iyo caqli-gal guud si uu u riixo isbeddel dhab ah. Waxaan horumarin doonaa amniga dadweynaha anigoo taageeraya ka jawaabeyaasha hore iyo dib u habeynta sida aan ula macaamilno dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda, balwadda, iyo rabshadaha dhallinyarada. Waxaan sidoo kale keenayaa degdeg iyo isla xisaabtan ku saabsan dhibaatada hoy la'aanta iyo awoodda wax iibsiga—anigoo mudnaanta siinaya natiijooyinka la qiyaasi karo, naxariis, iyo maalgashi caqli badan. Ka dib sannado badan oo kharash gareyn oo leh natiijooyin aad u yar, waa wakhtigii la hubin lahaa in doolarka dadweynaha loo isticmaalo barnaamijyo dhab ahaantii caawiya dadka.


Waxaan ku noolaa Koonfurta Degmada King ku dhawwaad labaatan sanno—ko koriyay carruurtayda dugsiyada dadweynaha, tababaray ciyaaraha dhallinyarada, iyo taageeray barnaamijyada u adeegga bulshadeena kala duwan. Waxaan la shaqeeyay hoggaamiyeyaasha caafimaadka, ganacsiga, shaqaalaha, iyo dowladda si aan wax u qabto. Taasi waa sababta in ka badan 65 hoggaamiye bulsho—oo ay ku jiraan Meeyarrada Renton, Kent, Des Moines, iyo Normandy Park—ay taageereen ololahayga.

Aniga iyo ninkayga waxaan halkan kula nool nahay laba wiil iyo qoys ballaaran oo noo dhow. Degmada 5aad waa gurigeena—oo waxaan si aad ah u danaynayaa mustaqbalkeeda. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

*Taageerooyinka: Xildhibaan Adam Smith, Guddoomiye Christine Gregoire, Xoghayaha Gobolka Steve Hobbs, iyo isbahaysiga ururada shaqaalaha, ganacsatada, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada deegaanka, oo ay ku jiraan inta badan Meeyarrada Koonfurta Degmada King, Guddoomiyeyaasha Dekedda Sam Cho iyo Toshiko Hasegawa, iyo in badan.*

# Golaha Degmada Lr. 5

## Ahmad Corner



(206) 208-7909
hello@ahmadforkingcounty.com
www.ahmadforkingcounty.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno North Seattle College; Cilmiga Bulshada, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Aasaasaha, YPCommunities; Guddiga Agaasimeyaasha, Mercy Housing; Guddiga La-talinta, WTIA

**Bayaanka:** Maahan inaan u tartamayo sababtoo ah tani waa tallaabada xigta ee xirfadda siyaasadeed, waxaan u tartamayaa sababtoo ah waxaan la noolaa caqabadaha ay weli la tacaalayaan dad badan oo ku nool Koonfurta Degmada King: deganaansho la'aanta guryaha, dhaqdhaqaaq la'aanta dhaqaale, iyo nidaamyada inta badan iska indho tira dadka shaqeeya. Waxaan ka tagay xirfad teknolojiyadeed si aan u qabto shaqo saldhig ah—abuurista barnaamijyo, hagidda hoggaamiyeyaasha da'da yar, iyo caawinta dadka kale inay ka gudbaan caqabadihii aan wajahay. Markii nidaamyada jira aysan albaabadooda furin, waxaan dhisay kuwo cusub; abuurista meelaha laga galo halka aysan mid jirin. Shaqadaas waxay ku weynaatay oo noqotay mid taageertay kumanaan xubno ka tirsan bulshada waxayna wax ka beddeshay sida aan hadda talo u siiyo shirkadaha iyo ururada aan faa'iido doonka ahayn oo ku saabsan sida loo dhiso iyadoo sinnaan maskaxda lagu hayo.

Labada arrimood ee udub dhexaadka u ah tartankan waa kuwo cad: wax la awoodi karo iyo amniga. Laga soo bilaabo guryaha ilaa daryeelka carruurta, qoysas badan oo shaqeeya ayaan awoodin qiimaha. Waxaan u dagaalami doonaa guryo shaqaale oo taageera dadka ka shaqeeya in gobolkeenu socdo - macallimiinta, ka jawaabeyaasha hore, kalkaaliyeyaasha, shaqaalaha dukaamada raashiinka, iyo dadka farsamada leh - waxaanan riixi doonaa horumarinta sinnaanta oo bixisa guryo la awoodi karo oo ballaarisa helitaanka daryeelka carruurta oo tayo sare leh.

Anigoo ah aabaha laba carruur, oo Madow da'yar ah, waxaan aad uga walaacsanahay kororka dambiyada iyo rabshadaha. Amniga dhabta ah wuxuu u baahan yahay wax ka badan fulinta sharciga - waxay ka dhigan tahay jawaab degdeg ah oo dhakhso leh iyo isku xirnaan xooggan oo u dhexeysa booliiska, shaqaalaha bulshada, iyo xirfadleyaasha caafimaadka maskaxda. Waxayna ka dhigan tahay maalgelinta ururada bulshada ee taageera dhallinyarada iyo qoysaska, iyo hubinta in deganeyaasha oo dhan ay helaan guryo, cunto, iyo taageero aasaasi ah.

Koonfurta Degmada King waa la iska indho tiray muddo aad u dheer. Waxaan u tartamayaa inaan taas beddelo - iyo inaan hubiyo in bulshooyinkeenu aysan mar dambe noqonin wax fikirka ka dib ah, laakiin ay noqdaan mudnaan la maalgeliyo.

Wax dheeraad ah ka baro barta ahmadforkingcounty.com

## Peter Kwon



(425) 417-8454
PeterSeaTac@gmail.com
www.PeterKwon.com

**Waxbarashada:** Bellevue College/University of Washington-Shahaado: Shabakada iyo Xisaabinta Kombuyuutarka; Ururka Magaalooyinka Washington, Shahaadada Hoggaaminta Dowladda Hoose.

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineer Sare ee Nidaamyada, Farsamada Dhijitaalka ah; Agaasimaha Mashruuca, Korean American Institute (Machadka Kuuriyaanta Ameerika).

**Bayaanka:** Markii xaafaddayda ay la kulantay xatooyo boosto, waxaan abaabulay oo aan helay sanduuqyo boosto oo sugan. Markii waayeellada ay ku dhibtoonayeen ilaalinta deyrarkooda, waxaan abaabulay nadiifinta xaafadaha. Kadib markaan arkay dadaalkayga hoose oo helaya natiijooyin, derisyadu waxay igu dhiirigaliyeen inaan u tartamo golaha magaalada.

Toban sanno, waxaan SeaTac ugu adeegay sida Xubinta Golaha Magaalada ahaan, oo aan ku hoggaamiyay natiijooyin - ma aha hadal haynta. Si wada jir ah, annagoo aan kor u qaadin canshuuraha magaalada, waxaan hoos u dhac dhaqaale u rognay oo dheeri dhaqaale anagoo ballaarinaynay jardiinooyinka, booliiska/dabka, iyo adeegyada aadanaha. Waxaan ka dhignay SeaTac mid ka mid ah magaalooyinka ugu jaban ee Degmada King oo ballaarinay horumarinta dhaqaalaha. Intii lagu jiray cudurka faafaha, waxaanu ilaalinay adeegyada muhiimka ah, waxaanu siinay deeqo ganacsiyada halgamaya, waxaanu mudnaanta siinay baahiyaha dadkayaga aadka u nugul. Waxaanu dhisnay in ka badan 2,000 oo guri oo la awoodi karo oo laga dhisay saldhigyada tareennada fudud.

Hadda waxaan u tartamayaa Golaha Degmada King si aan u keeno isla anshaxa maaliyadeed, hoggaaminta bulshada-marka hore, iyo muhimadda wada shaqeynta ee halka Degmada King. Waxaan diiradda saari doonaa kordhinta helitaanka adeegyada caafimaadka habdhaqanka iyo dadweynaha, guryaha la awoodi karo, hagaajinta amniga dadweynaha, iyo ballaarinta gaadiidka. Waxaan maalgelin doonaa ganacsiyada yaryar, tababarada ururka shaqaalaha, iyo barnaamijyada tababarka shaqada si aan u hubiyo in qof kasta oo degane ah uu horumari karo.

Waxaan aaminsanahay in madaxda la doortay ay tahay inay dhegaystaan. Subax kasta oo Axad ah tobankii sanno ee la soo dhaafay, waxaan diyaar ka ahaa dukaan kafeega xaafadda si aan u maqlo welwelka iyo fikradaha deganeyaasha, ka dibna ku dhaqaaqay ficil.

Waxaan fahamsanahay muhiimadda ay leedahay hufnaanta iyo isla xisaabtanka waxaanan garanayaa sida wax loo qabto. Waxaan ka shaqeeyaa Guddiga Ururka Qaranka ee Magaalooyinka oo aan ka soo shaqeeyay in ka badan 20 guddiyada gobolka iyo komishannada horumarinta nolosha ee Koonfurta Degmada King.

Aad ayaan ugu faraxsanahay in ay i taageeraan hoggaamiyeyaal badan oo deegaanka ah, xubnaha bulshada, iyo u doodeyaasha shaqada. Si kastaba ha ahaatee, taageerada ugu muhiimsan waa adiga. Waxay ii ahaan lahayd sharaf inaan kasbado codkiina oo aan kugu matalo, khibrad, hawlkarnimo, edeb, iyo dadaal qoto dheer oo aan u hayo bulshadeena.

## Golaha Degmada Lr. 7

### Pahaliyah Brown



(916) 661-9234
pahaliyah@votepahaliyah.com
www.VotePahaliyah.com

**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebisay University of Washington tababar ku saabsan adeegga dadweynaha , siyaasadda deegaanka, iyo hoggaanka bulshada.

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareynta Mashruuca ee dadweynaha iyo mutadawac bulsho oo muddo dheer oo leh khibrad dowladeed.

**Bayaanka:** Magacaygu waa Pahaliyah Brown, waxaanan u tartamayaa Golaha Degmada King sababtoo ah qoysaskeenu waxay mudan yihiin xaafado nadiif ah, gaadiid ammaan ah, iyo helitaanka fursado—meel kasta oo aan kaga nool nahay Degmada 7.

In ka badan 30 sanno oo adeegga dadweynaha iyo bulshada oo heer gobol iyo heer deegaan ah, waxaan ku qaatay xirfadeyda inaan ka dhigo dowladda mid daah-furan oo ka jawaab celisa. Waxaan tababaray ciyaaraha dhallinyarada, abaabulay xaflado xaafadeed, oo hoggaamiyey dadaallada lagu soo celinayo deegaanka iyo hagaajinta caafimaadka Dadweynaha. Waxaan aaminsanahay in marka hore la dhegaysto, ka dibna la hoggaamiyo xalka ka tarjumaya baahiyaha bulshadeena.


Waxaan ahay qof wax ku ool ah, oo diiradda saaraya natiijooyinka, qiimeeya natiijooyinka la taaban karo ee ku saleysan xogta. Ma sheeganayo inaan haysto dhammaan jawaabaha caqabadaha ugu adag—laakiin waxaan aaminsanahay in xalka uu ku jiro bulshadeena, haddii aan si ku filan u danayno inaan wada shaqeyno. Haddii la i siiyo fursad aan ugu adeego, waxaan ballanqaadayaa inaan marka hore dhegaysto oo aan dhiso is-afgarad bulsho oo wadajir ah si aan u wajahno dhibaatooyinka ugu adag iyo kuwa ugu fudud labadaba.

Ka xubintaada golaha ahaan, waxaan diiradda saari doonaa taageeridda ganacsiyada yaryar iyo abuurista shaqooyin leh mushahar-qoys, hagaajinta badqabka waddooyinka, hareeraha waddooyinka, iyo gaadiidka dadweynaha, ballaarinta helitaanka jardiinooyinka, meelaha cagaaran, iyo deegaan caafimaad leh, hubinta in kheyraadka si siman loogu qaybiyo dhammaan bulshooyinka, iyo abuurista meelaha dadweynaha ee nadiif ah oo ammaan ah oo loogu talagalay dhammaan.

Waxaan ka soo jeedaa qoys ciidan ah—aabbahay iyo walaalkay labaduba waxay ka tirsanaayeen oo ka hawlgabay Ciidanka Cirka wakhti lagu jiray dagaal. Waxaan si sharaf leh u taageeraa halyeeyadeena hore iyo qoysas adag. Waxaan ahay wiil ay dhashay hooyo Kuuriyaan ah oo aan ku faano dhaxalka aan ka soo jeedo ee Madowga Mareykanka, taas oo saldhig u ah ixtiraamka aan u hayo codadka kala duwan iyo taariikhaha qaabeeya Degmada 7.

Waxaa sharaf ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga oo aan kula shaqeeyo si aan u dhisno mustaqbal wanaagsan. Wax dheeraad ah ka baro barta www.VotePahaliyah.com.

### Pete von Reichbauer



(877) 895-8410
pvrcommittee@gmail.com
petelistens.com

**Waxbarashada:** Dugsiyada Kaatoliga ; Dugsiga Sare ee Clover Park ; University of Alabama ; Ciidanka Mareykanka (Hawlgabay)

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin, Golaha Degmada King ; Guddoomiye, Guddiga Siyaasad Goboleedka

**Bayaanka:** Dowladda waxay si fiican u shaqaysaa marka aan *wada shaqayno*.

Pete waa *u doodaheena*. Keliya ma aha maxkamada Seattle—Pete waxa uu joogaa xaafadaheena isaga oo dhegaysanaya dadka oo ka dhigaaya dowladdu inay noo shaqeeyso. Haddii ay tahay qof-iyo-qof ee halka dukaan qaxwo maxalli ah ama aqalka magaalada bulshada, Pete wuxuu ka dhegaystaa dadweynaha waxa muhiimka ah: badqabka dadweynaha, horumarinnada gaadiidka, iyo adeegyada dadweynaha ee jawaabta leh.

Sida Guddoomiyaha Guddiga Siyaasad Gobolkeedka, Pete wuxuu isu keenaa hoggaamiyeyaasha dhammaan 39ka magaalo ee ku yaal Degmada King si ay uga wada hadlaan arrimaha guud ee degmada—sida dembiyada, hoy la'aanta, iyo abuurista shaqooyin. Wuxuu dhisaa iskaashiyo maxalli ah, sida barnaamijyada tababarka ka hor ee dugsiyadeena. "Dadaalkaaga ku aaddan xirfadaha waa mid aad u wanaagsan. Waad ku mahadsan tahay adiga iyo asxaabtaada taageerada aad siisaan dhallinyarada Auburn si ay u helaan waddooyinka tababarka ka hor," ayuu yiri Alan Spicciati, Kormeeraha Guud ee Auburn SD. Pete waa taageere xooggan oo ah in si buuxda loo maalgeliyo Ka Jawaabeyaasha Koowaad, laga bilaabo saraakiisha booliiska ilaa dab-damiska, taas oo ah sababta ay shaqaalaha u taageeraan Pete.

Pete sidoo kale wuxuu ka caawiyay qaabaynta barnaamijyada muhiimka ah ee bulshada. Wuxuu ahaa Xubinta Aasaasaha Guddiga ee Isbitaalka St. Francis, iyo Aasaasaha Guddiga Agaasimeyaasha ee Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha ee Auburn / Federal Way.

Markii bilyaneerrada California ay isku dayeen inay Seahawks ka saaraan gobolka, Pete wuxuu soo dhex galay isagoo dalaal ka noqday in Paul Allen uu iibsado. Agaasimihii hore ee fulinta Ron Sims ayaa yiri: "Pete von Reichbauer wuxuu qabtay shaqo fantastik ah oo ku saabsan inuu Seahawks ku hayo Magaalada Seattle. Anigu ma rumaysni inay dhici lahayd faragelintiisa la'aanteed," iyo Seattle Times ayaa ugu yeeray "geesiga dagaalka." Sida Muwaadin gaar ah iyo hoggaamiyaha dadweynaha ahaan, Pete wuxuu taageeray ciyaaraha heer kasta; ciyaaruhu waxay isu keenaan dadka da' kasta leh.

Pete waa hoggaamiye caqli-gal ah oo la heli karo oo na dhegaysta. Laga bilaabo shirarka xaafadda ilaa go'aamada goboleed, Pete von Reichbauer ayaa xaadir ah, wuu dhegaystaa, wuuna keenaa!

## Golaha Degmada Lr. 7

### Maya Vengadasalam



(206) 465-5270
info@mayaforkingcounty.com
www.mayaforkingcounty.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Ganacsiga, Florida Atlantic University; Maareynta Lean Six Sigma, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Xisaabiye & Falanqeeye Ganacsi; La-taliye Horumarinta Hoggaanka ee Hadda, WSSDA

**Bayaanka:** Anigoo leh in ka badan toban sanno oo adeeg dadweyne iyo hoggaan la doortay ah, waxaan u tartamayaa Golaha Degmada King si aan u keeno maamul mas'uul ah, oo ku saleysan bulshada Degmada King, Degmada 7, anigoo hubinaya maalgelin wakhti dheer ah oo lagu taageerayo nidaamyada awood siiya shakhsiyaadka iyo bulshooyinka. Aniga iyo ninkayga waxaan ku noolayn Koonfurta Degmada King in ka badan 30 sanno, anagoo korinay wiilkeenna iyo mutadawac ka ahaa hindisaha dugsiyada iyo magaalada ee Kent, Auburn, Federal Way, iyo meelaha ku hareeraysan. Waxaan la shaqeeyay qoysaska, macallimiinta, iyo hoggaamiyeyaasha maxalliga ah si aan u xoojiyo bulshooyinkeenna oo aan u ballaariyo fursadaha.

Ka Agaasime Guddiga Dugsiga, Madaxweyne, iyo Wakiil Sharciyeed muddo siddeed sanno ahaan, waxaan taageeray miisaaniyado isku dheellitiran, maalgelinta waajibaadka gobolka, horumarinta natiijooyinka ardayda, iyo taageero sharciyeed oo xooggan si loo xalliyo farqiga fursadaha. Maanta, waxaan la-taliye u ahay hey'ad goboleed halkaas oo aan ku tababaro mas'uuliyiinta lasoo doortay ee ku aaddan maaliyadda iyo waajibaadka sharciga—anigoo adeegsanaya waayo-aragnimadayda dejinta siyaasadda iyo maareynta heerka fulinta iyo asalka xisaabaadka.

Dowladdu waxay si fiican u shaqeysaa marka deganeyaashu fahmaan sida go'aannada loo gaaro iyo sida maalgelinta dadweynaha loo isticmaalo. Waxaan ku dadaalay in aan taageero hufnaan wanaagsan si daneeyayaashu u *qiimeeyaan sida doolarka dadweynaha loo isticmaalo*. Waxaan tan ku samayn karnaa nidaamyo dhijitaal ah oo xooggan, habab jawaab celin oo firfircoon, iyo qalabyo isdhexgal oo awood siiya deganeyaasha.

Maareynta maaliyadeed ee mas'uulka ah waxay xoojinaysaa barnaamijyada muhiimka ah, waxay kicisaa kobaca dhaqaalaha, waxayna dhistaa bulshooyin adkeysi leh. Anigoo la shaqeynaya hey'adaha dowladda hoose iyo bixiyeyaasha adeegga, waxaan mudnaan siin doonaa xalal caqli-gal ah, oo naxariis leh oo ku saabsan guryaha la awoodi karo iyo hoy la'aanta.

Degmada King waxay u qalantaa hoggaan diiradda saaraya natiijooyinka oo ka tarjumaya qiyaamkeena kala duwan oo wax ka qabta caqabadaha dhabta ah. Waxaan ka shaqeyn doonaa xoojinta kobaca dhaqaalaha, hagaajinta helitaanka waxbarashada iyo amniga dadweynaha, ballaarinta guryaha la awoodi karo, iyo hubinta maamul hufan oo loo dhan yahay.

Adeeggayga awgiis, waxaa la iigu maamuusay abaalmarinno badan oo ay taageereen macallimiinta iyo hoggaamiyeyaasha bulshada labadaba. Waxaan keenaa waayo-aragnimo maamul iyo ballanqaad qoto dheer labadaba Degmada King – iyo *waxaa sharaf ii ahaan lahayd in aan kasbado codkaaga*.



**Ma Guurtay? Magacaaga ma beddelay?**

Cusboonaysii Diiwaan Gelintaada Codbixiyaha! Tag barta **VoteWA.gov** ugu dambeyn Julaay 28 si aad uga codeyso Doorashada Hordhaca.

# Duqa Magaalada

## Ronnie Morgan



(253) 733-8973
ronnieatthewater1313@gmail.com

**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Jiilka 5-aad ee Warshadaha Baabuurta ee Ganacsade Maxalli ah

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa. Duqa Magaalada sababtoo ah waxaan leeyahay aragti ah inaan Auburn u beddelo Bulsho Horumarsan oo ammaan ah oo aan dhammaanteen ku faani karno.

Waxaa iga go'an inaan wax ka qabto arrimaha xasaasiga ah ee saameeya nolol maalmeedkeena Auburn.

Iyadoo la abuurayo guryo la awoodi karo oo shaqaale; samaynta habka lagu dhisayo saaxiibtinimo badan oo horumariyayaal ah oo u gogol xaaraya degmooyinka kale ee deegaanka guri la'aanta ayaa dhawwaan noqon doonta wax la soo dhaafay. Yaraynta dembiyada iyo toogashada ayaa ah mudnaantayda ugu sareysa. Sida Duqa Magaalada ahaan waxaan hubin doonaa in xeerarka deegaanka iyo sharciyada gobolka si adag loo dhaqan gelin doono. Markaan horey u sii wado mashruuca Helitaanka SR 164 waxaan hiigsanayaa inaan yareeyo ciriiriga taraafikada ee dhex mara bartamaha magaalada Auburn. Abuurista fursadaha shaqo ayaa muhiim u ah guusha dadka degan Auburn waxaanan leeyahay qorsheyaal hami leh oo aan ku keenayo ganacsiyo cusub Auburn oo aan u abuurro fursado cusub kuwa jira. U Codee Inaad Beddesho Auburn

## Nancy Backus



(206) 459-9680
nancy.k.backus@gmail.com
nancybackus.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Xisaabinta, City University; Ka Qalin Jebiyay Machadka Hoggaaminta ee South Puget Sound (Leadership Institute of South Puget Sound), Ka Qalin Jebiyay WA-CELI

**Shaqo iyo Xirfad:** Duqa Magaalada Auburn 2014 ilaa iyo hadda; Shirkadda Boeing hoggaanka maaliyadda 1989-2014

**Bayaanka:** Sida *Duqiina* Magaalada ahaan, waxaan u heellannahay inaan dhiso magaalo ammaan ah, xooggan, oo adkaysi badan oo aan dhammaanteen ugu yeeri karno guri - waxaan fikradaha u beddelayaa ficil, caqabadaha fursado, waxaan sameynayaa maalgashi muhiim ah oo ku saabsan Badqabka dadweynaha, fursadaha guryaha, iyo kaabayaasha muhiimka ah si aan bulshada ugu ilaalino *ammaan, caafimaad qab, oo firfircooni*.

Waxaan diiradda saaray hagaajinta bartamaha magaalada iyo shaqooyinka mushaharka nolosha. Shaqadeena wadajirka ah waxay abuureysaa magaalo kobcaysa oo qoysasku ay dareemaan ammaan iyo ganacsigu uu barwaaqoobi karo. Waxaan ballaariyay dadaallada ka dhanka ah hoy la'aanta, anigoo ku xidhay in ka badan 400 qof guryo iyo adeegyo muhiim ah. Waxaan aaminsanahay naxariis, asla xisaabtan, iyo bulsho. Waxaan sidoo kale aaminsanahay xalal wax ku ool ah. Waxaan horumarinaynaa meelaha bulshada ee aan ku leenahay jardiinooyin dib loo cusboonaysiiyay iyo hindisayaal farshaxan iyo dhaqan oo sii kordhaya—oo ay ku jiraan xafladaha xagaaga ee xaafadaha.

Waxaa i taageeray hoggaamiyeyaal goboleed oo ay ku jiraan Xildhibaan Kim Schrier, Marilyn Strickland, Xildhibaan Adam Smith, Dab-damiyeyaasha #1352, duqooyinka magaalooyinka deegaanka iyo kuwo kale. U heellan *horumarkeena* oo loo maraayo hoggaan go'aan leh, iskaashi leh, *Waxaa sharaf ii ah inaan mar kale kasbado codkaaga.*

## Yolanda Trout



(253) 939-5707
info@ElectYolanda.com
www.ElectYolanda.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno ee Waxbarashada Goorta Hore

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada Auburn

**Bayaanka:** *Auburn waxay u qalantaa duq magaalo oo horseeda daacadnimo, naxariis, iyo aragti geesinimo leh oo ka dhigaysa magaalo ammaan ah, firfircoon, oo loo dhan yahay.* Sida xubinta golahaaga, waxaan dhisay xiriir adag oo aan la leeyahay mulkiileyaasha ganacsiga iyo xubnaha bulshada, kiraysteyaasha iyo mulkiileyaasha guryaha, iyo hoggaamiyeyaasha la soo doortay ee dalka oo dhan. Waxaan u adeegaa sidii madaxweynaha ururka Isbaanishka ee Mas'uuliyiinta Maxalliga ah ee la soo Doortay (Hispanic Elected Local Officials) ee hoos yimaada Ururka Qaranka ee Magaalooyinka (National League of Cities) waxaanan si firfircoon uga qayb qaataa dhowr guddiyo goboleed.

Sida duqaaga magaalada ahaan, waxaan keenni doonaa xiriiradan—iyo waayo-aragnimadayda nololeed—si aan u wado isbeddel dhab ah, oo waara. Muhiimaddayda waxaa ka mid ah hagaajinta badqabka taraafikada iyo booliiska bulshada, ballaarinta helitaanka daryeelka carruurta ee la awoodi karo iyo barnaamijyada hoggaaminta dhallinyarada, iyo hubinta in qof kasta oo Auburn ku nool uu helo guryo la awoodi karo.

Waxaa la joogaa wakhtigii hoggaan dhab ah loo heli lahaa arrimaha ugu muhiimsan bulshadeena. Waa wakhtigii isbeddelka. Waxaan si xushmad leh ku weydiisanayaa codkaaga.

## Golaha Jagada Lr. 4

### Brian Lott



(253) 326-4785
Brian@votelott.com
www.votelott.com

**Waxbarashada:** Bellevue College, tababar xirfadyahan oo ku saabsan maaraynta ganacsiga iyo hoggaaminta mashaariicda

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar & Maareeyaha Sare ee Mashruuca

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Auburn si aan u matalo shacabka. Auburn waxay mudan tahay hoggaan ku salaysan caqli-gal, isla xisaabtan, iyo daacadnimo. Waxaan u keenaa qiyaamkaas go'aan kasta oo aan sameeyo.

Anigoo leh asalka maaraynta mashaariicda iyo lahaanshaha ganacsiga, waxaan ogahay sida loo dhaafo burooqraasiyadda oo wax loo qabto. Waxaan taageeri doonaa booliis bulsho oo xooggan, wacyigelinta dhallinyarada, iyo xalal maxalli ah oo ku saabsan hoy la'aanta kuwaasoo isugu jira guryo, daaweynta caafimaadka maskaxda, iyo tababarka shaqada. Waxaan ku dadaalli doonaa in la yareeyo xeerarka adag ee ganacsiyada yaryar iyo mashaariicda guryaha la awoodi karo si Auburn ay ugu koraan siyaabo u adeegaya qoysaska shaqeeya. Soo noolaynta bartamaha Auburn waa furaha mustaqbalka magaalada. Waxaan taageeri doonaa koboc caqli-gal ah oo buuxiya dukaannada, abuura shaqooyin, oo dhisa bulsho midaysan.

Waxaan noqon doonaa mid la heli karo, daah furan, oo diiradda saaraya natiijooyinka. Waxaan dhagaysan doonaa walaacyadiina, u ololayn doonaa xalal wax ku ool ah, oo si wadajir ah uga shaqeyn doonaa horumarinta Auburn. Nabadgelyo, xooggan, oo barwaaqo leh – hadda iyo mustaqbalka.

### Yuval Fleming



fleming.yuval@gmail.com
FlemingForAuburn.com

**Waxbarashada:** University of Colorado Boulder; Shahaadada Jaamacadda, Cilmiga Siyaasadda iyo Dowladda

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Barnaamijka

**Bayaanka:** Auburn waxay u baahan tahay qorshe iyo aragti mustaqbal. Waxaan damacsanahay inaan keeno fikrado cusub, aragti cusub iyo xalal geesinimo leh si aan kor ugu qaadno tayada nolosheena, uga dhigno waddooyinkeena kuwo badqab leh oo hoos loogu dhigo qiimaha nolosha. Ballanqaadkayga asaasiga ahi waa inaan had iyo jeer ahaado mid la heli karo, daah-furan, oo aan si firfircoon u raadiyo ka-qaybgalka iyo wada-hadalka muwaadiniinta iyo jawaab-celinta bulshada.

Waxaan wajahaynaa dhibaatada qiimaha nolosha oo aan horay loo arag waxaanan u baahan nahay inaan helno habab hufan oo lagu dhimmo culayska canshuurta ee saaran dadka shaqeeya.

Waxaan leeyahay waayo-aragnimo 20 sanno ka badan oo ku aaddan door hoggaamineed ee militariga, waaxda gaarka ah iyo dowladda, waxaan aad ugu sareeyaa iskaashiga iyo dhisidda is-fahamka si aan u horumariyo xalal cusub oo dhibaatooyinka adag. Auburn waa meel gaar ah oo lagu noolaado, muqadas ah oo soo jiidasho leh, ku barakeysan qurux dabiici ah, kheyraadka badan iyo fursado dhaqaale. Dadkeena kala duwani waa naxariis leh, dulqaad leh, caqli badan oo dareen leh madaxdeenna la doortayna waa inay sidaas oo kale ahaadaan.

### Erica Tomas



ericatomas4office@gmail.com
ericaforauburn.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga ee University of Washington, Shahaadada Mastarka ee Caafimaadka Dadweynaha ee George Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** Cudurka Faafa, Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington

**Bayaanka:** Auburn waa magaalo koraysa; kaabayaasha iyo taageerada bulshada ee aan hadda haysano looguma tala gelin magaalada aan maanta nahay. Waxaan u tartamayaa golaha magaalada sababtoo ah waxaan doonayaa inaan hubiyo marka Auburn ay korayso, inaanan keliya xallin dhibaatooyinka hadda na haysta, laakiin sidoo kale qorsheyno mustaqbalka.

Sida xubin sharaf leh oo ka tirsan ururka shaqaalaha ahaan, mar walba waxaan u doodi doonaa baahiyaha dadka shaqeeya ee da' kasta leh ee Auburn ugu waca guri. Taasi waxay ka dhigan tahay kordhinta sahayda guryaha la awoodi karo; taasi waxay ka dhigan tahay kordhinta fursadaha gaadiidka; taasi waxay ka dhigan tahay dhisidda dukaamada raashiinka, adeegyada, iyo meelaha bulshada isugu timaado; taasi waxay ka dhigan tahay xaqiijinta in shaqooyinka ururka shaqaalaha ee mushaharka fiican leh la keeno oo lagu hayo halkan Auburn. Waxayna ka dhigan tahay hubinta in Auburn ay diyaar u tahay soo dhawweynta dhammaan kuwa raadinaaya meel ay ku barwaaqoobaan oo ku koraan.

Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga, oo aan ka dhigo Auburn mid barwaaqo ah hadda iyo sannadaha soo socda.

# Golaha Jagada Lr. 6

## Cobi Clark



campaign@cobiclark.com
cobiclark.com

**Waxbarashada:** Dhammaynaya: Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka iyo Sayniska, Falanqeynta Dhaqaalaha iyo Siyaasadda, Siyaasadda iyo Falsafadda, iyo Xisaabta


**Shaqo iyo Xirfad:** Soo-saare Hore ee Guryaha

**Bayaanka:** Waxaan ahay degane noloshiisa oo dhan ku noolaa deegaanka, oo loo aqoonsaday xirfad yahan ganacsi ka mid ah 40-ka ugu sareeya ee ka yar 40 jirka. Waxaan ka hirgeliyay in ka badan 300 guri guud ahaan Washington ka hor inta aanan diiradda saarin adeegga dadweynaha iyo u adeeggida Senatar Jeff Wilson inta lagu guda jiray kalfadhiga sharci dejinta ee 2025. Khibradayda ku saabsan guryaha iyo siyaasadda waxay ii oggolaanaysaa inaan keeno hoggaan caqligal ah, oo ku saleysan waayo-aragnimo dhab ah, si aan u xalliyo caqabadaha Auburn.

Waxaa iga go'an inaan balaariyo guryaha la awoodi karo iyada oo loo maraayo dib-u-habeyn caqligal ah oo ku saabsan aagagga, ilaalinta sharciga iyo xorriyadaha madaniga ah iyadoo lala kaashanayo nidaamyada maxkamadda iyo booliiska ee Auburn, iyo horumarinta ganacsiyada maxalliga ah si ay u guuleystaan. In kasta oo aan miiska keeno fikrado adag, haddana waxaan si adag u aaminsanahay *dhegaysiga* jawaab-celinta si loo hubiyo in siyaasad kasta ay la jaan qaaddo bulshada, iyadoo la ixtiraamayo xorriyadda shakhsiyadeed.

Anigoo leh xidido qoto dheer ee deegaanka iyo aragti fog oo ku wajahan mustaqbalka, waxaan diyaar u ahay inaan u istaago oo aan u adeego bulshadeena. Wax badan ka baro CobiClark.com oo fadlan u codee Clark doorashadaan!

## James Jeyaraj



(509) 294-4191
james.jeyaraj59@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Ururada, Whitworth University. Shahaadada Jaamacadda Labada Sanno ee Teknolojiyada Shabakadda Renton Technical College.

**Shaqo iyo Xirfad:** Qorsheeye Wax Soo-saar/Jadwaleeye

**Bayaanka:** Waxaan keenayaa khibrad dhammaystiran oo ku saabsan adeegga dadweynaha, ganacsiga, iyo ka qaybgalka bulshada. Anigoo hore u ahaan jiray Xubin Golaha Magaalada Auburn iyo Ku-xigeenka Duqa Magaalada, waxaan mudnaanta siiyay badbaadada dadweynaha, guryaha, iyo sinnaanta. Khibraddaydu waxay ii suuragelinaysaa inaan fahmo baahiyaha bulshada, dhiso iskaashiyo, oo hirgeliyo siyaasado loo dhan yahay, oo ku saleysan natiijooyin hagaajinaaya nolol maalmeedka deganeyaasha.

Xirfad ahaan, waxaan ka shaqeeyay warshadaha elektarooniga iyo hawada sare, taas oo bixisay aragti qiimo leh oo ku saabsan sida ganacsiga iyo dowladda hoose isugu xirmaan. Waxaan sidoo kale haystaa Shahaado Sare oo Hoggaaminta Dowladda Hoose ah oo ka socota Ururka Magaalooyinka Washington. Isku darka khibraddaan dadweynaha iyo kuwa gaarka ah waxay ii oggolaanaysaa inaan u wajaho maamulka magaalada si dheelitiran oo wax ku ool ah.

Hadda waxaan si qoto dheer ugu lug leeyahay shaqada aan faa'iido doonka ahayn. Ka Guddoomiyaha Guddiga urur maxalli ahaan oo siiya guryo la awoodi karo qoysaska danyarta ah, waxaan si toos ah u arkaa caqabadaha ay wajahayaan deriskeena aadka u nugul. Waxaa iga go'an in la ballaariyo helitaanka guryo xasilloon, oo la awoodi karo si loo caawiyo qoysaska inay barwaaqoobaan.

## Lisa M. Stirgus



(206) 856-0198
hello@votelisastirgus.com
www.votelisastirgus.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmi-Nafsiga, taqasus Dhiirigelinta iyo Waxqabadka Aadanaha, Capella University

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada Auburn, Jagada 6aad; Tababaraha Hoggaanka iyo Waxqabadka Ganacsiga

**Bayaanka:** Waxaan ahay hooyo, xaas, degane Auburn ah oo ku faanaya, iyo qof ka adkaaday caqabado badan si uu u dhiso nolol leh ujeeddo. Waxaan ka soo shaqeeyay heerka bangiga ilaa madaxa fulinta sare, anigoo hoggaaminaya kooxo ka kooban ilaa 425 xubnood iyo miisaaniyado gaaraya $2 bilyan. Waxaan helay shahaaddadayda jaamacadda anigoo jira 43, oo ay i dhiirigelisay xiisaha aan u qabo hoggaaminta isbeddelka *iyo saameynta* ay *ku leedahay* nolosha dadka. Anigoo leh in ka badan 20+ sannadood oo hoggaamin ah oo ku saabsan waaxda gaarka ah iyo tan aan faa'iido doonka ahayn, waxaan keenaa adkaysi, dulqaad, qalbi, iyo tan ugu muhiimsan, natiijooyin.

Waxaan u tartamayaa *in aan sii hayo* kursiga la ii magacaabay ee *Golaha Magaalada Auburn*, halkaas oo aan ku *muujiyay* hufnaan, isla xisaabtan ku aaddan runta, iyo qalbi!

Waxaa *si sharaf leh ii taageeray* Meeyarka Auburn Nancy Backus, Xubnaha Golaha Tracy Taylor, Clinton Taylor, iyo Hanan Amer, iyo sidoo kale Meeyarka Renton Armando Pavone, Meeyarka Kent Dana Ralph, Ururka Caalamiga ah ee Dab-damiyeyaasha Ururka Shaqaalaha 1352, iyo kuwo kale oo badan...

## Golaha Jagada Lr. 1

### Cameron Boosman

Sawir lama soo gudbin

boosmanforburien@gmail.com

**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxa Tababarka Hawlgallada, King County Metro

**Bayaanka:** Cameron Boosman ee ku aaddan Golaha Magaalada Burien; Hoggaamin horumarsan. Adeeg la xaqiijiyay.

Sida xaasle, aabbe, halyeey hore, iyo adeegaha dadweynaha heellan ahaan oo u shaqeeya King County Metro, Cameron wuxuu fahamsan yahay caqabadaha qoysaska Burien ay la kulmaan maalin kasta. Waxaa ka go'an bixinta xalal fikir horusocod ah, oo mas'uuliyad dhaqaale leh—xoogga saaraya adeegyada magaalada, hagaajinta waxtarka, iyo ilaalinta Burien inay ka badbaado hubanti la'aanta dhaqaale.

Hoy la'aanta, ciriiriga taraafikada, iyo amniga dadweynaha waa caqabado goboleedka ah oo u baahan xalal isku-dhafan oo goboleedka ah. Cameron wuxuu u doodi doonaa iskaashi xooggan oo lala yeesho Degmada King iyo magaalooyinka deriska la ah, isagoo hubinaaya in Burien ay yeelato cod awood leh oo ku saabsan go'aamada siyaasadda isla markaana ay aragto natiijooyin dhab ah, oo waara. Hoggaamintiisa waxaa hagaya ballanqaad ku saabsan horumar, sinnaan, iyo xallinta dhibaatooyinka si wax ku ool ah. Burien waxay istaahishaa hormuud fahmaya baahiyiheeda oo diyaar u ah inuu tallaabo qaado. U codee Cameron Boosman—hoggaamiye heellan oo ka shaqeynaya in Burien noqoto mid xooggan, ammaan ah, oo adkaysi badan leh.

### Jessica Ivey



(206) 251-7581
info@jessica4burien.com
www.jessica4burien.com

**Waxbarashada:** MBA (Shahaadada Mastarka), Shahaadada Cilmiga ee Suuqgeynta, Western Governors University; Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno, Naqshadeynta, El Paso College

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Suuqgeynta ee Seattle Orcas

**Bayaanka:** Aniga oo ah hooyo shaqeynaysa oo ku soo korisay carruurteyda Koonfurta Degmada King, waxaan fahamsanahay cadaadiska dhabta ah ee qoysaska Burien ay la kulmaan—kororka kharashaadka iyo baahida loo qabo xaafado nabad ah, oo soo dhawweyn leh. Ka Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Qorsheynta ee Burien ahaan, waxaan ka caawiyay dejinta aragti wax ka qabata guryaha la awoodi karo, si siman u maalgelisa xaafadaha, oo kor u qaada kobaca waara. Aniga oo leh taariikh xirfadeed oo ah hoggaamiye suuqgeyn, waxaan keenayaa waayo-aragnimo dhisidda bulshooyin xooggan iyo ku mideynaya dadka oo aan u maraayo yoolal wadajir ah.

Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan uga gudbo kala qaybsanaanta oo aan u keeno natiijooyin dhab ah. Waxaan u ololeyn doonaa guryo la awoodi karo iyo habab cusub oo guri lahaansho ah, waxaan taageeri doonaa kobaca dhaqaalaha anigoo soo jiidanaya shaqooyin iyo taageeraya ganacsiyada yaryar, waxaanan ka shaqeyn doonaa in Burien ay ahaato mid ammaan ah, lagu socon karo, oo firfircoon. Waxaan sidoo kale mudnaan siin doonaa jardiinooyinka, adeegyada, iyo barnaamijyada caafimaadka maskaxda ee ka jawaabidda wadajirka ah.

Ka xubin ka tirsan bulshada LGBTQ+ ahaan, waxaa iga go'an inaan dhiso Burien oo barwaaqo ah, oo loo dhan yahay qof walba. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

### Hugo Garcia



(801) 896-8076
hugo4burien@gmail.com
hugoforburien.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Evergreen iyo xoogaa jaamacad


**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada Burien, La-taliye Ganacsi Yar, Xubinta Guddiga, Ganacsade

**Bayaanka:** Khibraddayda balaaran, oo ay ku jirto ka shaqeynta Guddiga Qorsheynta iyo Iskaashiga Horumarinta Dhaqaalaha, waxay Burien ugu adeegtay si wanaagsan inta lagu jiray muddo xilleedkaygii koowaad. Waxaan sii ahaan doonaa u doodaha xooggan ee qoysaska shaqeeya, ganacsiyada yaryar iyo shaqaalaha.

Wakiilnimada caqligalka guud, naxariista leh ayaa ku yaraatay Golaha waxayna carqaladeysay waxtarkeenna. Asalkayga qaxootinimada iyo waayo-aragnimadayda nololeed waxay i xasuusisaa in isbahaysiyo xooggan oo loo dhisay in kor loogu qaado kuwa ugu nugul ay mudan yihiin in loo dagaalamo. Waxaan sii wadi doonaa inaan dhegaysto deriska oo aan kor u qaado codkooda si aan u abuuro magaalo adkaysi leh oo dhammaan qoysaskeenu, ayadoon loo eegin sida ay isu aqoonsadaan ama halka ay ku dhasheen, ay ku barwaaqoobi karaan.

Diiraddaydu waxay noqon doontaa in Burien laga dhigo mid la awoodi karo oo qoysaska iyo shaqaalaha ay udub dhexaad u noqdaan siyaasadaha magaalada. Taageerooyinkii ugu horeeyay waxaa ka mid ah: Dimuqraadiyiinta Degmada King, Ururka Shaqaalaha MLK, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta 33aad, Xubinta Golaha KC Girmay Zahilay, Xisbiga Qoysaska Shaqeeya, Ururka Rakaabka Gaadiidka, Haweenka Midabka leh ee Siyaasadda, UFCW 3000.

### Claudio Fernandez



info@electclaudioforburien.com
www.electclaudioforburien.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Ganacsiga iyo Suuqgeynta, Orange Coast College

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Dhismaha iyo Shaqaalaha

**Bayaanka:** Magaaladeenu waa inay noqotaa mid u jaban oo ammaan u ah deganeyaasha. Dad badan, gaar ahaan waayeellada ku nool dakhli go'an iyo qoysaska shaqeeya, ayaa lagu khasbayaa inay ka guuraan sababo la xiriira qiimaha sii kordhaaya. Waxaan u tartamayaa doorashada si aan u kordhiyo kartida la awoodi karo iyo si aan u hagaajiyo amniga dadweynaha.

Anigoo ah mulkiilaha ganacsi yar oo dhismo ah, waxaan fahamsanahay baahida loo qabo xalal wax ku ool ah oo qiimo jaban. Waxaan taageeri doonaa horumarinta mas'uuliyadda leh ee abuuraysa shaqooyin, soo jiidata adeegyo cusub, iyo kobcinta dhaqaalaha oo keenaaya dakhliga badan ee magaaladeena isla markaana meesha ka saaraya baahida loo qabo canshuuraha sare.

Magaaladeena waxay u baahan tahay hoggaan diiradda saaraya caqabadaha dhabta ah ee nolosha. Waxaan ahay aabbe maxalli ah iyo shaqaale xoogsato, waxaanan u tartamayaa inaan hagaajiyo magaaladeena, ma ahan inaan noqdo siyaasi. Waxaan iga go'an inaan ilaaliyo amniga dadweynaha, taageero qoysaska shaqeeya, iyo inaan dhiso mustaqbal ay qof walba ku barwaaqoobi karaan. Waxaan ballan qaadayaa inaan u adeego Burien si daacadnimo iyo ujeeddo leh. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

# Golaha Jagada Lr. 3

## Rashell Lisowski



info@electrashelllisowski.com
Electrashell.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda, Syracuse University; Shahaadada Jaamacadda ee Xiriirka Caalamiga, Syracuse University

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Abaabulka, Shabakadda Waxqabadka Bulshada Washington (WashingtonCAN)

**Bayaanka:** Waxaan kaa codsanayaa codkaaga si aad daacadnimada ka sareeysa siyaasadda dib ugu soo celiso Burien. Marka aan kor u qaadno qoysaska shaqeeya, waxaan kor u qaadnaa magaalada oo dhan. Waxaan ahay 30 jir mulkiile ganacsi yar leh, qaban qaabiyaha bulshada, iyo xaaska soo galooti, anigoo ka fikiraya inaan qoyskayga ku bilaabo halkan. Laakiin sida kuwa badan, ma hubo ilaa inta aan awoodi doono inaan Burien ugu yeero guri. Waxaan garaacay boqollaal albaab oo maqlayey cabsi isku mid ah: ku luminaaya guryaha canshuuraha kor u kacaaya awgeed, soo wajahday kirooyinka iyo kharashaadka nolosha ii cirka isku shareeray, iyo inaan dareemayo in la nalaga xiray go'aamada qaabeeya nolosheena. Waxaan ilaalin doonaa canshuuraha guryaha si caddaalad ah, ballaarin doonaa guryaha la awoodi karo ee deriska ah heer kasta oo dakhli ah, waxaan ilaalin doonaa goobaheena cagaaran, waxaanan dalban doonaa dowlad daah furan, isla xisaabtan leh oo adiga wax kaa maqasha. Waxaa iga go'an wadahadalo dhab ah, ka shaqeynta waxyaabo adag si wadajir ah, iyo u beddelka welwelka codbixiyeyaasha ficil. Magaalo ahaan, waxaan u baahanahay inaan hubinno in cod walba uu qaabeeyo go'aamada saameeya nolol maalmeedkeena.

## Marie Barbon



(253) 693-8435
infor@marieforburien.com
marieforburien.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Labada Sanno ee Kalkaalinta


**Shaqo iyo Xirfad:** Kalkaaliye Diiwaan gashan

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Burien si aan u bixiyo hoggaan naxariis leh, oo caqli-gal ah. Ka kalkaaliye carruurta iyo 16 sannadood degane Burien ahaan, waxaan arkay saameynta qalbi-jabka leh ee balwadda firfircoon ay ku yeelatay bulshadeena. Dad badan, oo ay ku jiraan carruur, ayaa la kulmay sumow xad-dhaaf daroogo oo shil ahaan ah mararka qaarna waxay lahayd natiijooyin dhimasho. Waa wakhti isbeddel.

Ka Guddoomiyaha Guddiga Adeegyada Aadanaha ahaan, waxaan ka shaqeeyay wax ka qabashada caqabadahan anigoo si toos ah u arkay sida ay muhiimka u tahay in la maalgeliyo badbaadada dadweynaha, hoyga, iyo adeegyada bulshada ee dhab ahaan shaqeeya. Kuwo badan oo ka mid ah dadweynaheena way dakhli hooseeyaan kuwaas oo qiimo aysan awoodin darteed laga saarayo Burien. Intii aan ka kordhin lahayn canshuuraha oo sii xumeeya awoodda wax iibsiga, waxaan u baahanahay inaan kobcinno kheyraadka magaalada anagoo soo jiidanayna ganacsiyo oo dhiseyna dhaqaalaha maxalliga ah.

Burien waxay u qalantaa hoggaan diiradda saaraya badbaadada dadweynaha, awoodda wax iibsiga, iyo kobaca waara. Waxaan noqon doonaa cod caqli-gal ah oo ku dhegaysanaya, u doodaya waxa muhiimka ah, oo aan marnaba dib uga noqon doonin marka bulshadeena halis ku jirto.

## Sam Méndez



(206) 651-5045
sam@electmendez.com
electmendez.com

**Waxbarashada:** BA (Shahaadada Jaamacadda) ee Dhaqaalaha & Siyaasadda, UC Santa Cruz, JD (Shahaadada Sharciga), University of Washington School of Law

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen, Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington (Washington State Health Care Authority)

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Burien sababtoo ah waxaan jeclahay magaaladaan, waana halka aniga iyo xaaskayga aan ku korinayno wiilkeena. Sida aabbe leh ilmo laba sanno jir ah ahaan, waxaan rabaa waxa ugu wanaagsan qoysaskeena: waxaan u baahanahay guryo la awoodi karo dheeraad ah, waddooyin badqab leh oo qoysaska ah, iyo dowlad magaalo oo noo shaqeysa *anaga*. Aniga oo ay weheliyaan dad kale oo badan, waxaan u dagaalamay—oon ku guuleystay—kororka xooggan ee mushaharka ugu yar, 57% ilaa 42%, laakiin golaheena ayaa ku luminaya lacagta canshuur bixiyeyaasha ayagoo ku dagaalamaya maxkamadda. Taasi waa khalad. Magaaladayadu waa inay la shaqeysaa Degmada King, ma ahan inay diido hal milyan oo doolar oo maalgelin muhiim ah iyada oo aan wax sharaxaad ah la bixin.

Waxaan u qalannaa wax ka wanaagsan. U codee kooxdeena horumarka leh—oo ay ku jiraan Xubinta Golaha Hugo Garcia iyo Sarah Moore—oo aan dhisno Burien oo u shaqeeysa qof walba. Waxaa i taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King, Dimuqraadiyiinta Degmada 33aad, Senator Tina Orwall, iyo kuwo kale oo badan. Nagu soo biir!

# Golaha Jagada Lr. 5

## Jamie Jo Skeen



info@jamiejo4burien.com
jamiejo4burien.com

**Waxbarashada:** Daraasaadka Kulliyaddda ee Guud, Daraasaadka Abtirsiimada

**Shaqo iyo Xirfad:** Ganacsade, Qoraa, Kaaliyaha Maamulka

**Bayaanka:** Waan jeclahay Burien—xamaasadda adeegga iyo dareenka bulshada halkan waa mid aan meel kale laga helin. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan ugu adeego dhammaan dadka bulshadan cajiibka ah oo aan uga caawiyo inay noqoto meel qof walba uu dareemo in la arkay, la maqlay, oo la soo dhawweeyay. Anigoo hore uga mid ahaa xubnaha golaha, waxaan fahamsanahay muhiimadda isgaarsiinta, wada shaqeynta, iyo isu tanaasulka. Waxaa laga yaabaa inay noqoto codkayga Golaha, laakiin waa aragtidaada aan matali doono. Waxaan aaminsanahay in la dhegaysto si loo fahmo, in lagu hoggaamiyo qalbi iyo qushuuc, iyo in lagu dhaqmo qiyaamka aan wadaagno. Mudnaantayda waxaa ka mid ah badbaadada dadweynaha, guryaha la awoodi karo, iyo taageeridda ganacsiyada yaryar si loo koriyo dhaqaalaha deegaanka kobcaya. Waa inaan hore u socona si wadajir ah, ma ahan dib u noqosho, waxaana iga go'an inaan ku dhiso horumarka aan ku gaarnay si daah furnaan iyo daryeel leh. Waxay ii noqon lahayd sharaf inaan u adeego Burien. Waxaan ku weydiisanayaa codkaaga.

## Sarah Moore



(360) 499-3186
sarahmooreforburien@gmail.com
sarahforburien.com

**Waxbarashada:** BS (Shahaadada Jaamacadda) ee Bayoolajiga, Bates College, Lewiston ME

**Shaqo iyo Xirfad:** Isku Duwaha Barnaamijka, Beeralayda Mastarka ee KC, Ku-xigeenka Duqa Magaalada Burien

**Bayaanka:** Waad ku mahadsan tahay sharafta aan kuugu adeegayo sida Xubintaada Golaha iyo Ku-xigeenka Duqa Magaalada ahaan. Waxaan Burien ku hoggaamiyey tallaabooyinka cimilada, anigoo ilaalinaya biyaha, hawada, dhulka geedaha na qeexaya oo na saameeya dhammaanteen. Sida guddoomiyaha Guddiga Garoonka Diyaaradaha ahaan, waxaan u doodaa dadka degan Burien ee ay saameeyeen buuqa iyo ballaarinta garoonka diyaaradaha. Waxaan u istaagay ilaalinta kiraysteyaasha, xasilloonida guryaha, mushahar caddaalad ah oo dhammaan loogu talagalay, iyo iskaashiga goboleed ee guryaha iyo daryeelka xaaladaha degdegga ah.

Waxaan sii wadi doonaa inaan taageero xaafadaha lagu lugeyn karo, caddaaladda deegaanka, iyo badqabka dadweynaha ee caqliga leh. Waxaan la shaqeyn doonaa golaha si aan u dhaqan gelinno siyaasado wax ka qabta caqabadaha adag iyo waxa sababa dambiyada, oo ay ku jiraan saboolnimada iyo fursad la'aanta, anigoo adeegsanaya hoggaan naxariis leh, oo falanqeyn leh. Waxaan si qashuuc leh kuu weydiisanayaa codkaaga.

Taageerooyinka waxaa ka mid ah: Kutlada Siyaasadeed ee Haweenka Qaranka - WA, Dimuqraadiyiinta 33aad iyo kuwa Degmada King, Saraakiisha Dowladda Hoose ee Dimuqraadiga, Wakiillada Gobolka Gregerson, Obras, Thomas, iyo Fitzgibbon, Senatarka Gobolka Alvarado, Xubinta Golaha Degmada King Mosqueda, iyo MLK Labour (Ururka Shaqaalaha MLK).

## Gabriel Fernandez



(206) 795-2234
gabriel4burien@gmail.com
gabriel4burien.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Evergreen, South Seattle College

**Shaqo iyo Xirfad:** Shaqaalaha dhismaha iyo maareeyaha shirkad yar oo dib-u-habeysa

**Bayaanka:** Waxaan ku soo barbaaray Burien waxaanan ka qalin jebiyay Dugsiga Sare ee Evergreen. Bulshadaan waa gurigayga, waxaanan u tartamayaa inaan ka dhabeeyo in qayb kasta oo ka mid ah ay noqoto mid ammaan ah, taageero leh, oo barwaaqo ah. Burien waxay horumar muhiim ah ka samaysay amniga dadweynaha sannadihii la soo dhaafay, waxaanan rabaa inaan sii wado dhisidda horumarkaas. Qof walba wuxuu mudan yahay inuu ammaan ku dareemo xaafadahooda, ma aha oo keliya bartamaha magaalada, laakiin guud ahaan magaalada oo dhan. Waxaan ku soo barbaaray shaqada dhismaha waxaanan fahamsanahay qiimaha koriinka caqliga leh, oo mas'uuliyadda leh. Ka xubin golaha ka tirsan ahaan, waxaan mudnaan siin doonaa maalgelinta meelaha muddo dheer aan adeegyada helin. Waa wakhti aan adeegyo, kheyraadka, iyo fursado u keeno gees kasta oo ka mid ah Burien. Waxaan aaminsanahay hoggaamin wax ku ool ah oo ku saleysan waayo-aragnimada bulshada iyo ballan adag oo ku saabsan amniga. Waxaan ku faanayaa inaan ka soo jeedo Burien, waxaanan diyaar u ahay inaan si adag ugu shaqeeyo bulshada i soo barbaarisay.

# Duqa Magaalada

## Chris D. Chung



(253) 584-2484
dbchung79@gmail.com

**Waxbarashada:** NY, St. John's Univ. Farmashiyaha (Qalin jebiyay), galay Akadeemiyaha Ciidanka Cirka ee Kuuriya & Chung-Ang Univ. (Seoul)

**Shaqo iyo Xirfad:** Farmashiiste Diiwaan Gashan oo ka Shahaadaysan Gobolka Washington

**Bayaanka:** Waxaan dhashtay anigoo ah kii ugu yaraa shan carruur ah oo uu dhalay sarkaal booliis ah oo u dhintay shaqo badnaan awgeed markii aan saddex jir ahaa, waxaana i korsatay hooyaday, oo hadda 93 jir ah, oo soo dulqaadanaysay in ka badan 15 sanno oo xusuus la'aan ah.

Waxaan maamulaayey farmashiyaha bulshada in ka badan 30 sanno waxaanan ku noolaa Federal Way in ka badan 25 sanno. Xaaskaygu waxay u adeegaysay ayadoo ah biyaaniiste qadiimi ah iyo organiistaha kaniisadda muddo ka badan 40 sanno. Saddexda carruur ah ee aan dhalnay waxaa ka mid ah macallin laba luqadood ku hadla, dhakhtar ku takhasusay qaliinka neerfaha, iyo arday caafimaadka.  Ka dib markii aan ka qalin jebiyay Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way.

Ka dib markii aan helay 54,469 codad doorashada hordhaca ahayd ee Wakiilka Caymiska 2024, waxaa iga go'an caafimaadka, badbaadada, iyo waxbarashada wanaagsan ee Federal Way—anigoo sii wada dhaqanka adeegga dadweynaha oo uu ku jiro xubin qoys ii dhow oo u adeegayay Golaha Magaalada Kirkland in ka badan 20 sanno.

## Susan Honda



(253) 293-8885
hondaforfw@gmail.com
www.honda4fw.com

**Waxbarashada:** Jaamacadda Puget Sound, Dugsiga Kalkaalisanimada ee Isbitaalka Tacoma General, Shahaadada Sare ee Hoggaaminta Dowladda Hoose.

**Shaqo iyo Xirfad:** Kalkaaliye Caafimaad Hawlgab ah, Mutadawac Bulsho, Xubin Golaha Magaalada.

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Duqa Magaalada Federal Way sababtoo ah waxaan jeclahay magaaladaan oo waxaan aaminsanahay awooddeeda. Waxaan halkan ku noolaa 46 sanno, anigoo u adeegaya bulshada si daacadnimo, khibrad, iyo hoggaamin la xaqiijiyay. Waxaan ka shaqeeyay hagaajinta amniga dadweynaha, wax ka qabashada arrimaha gaadiidka iyo isticmaalka dhulka, iyo taageeridda ganacsiga iyo horumarinta dhaqaalaha. Anigu waxaan u ololeeyaa miisaaniyad dheelitiran oo waxaan u shaqeeyaa dhallinyarada, qoysaska, iyo waayeellada bulshadeena.

Waxaan ka tirsanahay dhowr guddiyo iyo guddi hoosaad deegaan, goboleed, iyo heer qaran, taasoo ii suurto gelinaysa inaan u doodo Federal Way marka loo eego arrimaha muhiimka ah. In ka badan toban sanno oo adeeg Golaha Magaalada ah, waxaan ogahay waxa shaqeynaya iyo waxa ay tahay in la beddelo.

Sida Duqa Magaalada ahaan, waxaan diiradda saari doonaa hagaajinta amniga dadweynaha, horumarinta dhaqaalaha caqliga leh, dib-u-soo noolaynta bartamaha magaalada, guriyeynta iyo hubinta maamul daah furan oo loo dhan yahay. Waxay ahayd sharaf inaan ka adeego Golaha Magaalada. Waxaan jeclaan lahaa inaan kasbado codkaaga.

## Jim Ferrell



(253) 569-4482
jimaferrell@comcast.net
jimferrell.org

**Waxbarashada:** University of Washington - Shahaadada Cilmiga Adabka; Gonzaga University - Shahaadada Sharciga

**Shaqo iyo Xirfad:** Duqa Magaalada Federal Way; Hore u ahaa Ku-Xigeen Sare ee Dacwad-oogaha Degmada King

**Bayaanka:** Ka Duqaaga Magaalada ahaan, waxaa sharaf ii ah inaan idiin adeego! Maalin kasta, waxaan ka shaqeeyaa horumarinta Magaaladeena - laga bilaabo ku darista tiro rikoor ah oo saraakiil ah si loo sugo amniga Magaaladeena, keenista shaqooyin bulshadeena iyo ka dhabeynta maaraynta maaliyadeed ee xikmadda leh.

Tan iyo markii ugu horeysay la i doortay 2013, waxaan samaynay maalgashi istaraatiiji ah, mana jirto wakhti ay Magaalada ku jirtay xaalad dhaqaale oo ka wanaagsan tan hadda. Waxaan ku darnay 17 jago oo saraakiil ah labadii sanno ee la soo dhaafay anaga oo aan kordhin canshuuraha iyo iyadoo Tareenka Fudud ay soo socoto, waxaan horumarinaynaa jardiinooyinka, oo waxaan qaadeynaa tallaabo geesinimo leh si aan u horumarino bartamaha magaaladeena.

Ka hoggaamiye goboleed ahaan, waxaan ku faanayaa inay i taageereen 13 meeyarrada Degmada King; Guddoomiyaha Gobolka Bob Ferguson; Xildhibaan Adam Smith; Xubin Golaha KC Pete von Reichbauer; 10 ururka shaqaalaha oo matalaya kumanaan shaqaale oo ay ku jiraan dab-damiyeyaasha iyo ururka booliiska maxalliga ah. *Si wadajir, waxaan ka dhignay Magaaladeena mid ammaan badan, xoog badan, oo isku xiran. Aan ku sii hayno Federal Way mid hore u sii socota!*

## Saudia Abdullah



saudia@electsaudia.com
electsaudia.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Waxbarashada Caddaaladda, Georgia Southern; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, Kaplan University

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar

**Bayaanka:** Federal Way waxay sii wajahaysaa walaacyada badqabka dadweynaha iyo kheyraadka oo aan ku filnayn kuweena ugu nugul. Waa wakhtigii jihada cusub. Saudia Abdullah waxay keenaysaa ku dhawwaad 30 sanno oo waayo-aragnimo ku saabsan caddaaladda dambiyada ah si ay si wax ku ool ah ula shaqeyso sharci fulinta—iyadoo hubinaysa in xaafadaheena ay ammaan yihiin iyadoo la dhisayo kalsoonida iyo isla xisaabtanka. Waxay hormuud ka noqon doontaa xalalka guryaha ee u adeega qof walba, laga bilaabo unugyo la awoodi karo ilaa guryo dakhli dhex dhexaad ah, oo ay weheliso, horumarin caqli badan oo waara oo xoojiya bulshadeena. Saudia waxay mudnaanta siin doontaa maalgeshiyo macno leh oo ku aaddan dhallinyarada iyo waayeellada, iyadoo la hubinaayo in labada jiilba ay helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay u barwaaqoobaan. Hoggaaminteeda waa mid geesinimo, naxariis leh, oo ku saleysan waayo-aragnimo nololeed. Saudia waxay fahamsan tahay caqabadaha maalinlaha ah ee ay qoysaska la kulmaan waxayna bixin doontaa xalal waara, oo dadka udub dhexaad u ah. Waxay diyaar u tahay inay dhegaysato, hoggaamiso, oo ay ka caawiso Federal Way inay hore u socoto—si wadajir ah.

Waxaa taageeray: Wakiilka Gobolka Jamila Taylor, Senatarrada Twina Nobles & Claire Wilson, Senatar Hore Mona Das, Meeyarka Tacoma Victoria Woodards, iyo in ka badan.

# Golaha Jagada Lr. 2

## Nathan J Orth



(206) 681-6312
north00@gmail.com
nathanjorth.com

**Waxbarashada:** Bellevue College (AA ee Maamulka Ganacsiga), Western Governors University (Ay U Socoto, BS [Shahaadada Jaamacadda] ee Injineerinka Softiweerka)

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawlgalka iyo Maamulka ee Ganacsiga Oonleenka (eCommerce)

**Bayaanka:** Waxaan ahay Khibradle Maareeyaha Hawlaha oo u tartamaya xafiis si aan u dhiso Federal Way adag, oo si aad isugu xiran iyada oo loo marayo fursad dhab ah. Si wadajir ah waxaan qaadi karnaa tallaabo si aan u-geynta natiijooyin macno leh ugu soo saarno bulshadeena.

Mudnaantayda ugu weyn waa in aan abuuro waddooyin shaqooyin mushahar fiican, gaar ahaan kuwa teknolojiyada iyo xirfadaha farsamada si loo xoojiyo qoysaska iyo bulshadeena. Tani waxay ku lug yeelan doontaa helitaanka siyaabo lagu soo jiito warshado cusub iyo maalgelinta deganeyaasheena iyadoo carruurteena loo diyaarinayo xirfadaha mustaqbalka iyo bixinta tababar dib-u-habeyn loogu talagalay dadka waaweyn ee diyaar u ah fursado cusub. Haddii aan wada shaqeyno waxaan abuuri karnaa dhaqaale uu ka faa'iidaysto qof walba, yareeya dambiyada, oo hubiya in degane kasta uu ku horumari karo.

Iyadoo taageeradaada ila socoto, waxaa iga go'an inaan magaaladda Federal Way keeno koboc waara oo loo wada dhan yahay, taasoo ka dhigaysa meel aan dhammaanteen ku helno fursadaha aan u baahanahay si aan ugu guuleysano.

## Martin A. Moore



(253) 653-3825
electMartin@Outlook.com
www.electMartin.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda, Saint Martin's University; Shahaado Sare ee Hoggaaminta Dowladda Hoose, AWC; Ka Qalin Jebiyay, Dugsiga Sare ee Decatur

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin Marti oo Hadda ah, Degmada Dugsiga FW; Xubin hore ee Golaha Magaalada (2013-2021)

**Bayaanka:** Sida deganeyaasha badan ee Federal Way, safarkayga qaxootinimo wuxuu ku salaysan yahay adkeysi iyo adeeg. Waxa la isoo korsaday anoo agoon ah oo ka yimid Bulgaria anigoo siddeed jir ah, waxaan ku koray Federal Way waxaanan ka qalin jebiyay Dugsiga Sare ee Decatur. Kadib markii aan ka qalin jebiyay jaamacadda, waxaan u adeegay bulshadeenna sida xubin ka tirsan AmeriCorps ahaan, Kormeeraha Jardiinooyinka, iyo Xubin Golaha Magaalada laga soo bilaabo 2013–2021.

Markaan ka tirsanaa Golaha, waxaan ku daray saraakiil booliis, abuuray shaqooyin, helay caawinaad kirada, oo hirgeliyay daah furnaanta miisaaniyadda. Sida Xubinta Golahaaga xiga ahaan, waxaan xoojin doonaa amniga dadweynaha, taageeri doonaa siyaasadaha shaqaaleynta maxalliga ah, maalgelin doonaa barnaamijyada dhallinyarada, horumarin doonaa adeegyada waayeelka, oo hubin doonaa daah furnaanta dowladda oo weyn. Iyada oo tareenka Sound Transit uu imanaayo, waxaan arkaa mustaqbal oo leh fursado buuxa—waxaana diyaar u ahay inaan u dagaalamo Federal Way halkaas oo qof walba uu fursad u leeyahay inuu ku horumaro.

Waxaa si sharaf leh ii taageeray Saraakiishaada Booliiska FW, dab-damiyeyaasha, Xildhibaan Adam Smith, Wakiilka Kristine Reeves, Duqa Magaalada Ferrell, iyo kuwo kale oo badan. Waxaan rajeynayaa inaan kasbado codkaaga.

## Paul McDaniel

Sawir lama soo gudbin

vote@paul4washington.com
paul4washington.com

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

## Golaha Jagada Lr. 6

### RoseLynne P McCarter



(206) 383-9339
Rosie4citycouncil@gmail.com
rosie4citycouncil.org

**Waxbarashada:** SWOCC. UCC. RMCAD. CWU.

**Shaqo iyo Xirfad:** Guriyeynta PSS ee Peer Kent

**Bayaanka:** Anaga oo ah dadka waxaan rabnaa qof awood u leh inuu qof walba u hayo goob oo hoggaamin kara dariiqa lagu helayo maamul loo dhan yahay. Abuurista siyaasado leh baahiyaha qoysaska danyarta iyo dadka shaqeeya. In lasoo afjaro wareegga saboolnimada ee nagu habsaday. Iyo in la beddelo sheekada. Aniga ayaa ah qofkaas.

Aniga iyo qoyskeyga waxaan si ku faan leh Degmada King ugu yeernay guri shantii sanno ee la soo dhaafay. Waxaan awoodnay inaan nolol degan u abuurno nafteena. Waxaan helay jid aan ugu adeego bulshooyinkeena la takooray iyo kuwa nugul. Waxaan arkaa halgankooda oo si fiican ayaan u garanayaa waxaanan ahay caddeynta nool ee soo kabashada waa suurtagal. Waxaan rabnaa inaan caafimaad qabno, hoy lahaano, oo nala quudiyo. Waxaan rabnaa sinnaanta iyo fahamka iyada oo aan nala xukumin.

Waxaan ku biiray Golaha Siyaasadda anigoo u maraaya PSESD. Waxay i bareen miisaaniyadaha iyo xeerarka Robert ee habka. Markaas ayaan helay Waalidiinta Safiirada, halkaas oo aan ka bartay siyaasadda, sharciga, dowladda, iyo u doodista. Oo waxaan helay waddo aan ku gaaro xirfad buuxda. Waxaan arkaa mustaqbalka halkaas oo dadku leeyihiin guryo la sii wadi karo, tamar nadiif ah iyo beero ku yaal bulsho kasta oo bixiya cunto caafimaad leh.

### Starre Quiñones



(425) 757-1234
starrequinones@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda - Isgaarsiinta, Saint Edward's University

**Shaqo iyo Xirfad:** Halyeey Hore oo Naafo ah

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Kent si aan uga qayb qaato arrimaha si degdeg ah noo saameeynaya dhammaanteen. Haddii aad i doorato inaan ku matalo, waxaan ballanqaadayaa inaan ku salayn doono qorshayaashayda iyo ficilladayda mudnaanta tayada nolosheena maalinlaha ah.

Waxaan aaminsanahay in bulshadeena firfircoon oo kala duwan ay ugu wanaagsan tahay inuu u adeego qof leh asalka kala duwan oo ku filan si uu ula xiriiro xubnaha bulshada ee ballaaran. Sida dad badan oo idinka mid ah, waxaan ahay waalid, laakiin sidoo kale waxaan ahay gabadh uu dhalay qof soo galooti ah oo ka yimid Mexico, waxaanan u adeegay dalka aan ku dhashay, Dalka Mareykanka, anigoo ku biiray Ciidanka Badda ee Mareykanka. Khibradahaygu waxay iga caawiyaan inaan la xiriiro rabitaanka iyo baahiyaha qaybaha badan ee bulshadeena. Sida qof isku-dhaf oo ka mid ah Jiilka X iyo Jiilka Mileniyal ahaan, waxaan aad ugu habboonahay inaan la qabsado oo aan isku xiro farqiga u dhexeeya aragtiyada adduunka iyo aragtiyada dhaqameed. Sida haweeney kuwiir ah, waxaan taageeraa, difaacaa oo kor u qaadaa bulshadeena LGBTQIA+ si ay u dareemaan in la arko, ammaan iyo taageero. Sida qof safra oo hore ugu noolaa oo ka shaqeeyay dalal dibadda ah, waxaan si toos ah u bartay qiimaha beddelidda hababkii hore iyadoo la ilaalinayo dhaqanka iyo luqadda.

Ka-qaybgalka qof walba wuxuu muhiim u yahay bulshadaan gudaheeda, dalbanaaya in kuwa awooda ay hadlaan ay u hadlaan naftooda iyo kuwa kale! Waxaan nahay kuwo xoog badan marka aan wadajir nahay!

## Golaha Jagada Lr. 6

### Logan Evans



loganforkent@gmail.com
loganforkent.com

**Waxbarashada:** Taariikhda, Western Washington University; Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada, Western Governors University

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin, Dugsiga Sare ee West Auburn

**Bayaanka:** Waxaan ku faanayaa inaan isku tilmaamo xubin noloshiisa oo dhan ka tirsan bulshadeena waxaanan rabaa inaan taageero dadaallada Golaha Magaalada si loo keeno isbeddelo waaweyn oo Kent ah kuwaas oo hagaajin doona nolosha dhammaan deganeyaasha.

Waxaan ku raaxaystaa waxbaridda, laakiin qayb ka mid ah shaqadayda waa hawsha adag ee ah in aan maqlo ardaydayda oo wadaagaya khatarahooda, cabsidooda iyo dhibaatooyinkooda. Ma aha kuwo kali ah. Guud ahaan magaalada, laga bilaabo qoyska iyo saaxiibada ilaa dad aan la aqoon, waxaan maqlayaa isla sheekadaas: *Ma ahaan jirin sidan oo kale.* Dambiyada iyo hoy la'aanta waxay waxyeello u geysanayaan qof walba. Taasi waa sababta aan u istaagay. Waxaan ku dadaalli doonaa inaan ansixiyo cod kasta oo difaacaya amnigeena, nolosha dhaqaalaheena, tayada nolosheena iyo waddooyinka aan isticmaalno. Magaaladeena ma noqon doonto mid keliya lagu noolaan karo, laakiin waxay noqon doontaa magaalo mustaqbal leh, mid barwaaqo ah, oo carruurtayadu ku faani karaan inay ugu yeeraan gurigooda.

Waxaan ahay macallin, dhise isbahaysi, iyo muwaadin firfircoon. Qof daryeella, ma aha siyaasi. Waxaan sannado ku qaatay barashada sida wax loo dhegaysto, loo abuuro nidaam, loona mideeyo dadka. Haddii aad ii oggolaato, waxaan keenni doonaa isla adkaysigaas, isla awooddaas, iyo isla dareenkaas waajibaadka ah ee aan ku haystay fasalka oo aan u adeegsan doono Kent.

### Tod Oyefeso



(732) 804-8000
todoyefeso@gmail.com
votetod.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Injineernimada Farsamada, New Jersey Institute of Technology

**Shaqo iyo Xirfad:** Injineerka Tijaabinta, Blue Origin

**Bayaanka:** Sida dad badan oo degan Kent, waxaan ahay jiilka 1aad ee wax soo saarka Riyada Mareykanka. La mid ah waalidiintayda oo kasoo tagay dalkoodii hooyo ee Nigeria si ay nolol cusub uga bilaabaan Ameerika, aniguna waxaan ka soo tagay East Coast anigoo halkan Pacific Northwest ka raadinaya fursad. Anigu waxaan ahay xalliyaha dhibaatooyinka oo leh taariikh injineernimo oo la xaqiijiyay waxaana hadda ka shaqeeya Blue Origin, oo xarunteedu tahay halkan Kent Valley. Waxaan ahay adeege dadweyne oo ka qayb qaatay sii deynta Qorshaha Dhammaystiran ee Kent 2044 waxaana hadda ahay xubin ka tirsan Guddiga Isticmaalka Dhulka iyo Qorsheynta ee Kent. Ugu dambeyntii, waxaan ahay qof ku faanaya inuu yahay degane Kent ah oo aan rabin wax ka badan inuu arko magaaladaan oo barwaaqoobeysa oo koraysa iyadoo kor loo qaadayo dhammaan kuwa ugu yeera guri.

Wakhtigayga aqalka magaalada wuxuu i siiyay aragti ku saabsan dhibaatooyinka badan ee bulshadeena. Sida xubin ka tirsan golaha magaalada, mudnaantaydu waxay noqon doontaa in aan horumariyo amniga dadweynaha, bixinta helitaanka fudud ee fursadaha daaweynta caafimaadka maskaxda iyo daroogada, ka qayb qaadashada guusha dhaqaale ee ganacsiyada yaryar, taageeridda guryaha la awoodi karo ee dhammaan heerarka dakhliga, iyo ilaalinta aagagga madadaalada.

Kuma aan dhalan Kent, laakiin waxaan doortay magaaladaan. Fadlan i dooro oo u codeey si aan Kent uga dhigno mid wanaagsan loo ilaaliyo.

# Golaha Jagada Lr. 6

## Jamie Lee



(206) 446-2388
Jamieleeforkentwa@gmail.com
Jamieleeforkent.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Kentwood; Green River College; Euro Institute of Skin Care (Machadka Daryeelka Maqaarka ee Euro)

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsiga Yar, All Aglow Spa

**Bayaanka:** Sida degane cimrigeeda oo dhan ku nool Kent ahaan, waxaan u heellan nahay inaan dhiso bulsho xooggan. Spa-ga aan ku leeyahay bartamaha magaalada, waxaan si sharaf leh u taageernaa macallimiinta, kalkaaliyeyaasha, kuwa ka jawaaba xaaladaha degdegga ah, iyo qoysaska militariga. Safarkayga laga soo bilaabo waalidnimo ilaa hoggaamiye bulsho ayaa sii xoojiyay ballanqaadkeyga mustaqbalka Kent. Aniga oo qoyskayga halkan ku korinaaya, waxaan rabaa in Kent ay noqoto meel dhammaan qoysaska ay ku faanaan inay gurigooda ugu yeeraan.

*Amniga*: Waxaan ku tabarucay in ka badan 1,000 saacadood oo aan la shaqeeyay dhallinyarada ay saameeyeen balwadaha. Waxaan aaminsanahay in jawaab naxariis leh oo mas'uul ah loo baahan yahay si loo xalliyo dhibaatada daroogada—mid mudnaanta siisa daryeelka muddada-dheer si loo yareeyo dambiyada iyo hoy la'aanta. Hadafkaygu waa inaan helo maalgelinta loo qoondeeyay xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha si aan Kent ugu helo taageerada ay u baahan tahay.

*Horumar*: Anigoo ah xubin ka tirsan guddiga Wada-hawlgaleyaasha Bartamaha Magaalada Kent (Kent Downtown Partnership), waxaan ka caawiyay dib-u-habeynta magaaladeena anaga oo adeegsanayna dhacdooyinka ganacsiyada yaryar. Waxaan sii wadi doonaa u doodista kheyraadka ka caawiya ganacsiyada maxalliga ah inay koraan, anigoo abuuraya barnaamij dhexe oo loogu talagalay ganacsatada.

*Dhallinyarada* & *Qoysaska*: Laga bilaabo tababarka ciyaaraha ilaa hagidda barnaamijyada carruurta, waxaa iga go'an inaan taageero dhallinyarada Kent iyada oo loo maraayo barnaamijyo loo dhan yahay, oo xiiso leh halkaas oo carruurtu ay nabadgelyo iyo qiimeyn ku dareemaan. Waxaan ku hoggaamin doonaa daah furan, wada shaqeyn, iyo aragti ku saleysan xalal dhab ah. Si wadajir ah, waxaan abuuri karnaa Kent oo wax ku hoggaamisa naxariis, aragti, iyo ujeeddo. Wax dheeraad ah ka baro barta jamieleeforkent.com

## Andy Song



(253) 970-3771
andysong544@gmail.com
andy4kent.com

**Waxbarashada:** Seattle University, Johns Hopkins University, Seattle Pacific University

**Shaqo iyo Xirfad:** Barafasoor, Daaweeye/Mulkiile Ganacsi Yar, Agaasimaha Guddiga Dugsiga

**Bayaanka:** Sida magaalooyin badan oo ku yaal Ameerika, Kent ma ahan mid ka badbaaday hubanti la'aanta halka dhaqaalaha uu ku socdo. Shaqo la'aanta, qiimaha sii kordhaaya, walaacyada amniga dadweynaha, iyo jarista miisaaniyadda waxay saamayn doonaan qoysaska Kent. Waxaad ku nasan kartaa si raaxo leh inaad ogtahay in noloshaada ay ku jirto gacanta musharax leh natiijooyin iyo diiwaanno cad oo ku saabsan go'aan qaadashada siyaasadda iyo maaliyadda.

Anigoo ah qof asal ahaan ah Kuuriyaan Ameerikaan oo ay korisay hooyo qaxooti ah oo keli ah. Waxaan fahamsanahay dhibaatooyinka ay la kulmaan qoysas badan maxaa yeelay waan soo maray. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Kent si aan u hubiyo in degane kasta uu cod ku yeesho miiska.

Codbixiyeyaasha Kent horey ayay ii aamineen oo ii doorteen agaasimaha guddiga dugsiga, halkaas oo aan ku qoray oo hirgeliyay siyaasado, aan maamulay maalgelinta dadweynaha, oo aan si dhow ula shaqeeyay ardayda iyo qoysaska. Waxaan keenaa waayo-aragnimo la xaqiijiyay oo ku saabsan siyaasadda, lahaanshaha ganacsi guuleystay, iyo nidaamyada caafimaadka/amniga dadweynaha. Anigoo ah daaweeye caafimaadka maskaxda iyo barafasoor jaamacadeed, ma ahan oo keliya inaan ka hadlo caqabadahaan. Waan ku noolahay oo waan baraa. Waxaan dhisay barnaamijyo u adeega boqolaal qoys oo Medicaid ah anigoo tababaraya xirfadyahanno caafimaadka maskaxda ee safka hore.

Waxaan diyaar u ahay inaan hoggaamiyo anigoo wata daryeel, daacadnimo, iyo natiijo. Waxay ii ahaan lahayd sharaf inaan kasbado codkaaga. Abaalmarinta 40 ka yar 40 ee 2024: Wargeyska Ganacsiga ee Puget Sound

## Golaha Jagada Lr. 6

### Sharn Shoker



(253) 326-9249
electsharn@gmail.com
www.electsharn.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Daraasaadka Siyaasadda iyo Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka ee Sharciga, Dhaqaalaha & Siyaasadda Dadweynaha, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Siyaasadda ee Degmada King , Urur Aan Faa'iido Doon Ahayn oo ku sugan Seattle

**Bayaanka:** Waxaa iga go'an inaan keeno xalal wax ku ool ah oo lagu xallinayo caqabadaha Kent iyo inaan hubiyo in cod kasta la maqlo. Waxaan sannado badan ka shaqeynayay marxalad xasaasi ah oo u dhexeysa dowladda iyo bulshada—anigoo u doodaya isbeddelka oo u beddelaaya dooddaas ficil. Haddii ay tahay ballaarinta adeegyada dhallinyarada, ka shaqeynta siyaasado wanaagsan, ama dhisidda iskaashiyo, waxaan arkay waxa suurtagal ah marka dadku isu yimaadaan.

Waxaan ahay qof ku nool Kent noloshayda oo dhan, waxaan dhigtay dugsiyada Kent hadda waxaan wiilkayga ku korinayaa bulshada aan ku soo barbaaray. Qoyskaygu waxay lahaayeen oo ay maamuleen ganacsi maxalli ah halkan muddo ka badan labaatan sanno. Anigoo leh xididdo qoto dheer oo bulsho iyo khibrad hoggaamineed oo xooggan, waxaan diyaar u ahay inaan ka caawiyo qaabaynta Kent kobcaysa oo barwaaqo ah halkaas oo qof walba uu ku guulaysan karo oo uu dareemi karo ammaan.

Mudnaantaydu waxaa ka mid ah dhisidda xaafado iyo jardiinooyin ammaan ah, wax ka qabashada sababaha aasaasiga ah ee dambiyada iyo hoy la'aanta, taageeridda ganacsiyada maxalliga ah, iyo ballaarinta barnaamijyada qoyska ku saleysan ee hubiya helitaanka ilaha muhiimka ah. Si wadajir ah, waxaan u hubin karnaa in Kent ay sii ahaato magaalo waarta, oo firfircoon oo loogu talagalay jiilasha mustaqbalka. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

*Waxaan ku hanweynahay in ay i taageereen Xubnaha Golaha Magaalada Kent Brenda Fincher iyo John Boyd, Duqa Meeyarkii Hore ee Kent Suzette Cooke, Senatarka Gobolka Karen Keiser, iyo hoggaamiyeyaal iyo ururo kale oo maxalli ah oo badan.*

# CODBIXIYAHA ★ MUSTAQBALKA ★

**16 iyo 17 sanno jirka ayaa hore isku sii diiwaan gelin kara si ay u codeeyaan oo si toos ahna loo diiwaan gelinayo si ay u codeeyaan marka ay gaaraan 18 jir.**

**Si aad u noqoto codbixiyaha mustaqbalka, waa inaad tahay...**

| 16 | | |
|---|---|---|
| Ugu yaraan 16 jir | Muwaadin Mareykan ah | Degan Washington |

### Sideen isku diiwaan geliyaa?

Oonleenka hore isaga diiwaan geli si aad u codeyso barta **VoteWA.gov.**

Waxaad sidoo kale shakhsi ahaan hore isaga diiwaan gelin kartaa Xarunta Codbixinta, ama adigoo boostada ku soo diraaya foomka diiwaan gelinta xaashida ah.

### Maxaa dhacaya markaan is diiwaan geliyo ka dib?

Warqad codbixin ayaa boostada si toos ah laguugu soo diri doonaa doorashada ugu horeysa ee aad u qalanto.


Warqaddaada codbixinta waxaad ku soo celin kartaa boostada - istaambo looma baahna. Hubi inay lahaato shaabadda boostada oo ah ugu dambeyn Maalinta Doorashada.

Ama waxaad warqaddaada codbixinta ku ridi kartaa sanduuqa lagu rido ee sugan ilaa iyo 8 p.m. oo gaw ah Maalinta Doorashada.

**Naga soo dabagal @kcelections oo isticmaal hashtaagga #FutureVoter**

# Golaha Jagada Lr. 1

## Bryce James



(206) 910-2701
bryce@lfpcommunity.org
www.lfpcommunity.org

**Waxbarashada:** Shahaadooyinka: Xisaabaadka, Maaliyadda, Suuqgeynta, Cilmiga Sayniska Kombuyuutarka – CWU. Magacaabista Maaliyadeed – Wharton

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxweyne, Smart Portfolios - RIA, Madaxweyne, Portfolio Mason

**Bayaanka:** Xidido ku leh Lake Forest Park. Dhiirigelinaya dheelitirnaan. Diiradda saara mustaqbalka. Qoyskaygu waxay Lake Forest Park ugu yeereen guri muddo ka badan 75 sanno. Waxaan keenayaa in ka badan 40 sannadood oo hoggaamin maaliyadeed ah, waayo-aragnimo ku saabsan guddiyada aan faa'iido doonka ahayn iyo ganacsiga, waxaanan aasaasay dhowr shirkadood oo maaliyadeed iyo teknolojiyadeed.

Waxaan u tartamayaa inaan soo celiyo dheelitirka, kalsoonida dib u dhiso, oo aan ku soo celiyo qiimaha wadaagga ah go'aamada magaalada: ilaalinta deegaanka, wacyiga bulshada, iyo mas'uuliyadda maaliyadeed. Jidka hadda la maraayo waa mid aan waari karin. Tobankii sannadood ee la soo dhaafay, kharashaadka magaalada si degdeg ah ayay u kordheen halka keydadka ay yaraadeen iyadoo khasaaro sannadle ah jiro, haddana Golaha wuxuu sii wadaa inuu ku bixiyo qiyaastii $1 milyan sannadkii la-taliyeyaal—oo ay ku jiraan $100,000 si loo soo jeediyo kordhinta canshuurta. Hoos u dhigid 3% ah oo kharashaadka waaxyada oo dhan ah waxay wax ka qaban kartaa tan—iyadoo aan la keennin canshuuro cusub.

Waa wakhti loogu talagalay hufnaan, isla xisaabtan, iyo xalal ay bulshada hoggaaminayso sida arrimaha Sound Transit. Aan soo celino guddiyada muwaadiniinta si ay go'aamada u hagaan. U codee Bryce

## Victoria Grant



(678) 682-4071
victoriaforlfp@gmail.com
victoriaforlfp.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee North Oconee, SHRM Shahaadada Kheyraadka Aadanaha (Weli socota), Gargaarka Degdegga ah/CPR Sharciyeysan

**Shaqo iyo Xirfad:** Khabiirka Kheyraadka Aadanaha

**Bayaanka:** Lake Forest Park waxay u qalantaa hoggaan fikir leh, loo dhan yahay oo ka tarjumaya qiyaamka bulshadeena. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan uga caawiyo magaaladeena inay horumarto anagoo ilaalinayna waxa aan jecel nahay anagoo wax ka qabanayna caqabadaha ina hor yaalla si taxaddar leh, hufan, iyo wada shaqeyn.

Ku barbaaray qoys dhaqamo kala duwan leh, qoys jinsiyad isku dhaf ah, waxaan arkay saamaynta cunsuriyadda iyo sinnaan la'aanta si dhow. Shaqadayda u doodista waxaa ka mid ah taageeridda kuwa ka badbaaday rabshadaha qoyska iyo xadgudubka carruurta oo loo marayo Ka hortagga Xadgudubka Carruurta ee Athens, tabarrucidda Gays for Good, iyo ka qayb qaadashada nadiifinta kaynta ee guud ahaan Degmada King. Waxa kale oo aan si mutadawacnimo ah uga shaqeeyay Suuqa Beeralayda ee Lake Forest Park - waana sida kale oo aan ugu joogay ku xirnaanta. Waayo-aragnimadaasi waxay sii xoojiyeen rumaysashadayda dhegaysiga, ka soo muuqashada, iyo abuurista goob loogu talagalay dhammaan codadka.

Sida xubintaada golaha ahaan, waxaan ka shaqeyn doonaa sidii aan u ilaalin lahaa meelaha cagaarka ah, waxaan taageeri doonaa ganacsiyada maxalliga ah, waxaa dhisi doona dhinaca lagu socdo ee waddada oo si wanaagsan na isku kiin xira, oo aan u maalgashano kaabayaal ammaan ah, waara. Si wadajir ah, waxaan u dhisi karnaa Lake Forest Park oo aad isugu xiran.

## Semra Riddle



semra@semraforlfp.com

**Waxbarashada:** Naqshadeynta Muuqaalka iyo Maareeyaha Dhismaha ee Qandaraasle Guud

**Shaqo iyo Xirfad:** UW Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka ee Dhismaha

**Bayaanka:** Himiladayda ku aaddan LFP waa mid fudud: bulsho firfircoon oo loo wada dhan yahay. Tani waxay la macno tahay bulsho oo ah halka aad ka awoodi karto guri oo aad nolol ku dhisan karto. Halka aad kula kulmi karto saaxiibo hore iyo kuwo cusub Goob Saddexaad. Meel aad lug ku tegi karto dhammaan dugsiyadeena ama jardiinooyin si wanaagsan loo ilaaliyay oo ay isku xiraan waddooyin iyo jidad ammaan ah. Meel aad lug ku tagi karto dukaan qaxwo raaxo leh si aad ula kulanto saaxiibo. Meel aad ku ag fadhiisan karto Harta oo aad daawan karto carruurtaada oo baranaya dabaasha iyo paddleboard (doonta alwaaxa sida loo wado). Meel aad ka heli karto farshaxan meelaha muuqda iyo meelaha aan sidaas u muuqan. Meel aad xitaa ugu faanayso inaad ugu yeerto LFP gurigaaga. Ma noqon doonto mid degdeg ah ama sahlan laakiin marka aan wada shaqeyno, waxaan ka dhigi karnaa aragtidaan mid dhab ah. Waad ku mahadsan tahay codeyntaada.

Waxaa si ku faan leh u taageeray Dimuqraadiyiinta Dagaalamaya ee Degmada Sharci Dejinta 1aad; Dimuqraadiyiinta Degmada King, iyo dhowr mas'uuliyiin dowladeed iyo kuwa deegaanka oo la soo doortay.

# Duqa Magaalada

## Steve Whitaker



(253) 670-1262
steve@wordnerd.ninja
www.facebook.com/61576319510214#

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Golaha Magaaladda Milton, Duqa Magaalada Ku Meel Gaarka 2024 - hadda; Golaha Magaalada Milton, Jagada #1 2017 - 2025

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Word Nerd LLC, Mulkiilaha Ganacsiga Deegaanka; Comcast Spotlight, Soo saaraha, Agaasimaha, Kormeeraha Hawlgallada; Keydiyaha Kaybalka, Soo saaraha & Agaasimaha

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka taqasus gaar ah Suuqgeynta, City University Seattle; Shahaadada Jaamacadda ee Isgaarsiinta, Washington State University

**Adeegga Bulshada:** Guddiga Maaliyadda ee Golaha Magaalada; Guddiga Horumarinta Bulshada & Adeegyada Badqabka Dadweynaha ee Golaha Magaalada; Mission Woods Church, Odey; Karate Edge - Kaaliyaha Tababaraha; Ururka Booliiska Milton, Hore u ahaa guddoomiye iyo xoghaye; FME Rugta Ganacsiga, Hore u ahaa xoghaye fulinneed iyo safiir

**Bayaanka:** Waxaan jeclahay oo aan aaminsanahay Magaalada Milton. Milton waxay ahayd gurigeena muddo 20 sanno ah. Ka shaqeynta Duqa Magaalada ku meel gaar ahaan labadii sanno ee la soo dhaafay waxay i soo gaarsiisay mas'uuliyadda hoggaaminta magaalo, iyo ogaanshaha in had iyo jeer ay jiraan waxyaabo kale oo la qaban karo. Ka adeeggida golaha magaalada siddeedii sanno ee la soo dhaafay ayaa ahayd mid aad u qancisa, waxaana farxad ii ahayd inaan la shaqeeyo dad aad u heellan oo doonaya wanaagga Magaalada Milton.

Waxaan si xoog leh ugu heellannahay in magaalada ay diiradda saarto mas'uuliyadda maaliyadeed iyo badqabka dadweynaha. Waxaan door muhiim ah ka ciyaaray hagaajinta awoodda magaalada ee bixinta koronto lagu kalsoonaan karo, hubinta sahay biyo oo xooggan, iyo dadaalka lagu doonayo in magaalada Milton looga dhigo magaalo qurux badan oo lagu lugeeyo.

Ka duqa magaalada ahaan waxaan door weyn ka ciyaari doonaa anigoo sii wadi doona inaan hubiyo in bulshadeenu ay korto, barwaaqo noqoto, oo ay sii ahaato meel firfircoon oo lagu noolaado. Waxaan abuuri doonaa oo aan ilaalin doonaa xiriir wax ku ool ah oo aan la yeesho hoggaamiyeyaasha bulshada maxalliga ah iyo kooxaha. Dhammaan daneeyayaasha ayaa noqon doona kuwo xoog badan iyada oo loo maraayo iskaashiga wax ku oolka ah ee iskaashiyadan.

Waxaan kugu dhiirigelinayaa taageeradaada iyo codkaaga ku aaddan duqa magaalada. Aan u guurno mustaqbalka si wadajir ah.

## Megan Sheridan



(253) 223-1593
megan4miltonmayor@gmail.com
meganformayor.org

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Guddoomiyaha Qorsheynta ee Maple Valley, Xubinta Golaha Magaalada, Madaxweyne Ku-Xigeenka xafladda bulshada. Diiradda saaraya daah-furnaanta go'aan qaadashada, kobaca dheelitiran, ka-qaybgalka dadweynaha, isku keennida derisyada.

**Khibrad Xirfadeed Kale:** 30 sannadood oo khibrad ah iibka, maareynta xiriirka, wadaxaajoodka qandaraaska iyo hoggaaminta, xirfadaha lagama maarmaanka u ah maamul wax ku ool ah. Megan sidoo kale waxay buuxisay baahida Magaalada Milton ee qorsheynta iyo maaliyadda.

**Waxbarashada:** Tacoma Community College; Linfield University; Rockwell Institute

**Adeegga Bulshada:** Dadaalka Megan ee adeegga wuxuu ka baxsan yahay doorarka jagada la soo doortay. Waxay hagtay dhallinyarada, taageertay qoysaska korsada, abaabushay helitaanka waxbarashada iyo adeegyada muhiimka ah—gaar ahaan intii lagu jiray cudurka faafa. Waxay u heellan tahay isku xirnaanta, naxariista, iyo ka mid noqoshada dhammaan, taas oo ay keeni doonto Magaalada Milton.

**Bayaanka:** Milton waxay u baahan tahay Duq Magaalo oo leh ballanqaad ah inuu dhegaysto oo oo ku hoggaamiyo ujeeddo iyo naxariis—hubinta in magaaladeenu ay ku korto si ay u ilaaliso dabeecaddeeda iyadoo la kulmaysa baahiyaha isbeddelaya ee bulshada.

Doorka Duqa Magaalada waa adeeg, ma aha xaalad. Waxay ku saabsan tahay in la yimaado, la dhiso kalsoonida, iyo in la sameeyo go'aanno ka tarjumaya qiyaamka iyo mudnaanta dadka halkan ku nool oo ka shaqeeya.

Marka hore, waa inaan diiradda saarnaa qorsheynta muddada dheer ee xoojinaysa dhaqaalaheena iyo yareynta culayska canshuur bixiyeyaasha. Taasi waxay ku jirtaa in lala shaqeeyo Sound Transit iyo Dekedda Tacoma si loo hubiyo in magaalada Milton ay ka faa'iidaysato fursadaha gaadiidka iyo dhaqaalaha ee goboleedka. Horumarinta dhaqaalaha waa in ay taageertaa ganacsiyada yaryar, abuurtaa shaqooyin maxalli ah, oo ay ballaarisaa dakhliga iyada oo aan wax badan laga dalbanin deganeyaasha.

*Mudnaanta wadaagga ah ee magaalada waxaa ka mid ah:* Isgaarsiinta furan iyo ka-qaybgalka macno leh ee bulshada; Xiriir ixtiraam leh, wada shaqeyn leh oo lala yeesho Shaqaalaha Magaalada; Difaacid xooggan oo loogu talagalay Magaalada Milton heerka maxalliga, degmada, iyo gobolka; Qorsheyn midaysan oo lala yeesho Golaha Magaalada si loo qaabeeyo aragti cad oo fog. Bulshadeena waxay mudan tahay in la maalgashado. Si wadajir, waxaan u horumarin karnaa magaalada Milton—iyadoo la adeegsanayo daah-furnaanta, daacadnimada, iyo diirad saarista waxa runtii muhiimka ah. Aan diiradda saarno qiyaamka wadaagga ah, ma aha dhinacyada xisbiga—maxaa yeelay hoggaaminta wanaagsan waxay u adeegtaa qof walba.

## Duqa Magaalada

### Bruce White



(253) 517-3302
bruce@friendsofbruce.us
www.friendsofbruce.us

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Xubin Golaha Magaalada , Magaalada Milton 2022 - Hadda. Xubin Golaha Magaalada , Magaalada Kent 2002 - 2005.

**Khibrad Xirfadeed Kale:** Kombuyuutar iyo Barnaamij-sameeyaha Xogta, Horumarinta Nidaamyada Shabakadda; Mulkiilaha Ganacsi Baayacmushtarka Oonleenka oo Hadda ah

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Cilmiga Sayniska Kombuyuutarka, Linfield College, McMinnville, OR.

**Adeegga Bulshada:** Guddiga Qorshaynta Milton, Naadiga Rotary, Habitat for Humanity.

**Bayaanka:** Bruce White waa hoggaamiyaha ay Milton u baahan tahay—u heellan badbaadada, adeegga, iyo mas'uuliyadda maaliyadeed. Wuxuu taageeraa ciidanka booliiska oo ilaalinaya badqabka deganeyaasha iyadoo la dhisayo kalsoonida, hubinta in saraakiishu ay yihiin kuwo la heli karo oo wax ku ool ah. White wuxuu aaminsan yahay in amniga magaalada Milton uu ka bilaabmo fulinta sharciga oo ka tarjumaya qiyaamkeena.


Badqabka waddooyinka waa diiradda muhiimka ah.  Wuxuu taageeraa shaqaaleynta sarkaal heellan oo xakameynaya taraafikada si uu u kormeero xaafadaha, isagoo wax ka qabanaya xawaaraha si loo ilaaliyo carruurta iyo lugeeyayaasha. White wuxuu hagaajin doonaa socodka iyadoo lagu daraayo hareeraha waddooyinka xaafadaha, taasoo xaqiijinaysa waddooyin ammaan ah oo la heli karo oo loogu talagalay deganeyaasha. White wuxuu sidoo kale hubin doonaa in shaqaalaha magaalada ay yihiin kuwo karti leh oo diiradda saaraya macaamiisha, ayagoo bixiya adeegyo tayo sare leh oo ay deganeyaashu filayaan.

Maadaama uu yahay mid ka mid ah Golaha Magaalada ee hadda jira, White wuxuu kasoo horjeestay dhammaan kordhinta canshuurta hantida, isagoo sannad walba u codeeyay ka soo horjeedka marka uu dib u eegay miisaaniyadda—sannado ay magaalada ku raaxaysatay miisaaniyad dheeri ah oo weyn. Wuxuu diidayaa inuu si aan loo baahnayn culays loo saaro canshuur bixiyeyaasha, isagoo og in sicir bararka koraya uu durba caqabad ku yahay deganeyaasha, gaar ahaan kuwa ku nool dakhli go'an. Xannibaaddan maaliyadeed waxay gacan ka geysan doontaa sii wadista rafcaanka Milton sidii bulsho degan, la awoodi karo, oo soo dhawweyn leh - dabeecad uu ka go'an yahay inuu ilaaliyo.

Iyadoo sida Bruce White oo duqa magaalada yahay, Milton waxay ku barwaaqoobi doontaa halka ammaanka, adeegga, iyo mas'uuliyadda maaliyaddu ay waafajiyaan. Aragtidiisa wax ku oolka ah ee dadka ugu horeysiisa ayaa ka soocda kuwa kale. Taageer Bruce White si Milton ay u yeeshato mustaqbal xooggan, ammaan ah, oo la awoodi karo.

# Golaha Jagada Lr. 1

## James Alberson



(206) 300-0339
info@jamesalberson.com
www.jamesalberson.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Teknolojiyadda Kombiyuutarka - Purdue University; Shahaadada Mastarka oo leh Taqasus Suuqgeynta - Purdue University

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Hadda ee Golaha Magaalada Renton; Mulkiilaha Ganacsi, Sandler Training

**Bayaanka:** Ka Guddoomiyaha Golaha Magaalada Renton ahaan, waxaa iga go'an hoggaan caqli-gal ah iyo go'aanno caddaalad ah oo maskax leh oo hagaajinaya tayada nolosha ee Renton. Intii lagu jiray muddo xilleedkaygii ugu horeeyay, waxaan helay waayo-aragnimo qiimo leh iyo aragti ku saabsan wax ka qabashada arrimaha muhiimka ah, horumarinta hindisooyinka muhiimka ah, iyo la shaqeynta deganeyaasha si loo daboolo baahiyaha dhabta ah.

*Mudnaantaydu waa isla xisaabtanka, amniga, iyo fursadda.* Waa inaan soo celinaa mas'uuliyadda shakhsiga ah, diidnaa dhaqanka cudurdaar samaynta, oo aan qaadnaa tallaabo macno leh si loo ilaaliyo amniga dadweynaha. Waxaan sidoo kale diiradda saarayaa ballaarinta fursadaha iyada oo loo maraayo kobaca dhaqaalaha ee loo dhan yahay, horumarinta shaqaalaha, iyo helitaanka waxbarasho iyo tababar xirfadeed oo la awoodi karo. Qof kasta oo ku nool Renton waa inuu helo fursad uu u dhisto nolol ka wanaagsan naftiisa iyo qoyskiisa. Codkaaga, waxaan kusii wadi doonaa dhisidda Renton oo xooggan, mid firfircoon—mid u adeegta inay tusaale u noqoto gobolka.

*Taageerooyinka: Duqa Magaalada Armondo Pavone, Duqii Hore Denis Law, Xubnaha Golaha Renton Prince, Perez, iyo O'Halloran; Xubin Golaha Degmada King Reagan Dunn, iyo qaar kale oo badan.*

## Gwendolyn Hosea-Mimms



(206) 841-6303
hosea-mimms@outlook.com

**Waxbarashada:** PH.D Madison University, Maareynta Kheyraadka Aadanaha


**Shaqo iyo Xirfad:** Barre, Mulkiilaha Ganacsi Yar, Adeegaha Dadweynaha

**Bayaanka:** La kulan Dr. Gwendolyn Hosea-Mimms. Waxaan go'aansaday inaan u tartamo Golaha Magaalada Renton Jagada 1, ka dib markii aan la hadlay dad badan oo ka niyad jabay codbixinta. Waxaan u maleynayaa in niyad-jabka uu dilaayo dimuqraadiyaddeena waxaana ogahay in isbeddelku uu keliya yimaado iyadoo la adeegsanayo u doodid joogto ah oo fiiro gaar ah u leh arrimaha saameeya adiga iyo kuwa aad u aragto inay muhiim yihiin.

Go'aankayga wuxuu ka yimid hoggaamiyeyaashayda iyo la-taliyeyaashaydii lixdameeyadii iyo toddobaatameeyadii. Waxaan bartay in codkaygu uu muhiim yahay. Waan ka yaraa da'dii codbixinta, balse xilligaas waxaan awooday inaan ka qaybqaato. Waxaan ku xanaaqsanaa dadka sababtoo ah wixii aan usoo maray oo naga caawiyay si aan u helno codbixinta. Waan ogahay in halgankaas uu sabab u ahaa si aan u Tartamo.

Waxaan arkaa isla dhibaatooyinka Renton oo ku sii fidaya gobolka oo dhan. Hoy la'aanta, Dambiyada, Amni Darada Cuntada. Ma saamayn karno natiijooyinka haddii aan miiska joogin. Aan wax qabsano. Ii Codee.

## Michael Westgaard



(206) 370-1987
mikeforrenton@gmail.com
mikeforrenton.com

**Waxbarashada:** Lagu tababaray Dugsiga ganacsiga iyo farsamada gacanta. Dugsiga doorashada ee u ololeeynta Raise The Wage Renton (Renton Kor-u-qaad Mushaharka).

**Shaqo iyo Xirfad:** Hawl-wadeenka Biyaha Wasakhda ee Degmada King . SEIU925 Wakiilka Xarunta, Xubinta Guddiga Fulinta.

**Bayaanka:** Renton waxay noqonaysaa mid aysan shaqaalaha awoodi karin. Hadda waxaan leenahay kiro iyo qiimeyaal heerka Seattle ah - oo ay ku yar yihiin shaqooyinkooda mushaharka sare. Hindisaha warqadda codbixinta ee Renton Kor-u-qaad Mushaharka ee aan ka caawiyay inaan hoggaamiyo waxay ahayd bilow wanaagsan, taasoo siinaysa shaqaalaha Renton mushaharka ugu sareeya ee mushaharka ugu yar ee dalka 2024.

Laakiin taasi kuma filna. Waxaan u tartamayaa inaan keeno mushahar nololeed, guryo la awoodi karo, badbaadada dadweynaha, iyo gaadiid wanaagsan.

Sida wakiilka xarunta ururka shaqaalaha ee ku soo koray saboolnimada ahaan, waxaan u dagaalami doonaa shaqaalaha Renton ee caadiga ah ee la halgamaaya bixinta biilasha. Waxaan wax ka qaban doonaa dhibaatadeena qiimaha-nololeed anigoo soo jeedinaaya ganaaxyo la saarayo mulkiileyaasha waaweyn ee ku dhaafa guryaha kuwo banaan, dhisitaanka guryo la awoodi karo, oo ka shaqeynaya dhaqan gelinta mushaharkeena ugu yar ee cusub iyo xaddidaadyada kirada yar ee dhawwaan lagu ansixiyay Olympia. Si ka duwan siyaasiyiinta u adeega deeq-bixiyeyaasha shirkadaha iyo Rugta Ganacsiga, ololahaygu waa mid ay si mutadawacnimo loo wado, oo ay maalgeliyaan deeq-bixiyeyaal yar, oo ay taageerto IAM751 (Mashiiniisteyaasha Boeing), DSA, Dimuqraadiyiinta Degmada King , iyo Ururka Shaqaalaha MLK.

# Golaha Jagada Lr. 2

## Mary Clymer



(425) 306-3596
Mary@Clymer4Renton.com
Clymer4Renton.com

**Waxbarashada:** Dhigatay Central Washington University, Dufcadda 4aad ee ka qalin-jebisay Dugsiga Sare ee Renton

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar oo Caafimaadka iyo Fayo-qabka

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Renton si aan uga caawiyo hoggaaminta magaalada mustaqbal ku saleysan naxariis, ficil, iyo wadajir. Renton waxay ahayd guriga qoyskeena in ka badan 100 sannadood, waxaana si weyn ugu heellanahay inaan xaafadaha ka dhigno ammaan, kuwo isku xiran, oo barwaaqo ah.

Waxaan saddex jeer ahaa Mutadawaca Sannadka ee Renton, Xubin hore oo ka tirsan Guddiga Farshaxanka Renton, iyo taageere sharaf leh oo u ololeeya magaaladeena. Sannado badan oo adeeg dadweyne iyo adeeg macaamiil ah, waxaan bartay awoodda dhegaysiga, xallinta dhibaatooyinka hal-abuurka leh, iyo caawinta dadka kale. Anigoo ah mulkiilaha hore ee ganacsi yar oo ku yaalla bartamaha magaalada, waxaan fahamsanahay caqabadaha ganacsiyadeena maxalliga ah iyo taageerada ay u baahan yihiin.

Waxaa iga go'an xoojinta xiriirka bulshada, koritaanka istaraatiijiga ah, iyo helitaanka xalal loo dhan yahay oo wax ku ool ah oo ka tarjumaya qiyaamka wadaagga ah ee Renton. Waxaan ku hoggaamin doonaa daah furnaan, daacadnimo, iyo isla xisaabtan. Waxaa i taageeray Duqii hore ee Magaalada Denis Law, Bishobkii howlgabay Kirby Unti iyo dad kale oo badan. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Carmen Rivera



(425) 466-4143
riveraforrenton@gmail.com
RiveraforRenton.com

**Waxbarashada:** Tiffany Park, Nelsen MS, Lindbergh HS, Seattle University, University of Liverpool

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin ka tirsan Golaha Magaalada Renton, Kaaliyaha Maamulaha iyo Kaaliyaha Barafasoorka Waxbarashada

**Bayaanka:** Anigoo ah degane nolosheeda oo dhan ku qaatay Renton, macallin, iyo maareeye kiis hore, waxaan u tartamayaa doorashada mar labaad sababtoo ah waxaan istaahilnaa magaalo *amni ah*, *la awoodi karo*, iyo *lala xisaabtami karo.*

Waxaan ahaa Xubinta Golaha ugu horeeyay ee taageera kordhinta mushaharka ugu yar ee Renton, si loo hubiyo in shaqaalaha ay helaan shaqooyin mushahar fiican leh. Waxaan hoggaamiyey dadaallo lagu maalgelinayo ka hortagga rabshadaha dhallinyarada, lagu balaarinayo helitaanka taageerada caafimaadka maskaxda iyo dabeecadda, iyo lagu dhisayo kalsoonida bulshada iyo fulinta sharciga iyada oo loo maraayo iskaashiga ka wada-jawaabista wadajirka ah. Anigoo ah Xubinta keliya ee Golaha oo leh khibrad toos ah oo adeeg bulsho, waxaan ogahay sida nidaamyada u guuldareystaan iyo halka ay tahay in laga xoojiyo. Waxaan u dagaalamaa qoysaska shaqeeya, ganacsiyada yaryar, iyo xaafadaha leh guryo ammaan ah oo loogu talagalay dhammaan.

Aniga ayaa ah musharaxa keliya ee tartankan ee ay taageereen Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo ururada shaqaalaha. Waxaan keenaa waayo-aragnimo nololeed, qiyaamka horusocodka, iyo diiwaan hawlgal ah. Renton waxay mudan tahay hoggaamiyeyaal soo muuqda, dhegaysta, oo wax qabta. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Raman Mann



(206) 261-4999
mannforrenton@gmail.com
mannforrenton.com

**Waxbarashada:** B.Sc. (Shahaadada Jaamacadda) Bayoolajiga Kasturba Medical College of Manipal

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha Ganacsi Yar, Isbitaalka Xayawaanka ee Happy Tails

**Bayaanka:** Sida *degane ku nool Renton noloshayda oo dhan* iyo *mulkiilaha ganacsiga yar*, waan fahmay baahida bulshadeena. Waalidiintay—taksiile iyo kalkaaliye caafimaad — waxay i bareen qiyaamka shaqada adag, naxariista, iyo adeegga maanta i hagaya. Golaha dhexdiisa, waxaan mudnaan siin doonaa maalgashiga *badqabka dadweynaha* oo leh saraakiil aad u tababaran oo ilaalinaya jidadkeena iyo deganeyaasheena. Waxaan u shaqeyn doonaa *jardiinooyin nadiif ah* iyo *waddooyinka socodka* iyadoo la kordhinayo dayactirka iyo amniga.

Habkayga *dheellitiran ee hoy la'aanta* waxa ku jira ballaarinta adeegyada isku xidhka, barnaamijyada wacyigelinta, iyo guriyaynta ku meel gaadhka ah anagoo ilaalinayna goobaheenna dadweynaha . Waxaan taageersanahay *hagaajinta kaabayaasha* iyo abuurista fursado guri oo la awoodi karo.

Aniga iyo xaaskayga Arsh waxaan aasaasnay Isbitaalka Xayawaanka ee Happy Tails, anagoo abuurnay *shaqo maxalli ah* iyo bixinta *daryeel naxariis leh oo loogu talagalay xayawaanka rabaayada ah* iyo xoolaha. Hadda ka waalid noqonaaya ahaan, waxaa si aad ah nooga go'an mustaqbalka Renton. Waxaad u qalantaa xubin golaha oo leh aragtiyo cusub iyo qaab wada shaqeyn, dhisidda Renton halkaas oo qof kastaa uu fursad u leeyahay inuu ku guuleysto. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

# Golaha Jagada Lr. 6

## Michael Sanford



(206) 290-5765
Mwsanford@live.com

**Waxbarashada:** Highline CC--Ururka Maamuuska, Tababar gaar ah oo Militari--19D, 11H, 11M BFV, 96R Raadaarka Kormeerka Dhulka

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha/Hawl Wade Hawlgabay ee ganacsiyo maxalli ah iyo kuwa caalami ah labadaba

**Bayaanka:** Nolosheyda waxaa lagu qeexay adeeg—dalkeyga, bulshadeyda, iyo deriskeyga. Waxaan u tartamayaa Golaha SeaTac si aan u sii wado ballanqaadkaas. Degane Degmada King ah oo ku faanaya tan iyo 1961, waxaan ku noolaa SeaTac in ka badan toban sanno waxaanan ka soo shaqeeyay doorar hoggaamineed inta nolosheyda ah, laga bilaabo Saajin Heerka Koowaad ee Ilaalada Qaranka ee Gobolka Washington ilaa Madaxweynaha Ururka Mulkiileyaasha Guryaha ee Bow Lake.

Ka mulkiile ganacsi yar iyo la-taliye amni ahaan, waxaan fahamsanahay muhiimadda ay leedahay nabadgelyada, kobaca dhaqaalaha, iyo awood-siinta maxalliga ah. Intii lagu jiray cudurka faafa, waxaan hoggaamiyey mashruuc qiimeyn ku saabsan la macaamilka dadka hoy la'aanta ah si aan ugu xiro shakhsiyaadka nugul adeegyo muhiim ah. Waxaan sidoo kale hoggaamiyey dadaallo lagu caawinayo ganacsiyada si ay u yareeyaan khasaaraha una kordhiyaan faa'iidada iyada oo loo maraayo xalal amni oo hal-abuur leh, oo ay ku jiraan teknolojiyada diyaaradaha aan duuliyaha lahayn.

Waxaan u adeegsan doonaa waayo-aragnimadayda xirfadeed iyo tan nolosha si aan SeaTac uga dhigo mid ka sii wanaagsan sidii ay ahayd maanta. Fadlan iga caawi inaan gaaro yoolkan. U codee Michael Sanford ee ku aaddan Golaha SeaTac.

## Bedria Abdullahi



(206) 327-5171
Bedriaforseatac@gmail.com

**Waxbarashada:** University of Washington, Shahaado Jaamacadeedka Isgaarsiinta iyo Cilmiga Siyaasadda

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Fulinta, SeaTac Senior Support Systems (Nidaamyada Taageerada Waayeelka)

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa golaha magaalada sababtoo ah magaaladeenu waxay u baahan tahay inay noqoto mid maskax leh, loo dhan yahay, oo ku saleysan baahida bulsho kasta oo SeaTac ugu yeerta guri.

Waxaan gaarnay horumar macno leh oo ku aaddan himilooyinkeenna wadaagga ah; ku dhawwaad labanlaabidda awooddeena daryeelka carruurta, hirgelinta barnaamijyo muhiim ah oo horumarinta dhaqaalaha ah, dhisidda guryo nooc walba leh, muujinta ujeeddadeena xooggan ee ah inaan ka ilaalino North SeaTac Park horumarinta dekedda, iyo waxyaabo kale oo badan.

Waxaan taageeri doonaa siyaasado wax ku ool ah oo keenaaya natiijooyin muuqda oo ku aaddan dhammaan deganeyaasha: kordhinta tirada guryaha la awoodi karo iyo kuwa dhexe, abuurista amniga xaafadaheena gudahooda, diidmada in deganeyaasheena qaadaan culaysyo canshuur dheeraad ah, iyo ilaalinta adeegyadeena dabiiciga ah iyo jardiinooyinkeena. Waxaan ku faanayaa inay i taageeraan: Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-dejinta ee 33aad, Duqa Magaalada Mohamed Egal, Xubinta Golaha Jake Simpson, Xubinta Golaha James Lovell, iyo tobanaan waalid, shaqaale, hoggaamiyeyaal bulsho, iyo in ka badan. Waxay ii ahaan lahayd sharaf inaan kasbado taageeradaada.

## Marianne West



(425) 658-6555
mariannewest@msn.com


**Waxbarashada:** Lake Washington Institute of Technology (Machadka Farsamada ee Lake Washington)

**Shaqo iyo Xirfad:** Militari, Cunto Karinta, Xabsiyada, Maareeyn

**Bayaanka:** Ka Halyeey Hore ee Ciidanka Badda ee Dagaalkii Khaliijka ahaan, waxaan u adeegay siyo kala duwan oo aan fahamsanahay muhiimadda ay leedahay in la helo nidaam taageero oo xooggan. Waxaan aaminsanahay awoodda bulshada iyo muhiimadda ay leedahay bixinta adeegyo dhammaystiran oo daboolaya baahiyaha qof walba. Waxay ujeeddadayda tahay inaan noqdo halyeey u taagan kuwa aan helin adeegyada ku filan, gaar ahaan halyeeyadeena hore iyo dadka hoy la'aanta ah. Adkaysigooda iyo geesinimadooda waxay mudan yihiin aqoonsi iyo taageero, waxaana u heellannahay inaan hubiyo inay helaan kheyraadka ay u baahan yihiin si ay u horumaraan. Waxaan aqoonsanahay muhiimadda ay leedahay in la helo fursadaha gaadiid oo hufan si bulshadeena la isugu xiro, taasoo u oggolaanaysa helitaanka fursadaha iyo adeegyada si fudud. Anagoo kobcinayna deegaan loo dhan yahay, waxaan dhiiri galin karnaa wada hadal iyo isfaham, anagoo hubinayna in shakhsi walba uu helo fursad uu ku wadaago codkooda oo uu gacan ka geysto kobaceena wadajirka. Waxaan arkaa bulsho qof walba uu dareemayo nabad iyo qiimeyn, halkaas oo kala duwanaanshaha iyo is muujinta aan keliya lagu soo dhawweyn laakiin sidoo kale loogu dabaaldego.

# Ma isticmaashay Foojarradaada Dimuqraadiyadda?

## Weli waxaa jira wakhti lagu qoondeeyo foojarradaada!



### Waa maxay Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda?

Sannadka 2025, deganeyaasha Seattle waxay helayaan afar $25 Foojarrada Dimuqraadiyadda oo ay ku deeqi karaan musharaxiinta u tartamaaya xafiis Seattle ka mid ah. Deganeyaasha waxay foojarradooda u qoondeyn karaan musharax(iin) kasta oo ballanqaada inuu ka mid yahay barnaamijka.

Si aad u isticmaasho Foojarrada Dimuqraadiyadda, waa inaad tahay degane Seattle ku nool, ugu yaraan 18 jir, iyo muwaadin Mareykan ah, qaran Mareykan ah, ama degane sharcinimo ku jooga.

### Musharaxiintee ayaan siin karaa Foojarradayda Dimuqraadiyadda?

Musharaxiinta u tartamaaya Duqa Magaalada Seattle, Qareenka Magaalada, iyo Golaha Magaalada Jagooyinka 2, 8, iyo 9 ayaa u qalma maalgelinta Foojarka Dimuqraadiyadda. Iska hubi si aad u xaqiijiso in musharaxa aad jeceshahay uu isticmaalaayo Foojarrada Dimuqraadiyadda. Ka hel liiska musharaxiinta ka qayb qaadanaya halka seattle.gov/democracyvoucher ama wac (206) 727-8855.

### Goorma ayaan isticmaalaa Foojarradayda Dimuqraadiyadda?

Foojarrada Dimuqraadiyadda waxaad isticmaali kartaa laga bilaabo wakhtiga aad hesho ilaa Nofeembar 28, 2025. Hase ahaatee, musharaxiinta waxay heli karaan oo keliya tiro kooban oo ah Foojarrada Dimuqraadiyadda. Haddii aad wakhti dheer sugto si aad u isticmaasho foojarradaada, ayay aad ugu badan tahay in musharaxii dookhaaga ah uu gaaray xadadkooda foojarka.

### Waxaan lumiyay Foojarrayda Dimuqraadiyadda. Ma codsan karaa foojarro cusub?

Haa! Waxaad codsan kartaa Foojarro Dimuqraadiyad cusub adiga oo webseedka ka buuxinaaya foomka oonleenka, iimeel ugu dir halka democracyvoucher@seattle.gov, ama adigoo wacaya (206) 727-8855.

### Haddii aan isticmaalo Foojarradayda Dimuqraadiyadda, macluumaadkaas ma loo shaaciyaa dadweynaha?

Haa, ku tabarrucidda ololeyaasha, oo ay ku jiraan Foojarrada Dimuqraadiyadda, waa macluumaad dadweyne. Tani waxay ka dhigan tahay in magacaaga (iyo laga yaabo ciwaankaaga guriga), qofka aad wax ugu deeqday, iyo caddadka waxa lagu daabaci doonaa oonleenka.

**Su'aalo? Nala soo xiriir!**

seattle.gov/democracyvoucher | democracyvoucher@seattle.gov | (206) 727-8855

# Seattle/Degmada King

## HAGAHA CODBIXIYEYAASHA OO FIDIYOOW AH

*Taageerayaasha iyo kuwa ka soo horjeeda ee degmada oo dhan iyo cabbirrada warqadda codbixinta ee Seattle iyo dhammaan degmada King oo dhan, Golaha Degmada King ee Magaalo Weynta, Dekedda Seattle, Magaalada Seattle, iyo musharaxiinta Guddiga Dugsiga Seattle waxaa lagu martiqaaday inay duubaan muuqaal laba daqiiqo ah oo sharaxaaya cidda ay yihiin iyo sababta ay u tartamayaan.*

- ☑ **Si toos ah uga dhegayso musharaxiinta!**
- ☑ **Bayaannadu waa ilaa iyo laba daqiiqo oo lama tafatirin**
- ☑ **Musharaxiinta waxay u kala horeeyaan sida ay ugu qoran yihiin warqadda codbixinta**


**seattlechannel.org/elections**




**Hagaha Codbixiyeyaasha ee Fiidiyowga ah ee aan xisbina raacsanayn waa wada shaqeynta Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka ee Seattle, TV-ga Degmada King, iyo Janaalka Seattle.**

## Duqa Magaalada

### Joe Mallahan



(206) 271-3893
contact@joemallahanforseattlemayor.com
www.joemallahanforseattlemayor.com

**Waxbarashada:** MA (Shahaadada Mastarka), Daraasadaha Japan, UW; MBA (Shahaadada Mastarka), University of Chicago; BA (Shahaadada Jaamacadda) ee Siyaasadda, Catholic University of America

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxa Fulinta ee Hore ee T-Mobile

**Bayaanka:** Seattle waa magaalo leh qiyaam adag—laakiin dowladda magaalada ayaa ku fashilantay hirgelinta qiyaamkaas. Waxaan u tartamayaa Duqa Magaalada sababtoo ah waxaan aaminsanahay inaan ku noolaan karno qiyaamkeena. Iyadoo la adeegsanayo dowlad magaalo oo aad u hufan, *Seattle waxay noqon kartaa tusaale horusocod ah oo qaran*—taasoo ah beddelka fowdada iyo naxariis-darada siyaasadda ee MAGA.

Ka Duqa Magaalada ahaan, waxaan ka dhigi doonaa magaalada mid u shaqeysa dhammaanteen. Waxaan u baahanahay inaan *si weyn u horumarinno amniga dadweynaha*, waxaanan u baahanahay *kormeer rayid* oo ku saabsan waaxdeena booliiska. Waxaan dhammeyn doonaa 50 socdaal la socda booliiska sannadkayga ugu horeeya si aan ugu saldhigo xaqiiqada amniga dadweynaha.


Waxaan u baahanahay inaan *horumarinno awoodda wax iibsiga* iyo inaan *si weyn u dhimno hoy la'aanta*. Waxaan jarayaa caqabadaha sharciyada ee dib u dhigaaya dhismaha guryaha, waxaan maalgelinayaa mashaariic u adeegaya qoysaska shaqeeya, waxaanan ka faa'iidaysanayaa canshuur-celinta federaalka si aan si degdeg ah u dhisno guryo la awoodi karo. Waxaan ballaarin doonaa helitaanka daryeelka caafimaadka maskaxda iyo daaweynta balwadda, waxaanan keenni doonaa *5,000 oo sariirood oo hoy degdeg ah sannadkayga ugu horeeya gudihiisa*—ma daaweyn kartid balwadda iyo caafimaadka maskaxda marka dadku ku nool yihiin waddooyinka.

Mar walba waxaan ahaa *wakiil isbeddel*. Ka madaxweyne ganacsi ahaan, waxaan dib u habeyn ku sameeyay laba ganacsi oo dhexdhexaad ah anigoo la shaqeynaya shaqaalaha safka hore. Ka Madaxweyne Ku-xigeen T-Mobile ahaan, waxaan beddelay sida aan ugu adeegno malaayiin macaamiil ah oo dakhligoodu hooseeyo anigoo dhegaysanayay shaqaalaha safka hore oo ku dhiirigelinaya hal-abuurnimo geesinimo leh. Sidoo kale abaabulaha bulshada ahaan, waxaan isku keenay dad si aan u xallino dhibaatooyinka waaweyn ee magaalooyinka.

Waxaan si qoto dheer u daneynayaa Seattle iyo dadka ugu yeera guri. Waxaan wax ka qaban karnaa hoy la'aanta anagoo adeegsanayna naxariis iyo isla xisaabtan. Waxaan dib u habeyn ku samayn karnaa amniga dadweynaha anagoo adeegsanayna degdegsiimo iyo daacadnimo. Waxaan ka dhigi karnaa Seattle mid la awoodi karo mar kale—iyada oo aan la hurin cidda aan nahay.

Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga. *Joe Mallahan*

### Ry Armstrong



(206) 657-6287
info@armstrongforall.com
www.armstrongforall.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, Central Washington University; Shahaadada Mastarka ee Cilmiga Adabka, Horumarinta Joogtada ah, American University

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliye Qaran, AEA; Mulkiilaha Ganacsi Yar; Agaasimaha Fulinta Wadajirka, Sustainable Seattle

**Bayaanka:** Waxaan ku nool nahay mid ka mid ah magaalooyinka ugu qanisan taariikhda, haddana dadka ayaa weli hoy la'aan ah. Tani waa doorasho ay sameeyeen hoggaamiyeyaashayada. Ku dhashay kuna koray halkan, waxaan ogahay waxa magaaladaani u baahan tahay inay noqoto inay u shaqeyso dadkeeda, waxaana ka daalay ballanqaadyada jaban ee ka yimaada siyaasiyiinta xirfadlayaasha ah ee hadalka badan laakiin aan waxqabad lahayn.

Waxaan ahay abaabulaha shaqaalaha iyo agaasimaha fulinta ee urur aan faa'iido doon ahayn oo aaminsan in Seattle ay leedahay mustaqbal mudan in loo dagaalamo. Waxaan keenni doonaa hoggaamin geesinimo leh oo wax ku ool ah taas oo dhigaysa qoysaska shaqeeya, kiraystayaasha, iyo ganacsiyada yaryar bartamaha go'aannada siyaasadeed. Waxaan sannado badan la shaqeynayay ururada shaqaalaha waxaana hadda u adeegaa sidii Xildhibaan Qaran oo la doortay ee AFL-CIO-ku xiran ee Actors' Equity Association (Ururka Sinnaanta Jilayaasha), oo matalaya in ka badan 50,000 oo shaqaale ah oo ka tirsan dhaqaalaha hal-abuurka ah ee u dagaallamaya mushaharaadka nolosha, badbaadada goobta shaqada, iyo faa'iidooyinka. Sida Agaasimaha Wada-Fulinta ee Sustainable Seattle ahaan, maalmahayga waxaa ku qaataa maaraynta miisaaniyad malaayiin badan doolar ah oo noo oggolaanaysa inaan u dagaallano caddaaladda deegaanka ee bulshadeena.

Si aan wax uga qabanno *qalalaasaha nololeed*, waxaan mudnaan siin doonaa dhismaha guryo la awoodi karo, *la sii wadi karo*, iyo guryo la heli karo anigoo ilaalinaya in dadka Seattle ka soo jeeda la bara kiciyo, oo ay ku jiraan maalgashiga guryaha bulshada iyo ballaarinta daryeelka carruurta ee la awoodi karo. Si loo xalliyo *hoy la'aanta,* waxaan ku dari doonaa 1,000 sariiro hoy ah 100-ka maalmood ee ugu horeeya anigoo isla markaana maalgelinaya xalal waara, oo ku saleysan xogta. Si aan u hagaajino *Badqabka Dadweynaha* ee magaaladeena, waxaan aaminsanahay in aan dib u eegno dadaaladeena si aan ugu bixino *jawaabta saxda ah* in si degdeg ah loogu daboolo baahiyaha deriskeena, si aan u caawino dadka halkii aan sii wadi lahayn nidaam jaban.

Aynu dhisno Magaalada Seattle oo dhegaysata qof walba oo ku hoggaamisa naxariis. Doorashadaan waa dagaal aan cudurdaar lahayn oo aan loogu talagalin "Hal Seattle," laakiin dhammaan Magaalada Seattle.

*Isbeddel dhab ah wuxuu u baahan yahay geesinimo dhab ah*. Waxaan codsanayaa codkaaga si aan u dhisno magaalo noo shaqeysa dhammaanteen.

*Si aad u eegto taageerooyinkeena, booqo www.armstrongforall.com.* Ma qabtaa wax su'aalo ah? Soo wac wakhti kasta 206-657-6287.

# Duqa Magaalada

## Isaiah Willoughby



(206) 228-4802
THEPEOPLESVOICE206@outlook.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno Shahaadada Wareejinta ee Hantida Ma Guurtada North Seattle College

**Shaqo iyo Xirfad:** Ganacsiga

**Bayaanka:** "Midka Aan Doortay, oo Naftayda ku Faraxsan Tahay. Waxaan Korkiisa Saarayaa Ruuxayga, oo Wuxuu u Keenni Doonaa Ummadaha Caddaalad.

Qoraalkan ka socda Isaiah 42 ma aha oo keliya inuu saldhig u yahay iimaankayga—wuxuu qaabeeyaa ujeeddadayda. Sida adeegaha lagu tilmaamay qoraalkan, waxaa i dhaqaajiya ujeeddo qoto dheer: in aan caddaalad u keeno magaalada, in aan kor u qaado kuwa dareema in aan la maqlin, iyo in aan ku socdo qushuuc iyo awood sidii iftiin wakhtiyada adag. Ololahaygu wuxuu ku salaysan yahay qiyaamkaas—naxariis, geesinimo, iyo ballanqaad joogto ah oo ku wajahan dadweynaha Seattle.

Anigu waxaan ahay Isaiah Willoughby, waxaanan u tartamayaa Duqa Magaalada Seattle si aan awoodda ugu soo celiyo dadweynaha—waana sida saxda ee ku habboon.

Sida qof ka qalin-jabiyey Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno ee Hantida Ma Guurtada oo ka socota North Seattle College, waxaan keenaayaa waayo-aragnimo nololeed iyo aqoon farsamo labadaba si aan wax uga qabto mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee magaalada: guryaha. Waxaan fahamsanahay nidaamyada, caqabadaha, iyo fursadaha—waxaana diyaar u ahay inaan aqoontaas u adeegsado si aan u abuurro isbeddel dhab ah, oo waara.

Hadafkaygu waa inaan dhisno magaalo u shaqeysa qof walba, ma aha oo keliya kuwa sida aad u wanaagsan xiriirk u leh. Iyada oo loo maraayo daah furnaan, iskaashi hoose, iyo xalal ku salaysan xogta, waxaan taageeri doonaa: Guryo runtii la awoodi karo; Amniga dadweynaha oo ku salaysan kalsoonida bulshada; Dhaqaalaha magaalada oo kor u qaada qoysaska shaqeeya iyo ganacsiyada yaryar.

Ololahaan waa wax ka badan tartan xafiis—waa dhaqdhaqaaq. Dhaqdhaqaaq looga dhigaayo dowladda mid lala xisaabtami karo, la heli karo, oo ka jawaabaysa codadka deganeyaasha maalin walba ee Seattle. Iyada oo "Codka Dadweynaha" uu yahay calankeenna, waxaan dhabeyn doonaa in go'aannada siyaasadeed aanan lagu qaabayn qolka dambe, laakiin lagu qaabeeyo fagaareyaal furan— waxaana go'aamada qaadan doona shacabka, loona samayn doona shacabka. Si wadajir ah, waxaan u horseedi doonaa Seattle mustaqbal caddaalad ah, firfircoon, oo loo dhan yahay—midkaas oo caddaaladdu u qulqulayso sida webi, codadka kuwa la iska indha tirayna la maqlo oo awood la siiyo.

## Bruce Harrell



(206) 569-8486
info@bruceforseattle.com
bruceforseattle.com

**Waxbarashada:** University of Washington, BA (Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka) iyo Dugsiga Sharciga; Garfield High School (Valedictorian [Heerka tacliineed ee ugu sareeya fasalkooda qalin-jebinta])

**Shaqo iyo Xirfad:** Duqa Magaalada Seattle; hore Golaha Magaalada, Qareen matalaya shaqaalaha, ganacsiyada yaryar

**Bayaanka:** Haddii aan helo taageeradaada, waxaan sii wadi doonaa inaan ka gudubno caqabadaha– oo aan dhisno mustaqbal ifaaya, oo si badan loogu siman yahay. Tan iyo 2022, waxaan ka caawinay kumanaan qof oo nugul inay helaan guryo iyo hoy– taasoo taageertay hoos u dhac 80% ah oo ku yimid teendhooyinka aan la oggolayn ee magaalada oo dhan. Heerarka dambiyada waa hooseeyaan, waxaan dib u dhisaynaa tirada booliiska, iyo ka jawaabeyaasha Waaxda CARE ee daryeelka degdegga ah oo u tababaran hoos u dhigista xiisadaha ayaa ka caawinaaya dadka ku sugan xaaladaha adag. Waxaan samaynay maalgashi aan horey loo arag oo ku saabsan guryaha la awoodi karo, tallaabooyinka cimilada, gaadiidka dadweynaha iyo gaadiidka. *Aan sii wadno inaan si wadajir ah uga shaqeyno Seattle oo xooggan, oo midaysan.*

Waxaan ahay arday ka qalin jebiyay Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle iyo UW, degane noloshiisa oo dhan Seattle ah, iyo aabbe si qoto dheer ugu heellan kala duwanaanta iyo firfircoonida magaalada. *Haddii aan helo codkaaga waxaan sii wadi doonaa inaan diiradda saaro natiijooyinka, aanan samayn cudurdaar, oo aan raadiyo isbeddel geesinimo leh, oo wax beddeli kara*.

*Waxaan u heellannahay tallaabo ku saabsan guryaha*– waxaan u qoondeeyay in ka badan $1 bilyan si loo abuurro kumanaan guryo la awoodi karo, loona hagaajiyo helitaanka guryaha taageerada leh iyo shaqaaleynta. Waxaan meesha ka saaray caqabadaha dhismaha guryaha, waxaanan ansixiyay heerarka Dhismaha Cagaaran ee hoggaaminaya qaranka. Waxaan sii wadi doonaa inaan ka shaqeeyo bulshooyin la awoodi karo, anigoo deriska aan hoyga lahayn ku xiraaya kheyraadka.


*Waxaan sii wadi doonaa hagaajinta amniga dadweynaha*– anigoo fuliyay ballanqaadkii aan ku sameeyay aasaaska cutubka jawaabta caafimaadka dabeecadda ee aan hubeysnayn, shaqaaleysiiyay kuwo badan– iyo si badan u kala duwan– saraakiil booliis ah, yareeyay wakhtiyada jawaabta, oo la dagaalamay ka ganacsiga daroogada. Anigoo ah u doode dhallinyarada noloshiisa oo dhan, waxaa iga go'an yareynta rabshadaha hubka ee dugsiyadeena iyo bulshadeena. Horusocodka, waxaan dardargelin doonaa barnaamijyada nagu sii haynaaya badqab iyo caafimaad.

*Waxaan sii wadi doonaa inaan difaaco Seattle*– anigoo ka hortagaaya dadaallada maamulka Trump ee lagu carqaladeynayo mowqifka Seattle oo ah magaalo soo dhawweynaysa soo galootiga, LGBTQ, iyo bulshooyinka BIPOC. Waxaan hubin doonaa in xuquuqdeena iyo sharciyadeena la ixtiraamo.

Taageerooyinka: Guddoomiyaha Gobolka Ferguson; Xeer Ilaaliyaha Guud Brown; Senatar Cantwell; Xubnaha Kongareeska Jayapal, Smith, Strickland; Guddoomiyeyaashii hore Inslee, Locke, Gregoire; Ururka Shaqaalaha MLK, Ururka Shaqooyinka Dhismaha, ATU 587, Mashiinisteyaasha 751, Dab-Damiyeyaasha Seattle; Hoggaamiyeyaasha Deegaanka iyo Guriyeynta; Transportation4Washington; Baaskiillada WA, iyo in ka badan!

# Duqa Magaalada

## Clinton Bliss



(206) 637-6602
doctorblissformayor@gmail.com
www.doctorblissformayor.com

**Waxbarashada:** Dhammeeyay Barnaamijka Tababarka Dhakhtarnimada ee University of Washington, Ka qalin jebiyay mid ka mid ah tobanka iskuul ee caafimaadka ee ugu sareeya.

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiilaha ganacsi yar iyo Dhakhtar Daryeelka Aasaasiga ee Wallingford.

**Bayaanka:** Salaan wacan, waxaan ahay Dhakhtar Bliss, dhakhtar daryeelka aasaasiga ee Seattle iyo mulkiilaha ganacsi yar. Qiiyaamka ganacsigeena waa Tayada, Naxariista, Adeegga, iyo Daacadnimada waxaadna ku arki kartaa jawaab ka celinteena Google. Waxaan leeyahay nolol dhan oo hoggaan iyo adeeg dadweyne ah.

Waxaan u tartamayaa duqa magaalada si aan u joojiyo burburinta nolosheena, qoysaskeena, dalkeenna iyo nidaamkeena maamulka oo aan ku beddelo aragti cusub oo isbeddel togan ah.

Mid ka mid ah dhibaatooyinkeena ugu waaweyn ayaa ah inaan is eedayno ee ku aaddan dhibaatooyinka ka dhashay nidaamkeena sinnaan la'aanta dhaqaale iyo eexda ku jirta dowladeena, maxkamaddeena iyo dugsiyadeena. Nidaamkeena musuqmaasuqa sharciyeysan ee saraakiisha dadweynaha iyada oo loo maraayo deeqaha ololaha oo ay ku xigto dib ugu bixinta maalgelinta dadweynaha waa mid aan caddaalad ahayn oo khasaaraya. Markaan saxno dhibaatadaan, khasaaruhu wuu yaraadaa, iskaashigu wuu kordhaa, waxaana jiri doona dowlad wakiil dhab ah.

Mudnaantayda ugu weyn waa soo celinta amniga dadweynaha iyo anshaxa, isticmaalka maalgelinta dadweynaha si ay uga faa'iidaystaan dhammaan dadka, iyo joojinta eexda dhaqaale ee dowladda. Ololahaygu kuma tiirsana deeqo ka yimaada koox ama ganacsi waa mid gebi ahaanba ku shaqeeya tabaruc oo keliya sidaas darteed waxaan xor u ahay inaan si buuxda kuu matalo adiga codbixiyaha. Haddii la i doorto waxaan ka shaqeyn lahaa:

*In la dhiso goobaha hoyga si qof kasta oo hoy la'aan ah uu meel u helo; in la caawiyo kuwa la daal dhacaya balwadda iyo xanuunka maskaxda; in la xiro dambiileyaasha; in la joojiyo farshaxanka sharci-darada ah (graffiti); in la joojiyo dagaalka khasaarada badan leh ee aan waxtarka lahayn ee ka dhanka ah la dagaalanka daroogada; in maktabadaheena iyo xarumaheena bulshada loo isticmaalo sida kheyraadka ardayda halka dugsiyadeena dadweynaha ay ku guuldareystaan inay wax barraan; in la abuuro qorsheyn qiimeysa cufnaanta, meelaha cagaaran, beerista geedaha, iyo isticmaalka isku dhafan oo leh meel u dhow guryaha, ganacsiyada iyo dukaamaysiga; iyo ugu dambeyntii, in la beddelo gaadiidka buuqa badan, wasakhaysan, iyo midka aan amniga ahayn oo lagu beddelo gaadiid nadiif ah, aamusan oo la awoodi karo hadda!*

Macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo DoctorBlissForMayor.com Waad ku mahadsan tahay taageeradaada!

## Thaddeus Whelan



info@thadformayor.com
thadformayor.com

**Waxbarashada:** Sirdoonka Ciidanka; Shahaado Jaamacadeedka ee Dugsiga Dadweynaha iyo Arrimaha Caalamiga, Princeton University

**Shaqo iyo Xirfad:** Falanqeeyaha Barnaamijka Maareynta, Maamulka Duulimaadyada Federaalka

**Bayaanka:** Seattle, sida inta kale ee dalka, waxay ku jirtaa xaalad musiibo aqoonsiga oo wakhtiga casriga ah. Xitaa iyada oo faa'iidooyinka shirkadaha ay kor u kacayaan, dadka magaalada kama helaan wax faa'iido ah maadaama ay guryahooda aysan awoodi karin, oo ay sii go'doomaan marka loo eego gaadiidka dadweynaha oo yaraaday, iyo niyad-jabka nidaam aan u muuqan inuu danaynayo daryeelkooda. Waa inaan go'aansanaa haddii aan noqonayno magaalo loogu talagalay kuwa ugu taajirsan ee naga mid ah ama qof walba, aniguna si kal iyo laab ah ayaan u doortay tan dambe.

Waxaan u tartamayaa Duqa Magaalada sababo badan awgood, laakiin ujeeddadayda guud waa mid adeeg ah. Waxaan noloshayda oo dhan ku qaatay u adeegga dadka, waxaanan u arkaa tan inay tahay sii wadidda ujeeddadaas. Waxaan rabaa inaan dhiso magaalo soo dhawweysa muwaadiniinteeda iyadoo leh guryo la awoodi karo, gaadiid dadweyne oo xoog leh, ammaan iyo nabadgelyo ee mustaqbalka iyaga iyo qoysaskooda labadaba.


Taasi waxay la macno tahay in la weerarro dhibaatooyinka qiimaha guryaha ee meeshooda ay ka imaanayaan; sahayda. Waxay ka dhigan tahay ballaarinta Waddada Tareenka Fudud iyo waddooyinka baska si ka dhaqso badan sidii hore. Waxay ka dhigan inaan heer sareeya kula xisaabtanno hey'adaheena ammaanka dadweynaha iyo kuwa dowladda. Waxay ka dhigan tahay taageeridda iyo ballaarinta xorriyadaha shakhsiyeed ee muwaadiniinta Seattle, iyo ilaalinta iyaga iyo xuquuqdooda in aan lagu xadgudbin, ha ahaato taas mid ka timaada dowladda federaalka ama mulkiilahooda guriga.

Muddo aad u dheer waxaa na lagu qasbay inaan dowladdeena ula dhaqanno si xaqiraad ah, anagoo rajaynayna in go'aannada ay gaaraan aysan noogu dhaawicin si xad dhaaf ah. Waa wakhtigii aan beddeli lahayn habkaas, oo aan u dagaallano halkii inji ee aan u heli karno dadkeena.

Waa wakhtigii lagu aaminni lahaa wax ka wanaagsan. Waa wakhtigii la aaminni lahaa Seattle.

# Duqa Magaalada

## Joe Molloy



(206) 590-1126
info@joemolloyformayor.com
www.joemolloyformayor.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Dadweynaha oo leh Taqasuska Horumarinta Bulshada

**Shaqo iyo Xirfad:** Horey u ahaan jiray Maareeyaha Hawlaha Hadda Qandaraaslaha ee T-Mobile Park

**Bayaanka:** Waxaan ahay Joe Molloy — u doode hoyga iyo naafada, fikire-nidaamyada arigti dheer leh, iyo hoggaamiye ay qaabeeyeen waayo-aragnimo nololeedka safka hore oo ku saabsan nidaamyada jaban. Ma ihi siyaasi xirfad leh, laakiin waxaan ahay adeegaha dadweynaha — waxaan u tartamayaa Duqa Magaalada anigoo leh dareen degdeg ah iyo ujeeddo qoto dheer.

Waxaan u soo guuray Seattle anigoo leh ujeeddo — anigoo aaminsan inay tahay mid ka mid ah meelaha yar ee dunida ee dadka ila midka ah ay si buuxda isu muujin karaan. Qaar badan oo naga mid ah ayaa halkan u yimid ayagoo ay soo jiidatay ballanqaadkaas. Laakiin runta waa cadahay: nidaamyadeennu ma aha wax matalla qiyaamkeena. Weli ma ahan. Waxaan aaminsanahay inay noqon karaan — haddii aan nahay kuwo geesinimo leh, diyaar ah, oo u heellan isbeddel dhab ah.

Ololahaan ma aha oo keliya in la soo afjaro hoy la'aanta. Waxay ku saabsan tahay ka dhabeynta in suurtagalnimada hoy la'aantu aysan mar dambe jirin. Taasi waxay ka dhigan tahay in la dhiso magaalo leh helitaan guud oo hoy, daryeel caafimaad, jawaabaha degdegga ah ee masiibada, iyo taageerada bulshada — magaalo u shaqeysa dhammaanteen.

Seattle waxay noqon kartaa magaalada ugu horeysa ee qaranka ee soo afjarta hoy la'aanta — oo adduunka tusta sida loo sameeyo. Marka aan sidaas samayno, ma xallinayno hal dhibaato oo keliya. Waxaan dhisaynaa aasaas mustaqbal ammaan ah, waara, oo barwaaqo leh.

Waxaan la noolaaday cawaaqibta nidaamyada jaban ee magaaladeena iyo qarankeena — laga bilaabo hoyga ilaa daryeelka caafimaadka ilaa amniga dadweynaha. Waayo-aragnimadaas tooska ah ayaa qaabeeysa hoggaankayga waxayna kicisaa aragtidayda cad. Ololahaygu wuxuu halkan u joogaa inuu uu xanuunkaas u beddelo siyaasado, oo uu dhiso nidaamyo ku saleysan sharaf, sinnaanta, iyo daryeel.

Tani ma aha oo keliya siyaasado — waxay ku saabsan tahay ujeeddo. Seattle waxay diyaar u tahay hoggaan garanaya khatarta, arka waddada inaga horeysa, oo diida inuu cidna kaga tago xaga dambe.

## Katie Wilson



info@wilsonforseattle.com
wilsonforseattle.com

**Waxbarashada:** Baratay fiisigiska iyo falsafadda ee Balliol College, Oxford University

**Shaqo iyo Xirfad:** Aasaasaha iyo Agaasimaha Fulinta ee Ururka Rakaabka Gaadiidka (Transit Riders Union)

**Bayaanka:** Siyaasiyiinta xirfadleyaasha ah waxay rabaan inay ilaaliyaan xaaladda hadda jirta, laakiin way caddahay in xaaladda hadda jirta aysan shaqeynayn. Seattle waa magaalo weyn, laakiin waxay noqonaysaa mid aan lagu noolaan karin. Qoysaska shaqeeya way dhibban yihiin. Dad ka badan kuwii hore abid ayaa hoy la'aan ah. Waxaan u qalannaa duq magaalo oo aan ku mashquulin musuqmaasuq iyo fadeexado, mid diiradda saaraya wax ka qabashada caqabadaha waaweyn ee Seattle wajahayso: kharashka nolosha oo cirka isku shareeray, hoy la'aanta, amniga guud, iyo weerarrada naxariis darada ah iyo fowdada ah ee Trump.

*Tani waa magaaladiina —wax fiicanna waan ka samayn karnaa.*

Waxaan waayahayga shaqo ku qaatay inaan la dagaalamo dadka ka shaqeeya magaaladeena si aan ugu guuleysano guulo waaweyn oo loogu talagalay qoysaska shaqeeya: mushaharka ugu yar ee dalka ugu sareeya, ilaalin xooggan oo loogu talagalay kiraysteyaasha, qiimeyaal la awoodi karo oo loogu talagalay rakaabka gaadiidka, iyo canshuurta taariikhiga ah ee JumpStart ee shirkadaha hodanka ah, taas oo ka hortagtay gooymo wax burburin kara intii lagu jiray cudurka faafaha.

Ka duqa magaalada ahaan, waxaan abuuri doonaa 4,000 oo unug oo guri degdeg ah si loo yareeyo hoy la'aanta. Waxaan maalgelin doonaa beddelka jawaabta booliiska ee wicitaannada aan rabshadaha lahayn si SPD ay diiradda u saarto dambiyada culus. Waxaan ballaarin doonaa daaweynta caafimaadka maskaxda iyo balwadda. Waxaan taageeri doonaa ganacsiyada yaryar oo abuuri doonaa shaqooyin wanaagsan oo cagaaran. Waxaan sii xoojin doonaa guulaha aan u keenay shaqaalaha magaaladeena, waxaanan kordhin doonaa dakhliga cusub ee horusocodka ah si aan u ilaalino bulshooyinka nugul ee ka hortagga gooymaha Trump. Codbixiyeyaasha waxay laba jeer si aqlabiyad leh u taageereen guryaha bulshada, si weyn; Seattle waxay u qalantaa duqa magaalada oo ka shaqeyn doona sidii ay u guuleysan lahayd, ee ma aha mid burburinaya.

Seattle waxay yeelan kartaa guryo badan oo la awoodi karo, meelaha dadweynaha oo wanaagsan, dugsiyo tayo sare leh, gaadiid dadweyne oo heer caalami ah, iyo xaafado firfircoon. Uma baahnid dakhli lix-lambare ah si aad halkan gurigaaga ugu dareento. Tani waa magaaladiina — magaalo aan wada dhisi karno.

Haddii aad i siiso codkaaga, waxaan heli karnaa halyeey dhab ah oo u taagan qoysaska shaqeeya iyo dhisaha isbahaysiga ee xafiiska duqa magaalada. *Waxaa taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King, UAW 4121, iyo kuwo kale oo badan oo ku qoran wilsonforseattle.com/endorse.*

# Qareenka Magaalada

## Ann Davison



(206) 257-2206
info@neighborsforann.com
www.neighborsforann.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka Cilmi-nafsiga, Baylor University; J.D. (Shahaadada Sharciga), Willamette University College of Law

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareenka Magaalada Seattle

**Bayaanka:** Tan iyo markii la i doortay 2021, waxaan hoggaaminayay dagaalka lagu badbaadinayo magaaladeena; hadda waxaan hoggaaminayaa dagaalka ka dhanka ah Trump anigoo adeegsanaya awoodda buuxda ee xafiiskayga si aan u ilaaliyo bulshadeena hanjabaadihiisa ka dhanka ah soo galootiga iyo si aan u difaaco kuwa ugu nugul Seattle.

Anigoo ah haweeneydii ugu horeysay ee Seattle, iyo hooyo, ee u adeegta Qareenka Magaalada, waxaan la dagaalamay ka ganacsiga dadka ee Aurora; waxaan ka shaqeeyay in la tirtiro suuqyada daroogada ee furan ee halis gelinaaya xaafadaha oo dhan; waxaanan abuuray Beddelka Dacwadda Daroogada, oo siinaya kuwa la daal dhacaya balwadaha waddo loo maro daaweyn.

Si loo caawiyo dhimmista rabshadaha hubka, waxaan soo jeediyay xeerar caqli-gal ah oo loogu talagalay goobaha saacadaha dambe si loo yareeyo toogashooyinka habeenkii dambe. Waxaan u dagaalamay deegaanka iyo macaamiisha, anigoo ka helay $160 milyan shirkadaha wasakheeya ee ku shubaya kiimikooyin sun ah Webiga Duwamish, waxaanan dacweeyay Kia/Hyundai sababtoo ah si aan loo baahnayn ayay macaamiisha ugu soo bandhigeen xatooyada baabuurta.

Sababtoo ah waxaan aaminsanahay daah furnaanta iyo isla xisaabtanka, waxaan abuuray barnaamij xog cusub oo muujinaya dadweynaha sida nidaamka caddaaladda dambiyada u shaqeeyo; tusaale hadda ay raacaan kuwa kale oo dalka oo dhan ah. Waxaan hoggaamiyey dadaalka lagu riixayo Golaha Sharci-dejinta Gobolka si loo xalliyo dib-u-dhaca shaybaarka sunta ee DUIs si loo hagaajiyo badbaadada waddooyinka.

Waxaa i taageeray Guddoomiyeyaashii Dimuqraadiga ahaa Christine Gregoire iyo Gary Locke, Xildhibaanka Dimuqraadiga Adam Smith, Qareenka Degmada King Leesa Manion, Qareenka Degmada Pierce Mary Robnett, Xildhibaanka Dimuqraadiga David Hackney, Rev. Harriett Walden, Baadariga Aaron Williams, Ururada Dhismaha iyo Dhisidda ee Seattle, Ururka Dab-damiska Seattle; iyo inta badan Golaha Magaalada oo uu ku jiro Guddoomiyaha Golaha Magaalada, iyo garsooreyaal hawlgab ah.

Dib ugu ma noqon karno inaan sii ahaanno magaalo aan fulin shuruucdeeda oo u oggolaatay meelaha dadweynaha inay noqdaan kuwo aan ammaan ahayn oo aan la geli karin. Waxaan soo bandhigayaa hoggaan la xaqiijiyay, xalal macquul ah iyo ballanqaad ah inaan sii wado dagaalka mustaqbalka Seattle.

## Rory O'Sullivan



(206) 356-9852
rory@electroryosullivan.com
electrory.com

**Waxbarashada:** JD (Shahaadada Sharciga), Georgetown University Law Center; Shahaado Jaamacadeedka Dhaqaalaha, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Aasaase Lamaane, U Doodeyaasha Dheefta Shaqaaleynta Washington (Washington Employment Benefits Advocates)

**Bayaanka:** Xirfadda sharciga ah ee Rory waxay had iyo jeer la jaanqaadday baahiyaha bulshadeena. Intii lagu jiray xiisadda la wareegidda guryaha wuxuu caawiyay Mashruuca Caddaaladda Norhtwest isagoo matalaya mulkiileyaasha guryaha ee wajahaya la wareegidda. Markii Degmada King ay ku dhawwaaqday xaalad degdeg ah ee hoy la'aanta, Rory waxa uu u shaqeeyay sidii Qareenka Maamulka ee Mashruuca Caddaaladda Guriyeynta, kaas oo ahaa barnaamij ka socda laba guri oo maxkamadeed oo ay ku lug leeyihiin in ka badan 100 qareen oo hubinaya in kiraysteyaasha aan si khalad ah looga saarin.

Tobanaan sanno, Rory waxa uu ka shaqeynayay sidii uu fara-gelinta uga joojin lahaa danaha shirkadaha waaweyn ay ku leeyihiin doorashadeena. 2003dii, waxa uu gacan ka gaystay in la aasaaso urur la yiraahdo Ololeyaasha Dadweynaha Washington. In ka badan 20 sanno ka dib, ururkaas, oo hadda loo yaqaan Fix Democracy First (Hagaaji Dimuqraadiyadda Marka Hore), ayaa wali dadka isugu keenaya arrimaha lacagta ee siyaasadda. 2015, Rory wuxuu ka caawiyay diyaarinta luqadda hindisaha abuuray barnaamijkii ugu horeeyay dalka ee foojarka dimuqraadiyadda.

Rory wuu ogyahay in la joogo wakhti aan u dagaalami lahayn magaaladayada. Wuxuu la xisaabtami doonaa loo-shaqeeyeyaasha marka ay xadaan mushaharka shaqaalaha oo ay abuuraan xaalado shaqo oo aan ammaan ahayn. Wuxuu dacwayn doonaa kiisaska rabshadaha qoyska wuxuuna ilaalin doonaa kuwa badbaaday. Wuxuu u dagaalami doonaa inuu Seattle ka ilaaliyo masaafurinta Trump iyo xad dhaafka. Wuxuu ka caawin doonaa xaafadaheenna inay kalsooni la dhistaan booliiska isagoo la xisaabtamaya SPOG, wuxuuna soo celin doonaa maxkamadda bulshada si loo yareeyo ku noqoshada dambiga loona siiyo dadka fursad ay guul ku gaaraan.

Rory wuxuu u tartamayaa Qareenka Magaalada si uu u dhiso bulshada, u jebiyo meertada dambiyada, oo uu gaarsiiyo badbaado, caddaalad Seattle oo dhan ah. Wuxuu la nool yahay xaaskiisa, wiilkiisa, iyo eygooda Columbia City.

Rory waxaa taageeray: Urur kasta oo Dimuqraadi ah oo taageeray; oo ay ku jiraan Dimuqraadiyiinta Degmada 32aad, 36aad, 37aad, and 46aad, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Ururka Disbaajaryaasha Seattle, ILWU Local 19, FairVote Washington, Senator Saldaña, Wakiilada Thomas, Santos, iyo Street, Xubnihii Hore ee Golaha Magaalada Morales, Herbold, iyo O'Brien, Senatarkii Hore Kline, Xubintii Hore ee Golaha Degmada Kohl Welles, iyo qaar badan oo kale.

# Qareenka Magaalada

## Nathan Rouse



(206) 593-2203
campaign@voterouse.com
www.voterouse.com

**Waxbarashada:** Colorado College, B.A. (Shahaadada Jaamacadda); Seattle University School of Law, J.D. (Shahaadada Sharciga)(summa cum laude)

**Shaqo iyo Xirfad:** Difaace Dadweyne (Hadda); Qareenka, Davis Wright Tremaine; Karaaniga Garsoore Federaal ah

**Bayaanka:** Magaalada Seattle waxay u qalantaa nidaam caddaalad ah oo ka tarjumaya qiyaamkeena—mid ku saleysan isla xisaabtan iyo naxariis. Hadda, taas ma ahan waxa aan helayno. Xafiiska Qareenka Magaalada ayaa ku fashilmay bixinta waajibaadkiisa ugu aasaasiga ah. Kiisaska rabshadaha guriga iyo wadista gaariga adiga oo sakhraansan (DUI) waxaa lagu laalayaa heer aan la aqbali karin waxaana dhibaneyaasha looga tagayaa iyaga oo aan taageero helin. Dembiyada heerka hoose ah ayaa sii socda iyada oo aan wax isbeddel ah lagu samayn dhaqanka, halkii aan ka heli lahayn badbaado dhab ah oo dadweynaha ah waxaan helnaa ciwaanno siyaasadeed iyo dacwad oogid loogu talagalay bandhig siyaasadeed.

Waxaan u tartamayaa sababtoo ah waxaan ogahay waxa jaban iyo halka isbeddel dhab ah looga baahan yahay inuu ka dhaco. Anigu waxaan ahay difaace dadweyne, u doode sharci, iyo aabbe laba carruur ah oo yaryar. Waxaan karaani u ahaa garsooreyaal federaalka ah, waxaanan gacanta ku hayay dacwadaha madaniga ah ee adag mid ka mid ah shirkadaha ugu waaweyn ee Magaalada Seattle, waxaanan sannado badan ku qaatay wakiilnimada dadka kuwaas oo nidaamku cadaalad darro ku sameeyay.

Anigu ma ihi dacwad-ooge ama qof siyaasadda ku dhex jira. Waxaan ahay qof ku soo shaqeeyay goobaha adag—ula taagan dadka marka nidaamka uu burburo. Waxaan keenayaa khibrad sharci oo ballaaran iyo qiyaam nololeed—ma aha rabitaan siyaasadeed.

Waxaan noqon doonaa Qareen Magaalo oo keena natiijooyin, ma aha cudur daar. Tani waxay ka dhigan tahay in si wax ku ool ah loo maxkamadeeyo kiisaska culus iyo in la isticmaalo beddelaad la xaqiijiyay si loo joojiyo wareegga dhibaatada. Waxaan soo celin doonaa oo xoojin doonaa maxkamadda bulshada, waxaan ballaarin doonaa helitaanka daaweynta iyo adeegyada taageerada, waxaanan maalgelin doonaa qalabka dhab ahaantii yareeya soo noqnoqoshada dambiyada. Waxaan sidoo kale joojin doonaa dammaanadda lacagta ah ee dembiyada aan rabshadaha lahayn, kuwa hooseeya. Xorriyadda waa inaysan waligeed ku xirnaan inta lacag ah ee qof uu haysto—waa inay ku xirnaataa khatar, ammaan, iyo caddaaladda.

Waxaan ku faanayaa in ay i taageereen hoggaamiyeyaasha Dimuqraadiga iyo u doodeyaasha sharciga ee sharafta leh ee garanaya in Magaalada Seattle ay u baahan tahay Qareen Magaalo oo ku saleysan qiyaamka—qof ku hoggaamin doona daacadnimo, keena natiijooyin, iyo diidmada bandhigga siyaasadeed.

Waxaan ballanqaadayaa inaan noqdo Qareenka Magaalada oo ka ilaaliya Magaalada Seattle weerarrada Trump, aaminsan in la xisaabtanka iyo naxariistu ay wada noolaan karaan, fahamsanna in ammaanka dhabta ah uu ka yimaado jebinta wareegyada—ee aan ahayn sii xoojinta. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

## Erika Evans



(206) 382-5552
info@electerikaevans.com
www.ElectErikaEvans.com

**Waxbarashada:** JD (Shahaadada Sharciga), Seattle University; BA (Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka), University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Kaaliyihii Hore ee Xeer Ilaaliyaha Guud ee Mareykanka, Kaaliyaha Qareenka Magaalada–Dambiga, Madaniga

**Bayaanka:** Seattle waxay mudan tahay Qareen Magaalo oo na ilaalin doona oo u istaagi doona xuquuqdeena. Waxaan u tartamayaa inaan keeno ammaan dhab ah oo dadweynaha—anigoo la xisaabtamaya dambiileyaasha rabshadaha wada oo wax ka qabanaya sababaha aasaasiga ah sida isticmaalka maandooriyaha iyo deganaansho la'aanta dhanka guryaha. Waxaan xirfaddayda ku qaatay inaan u dagaalamo dhibaneyaasha rabshadaha, carruurta, iyo bulshooyinka aan matallaad ku filan helin. Waxaan maxkamadeeyay xatooyada mushaharka iyo dambiyada nacaybka, waxaanan la xisaabtamay kuwa ka ganacsada hubka iyo Fentanyl-ka.

Aniga ayaa ah musharaxa keliya ee leh waayo-aragnimo ah xeer-ilaaliye magaaleed iyo federaal ah, qareen difaac madani ah oo u shaqeeya Magaalada Seattle ah, garsoore ku-meel-gaar ah, iyo hoggaamiye bulsho. Doorkaas, waxaan si toos ah u arkay in sharcigu uusan keliya ku saabsaneyn ciqaabta—balse uu ku saabsan yahay caddaaladda, isku dheelitirka isla-xisaabtanka iyo naxariista.

Waxaan ku soo barbaaray qoys urur shaqaale ah oo ku saleysan xuquuqda madaniga ah iyo caddaaladda dhaqaale. Awoowgay, oo ahaa shaqaale beereed, ayaa markii dambe isticmaalay madashiisa Olombikada ee 1968 si uu ugu istaago xuquuqda madaniga ah iyo xuquuqul insaanka. Hooyaday waxay ahayd shaqaale dhisme iyo shaqaale bulsho. Aabbahay waa darawal gaadiid oo sharaf leh. Waxay i tuseen qiimaha shaqada adag, caddaaladda, iyo geesinimada.

Sida Qareenka Magaalada ee xiga ahaan, waxaan soo celin doonaa Maxkamadda Bulshada waxaanan diiradda saari doonaa dib-u-habeynta—ee maaha in ay noqdaan kuwa dib u soo noqnoqda. Waxaan soo afjari doonaa dib u dhacyada aan la aqbali karin ee maxkamadeynta kiisaska rabshadaha qoyska iyo DUI. Waxaan ka tagay shaqadaydii Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Mareykanka markii Trump xafiiska qabtay. Iyadoo xuquuqda madaniga, deegaanka, shaqaalaha, iyo taranka ay weerar ku jiraan, waxaan u baahanahay Qareen Magaalo oo la wadaaga qiyaamka, yaqaana sharciga, oo nala dagaalami doona.


Si sharaf leh waxaa taageeray: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Washington, Nick Brown; Dacwad-Oogaha Degmada King Leesa Manion; Guddoomiyaha Golaha Degmada King Girmay Zahilay; Guddoomiyeyaasha Dekedda Seattle Cho, Calkins; Senatarka Gobolka Saldaña, Wakiillada Street, Reed, Thomas; Xubnaha Golaha Magaalada Hollingsworth, Juarez (hore), Lewis (hore); ATU587; Degmada King, Dimuqraadiyiinta 36aad, 46aad, iyo 100+ hoggaamiyeyaal sharci, shaqaale, xuquuqda madaniga ah!

*Aan dhisno Seattle ammaan ah, oo caddaalad badan—si wadajir ah.*

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

## Golaha Degmada Lr. 2

### Adonis Ducksworth



(206) 495-5597
info@adonisforseattle.com
www.adonisforseattle.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, Waxbarashada Magaalooyinka, University of Washington - Tacoma; M.P.A., University of Washington - Seattle

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliye Sare ee Siyaasadda, Magaalada Seattle

**Bayaanka:** Sida qof noloshiisa oo dhan xaafadda Koonfur-bari Seattle ahaa, xubin ka tirsan ururka shaqaalaha, khabiir gaadiidka dadweynaha, iyo hoggaamiyaha wacyigelinta bulshada - xididdadaydu waxay si qoto dheer ugu xiran yihiin Degmada 2aad. Laga soo bilaabo Degmada Chinatown-International ilaa Rainier Beach, Degmada 2aad waxaa qeexda kala duwanaanshaheena, rumaynta sinnaanta, iyo go'aanka ah in qof walba lagu daro- qiyaamkaas ayaan keeni doonaa Golaha Magaalada. Waxaan u tartamayaa sababtoo ah bulshadeenu waxay mudan tahay wax ka wanaagsan. Haddii aan helo codkaaga, waxaan ka dhigi doonaa Koonfur-bari Seattle mid la awoodi karo, ammaan ah, oo soo dhawweysa carruurteena iyo qoysaskeena.

Si wadajir, waxaan awoodnaa: Inaan joojinno Rabshadaha Hubka anagoo maalgelin ku samaynayna adeegyada taageerada qoysaska, hawlaha kobcinta ee dugsiga ka dib, barnaamijyada xallinta khilaafaadka iyo ka leexinta; Inaan hoy siino kuwa hoy la'aanta anagoo maalgelin ku samaynayna adeegyada ka hortagga hoy la'aanta oo dadka si degdeg ah gudaha loogu soo celiyo; Dhisitaanka Guryo Dadku Awoodi Karaan anagoo abuurayna oo maalgelin ku samaynayna fursadaha guryo buuxiya baahiyaha kiraysteyaasha, shaqaalaha, qoysaska, iyo waayeellada; Inaan joojinno dadka xawaaraha ku socda Rainier Ave iyo MLK, oo aan mudnaanta siino gaadiidka dadweynaha, badbaadada dadka lugaynaya, iyo baaskiilada; Inaan Ilaalino Xuquuqdeena anagoo hor istaagayna Trump.

Waxaan ku soo barbaaray Beacon Hill anigoo ay hooyo keli ah oo laba shaqo ka shaqaynaysay i soo korisay. Waxaan ka shaqeeyay Jefferson Park Golf Course iyo Seattle SuperSonics anigoo ahaa wiil kubadda qaada. Waxaan ku soo noqday jaamacadda anigoo 30 sanno jir ah oo aan u maray Barnaamijka Dib u Tababarka Shaqaalaha.

Maanta waxaan ku noolahay Rainier Beach anigoo la nool xaaskayga, oo hore u ahayd qareen difaaca dadweynaha, iyo laba gabdhood. Doorkayga Magaalada, waxaan dadka isugu keenaa maalgashiyada siyaasadeed ee muhiimka ah oo ay ku jirto canshuurtii guuleystay ee gaadiidka sannadkii hore. Waxaan ahay u doode bulsho oo u dooda dhallinyarada; waxaan carruurta baraa iskayt boordhinka waxaanan u doodayaa jardiinka iskaytka (skatepark) ee Rainier Beach.

Taageerooyinka: Xubnaha Golaha Solomon, Hollingsworth, Strauss, Kettle; Wakiilladii hore ee Gobolka Dawn Mason; Xubin hore oo Golaha Degmada ah Larry Gossett; Haweenka Midabka leh ee ku Jira Siyaasadda; ATU587 Hawl wadeennada Gaadiidka; UA32 Xirfadleyaasha Tubooyinka iyo Xireyaasha Tubooyinka; iyo kuwo kale!

Waxaan jeclaan lahaa inaan kasbado codkaaga oo aan matalo magaalada iyo degmada i soo barbaarisay!

### Eddie Lin



hello@linforseattle.com
www.linforseattle.com

**Waxbarashada:** Juris Doctorate (Shahaadada Sharciga), Seattle University School of Law (Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Seattle); B.A. (Shahaadada Jaamacadda) Barashada Bariga Aasiya, Macalester College.

**Shaqo iyo Xirfad:** Kaaliyaha Qareenka Magaalada, Xafiiska Guriyeynta ee Seattle.

**Bayaanka:** Qof walba wuxuu mudan yahay inuu dareemo nabad, inuu yeesho guri la awoodi karo iyo dugsiyo wanaagsan oo xaafadeed. Waxaan u tartamayaa inaan xaqiijiyo in Degmada Caalamiga ah ee Chinatown (Chinatown International District) iyo Dhinaca Koonfurta ay u yeeshaan cod xooggan oo ka jira Golaha Magaalada – qof dhegaysta oo ka jawaaba walaacyada dadweynaha. Ka qareen u shaqeeya Xafiiska Guriyeynta ee Seattle ahaan, waxaan caawiyay si loo maalgeliyo kumanaan guryo la awoodi karo. Iyadoo lagu salaynaayo waayo-aragnimadayda nololeed iyo xirfadyahanimo, *mudnaantayda ugu weyn waa in la yareeyo kharashaadka guriyeynta iyo in la kordhiyo fursadaha guriyeynta*.

Waxaan si sharaf leh u guursaday macallin dugsiga dadweynaha ah iyo hoggaamiye urur shaqaale, waxaanan ku soo korinay wiilasheena Beacon Hill ayagoo dhigta dugsiyada dadweynaha. Sida wiil uu dhalay soo galooti Taiwanese ah, waxaan la kulmay takoorka waxaanan la dagaalami doonaa inaan difaaco bulshooyinka soo galootiga. Jaamacadda dhexdeeda, waxaan ku tiirsanaa deeqo waxbarasho, kaalmo dhaqaale, iyo shaqooyin sida rinjiyeeye guri iyo nadiifiye. Markii aan u soo guuray Seattle, waxaan markii hore ku noolaa anigoo ka shaqeynaya sidii fariin-bixiye baaskiil, rooti sameeye iyo dukaanka buugaagta.

*Wargeyska The Stranger* ayaa si fiican u sheegay*: "Masiibada qiimaha la awoodi karo ee Seattle ma ahan wax ku cusub Eddie—waa wax uu ku noolaa.*

Iyadoo miisaaniyadda magaalada ay hoos u dhac ku soo fool leedahay iyo qalalaasaha heer federaal, waxaan u baahanahay hoggaamiyeyaal khibrad leh oo fikir badan si ay u keenaan horumar macno leh. Waxaan la dagaalami doonaa inaan canshuur ku soo rogo shirkadaha hodanka ah iyo kuwa aadka u taajirsan si loo maalgeliyo baahiyaheena muhiimka ah.

Waxaan la kulanay heerar rikoor ah oo ku saabsan rabshadaha hubka dhallinyarada, gaar ahaan Dhinaca Koonfurta. Ma nasan doono ilaa aan helno badbaado dadweyne oo dhammaystiran iyo jawaabo degdeg ah oo ka wanaagsan. Tani waxay ka dhigan tahay maalgelinta ururada ku saleysan bulshada kuwaas oo si dhow ula shaqeeya dhallinyarada halista ku jirta oo ka caawiya bulshadeena inay helaan guryo, adeegyo, iyo waxa baahida loo qabo. Waxaan balaarin doonaa barnaamijyada keenaaya shaqaalaha bulshada iyo xirfadleyaasha caafimaadka maskaxda si ay uga jawaabaan wicitaanno badan oo caawinaad ah, iyadoo la xallinayo dhibaatada shaqaalaha booliiska.

Ugu dambeyntii, ma lihi wax iskhilaaf dhaqaale ah oo ku saabsan ganacsi kasta oo horyaalla Golaha Magaalada, sidaas darteed waxaan awood u leeyahay inaan u codeeyo dhammaan sharciyada muhiimka ah ee saamayn waarta leh. *Si Wadajir ah, aan ka dhigno Seattle meel qof walba ku barwaaqoobo!*

# Golaha Degmada Lr. 2

## Jamie Fackler



info@JamieForSeattle.com
JamieForSeattle.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Bellingham 1992 Shaqo adag iyo dadaal ku saabsan xirfaddayda ayaa ahayd waddadii aan ku guuleystay

**Shaqo iyo Xirfad:** Kormeeraha Dhismooyinka ee Magaalada Seattle, Nijaar Hore, Guddiga Dimuqraadiyiinta 37aad

**Bayaanka:** Seattle waa mid ka mid ah magaalooyinka ugu qanisan meeraha, laakiin haddii aad ku socoto Waddada Jackson ama aad raacdo tareenka fudud ee aad dhex marto Rainier Valley, ma dareemaysid sidaas. Waxaan leenahay bilyaneerro ka dhuumanaya canshuurta halka qoysaska aysan helin waxyaabaha aasaasiga ah. Tani maaha dhibaato ka taagan kheyraadka, waa dhibaato ka taagan mudnaanta.

Waxaan xasuustaa markii Seattle ay ahayd meel qoysaska shaqaalaha ay guri yeelan karaan oo ku barwaaqoobi karaan. Waa waayo-aragnimadan iyo waayo-aragnimada ka mid noqoshada ururka shaqaalaha oo i barray in aanan u baahnayn inaan u aqbalno waxyaabaha sida ay yihiin. Ma aha inaan aqbalno magaalo u shaqeysa oo keliya dad kooban. Waxaan dhisi karnaa Seattle oo qof walba uu hoy ku leeyahay, halkaas oo carruur walba ay ku dareemaan nabad marka ay iskuulka u socdaan, iyo halkaas oo bulshadeenu ay xididdo ku leeyihiin yihiin, xooggan yihiin, oo ay ka buuxdo rajo.

Waxaan ahaa taageere ugu horeeyay ee Guryaha Bulshada sababtoo ah waxaan u baahanahay inaan bixino guryo tayo sare leh oo uu ururka shaqaalaha dhisay sida danta guud ah. Waxaan balaarin doonaa fursadaha guryaha si joogto ah u jaban, ilaalin doonaa xuquuqda kiraysteyaasha, oo kordhin doonaa awoodda hoyga. Xafiiskayga golaha wuxuu balaarin doonaa Kooxda Daryeelka wuxuuna taageeri doonaa ururada bulshada ee ka shaqeeya safka hore si ay u xalliyaan dhibaatadeena daroogada iyo caafimaadka maskaxda. Waxaan diidi doonaa inaan aqbalno heshiis booliis oo aan lahayn tallaabooyin isla xisaabtan ah, waxaan la shaqeyn doonaa barnaamijyada leexinta, oo dib u soo celin doonaa dareenka nabadgelyada ee magaaladeena.

Anigu ma ihi siyaasi xirfadeed mana arkin naftayda oo tan sameynaysa, laakiin magaaladeenu waxay u qalantaa inay dad caadi ah oo dhibaatooyin caadi ah leh ku yeeshaan aqalka magaalada. Kama baqayo inaan istaago, su'aalaha adag weydiiyo, oo hoggaamiyo.

Waxaan *ku faanayaa* in ay i taageereen Xubin hore oo Golaha Magaalada Tammy Morales iyo Xubinta Golaha Degmada King Larry Gossett; *Ururka Shaqaalaha* MLK iyo ururada shaqaalaha ee soo socda, PROTEC17, ILWU19, ATU587, SUP. Sharaf ayay ii ahaan lahayd haddii aad i taageeri lahayd sidoo kale.

## Jeanie Chunn



info@votejeanie.com
www.votejeanie.com

**Waxbarashada:** University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasime, The Hometeam; La-taliye Mashruuc, Shabakadda Ganacsiga Wanaagsan ee Seattle

**Bayaanka:** Wakhtiyadan, waxaan u baahanahay xubin golaha oo dhegaysta bulshadeena kala duwan, si daacad ah ugu dagaalama matallaadda baahidooda, oo aan lagu iibsan danaha gaarka ah.

Waxaan ku nool nahay magaalo leh heerka canshuur ee qalloocan oo u janjeera kuwa taajiriinta ah, ciidan booliis oo aan lahayn isla xisaabtan, iyo maamul si joogto ah u nadiifiya dadka aan hoyga lahayn. Waxaan go'aansaday inaan tartamo si aan u helno qof gudaha ku jira oo diyaar u ah inuu burburiyo nidaamyada aan noo adeegin oo uu raaco qiyaamka horusocodka ah ee aan ku wacdino.

Sida u doode muddo dheer ka shaqeynayay bulshada ahaan, waxaan ogahay caqabadaha horyaalla xaafadaha—guryaha la awoodi karo, hoy la'aanta, amniga dadweynaha, iyo caddaaladda deegaanka—ay u baahan yihiin xalal wax ku ool ah iyo hoggaan geesinimo leh.

Dadaalkayga u doodista ayaa ka caawiyay ansixinta siyaasado badan oo ay ku jiraan Jump Start Seattle (Seattle Kicin Ku Bilow), Pay Up Legislation (Sharci Dejinta Bixinta), ogolaanshaha rukhsadaha goobaha banaanka ee bilaashka ah ee maqaayadaha, xaddidaadda khidmadaha u-geynta, iyo helitaanka $28.6 Bilyan oo maalgelinta federaalka ah oo loogu talagalay maqaayadaha madax-banaan ee dalka oo dhan. Guulaha siyaasaddayda ayaa muujiyay in aan isbeddel dhab ah keenni karo, waxaana rabaa in aan tan u sameeyo degmadeena maalin kasta.

Waxaa iga go'an siyaasadaha guryaha la awoodi karo oo mudnaanta siinaya dadka halkii faa'iido laga raadin lahaa, ilaalinta amniga waddooyinkeena iyada oo loo maraayo xalal ku saleysan caddeyn oo ay bulshada oo horseeddo, iyo xoojinta dhaqaalaha maxalliga ah anigoo taageeraya ganacsiyada yaryar iyo abuurista fursado shaqo oo bixiya mushaharka nololeed.

Waxaan haynaa fursad aan isbeddel dhab ah uga samayno Seattle oo aan uga baxno ajeendaha shirkadeed ee maamulka hadda jira. Intii aan kheyraadka lumin lahayn dambiyayn lahayn saboolnimada, waxaan ku qasbi karnaa shirkadaha inay bixiyaan canshuurahooda, ka fogaadaan shidaalka gaaska ah, oo aan dhisno dhaqaale daryeel iyo naxariis leh. Kuwani waa isbeddelada dhab ahaantii ka dhigi doona magaaladeena mid ammaan ah, caddaalad badan, deegaan ahaan waara. Waxaan codkaaga kuu weydiisanayaa inaan dhiso Seattle oo qof walba muhiim yahay oo qof walba ku horumaro. Si wadajir, ma jiraan wax aanan wada qaban karin. Aan abuurno magaalo la awoodi karo, mas'uul ah, oo soo dhawweynaysa qof walba.

## Golaha Jagada Lr. 8

### Jesse A. James



(206) 657-7062
jesseajames4office@gmail.com
jesseajames.com

**Waxbarashada:** Shoreline Community College

**Shaqo iyo Xirfad:** Suxufi u shaqeeya The Summit, muusikiiste, kamarad/fiidiyoow, cunto/adeeg

**Bayaanka:** Ka qof dhallinyaro (millennial) ahaan oo si toos ah u garanaya caqabadaha shaqada iyo kirada ee Seattle, mudnaantayda ugu weyn ka xubin golaha ahaan waxay noqon doontaa inaan ka dhigo Seattle mid ammaan ah oo uu awoodi karo qof walba.


Sannadkii 2022, waxaan u tartamay Kongareeska anigoo ku saleynaya barnaamij ku saabsan dib-u-habeynta canshuuraha ee dadka shaqeeya iyo kuwa dakhliga dhexe, iyo sidoo kale difaaca xuquuqda taranka. Tan iyo markaas, waxaan ku biiray Xisbiga cusub ee Cascade, waxaana la i doortay Guddiga Agaasimeyaasha ka dib markii aan hoggaamiyey dadaal xooggan oo guuleystay si xorriyadda hadalka iyo daryeelka caafimaadka guud loogu daro barnaamijka xisbiga. In kasta oo ay jiraan dhacdooyinkan mabda'a leh, waxaan aaminsanahay in fikradda ay tahay in la siiyo mudnaanta wax ku oolka iyo bulshada marka ay timaado dowladda hoose. Halkan ayaa ah meesha isbeddel dhab ah inta badan ka dhaco, aniguna waxaan halkan u joogaa inaan sameeyo farqi dhab ah!

Siyaasadda Federaalka waa mid jahwareersan, waxaana u baahanahay xasillooni xagga dowladda hoose si loo xakameeyo fowdada. Seattle waxay horumar ka samaysay sannadihii ugu dambeeyay dhinacyada badbaadada dadweynaha iyo guryaha, iyadoo ilaalinaysa in magaaladeenu ay soo jiidasho u leedahay ganacsiga, inkastoo, aniga oo aragtidayda ah, wax badan oo dheeraad ah la qaban karo si loo hormariyo ganacsiyadeena yaryar ee soo jiidashada leh halkii laga horumarin lahaa shirkadaha waaweyn ee naaxay. Waxaan heli karnaa meesha ku habboon anagoo bixinna barnaamijyo bulsho oo naxariis leh, isla markaana taageerayna mulkiileyaasha ganacsiyada yaryar.

Waxaan taageerayaa ballaarinta joogtada ah ee tareenka fudud iyo gaadiid goboleedka oo qayb ka ah istiraatijiyadda gaadiidka ee horumarsan. Waxaan sidoo kale ahay u ololeeye muddo dheer u taagan baabi'inta Canshuurta Sokorta ee dib-u-dhaca leh. Waxaan taageeraa fannaaniinta maxalliga ah, si dabiici ah, maadaama aan ahay muusikiiste. Siyaasadahaas waxay la socdaan ujeeddadayda guud, taas oo ah in isla xisaabtan, dheelitirnaan, iyo maskax ku saleysan bulshada la keeno Golaha Magaalada. Uma baahnin erayo xiiso leh ama hal-ku-dhegyo hal dhinac ah, waxaan u baahanahay isbeddel dhab ah iyo go'aan qaadasho adag, sidaas darteed waxaan halkan u joogaa inaan shaqada qabto!

*Waxaa taageeray Krist Novoselic, Mary McClure (Dimuqraadi) Guddoomiyaha Dekedda ee Kingston, iyo kuwa kale*

### Cooper Hall



(206) 809-4415
hallforseattlecityhall@gmail.com
hallforseattle.com

**Waxbarashada:** Seattle Academy of Interactive Entertainment (Akadeemiyaha Madadaalada Isdhexgalka ee Seattle) - Dibloomada Naqshadaynta Ciyaarta iyo Soo saarista

**Shaqo iyo Xirfad:** Horumariyha Ciyaaraha oo Madax-banaan

**Bayaanka:** Cooper Hall waa shakhsi cusub oo horusocod ah oo u tartamaaya Aqalka Magaalada Seattle si uu u keeno siyaasado loo dhan yahay iyo natiijooyin muuqda. Waxaa lagu koriyay tuulo yar oo lagu jaro dhirta alwaaxyada lagu sameeyo oo ku taal Koonfur-galbeed Washington, halkaas oo uu la kulmay caqabado waaweyn. Ka dib markii uu waayey aabbihiis shil uu sababay darawal sakhraansan, hooyadiis ayaa korisay isaga iyo walaalihiis iyada oo ku noolayd duruufo hooseeya, kuna baraysay adkaysi iyo naxariis.

Seattle gudaheeda, Cooper wuxuu sii watay waxbarashada sare, isagoo bartay naqshadaynta garaafiga, naqshadaynta ciyaaraha fiidiyowga, iyo koodinka, taasoo kor u qaaday ruuxiisa wax soo saarka iyo hal-abuurka. Si uu u maamulo deymaha waxbarasho ee ardayga, wuxuu ka shaqeeyay Amazon wakhtiyo adag oo habeenkii ah, isagoo la kulmay dhibaatooyinka dhaqaale ee dad badan oo reer Seattle ah ay la tacaalaan—xasillooni la'aanta dhaqaale, daymaha, iyo raadinta shaqo macno leh.

Safarka Cooper wuxuu ka tarjumayaa xaqiiqada deganeyaasha aan la soo koobi karin, taasoo siinaysa faham qoto dheer oo ku saabsan caqabadahooda. Si ka duwan siyaasiyiinta ballanqaadyada madhan sameeya, Cooper wuxuu hayaa aragti cusub, naxariis leh, oo kala duwan, oo ku saleysan waayo-aragnimo nololeed. Waxaa ka go'an xalal horumar leh oo wax ku ool ah kuwaas oo kor u qaada sinnaanta, taageera codadka la haybsooco, oo wax ka qabta caqabadaha nidaamsan.

Cooper wuxuu dhiiragelin doonaa is diiwaan gelinta dugsiyada dadweynaha ee Seattle, wuxuu kordhin doonaa dakhliga waxbarashada, wuxuu bixin doonaa daryeelka carruurta ee guud, wuxuuna taageeri doonaa waxbarashada sare iyada oo loo maraayo dariiqa jaamacadda-ilaa-shaqada. Wuxuu u ololayn doonaa doorashooyinka kabtanyaasha booliiska, isagoo hubinaaya isla xisaabtanka iyo matallaadda halka uu hagaajinaayo heerka xallinta dambiyada hantida. Cooper wuxuu hoos u dhigi doonaa kirada isagoo ku xiraaya dhiirigelinta canshuurta hantida. Wuxuu cusboonaysiin doonaa shuruucda duugoobay ee deegaamaynta wuxuuna soo jeedin doonaa qorsheyaal kala-guur oo shakhsiyeed mid kasta oo ka mid ah dadka hoy la'aanta ah. Wuxuu mudnaanta siin doonaa hindisaha tamarta cagaaran, isagoo siinaya magaalada kaabayaasha wanaagsan, kharashyada tamarta oo hooseeya, iyo raad-kaarboon yar iyadoo la dhiirigelinaayo ganacsiyada cusub inay u soo guuraan kuwaas oo kordhiya mushaharka oo ka dhigaya Seattle mid isku filan.

Hadda oo uu si qoto dheer ugu hawlan yahay u doodista bulshada, aragtida Cooper waa Seattle oo firfircoon, caddaalad ah halkaas oo qof walba uu helo fursad caddaalad ah, iyadoo la hubinaayo xalal dhab ah oo horumarinneed halkii laga heli lahaa hadallo madhan. U Codee Cooper Hall ee ku aaddan City Hall (Aqalka Magaalada) oo booqo boggiisa hallforseattle.com si aad u hesho wax dheeraad ah!

# Golaha Jagada Lr. 8

## Alexis Mercedes Rinck



(206) 705-9305
info@alexisforseattle.com
www.alexisforseattle.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, UW Evans School; Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Syracuse University

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubin Golaha Magaalada; xirfad yahan hore ee siyaasadda iyo qorshaynta, UW

**Bayaanka:** Tan iyo maalintii ugu horeysay ee aan ku biiray Golaha, waxaan ahaa cod u taagan isbeddel horusocod ah iyo dadka shaqeeya—anigoo hoggaaminaya dadaalka si loo maalgeliyo guryaha la awoodi karo ee ururka shaqaalaha uu dhisay, loo ilaaliyo mushaharka iyo faa'iidooyinka, loona hubiyo in nidaamka amniga dadweynaha uu yahay mid lala xisaabtami karo, si habboon u shaqaaleysan, oo ka jawaaba. Waxaan la shaqeeyay sharci-dejiyeyaasha si aan u xaqiijiyo maalgelinta barnaamijyada naga ilaalinaya oo ka caawiya dadka xaaladaha adag, waxaanan ansixiyay xirmo koronto-gelinta gaadiidka si aan u gaarno yoolalka cimilada. Iyadoo laga jawaabayo dhibaatooyinka Maamulka Trump, waxaan hoggaamiyey abuurista Guddiga Isbeddelka Siyaasadda Federaalka si looga jawaabo weerarrada Seattle.

Anigoo ay i dhaleen waalidiin dhallinyaro ah oo ku jiray wareegyada rabshadaha gaangiga, isticmaalka maandooriyaha, iyo hoy la'aanta, waxaan awooday inaan horumaro taas oo aan uga mahadnaqaayo waalidka waalidiintayda, macallimiin wanaagsan, iyo Naadiga Wiilasha & Gabdhaha. Arrintaas ayaa horseed u ah ballanqaadkayga ah inaan dhiso Seattle qof walba ku guuleysan karo, ayadoon loo eegin asalka ama dakhliga.

Waxaan keenayaa hab iskaashi ah oo xog ku saleysan oo ku saabsan dejinta siyaasadaha oo diiradda saaraya sinnaanta, naxariista, iyo saameynta dhabta ah ee nolosha. Waxaan taageeray tallaabooyinka cimilada anigoo maalgelin ku sameeyay jidadka lugeynta, gaadiidka, iyo kaabayaasha cagaaran, waxaanan ka shaqeynayaa sidii loo diyaarin lahaa miisaaniyad dheelitiran oo horusocod ah oo magaalada ah taasoo ilaalinaysa adeegyada muhiimka ah.

Waxaan gaarnay horumar macno leh, laakiin waxaa harsan wax badan oo la qabto. Waxaan u tartamayaa inaan sii wado shaqadaan—horumarinta guryaha la awoodi karo iyo la dagaalanka dib-u-dhacyada fursadaha muhiimka ah ee guryaha, u istaagista shaqaalaha, iyo hagaajinta amniga xaafadaha. Waxaan sii wadi doonaa inaan soo muuqdo, si dhow u dhegaysto, oo aan dhiso isbahaysiyo si aan ugula kulanno xilligaan si degdeg ah iyo daryeel. Waxaan jeclaan lahaa inaan kasbado taageeradiina sii socota.

*Taageerooyinka: Degmada King, Dimuqraadiyiinta 32aad, 36aad, 37aad, iyo 46aad; Shaqaalaha MLK; SEIU 1199NW, ILWU Local 19, Ururka Shaqaalaha UniteHere 8, Protec17, Planned Parenthood Alliance Advocates (U doodayaasha Isbahaysiga Waalidnimada ee Qorshaysan); OneAmerica Votes; APACE; Working Families Party (Xisbiga Qoysaska Shaqeeya); Fuse WA; The Urbanist (Reer Magaalka); Transit Riders Union (Ururka Kuwa Kora Gaadiidka); LGBTQ+ Victory Fund; Xildhibaan Jayapal; Xubnaha Golaha Degmada Mosqueda, Barón, Zahilay, iyo Dembowski; Sharci-dejiyeyaasha ka socda degmo kasta oo Seattle ah—iyo in ka badan!*

## Rachael Savage



(206) 619-5427
director@savageforseattle.com
www.savagecitizens.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Nolosha dhabta ah. Aasaasaha iyo mulkiilaha ganacsi gudaha Seattle 1993-2025

**Shaqo iyo Xirfad:** Ganacsade, Agaasimaha Hey'ad Aan Faa'iido Doon Ahayn ee goobta Daaweynta Ku Tiirsanaanta iyo Soo Kabashada

**Bayaanka:** *Ganacsade ahaan* Waxaan la noolahay cawaaqitka ay sababeen siyaasiyiintu inay burburiyaan nidaamkeena caddaaladda dambiyada, oggolaanaya dambiyada, balwadda iyo cudurrada dhimirku inay sababaan dhimasho, burburka ganacsigeena iyo bartaha magaaladeena quruxda badan iyo dareenka badbaadada muwaadin kasta. *Degane ahaan* waa in aan la dagaalamo kirada sii kordhaysa oo aan la kulmay in iibsashada guriga uu noqday mid awooddayda ka baxsan. *Sida xubintaada golaha magaalada ee weyn ahaan*, hadafkaygu wuxuu noqon doonaa inaan u adeego qof kasta, anigoo meel marinaya siyaasad wax ku ool ah oo xidhaysa mushaharka iyo farqiga kirada, dib u dhis ku sameeya waaxdayada booliiska, sugaysa jeelka magaalada, fasaxa xadhiga iyo xukunada xadhiga iyo dhista xarumaha daaweynta muddada dheer si loo xalliyo faafitaanka daroogada iyo cudurada dhimirka.

Seattle waxaan wali ku nool nahay nabad la'aan. Booliiska looma oggola in ay wax xidhaan, degmada waxay noo sheegaysaa in jeelka uusan qol ka banaanayn, garsoorayaashu ma xakameeyaan oo ma xukumaan, booliiska waxa loola dhaqmaa sidii dambiileyaal, dambiilayaashana waxa loola dhaqmaa sidii dhibanayaal. Xaaladahan oo kale waxaa ku burburay tayada nolosha magaaladeena. Ganacsiyadu way fashilmeen oo ay isaga baxayaan. Magaalada dadkeena shaqeeya ma awoodaan inay iska bixiyaan kirada sare ee cirka isku shareeraysa, bisha dhammaadkeedana waxba uma hadhin. Midda ugu daran waxaynu nahay magaalo ay saxafada iyo dowladdaba cabbudhiyaan fikirka muhiimka ah iyo kala duwanaanshaha ra'yiga, xataa hadii ay dhacdo fashil siyaasadeed oo soo noqnoqday.

Waxaan samayn karnaa si ka wanaagsan. Muwaadin kasta waxa uu leeyahay rabitaan la mid ah, in si caddaalad ah loogu dhaqmo sharciga iyo in uu ku noolaado nabad, xasilloon, bulsho barwaaqo ah. Badbaadadu waxay soo celin doontaa ganacsi iyo barwaaqo. Waan wada samayn karnaa tan. Codkaaga, waxaan ku matali doonaa codka aan la maqlin, codka caqli-galnimada, codka midaysan, kana soo horjeeda xaaladda taagan oo in badan na fashilisay.

Waxaa taageeray: Ururka Saraakiisha Booliiska Seattle, Jamhuuriyiinta Degmada King

## Golaha Jagada Lr. 8

### Ray A. Rogers



(206) 581-4279
wevoterogers@gmail.com
rayrogersforseattle.com

**Waxbarashada:** BA (Shahaadada Jaamacadda) ee Cilmiga Fiqiga iyo Macallinka Asluubta Wanaagsan ee Saaxiibka oo Shahaadaysan

**Shaqo iyo Xirfad:** Baadariga Hoggaamiyaha Kaniisadda, Full Gospel Pentecostal Assemblies; U doodaha Qoyska Ardayga, SPS

**Bayaanka:** Waan ogahay waxa dhaca markay dowladdu fashilanto waayo waan ku noolaa. Waxaan ku soo koray Koonfur-bari Seattle wakhti ay carruur aad u badan, oo aan ku jiro, loo jiitay dhinaca rabshadaha iyo balwadda. Waxaan sannado ku qaatay la dagaalanka hoy la'aanta, ku xadgudubka daroogada, iyo xabsiga. Noloshayda halkaas ayay ku dhammaan lahayd. Laakiin ma aysan dhicin, sababtoo ah hoggaamiye bulsho ayaa wakhti ku qaatay inuu i rumaysto marka qof kale uusan i rumayn. Nolosheyda waan rogey. 20kii sanno ee la soo dhaafay, waxaan ka shaqeynayay inaan caawiyo dadka kale inay sidaas oo kale sameeyaan. Hadda waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada Seattle sababtoo ah magaaladeena waxay joogta bar marxalad adag.

Waxaan khibrad dhab ah ee dhulka u leeyahay la dagaalanka dambiyada iyo balwadda. Waxaan aasaasay Wacyigelinta Circle of Love (Wareega Jaceylka), barnaamij aasaasi ah oo taageeraya dadka la kulma balwadaha, rabshadaha, iyo hoy la'aanta. Waxaan abaabul nabadeed ka abaabulay isla beerihii aan mar seexan jiray. Waxaan quudiyay kuwa gaajeysan, waaniyay dhallinyarada, oo aan la istaagay qoysas u dagaalamaya si ay carruurtooda u badbaadiyaan.

Qaar ka mid ah Goluhu waxay rabaan inay nagu soo celiyaan hawl-xumadii, kala qaybsanaantii, iyo diidmadii dhibaatada badan keentay. Ma oggolaan doono inay taasi dhacdo. Waxaan u dagaalami doonaa sidii loo heli lahaa booliis si buuxda u shaqeeya oo bulshada udub dhexaad u ah, si xaafad walba ay u dareemaan ammaan. Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan dadka ka raro teendhooyinka oo aan geliyo guri, si naxariis iyo degdeg ah. Waxaan maalgelin doonaa barnaamijyada dhallinyarada, ka hortagga rabshadaha, taageerada caafimaadka dhimirka, iyo fursadaha dhaqaale ee dhabta ah—maxaa yeelay waxaan arkay waxa dhaca marka aynaan yeelin. Waxaanan u istaagi doonaa ganacsiyada yaryar ee bulshadayada ka dhiga kuwo firfircoon.

Ma awoodno in aan sii wadno doorashada siyaasiyiinta aan xaqiiqada la socon. Uma tartamyo inaan dhaliyo dhibco siyaasadeed, mana xiisaynayo dagaalo aan dhammaad lahayn oo afkaareed inta ay qoysasku halgamayaan. Waxaan u tartamayaa inaan wax ka qabto oo aan hoggaan dhab ah oo ku qotoma khibrad nololeed, naxariis, iyo caqli-galnimo keeno aqalka magaalada.

**Codeyntaadu waa mid tirsanta. Waad hubin kartaa.**

**Ka raad-raac warqaddaada codbixinta barta kce.wiki/TrackMyBallot**





# Baraheena Bulshada!

Ka taag-garee @kcelections goobaha bulshada halka kore ku xusan waxaana laga yaabaa inaan wadaagno sawirkaaga.

**Nala wadaag sawirkaaga codeynta #VotingSelfie!**

# Golaha Jagada Lr. 9

## Connor Nash



info@nashforseattle.com
nashforseattle.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Dhaqaalaha iyo Siyaasadda, Towson University; Shahaadada Mastarka ee Arrimaha Dadweynaha, University of Missouri

**Shaqo iyo Xirfad:** Dhaqaale-yahan, Qoraa Ra'yi Madax-Banaan

**Bayaanka:** Seattle waxay u qalantaa gole magaalo oo dhegaysta codbixiyeyaasha, maaha mid iska indha-tira. Seattle waxay u qalantaa gole ansixiya sharciyo caan ah, ma aha sharciyo ay dadku si weyn uga soo horjeedaan. Seattle waxay u qalantaa gole doonaya inuu ku caawiyo, ma aha mid ka faa'iideysta xilka. Waxaan noqon doonaa xubin golaha oo ku dhegaysta, ku taageera, oo kuu dagaalama.

Waxaan u soo guuray Seattle sannadkii 2018 sababtoo ah waxaan helay magaalo qurux badan oo aan ku noqon karo naftayda dhabta ah ee kuwiirka. Shaqo kasta oo aan halkan ka qabtay waxay ahayd inaan u adeego bulshada aan jeclahay. Waxaan ka caawiyay macaamiisha inay la dagaalamaan ganacsiyada khiyaannada ah ee halka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, waxaan bixiyay hufnaan halka Waaxda Caafimaadka, waxaanan keenay tirooyinka saxda ah ee sicir bararka ee dowladda federaalka. Xitaa wakhtigayga firaaqada ah, waxaan ka shaqeeyaa horumarinta Seattle anigoo adeegsanaya maqaalada ra'yiga ah, halkaas oo aan ku fashilino siyaasiyiinta beenta iyo dib u dhaca u keenaaya bulshadeena, gaar ahaan marka ay khusayso Little Saigon.

Xubin ka tirsan golahaaga ahaan, mudnaantayda ugu sareysa waxay noqon doontaa inaan dib ugu soo celiyo isla xisaabtanka iyo hufnaanta Aqalka Magaalada. Haddii aan xafiiska joogo, dadka Seattle waa la dhegaysan doonaa waxaanan ku dadaalli doonaa sharci dejin ay rabaan inta badan dadka, maaha waxa ay doonayaan tiro yar oo gaar ah.

Sababo la xiriira dhibaatooyinkeena deegaanka iyo dhaqaalaha, waxaan soo bandhigi doonaa sharci loogu talagalay barnaamij shaqo oo Green New Deal ah (Axdiga Cusub ee Cagaaran). Seattle waxay u baahan tahay shaqooyinka ururka shaqaalaha oo mushahar fiican bixiya si loo nadiifiyo dhammaan xaafadaha, jardiinooyinka, iyo marinta biyaha, ma aha oo keliya Bartamaha Magaalada. Ka saarista qashinka, beerista geedaha, iyo mashaariicda dib-u-habeynta waxay dhammaantood ka caawin doonaan nadiifinta deegaankaaga ayagoo taageeraya dhaqaalaheena.

Ugu dambeyntii, waxaan u baahanahay inaan ka dhisno hoy badan iyo guryo la awoodi karo *meel walba.* Xaafadaha dadka kala duwan ku nool yihiin ayaa ka xoog badan kuwa kala soocan ee aan hadda haysano. Tallaabooyinka ugu horeeya waxaa ka mid ah canshuurta banaanaanta ee guryaha iyo dhulalka, iyo kordhinta khidmadaha barnaamijka Waajibka Guryaha La Awoodi Karo si loo kordhiyo maalgelinta horumariyaha guryaha bulshada ee magaalada.

Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga doorashadaan Hordhaca ah.

## Dionne Foster



(206) 651-5493
info@dionnefoster.com
dionnefoster.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Shaqada Bulshada, UW; BA (Shahaadada Jaamacadda), George Mason University, Cilmiga Bulshada, Daraasaadka Haweenka

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Isbahaysiga Horumarka; Madax hore ee Seattle Foundation, La-taliyaha Siyaasadda Seattle

**Bayaanka:** Seattle waxay u baahan tahay hoggaanka Golaha oo diiradda saaraya mudnaanta degdegga ah ee magaalada oo dhan, aan ahayn ajendayaal shakhsiyadeed. Waxaan diiradda saari doonaa khibrad iyo dadaal si aan wax uga qabto guriyeynta la awoodi karo, u taageero dadka ku jira xaaladaha adag, oo aan u ilaaliyo magaaladeena inay noqoto mid ammaan ah oo soo dhawweynaysa dhammaan.

Ballanqaadkayga ku aaddan natiijooyinka hagaajiya nolosha wuxuu salka ku hayaa xirfaddayda ah falanqeeyaha siyaasadeed ee Magaalada, hoggaamiye samafal, iyo macallin shaqada bulshada. Waxaan la kulmay caqabadaha horyaalla qoysas badan: ka shaqeynta shaqooyin badan intii aan dugsiga sare iyo jaamacadda ku jiray, iyo ku tiirsanaanta caawinta guryaha iyo daryeelka caafimaadka si uu qoyskayga u helo xasillooni. Waxaan ka shaqeeyay guud ahaan magaalada si aan u horumariyo guriyeynta iyo tallaabooyinka cimilada iyo guud ahaan gobolka si loo maalgeliyo daryeelka carruurta ee la awoodi karo iyada oo loo maraayo canshuurta faa'iidada dakhliga. Marka aan ku biiro Golaha Magaalada, waxaan u dagaalami doonaa tallaabooyin geesinimo leh oo horusocod ah si aan u dhiso Seattle xooggan.

*Waxaan u baahanahay guryo dheeraad ah oo la awoodi karo oo ku yaalla Seattle.* Waxaan mudnaanta siin doonaa in dadka la geliyo gudaha iyada oo la siinayo hoy, daaweyn, iyo guri joogto ah. Waxaan soo afjari doonaa ficil la'aanta Golaha ee dib u dhigaysa dhismaha guryaha loo baahan yahay. Waxaan horumarin doonaa lahaanshaha guryaha, ka hortagi doonaa barakaca, oo taageeri doonaa fursadaha guryaha ee ay codbixiyeyaashu ansixiyeen si dhammaan dadka Seattle ay u helaan guryo deegaan oo la awoodi karo.

Waxaan 911 u wacay labada xaaladoodba kuwa degdeg ah iyo kuwa aan degdeg ahayn. *Waxaan rabaa inaan hubiyo in wicitaan kasta uu helo jawaabta saxda ah.* Waxaan taageeri doonaa booliis wax ku ool ah oo isla xisaabtan leh, horumarin doonaa sinnaanta jinsiga ee fulinta sharciga, oo balaarin doonaa Kooxda DARYEELKA (CARE Team). Waxaan maalgelin doonaa ka-qaybgalka dhallinyarada, caafimaadka dabeecadda, ka-hortagga rabshadaha hubka, iyo xalalka amniga ee bulshada ku saleysan.

Codkaaga ayaan ku hoggaamin doonaa horumarinta tareenka fudud iyo gaadiidka waara. Waxaan u dagaalami doonaa shaqaalaha—anigoo taageeraya ururka shaqaalaha iyo mushaharka caddaaladda ah, oo ay ku jiraan shaqaalaha ku-meel gaarka ah. Waxaan yarayn doonaa culayska ganacsiyada yaryar, oo waxaan taageeri doonaa farshaxanka iyo dhaqanka. Si *wadajir ah, waxaan u dhisi karnaa Seattle caddaalad badan, sii cagaaran, oo si badan ugu xiran qof walba.*

Taageerooyinka: Golaha Shaqaalaha MLK; Degmada King, Dimuqraadiyiinta 32aad, 36aad, 37aad, 46aad; U doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada ee Qorsheysan ee WA; Musharaxa Moms Demand Action Gun Sense (Hooyooyinku Waxay Dalbadaan Ficilka Caqligalka Hubka); Guddiga Siyaasadeed ee Haweenka Qaranka ee WA; Xildhibaan Pramila Jayapal; Sharci-dejiyeyaasha Dimuqraadiga Seattle; OneAmerica Votes, iyo in ka badan!

# Golaha Jagada Lr. 9

## Sara Nelson



(206) 910-8762
info@saraforcitycouncil.com
www.saraforcitycouncil.com

**Waxbarashada:** PhD, Dhaqanka Bulshooyinka Aadanaha (Anthropology), University of Washington.

**Shaqo iyo Xirfad:** Xubinta Golaha Magaalada ee Seattle oo dhan; mulkiilaha ganacsiga yar (Fremont Brewing).

**Bayaanka:** Waxaan tartamay afar sanno ka hor sababtoo ah waxaan arkay magaalo u baahan soo kabasho degdeg ah. Sannado badan oo siyaasadihii fashilmay ayaa dadka ka tagay ayagoo aan hoy lahayn oo ku nool jardiinooyinkeena, hareeraha waddooyinka socodka, iyo guud ahaan xaafadaheena. Fentanoolka wuxuu noqday xaalad caafimaad oo degdeg ah oo dadweynaha ah. Isticmaalka daroogada waa la iska indho tiray. Gargaareyaasha goorta hore ayaa shaqada ka tagaya iyo wakhtiyada jawaabta 9-1-1 ayaa sii xumaanayay. Musiibadaan waxay si daran u saameeynaysay deriskeena ugu nugul, waxaana ogahay in Seattle ay wax ka fiican qaban karto.

Sida qof ka soo kabanayo naftayda, rumaysnaanta fursadaha labaad ayaa kicisa wax kasta oo aan sameeyo. Waa sababta aan ugu dadaalay ballaarinta helitaanka qorshe dhammaystiran, daaweyn dalbasho ah, oo aan helay maalgashi weyn oo ku saabsan adeegyada soo kabashada iyo ka hortagga xadgudubka daroogada. Sababtoo ah caawinaad dhab ah ayaa nolosha beddela.

Waxaan isla degdeggaas keenay guriyeynta, sidoo kale. Waxaan dadka u guurinay gudaha, ballaarinay hoyga adeegyada leh, oo fududeynay oggolaanshaha si aan u dhaqaajino mashaariic badan. Maalgelinta Seattle ee guryaha la awoodi karo ayaa hadda gaartay heerkii ugu sareeyay abidkeed.

Hoggaankayga hoostiisa, waxaan dib uga noqonay isbeddelka sannado badan oo ah inaan luminay saraakiil ka badan inta aan shaqaaleysiinno. Hadda waxaan horumarinaynaa qorshaha ugu hamiga badan ee badqabka dadweynaha ee Seattle ay aragtay. *Daaweyn badan oo la heli karo marka loo baahdo. Kooxaha masiibada oo badan. Ka jawaabeyaal tababaran oo badan.* Oo ha qaadan ereygayga oo keliya. Sida uu dhawwaan Danny Westneat ku qoray Seattle Times, "Waa mid aan la diidi karin - sheekada Seattle waxay u leexatay isbeddel wanaagsan."

Seattle way soo kabanaysaa, laakiin horumarku waa jilicsan yahay. Sida maamulka Trump uu anaga noogu soo horjeesto ahaan, magaalooyinka sida anaga oo kale ah waa inay hoggaamiyaan - si cad oo leh ujeeddo. Dib ugu ma noqon karno siyaasadaha fashilmay ee dhawwaan la soo dhaafay. Haddii aan helo codkaaga, waxaan sii wadi doonaa shaqada: ballaarinta daaweynta, ilaalinta badqabka dadka, iyo keenista natiijooyin dhab ah oo loogu talagalay dadka Seattle.

*Waxaa taageeray Dab-damiska Seattle, Ururka Shaqaalaha ee Ganacsatada Dhismaha Seattle, Iron Workers (Shaqaalaha ka shaqeeya biraha), Xildhibaan Adam Smith, Hoggaamiyaha Aqlabiyadda Senatka Jamie Pedersen, Guddoomiyeyaashii hore Chris Gregoire iyo Gary Locke, iyo qaar kaloo badan.*

## Mia Jacobson



miaj.mi@gmail.com
www.voterabbit.com

**Waxbarashada:** University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Longshoreman (Shaqaalaha Dekedda Maraakiibta)

**Bayaanka:** Magacaygu waa Mia Jacobson. Waxaan ahay 37 jir, jiilkii saddexaad ee dadka West-Seattle, jiilkii saddexaad ee ururka Shaqaalaha Dekedda Maraakiibta, iyo hooyo keliya oo saddex carruur ah haysata. Waxaan ku dhashay guriga aan carruurta ku korinayo, taasoo la micno ah inaan arkay magaalada Seattle oo si weyn isu beddeshay intii aan noolaa.

Waxaan u tartamayaa xafiiska si aan u carqaladeeyo indha sarcaadka bulshada ee sheegaya in waxa aan sameyneyno ay noo shaqeynayaan. Hannaanka samaynta siyaasadda maxalliga ah ma aha mid firfircoon oo ku filan si wax looga qabto dhibaatooyinkeenna casriga ah. Sharciga waxaa lagu diyaariyaa wada sheekaysiyo aysan muwaadiniintu si macno leh u heli karin, uga qayb qaadan karin, ama xisaabtan uga dalban karin. Ma jiro wada hadal dadweyne oo dhex mara wakiilladeenna iyo dadkooda. Ma jirto fursad lagu hubiyo soo jeedin kasta oo waqtiga dhabta ah la sameeyo iyadoo la adeegsanayo caddeymo, ra'yi dadweyne, ama waayo-aragnimo shakhsiyeed. Ma lihin saameyn la cabbiri karo oo ku saabsan go'aannada wakiilladeenna marka laga reebo wareegga doorashada.

Tani waa dhibaato halis ah oo inaga wada dhexeysa, iyadoon loo eegin kala duwanaanshaheenna siyaasadeed. Waa inaan diyaarinno hannaanka u oggolaanaya dadka Seattle inay hagaan dowladdooda.

Teknolojiyada waxay beddeshay sida aan u noolnahay nolosheenna. Hadda waxaan helnaa cilmi-baaris iyo khubaro loo baahan yahay si aan u hubinno waxa naloo sheegay inay shaqeynayaan iyadoo la adeegsanayo caddeymo. Waxaan isku dubaridi karnaa tiro badan oo goob dijitaal ah si aan uga doodno siyaasadaha maxalliga ah 24 saacadood maalintii. Seattle waxay ka gudubtay baahida loo qabo ku tiirsanaanta wakiilnimo marka la go'aaminayo waddo hore oo noo shaqeysa.

Haddii la i doorto, waxaan si wadajir ah uga shaqeyn doonaa sidii loo horumarin lahaa helitaanka muwaadiniinta iyo sidii la xisaabtan loogu soo kordhin lahaa hannaanka sharci dejinta ee maxalliga ah. Haddii aan helo codkaaga, waxaan geli karaa albaabka oon xaga dambe ka burburin karaa. Oo ay i la socoto aragtidaada, waxaan diiradda ka wareejin karnaa awoodaha jira una wareejin karnaa awoodaha aan noqonay.

# Golaha Jagada Lr. 7

## Max McCallum



Max.for.tukwila@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Dugsiga Sare, Dugsiga Sare ee Adeegga & shahaadooyinka Alxanka, WW NDT Adeegyada

**Shaqo iyo Xirfad:** Sarkaalka Fulinta Baarkinka, Magaalada Seattle

**Bayaanka:** Waxaan ahaa nin shaqaale ah tan iyo markii aan jiray 16, waana dadka qaangaarka ah ee shaqeeya kuwa aan u baahanahay inay ku jiraan dowladda. Waxaan ognahay dhibaatada nolosha mushahar ilaa mushahar & cunto yari. Waxaan u tartamayaa Golaha Magaalada si aan xalal wax ku ool ah ugu keeno bulshada; waxaan arkay khataraha aan wajahayno, dhibaatada aan ku jirno, iyo awoodda aan u leenahay inaan nafteena daryeelno. Mudnaantaydu waa: hagaajinta gaadiidka dadweynaha, taageeridda dadka saboolka ah, taageeridda ganacsiyada maxalliga ah, ballaarinta guryaha la awoodi karo, iyo hubinta daah furnaanta ee Aqalka Magaalada. Waxaan ku dhaaranayaa inaan marka hore dhegaysto, si xikmad leh u dhaqmo, mar walbana dadka ka hormariyo siyaasadda. Haddii aan helo taageeradiina, waxaan shaqeyn doonaa maalin kasta si aan magaalada uga dhigo meel ammaan ah oo loo dhan yahay dhammaan.

Washington waxay ahayd gurigayga tan iyo 2021, waxaan halkan kula kulmay dad badan oo cajiib ah, oo ay ku jirto xaaskayga quruxda badan. Waxaan jeclahay gobolkaan, bulshadeena, waxaana ku dadaalli doonaa inaan caawiyo si kasta oo aan awoodo.

Waad mahadsan tahay.

## Jane Ho



(253) 256-3275
Janefortukwila@gmail.com
Janefortukwila.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda, Maareynta Ganacsiga oo leh Taqasus Yar oo Xiriirka Caalamiga ah, St Martin's University

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Mashruuca

**Bayaanka:** Sida jiilkii ugu horeeyay ee Fiyatnamiis Ameerikaan ahaan oo 30-sanno Koonfurta Degmada King deganaa, waxaa iga go'an inaan ka caawiyo bulshadeena inay horumar gaarto. Waalidkay waxay u soo haajireen Mareykanka sannadkii 1990 si ay u dhisaan mustaqbal wanaagsan, oo adkaysigooda ayaa dhiirageliyay go'aankayga ah inaan u adeego Tukwila si la mid ah go'aan qaadashadaa.

Iyadoo loo maraayo waayo-aragnimadayda Guddiga Qorsheynta ee Tukwila iyo ku lug lahaanshaha Ururka Taariikhiga ah ee Tukwila, waxaan bartay in hoggaaminta xooggan ay u baahan tahay aqoon, diyaar garow, iyo ficil. Waxaan danaynayaa taariikhda hore, tan hadda, iyo tan mustaqbalka ee magaaladeenna. Mudnaantayda waxaa ka mid ah hagaajinta amniga dadweynaha iyada oo loo maraayo booliiska bulshada, ballaarinta guryaha la awoodi karo, taageeridda ganacsiyada yaryar iyo kobaca dhaqaalaha, iyo miisaaniyad mas'uul ah oo soo saarta natiijooyin.

Tukwila waxay u baahan tahay hoggaan dhegaysta, ka qaybqaata, oo ka tarjumaya qoysaska kala duwan ee magaaladeena. Waxaan noqon doonaa mid la heli karo, ka jawaabaya, oo ka go'an dhisidda bulsho halkaas oo cod kasta la maqli karo iyo qof kasta uu dareemayo qiimeyn. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga oo aan ku matalo.

## Krysteena Mann



(206) 990-2690
kmann.candidate@gmail.com
krysteenawithtukwila.nationbuilder.com

**Waxbarashada:** Maamulka iyo Shahaadooyinka Farshaxanka Waxqabadka, Columbus Community College; American Musical and Dramatics Academy

**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulka; Kaaliyaha Shakhsiyeed

**Bayaanka:** Waxaan ahay Abaabulaha Horusocodka Bulshada Hantiwadaaga ee Dimuqraadiga. Waxaan ahaa abaabule bulsho iyo u dhaqdhaqaaqe siyaasadeed muddo 14 sannadood ah, 10 ka mid ah waxaan ku qaatay Koonfurta Degmada King. Tukwila waxay ahayd gurigayga tobankii sannadood ee la soo dhaafay, waxayna mudan tahay *cod loogu talagalay dadka shaqeeya iyo kuwa la takooray.* Waxaan mudan nahay awood go'aan qaadasho dimuqraadi ah oo ku saabsan dhinac kasta oo nolosha ah: shaqada, guryaha, waxbarashada, daryeelka caafimaadka, iyo wixii ka baxsan. Tani waa sababta siyaasaddayda ay ugu abuurantay cilmi baaris qoto dheer; iyada oo loo maraayo hannaanka horumarinta tooska ah oo lala sameeyo deganeyaasha.

Waxaan i taageeray Ururka Rakaabka Gaadiidka, Foster High YDSA, Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 11aad, UFCW3000, iyo kuwo kale taasoo caddeyn u ah diiwaankayga isbeddelka.

*Deganeyaasha Tukwila waxay mudan yihiin inay barwaaqoobaan, ma ahan oo keliya inay badbaadaan.* Waxaan barwaaqoobi doonaa anagoo maalgelin ku samaynayna magaaladeena oo loo maraayo ilaha dakhliga horumarsan si aan u dhisno guryo si joogto ah la awoodi karo, u ballaarinno gaadiidka dadweynaha, u abuurno shabakado cunto oo dadweyne maamulaan, oo aan u noqono Magaalo Hoy Nabad u ah Kuwiirka iyo Soo Galootiga.

## Gina Bernhardt Nielsen



(206) 854-4333
Gina4Tukwila@gmail.com
www.Gina4Tukwila.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Dhaqaalaha, University of Washington; AA (Shahaadada Jaamacada Labada Sanno)-Maamulka Ganacsiga, Highline College; Maareynta Mashruuca, Syracuse University


**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Jardiinooyinka Tukwila; Falanqeeye Sare ee Hannaanka Ganacsiga-Magaalada Bellevue

**Bayaanka:** Ka jiilka saddexaad ahaan, degane noloshayda oo dhan iyo Guddoomiyaha Jardiinooyinka ee Tukwila, waxaan ku faanayaa inaan magaaladaan cajiibka ah ugu yeero guri. Waxaan arkay sannado badan oo isbeddel ah oo ka dhacay magaaladeena—koritaanka kala duwanaanshaha, ganacsiga, iyo fursadda—iyadoo la maamuusayo taariikhdeeda. Waxaan dan ka leeyahay caafimaadka, barwaaqada, iyo sii socoshada koritaanka bulshadeena.

Sida u doodahaaga ahaan, diiraddayda waxaa ka mid ah mudnaanta kordhinta fursdaha guryaha la awoodi karo iyada oo loo maraayo hindisaha guryaha dhexe ee magaalada, cusboonaysiinta kaabayaasha, horumarinta jardiinooyinka iyo fursadaha caafimaadka iyo daryeelka, kordhinta fursadaha ganacsiga iyo shaqooyinka, balaarinta helitaanka gaadiidka, iyo badqabka dadweynaha.

In ka badan 20 sannadood oo aan ku jiray dowladda magaalada iyo maaraynta isbeddelka, waxaan keenayaa waayo-aragnimo iyo hoggaan diiradda saaraya go'aan qaadasho fikir leh, oo dheelitiran. Waxaan aaminsanahay xalalka bulshada oo dhan, oo loo dhan yahay—oo ku dheelitiraaya baahiyaha miisaaniyad la hagaajiyay iyo horumarinta horumarka si loo wanaajiyo dhammaan magaaladeena. Waxaa iga go'an inaan ka dhigo magaaladeena meel ay dhammaan ku dareemaan nabadgelyo, ku xirnaansho, in la matallo, iyo sharaf inay ku noolaadaan, ka shaqeeyaan, oo ay ku barwaaqoobaan halkan—si wadajir ah. Sharaf ayay ii tahay codeyntaada.

# x Saxiixidda bakhshadda soo celinta ee warqaddaada codbixinta



Doorasho kasta, qiyaastii 1% ka mid ah warqadaha codbixinta ayaan la tirin maxaa yeelay **saxiixu uma dhigmo kan aan ku hayno faylka ama waa mid aan saxiix lahayn.**




## ✓ Hubi in Saxiixaagu uu Ku Baaso Xaqiijinta

- ✓ Saxiixaagu uma baahna inuu noqdo mid qurux badan, nidaamsan, ama xitaa la akhrin karo! Waxaa keliya uu u baahan yahay inuu u dhigmo mid ka mid ah saxiixyada aan hore ugu hayno faylka.

- ✓ Saxiixaagu ma isbeddelay? Noo soo dir mid cusboonaysiisan! Foom ka daabaco halka **kce.wiki/VoterReg**.

- ✓ Haddii aad illowday inaad saxiixdo ama saxiixaagu aanu si dhaw isugu dhigmin, waxaan boostada kuugu soo diri doonaa warqad. Waxaan sidoo kale kugula soo xiriiri doonaa taleefan ama iimeel ahaan haddii aad na siisay macluumaadkaas. Haddii aad isku qortay inaad hesho digniimaha warqadda codbixinta, waxaad sidoo kale heli doontaa fariin qoraal taleefan.

- ✓ Haddii uu saxiixaagu maqan yahay ama uusan isku dhigmin, waxaad u baahnaan doontaa inaad buuxiso oo aad soo celiso foom fudud ugu dambeyn 4:30 p.m. Agoosto 18 si warqaddaada codbixinta loo tiriyo.




### Raad-raac warqaddaada codbixinta!

Haddii ay arrin ka jirto dhinaca saxiixaaga, waxaad ka arki doontaa halkaas raad-raaca warqadda codbixinta ee oonleenka.

Ka hel raad-raaca warqadda codbixinta oo isku qor helitaanka digniimaha warqadda codbixinta barta kce.wiki/TrackMyBallot.

**Iskaan-garee si aad u ogaato wax dheeraad ah**

**Haddii aad qabto su’aalo ku saabsan xujaynta saxiixa, fadlan naga soo wac halka 206-205-5686.**

# Agaasimaha Degmada Lr. 4

## Ken Kemp



(360) 621-0665
kenneth4highline@gmail.com
VoteKen.org

**Waxbarashada:** Ka Qalin Jebiyay Olympic College oo leh Shahaadada Jaamacadda Labada Sanno, Macallin Shahaadaysan ee Xisaabta iyo Sayniska.

**Shaqo iyo Xirfad:** Local (Ururka Shaqaalaha) 26 Steamfitter/Macallin, Local (Ururka Shaqaalaha) 589 Darawal Urur Shaqaale, Soo saaraha Muusikada, Farshaxan.

**Bayaanka:** Degmadaan waxay ku fashilmeen carruurteena tobanaan sanno iyadoo mudnaanta la siinayo wax walba marka laga reebo waxbarashada. Waa wakhti lagu horumarin lahaa tacliinta. Waxaan u tartamayaa Guddiga Dugsiga Highline si aan u hubiyo in dhammaan ardayda—kuwayga iyo kuwiinaba—ay si fiican ugu diyaar garoobaan mustaqbalka.

Ka arday ka soo baxay waxbarashada xirfadda, waxaan dhistay xirfad guul leh anigoo adeegsanaya xirfadaha dhabta ah ee nolosha. Qoyskaygu wuxuu ka kooban yahay afar jiil oo ku nool Degmada Dugsiga Highline, waxaanan keenayaa in ka badan 20 sanno oo waayo-aragnimo ah oo aan ku isticmaalay waxbarashadaas nolosheyda. Haddii ardaydu doortaan jaamacad, xirfado, ama tababar farsamo, waxay mudan yihiin fursad kasta oo ay ku guuleystaan. Carruurteena ma haystaan tobanaan sanno oo ay sugaan—waa inaan ka dhignaa waxbarashada mid u shaqeysa iyaga *hadda*.

Qaar waxay eedeeyaan ururka macallimiinta. Taasi maaha mid caddaalad ah. Ka xubin urur shaqaale oo ku faana oo aan ahaa inta badan nolosheyda, waxaan si toos ah u arkay sida ururadu u taageeraan kobaca iyo fursadaha. Arrinta dhabta ah waa hoggaan xumo iyo mudnaanta oo si khaldan loo dejiyey. Ardaydu waxay mudan yihiin guddi dhegaysta, hoggaamiya, oo tacliinta mudnaanta siiya.

Waxaan u soo adeegay sida macallin, hoggaamiye dhallinyaro, tababarre, iyo la-taliye. Waxaan si qoto dheer u daneynayaa ardaydeena—haddana 80% ayaa dib u dhacaya. Waxaan soo celin doonaa xasilloonida, waxaan kor u qaadi doonaa heerarka tacliinta, waxaanan taageeri doonaa macallimiinta iyo qoysaska labadaba. Fadlan iga caawi inaan caawiyo bulshadeena iyo carruurteena. Hadda waa *wakhtigooda*. U codee Ken Kemp.

## Damarys Espinoza



damarys4highlineschools@gmail.com
electdamarys.com

**Waxbarashada:** Shahaadada ugu sareysa Shahaadooyinka Jaamacadda iyo Shahaadada Mastarka ee Cilmi-nafsiga Dhaqanka Bulshada (Sociocultural Anthropology), University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Hoggaamiyaha hey'ad aan faa'iido doon ahayn; Bare; La-taliye

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa doorashada Agaasimahaaga Guddiga Dugsiyada Dadweynaha ee Highline sababtoo ah waxaan aaminsanahay in arday kasta uu mudan yahay fursadda uu ku horumaraayo.

Anigoo ku faanaaya inaan kasoo baxay dugsiyada dadweynaha, ahna jiilkii ugu horeeyay ee ka qalin-jebisay jaamacad ahna gabadh ay waalidiinteed yihiin muhaajiriin reer Mexico, waxaan fahamsanahay awoodda waxbarashada ee beddeli karta nolosha.

Waxaan ahay hooyo leh saddex carruur oo yaryar, oo ah arday hadda iyo mustaqbalka ee HPS, waxaana si qoto dheer iiga go'an mustaqbalkooda iyo mustaqbalka dhammaan ardayda ku sugan degmadeena. Waxaan rabaa in arday kasta uu dareemo qiimeyn iyo in loo diyaariyo mustaqbalkooda iyada oo loo maraayo barasho macno leh iyo fursado ay ku koraan oo ay ku guuleystaan.

Waxaan u soo shaqeeyay sidii kaaliye macallin haddana waxaan bare ka ahay University of Washington. Macallimiinta HPS waxay door muhiim ah ka ciyaaraan ka caawinaadda ardayda inay horumaraan. Waxay u baahan yihiin taageero iyo kheyraad si ay u qabtaan shaqadooda ugu fiican. Qoysaska iyo bulshooyinka ayaa ah udub dhexaadka shaqadayda. Waxaan ka shaqeeyaa hey'ad aan faa'iido doon ahayn oo u adeegta qoysaska la kulmaya hoy la'aanta, kuwaas oo badankood leh arday dhigata HPS. Ardaydu waxay barwaaqoobaan marka qoysaskooda iyo bulshadooduba barwaaqoobaan. Aan dhisno nidaam taageero ah oo isku xira dugsiyada, qoysaska, iyo kheyraadka bulshada. Sida Agaasimahaaga Guddiga Dugsiga ee hadda ahaan, waxaan kaa codsanayaa codkaaga doorashadaan. Si wadajir ah, waxaan u dhisi karnaa dugsiyada ardaydeenu ay mudan yihiin.

## Agaasimaha Degmada Lr. 4

### Shirley-Nita Enninful



(206) 321-7416
shirleynita27@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Maamulka Adeegyada Caafimaadka, MSU Moorhead; Shahaadada Mastarka, Keller Graduate School of Management.

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeyaha Mashruuca, Plymouth Housing

**Bayaanka:** Waxaan mudannahay hoggaamiyeyaal aqoonsada oo ixtiraama asalka iyo waayo-aragnimada kala duwan ee dadka, hoggaamiyeyaal u dabaaldega kala duwanaanshaha dhaqanka iyo midabka oo u isticmaala sidii awood, iyagoo dhiirigelinaya jawi loo dhan yahay oo qof walba ku kori karo isagoo wax baranaya. Waxaan u baahanahay hoggaamiyeyaal aragti dheer leh oo arka wax ka baxsan xaaladda hadda oo arki kara mustaqbalka halkaas oo caqabadaha fursadaha waxbarasho ee siman ay burbureen

Ku dhashay oo ku koray Ghana, Galbeedka Afrika, waxaan u soo guuray Mareykanka markii aan jiray 18 sanno si aan jaamacad u dhigto. Qoyskayga iyo aniga waxaan Washington ku nooleen muddo 11 sanno ah, waxaanan korinayaa laba carruur oo aad u fiican. Khibradahayga intii aan ku jiray dugsiga iyo shaqada ayaa i siiyay qadarin qoto dheer oo ku saabsan qiimaha waxbarashada.

Intii aan shaqada ku jiray, waxaan nasiib u yeeshay inaan si dhow ula shaqeeyo kooxo kala duwan iyo daneeyayaal. Khibradahaan waxay i siiyeen xirfadaha aan uga gudbi karo caqabadaha adag, abuurista deegaan loo dhan yahay, iyo kicinta isbeddel macno leh.

Markaan u adeegayo guddiga dugsiga, waxay ujeeddadayda tahay inaan xoojiyo ka-qaybgalka bulshada anigoo abuuraya iskaashi xooggan oo u dhexeeya dugsiyada, qoysaska, iyo bulshada si loo taageero guusha iyo wanaagga ardayda iyo in la horumariyo fursadaha waxbarasho si loo hubiyo in dhammaan ardaydu helaan agabka iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan waxbarashada iyo shakhsi ahaan.

# Agaasimaha Degmada Lr. 4

## Carolyn Wilsie-Kendall



(253) 531-4855
aceandme007@yahoo.com

**Waxbarashada:** Lincoln HS, Tacoma, WA Qalin Jebiyay; Kaaliyaha Maamulka @ Knapps Business College; Koorsooyin Kulliyad oo kala duwan

**Shaqo iyo Xirfad:** Kaaliyaha Maamulka @ FPSD, Pacific Lutheran University, Puyallyp SD

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa Guddiga dugsiga ee Degmada Dugsiga Kent si aan uga qayb qaato go'aamada degmada ee mudnaanta siinaya tayada waxbarashada, isgaarsiin hufan, iyo wakiilnimo dhab ah oo bulshada matasha. Sida qof u ololeeya carruurta nolosheeda oo dhan oo leh waayo-aragnimo toos ah oo tobanaan sanno ah oo ku saabsan waxbarashada, anigoo ka shaqeynaya Degmada Dugsiga Franklin Pierce ee Tacoma, Washington dugsiyada dadweynaha sida; Xoghaye, Golaha PTA & Guddoomiyaha PTA ee dugsiyo kala duwan; Xoghayaha Guddoomiyaha Ururka Shaqaalaha oo dhiirigelinaya canshuuraha degmada dugsiga. Sidoo kale u adeegaya Maxkamadaha Dhallinyarada ee Degmada Pierce; Ilaaliyaha ad Litem/CASA gal iyo La-taliyaha Leexinta. Ka hor intaanan ku lug yeelan degmada dugsiga waxaan lahaa oo aan maamuli jiray xarun xanaaneyn carruurta oo shahaadaysan muddo 8 sannadood ah. Waxaan fahamsanahay qiimaha iskaashiga xooggan ee ixtiraamka leh ee u dhexeeya dugsiyada iyo qoysaska.

Waxaan si gaar ah uga walaacsanahay dhicitaanka dhibcaha imtixaanka ee guud ahaan dalka. Diiradeena waa in ay ku soo noqotaa waxbarashada aasaasiga ah; Akhriska, Qorista & Xisaabta. Dugsiyadu waa inay ardayda u diyaariyaan nolosha, ma ahan inay waalidka ku beddelaan arrimaha shakhsiyeed. Waxay ii noqon lahayd sharaf inaan dhegaysto oo aan matalo Degmada Dugsiga Kent iyo Bulshada si loo ilaaliyo daacadnimada waxbarashada oo aan u shaqeeyo dhinaca go'aanno loo sameeyo carruurta si ay u helaan xirfadaha aasaasiga ah ee ay u baahan yihiin si ay u guuleystaan.

## Teresa Gregory



(253) 220-7540
teresag4ksd@outlook.com
www.tg4ksd.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Ganacsiga ee UW Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Kheyraadka Aadanaha iyo Ururka. Dabeecadda

**Shaqo iyo Xirfad:** La-taliye Horumarinta Hoggaaminta

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan sii hayo kursigayga guddiga dugsiga ee KSD anigoo ah waalid iyo xubin ka tirsan bulshada oo aaminsan awoodda wax ka beddelka ee waxbarashada. Dugsiyadeenu ma aha oo keliya dhismooyin —waxay sameeyaan mustaqballo. Waxaan mudnaanta siin doonaa saddex meelood oo muhiim ah: 1. Waxbarashada Sare – Waxaan u doodi doonaa ilaha awoodda siiya macallimiinta oo hubiya in dhammaan ardayda, laga bilaabo xanaanada goorta hore ilaa dugsiga sare, ay helaan qalab casri ah iyo taageero si ay u guuleystaan. 2. Daah furnaan Maaliyadeed – Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan hubiyo in doolar kasta si xikmad leh oo daah furan loo isticmaalo, mar walbana mudnaanta la siinayo baahiyaha ardayda. 3. Xiriiro Adag oo Bulsho – Waxaan kobcin doonaa isgaarsiinta furan ee u dhexeysa qoysaska, macallimiinta, iyo guddiga, anigoo ku dhiirigelinaya go'aan qaadasho wadajir ah.

Si wadajir ah, waxaan abuuri karnaa deegaan waxbarasho oo tayo sare leh, oo loo dhan yahay halkaas oo carruur kasta ay ku barwaaqoobaan. Waxaan ku weydiisanayaa codkaaga keliya ma aha inaan ugu adeego guddiga laakiin aan idiin adeego adiga iyo carruurtaada. Si wadajir ah, waxaan u samayn karnaa isbeddel.

## Agaasimaha Degmada Lr. 4

### Zac Fister



(252) 279-8765
zac4ksd@gmail.com
zac4ksd.com

**Waxbarashada:** Dugsiga Sare ee Capuchino, Dugsiga Isgaarsiinta Elektarooniga ah ee USMC (Ciidamada Mariinka Dalka Mareykanka)

**Shaqo iyo Xirfad:** Farsamayaqaan Raadiyaha Moobilka ee Dhulka, Dowladda Mareykanka

**Bayaanka:** Carruurteena waxay mudan yihiin waxbarasho tayo leh, ayadoon loo eegin duruufaha ama xaaladda. Kala Duwanaanshaheena waa inuu noqdaa xooggeenna ee ma aha xudduuda koritaankeena wadajirka ah. Waxaan u tartamayaa inaan beddelo xaaladda hadda jirta, si aan u kobciyo tacliinta, taageero oo kor ugu qaado tayada dugsiyadeena. In aan dhaqaale ahaan mas'uul ka noqono ardaydeena iyo sidaas darteed bulshadeena. Aan ka dhigno Dugsiyada Kent meel ay waalidiintu rabaan carruurtooda, oo macallimiintu ay u dagaalamaan inay yimaadaan, laakiin aanay ahayn inay u dagaalamaan waxay u baahan yihiin. Anigoo ah waalid ku faanaya oo leh laba arday oo dugsiga hoose ah, safarkayga waalidnimo ee gudaha degmada ayaa hadda bilaabanaya. Waxaan rabaa in aan hubiyo in iyaga, iyo arday kasta oo kale, aysan ku qasbanayn in ay u halgamaan waxa noqon kara xuquuq aasaasi ah. Waxbarasho tayo leh oo aan lahayn walbahaar aan loo baahnayn.

Waxaan rabaa maalgelin cad oo kooban, maalgelin oo si dhakhso ah uga gudubta xadka dhammaadka iyada oo aan caqabad lahayn. Ma aha oo keliya hal Weyn, oo ah Cabbirka Sharciga Curaarta ee Quruxda Badan oo wax walba ku ballanqaadaysa cadceedda hoosteeda, balse aan lahayn waddo cad oo guul lagu gaari karo. Sida Halyeey Hore ee Ciidanka Mariiniska, oo ah shaqaale dadweyne oo sharaf leh, waxaan noloshayda oo dhan ku qaatay adeegga dadweynaha, oo haddana, in ka badan abid, waa wakhtigii aan u dagaalami lahaa waxa saxda ah.

Mar kale ka dhig Aabbeyaasha PTA-ga kuwo wanaagsan!

## Sugidda Doorashooyinkeena Si Codeyn Kasta Loo Tiriyo

**Halkan Doorashooyinka Degmada King, hadafkeenu waa inaan qabanno doorashooyin sax ah, sugan, oo la heli karo.**

### Ammaanka Goobta

- Xarunteena waxaa kormeera in ka badan ku dhawwaad 80 kaamirooyinka amniga ah.
- Dadweynaha ayaa naga daawan kara in ka badan 15 kaamiryoonka tooska ah anagoo shaqeynayna inta lagu jiro habeynta warqadda codbixinta.
- Shaqaalaha iyo goobjoogeyaasha waa inay aqoonsi ku soo galaan ugana baxaan goobta looga shaqeeyo warqadaha codbixinta.
- Aagga lagu keydiyo iyo xisaabinta warqadda codbixinta ayaa u baahan aqoonsi iyo mashiinka suulka la saaro labadaba.

### Ammaanka Oonleenka

- Khubaro ku taqasusay amniga internetka oo shahaadeysan ayaa shaqaale ka ah waaxda doorashooyinka iyo IT-ga Degmada King.
- Dhammaan shaqaaluhu waxay qaataan tababarka sannadlaha ah ee ammaanka oonleenka.
- Nidaamyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo xisaabinta codeynta ayaa la kala soocaa si loogu ilaaliyo ammaanka ugu sareeya.
- Nidaamka xisaabinta codeynta waa nidaam gebi ahaanba ah shabakad xiran, kumana xirna internetka.

# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Laura Jensen



(253) 259-6858
JensenForKSD@gmail.com
www.JensenForKSD.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Taariikhda, Central Washington University

**Shaqo iyo Xirfad:** kaaliye macallin hore

**Bayaanka:** Magacaygu waa Laura Jensen waxaanan u tartamayaa jagada Guddiga Dugsiga Kent, Degmada 5aad. Anigoo ku koray Kent, waxaan si toos ah u arkay qiimaha waxbarasho adag, oo taageero leh. Waxaan doonayaa inaan hubiyo in dhammaan ardayda degmadeena ay helaan isla fursadihii loogu talagalay guusha sida aan helay.

Waxaa iga go'an *helitaanka waxbarasho oo loo siman yahay* ardayda oo dhan. Carruur kasta waxay u qalantaa kheyraadka iyo taageerada si ay u gaaraan awooddooda buuxda. Sidoo kale, waxaan aaminsanahay *daah furnaan* iyo *mas'uuliyad* ee ku aaddan go'aannada degmada oo dhan. Bulshadeenu waa inay si buuxda u ogaataa sida dugsiyadeena loo maamulo iyo sida maalgelinta loo qaybiyo. Taageeridda macallimiinteena iyo shaqaalaheena waa mudnaantayda. Waxaan 16 sannadood ka shaqeynayay Kent sidii kaaliye macallin, waxaanan ogahay in shaqaaluhu muhiim u yihiin guusha ardayda. Waa inaan hubinnaa in shaqaaluhu helaan kheyraadka iyo taageerada xirfadeed ee ay u baahan yihiin. Sidoo kale waxaan aaminsanahay *mas'uuliyadda maaliyadeed*—doolar kasta waa in lagu bixiyo iyadoo maskaxda lagu hayo baahiyaha ardayda.

Musharax ahaan, waxaan ballanqaadayaa inaan si wadajir ah u shaqeeyo, bulshada dhegaysto, oo aan u doodo danaha ugu wanaagsan ee ardaydeena. Waxaan codsanayaa codkaaga si aan uga caawiyo in Degmada Dugsiga Kent noqoto meel ay dhammaan ardaydu ku barwaaqoobaan.

*Ka socota dugsiyadeena. Oo loogu talagalay dugsiyadeena.*

## Jane Smith



(253) 355-1236
votejanesmith@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Sayniska Kombuyuutarka, University of Washington Tacoma

**Shaqo iyo Xirfad:** Hooyo; Injineerka Softiweerka, PayPal

**Bayaanka:** Waxaan ahay qof guri ku leh Kent iyo hooyo laba carruur ah leh. Waxaan ku noolaa Washington noloshayda oo dhan waxaanan qoyskayga ku aasaasay Kent. Waxaan sidoo kale mutadawacnimo ku barray cilmiga sayniska kombuyuutarka dugsi sare oo Washington oo aan u maraayo barnaamijka Microsoft TEALS.

Bulshadeenu si deeqsinimo leh ayay u taageertay canshuuraha dugsiyada, hase yeeshee natiijooyinka ardayda way liitaan. Waxaan u ololeyn doonaa miisaaniyad mas'uul ah oo u jihaysa kheyraadka ardayda iyo macallimiinta, iyo siyaasado si wax ku ool ah u isticmaala kheyraadkaas. Waxaa iga go'an soo celinta badqabka iyo nidaamka si loo abuurro dugsiyo ku habboon waxbarashada.

Waxaan u ololeyn doonaa soo celinta *aasaaska tacliinta*, *meelo ammaan ah oo jinsi ahaan kala soocan*, iyo *nidaamka iyo caddaaladda* fasalka dhexdiisa. Waxaan waalidiinta u hayaa ixtiraam weyn waxaanan ka shaqeyn doonaa soo celinta doorkooda saxda ah ee ah inay yihiin kuwa ugu muhiimsan ee go'aanka ka gaara waxbarashada carruurtooda. Si xushmad leh ayaan u codsanayaa codkaaga si aan ugu adeego dugsiyada Kent.

## Agaasimaha Degmada Lr. 5

### Laura Williams



(253) 544-8142
Laura4kentschools@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Waxbarashada Xisaabta, University of Montana; Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada, University of Washington Tacoma

**Shaqo iyo Xirfad:** Shan iyo toban sannadood macallin dugsiga sare ee xisaabta/masraxa; Madaxa Fulinta Ururka Shaqaalaha

**Bayaanka:** Ardaydeena, macallimiinteena iyo qoysaskeena waxay mudan yihiin hoggaan adag, oo khibrad leh oo fahmaya caqabadaha gudaha iyo dibadda fasalka. Ka macallin khibrad leh iyo hooyo heellan ahaan, waxaan keenaa aqoon toos ah oo ku saabsan waxa dugsiyadeennu u baahan yihiin si ay u guuleystaan. Waxaan sannado ku bixiyay u doodista ardayda, taageeridda macallimiinta, iyo ka shaqeynta xoojinta waxbarashada dadweynaha.

Waxaan aaminsanahay dugsiyo ammaan ah, heerar tacliimeed oo sareeya, iyo miisaaniyad caqli leh oo hufan sababtoo ah arday kasta wuxuu mudan yahay *waayo-aragnimadooda waxbarashada ee ugu fiican*. Sida qof ka qalin jebiyay deegaanka ahaan, waxaan la noolaa xaqiiqada nidaamkeena waxbarasho, waxaana diyaar u ahay inaan ku hoggaamiyo si daacadnimo, ficil, iyo qalbi leh. Aan carruurteena horey u dhigno oo aan wada dhisno mustaqbal adag.

Waxaa taageeray Meeyarka Dana Ralph, dhammaan Xubnaha Golaha Magaalada Kent, Xildhibaan Adam Smith, Guddoomiyaha Dhulalka Dave Upthegrove, Hoggaamiyihii Hore ee Aqlabiyadda Pat Sullivan, Afhayeenka ku-meel-gaarka ah Chris Stearns, Dimuqraadiyiinta deegaanka iyo Degmada King. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan khibraddayda ku soo kordhiyo guddiga oo aan kasbado codkaaga.

## Agaasimaha Degmada Lr. 1

### Brian Travis



(850) 459-3991
Reformpartywa@yahoo.com

**Waxbarashada:** A.A. (Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno) Edmonds College 2013, BAS Central Washington University 2018, MBA (Shahaadada Mastarka) Western Governors University 2022

**Shaqo iyo Xirfad:** Xisaabinta iyo Karaaniga Xafidaadda Xisaabaadka

**Bayaanka:** Waxaa a qoray "cabsida Rabbiga waa bilowga xikmadda oo dhan"

In kasta oo aanan taageersanayn aasaaska diinta ee dugsiyada dadweynaha; haddana, ku saleynta cilmiga adduunka iyo ka saarista diinta ee waxbarashada dadweynaha iyadoo laga reebayo tixgelinta runta ama xaqiiqooyinka anshaxa, waxay lahayd cawaaqib xumo tan iyo 1962.

Carruurta waxaa laga qaaday fursadda ay ku tixgelin lahaayeen haddii ficilladooda gaarka ah ay leeyihiin cawaaqib ku meel gaar ah iyo kuwo weligeed ah; taasoo inta badan ka tagaysa carruurta ayagoo aan lahayn awoodaha ugu fudud ee sababaynta. Ma tixgeliyaan toogteyaasha dugsiyada iyo carruurta kale ee gala falalka rabshadaha iyo dambiyada aan micnaha lahayn ee ka dhanka ah kuwa aan waxba galabsan ee gudaha iyo dibadda dugsiyada in cawaaqibka sugaaya dhimashada ka dib? Ardayda ma loo oggol yahay in macnaha falsafadeed ee caqliga leh ee ku saleysan dhaqanka ay ku tixgeliyaan jiritaanka ruuxa aadanaha, iyo xukunka maalinta qiyaamaha?

Carruurta, waxaa lagu barran karaa labada dariiq ee adduunkan iyo sidoo kale waxaa lagu barran karaa inay tixgeliyaan midka weligiis imaan doona. Kuwa dhahaaya dugsiyada dadweynaha maaha meel lagu baro qiimaha anshaxa ee shakhsi ahaanneed, maxay yihiin dhaqdhaqaaqyada LGBTQ iyo caddaaladda bulshada haddii aysan ahayn gudbinta hal xirmo oo qiimaha anshaxa oo ay leedahay koox dad ah oo ku saabsan koox kale. Carruurta maanta waxay noqon doonaan kuwa awoodda leh berrito, barra waxa saxda ah iyo waxa khaldan.

### Carson Sanderson



(509) 906-1816
electCarsonSanderson@gmail.com
electCarsonSanderson.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Injineerinka ee Cilmi-baarista Hawlaha iyo Injineerinka Maaliyadda, Princeton University

**Shaqo iyo Xirfad:** Kormeeraha Imtixaanka Degmada Dugsiga Northshore; Madaxweynaha, Golaha Waalidiinta HiCap

**Bayaanka:** Anigoo ah hooyo laba jinsi ah oo leh afar arday oo leh baahiyo waxbarasho oo gaar ah, waxaan fahamsanahay caqabadaha waalidiinta. Waxaan sannado ku qaatay tabarucaadda dugsiyada, PTAs, iyo Guddiga Waalidiinta HiCap iyo waxbaridda Girl Scouts.

Northshore waa degmo dugsiyeed heer sare waana hoggaamiye goboleed hal-abuur waxbarasho leh, laakiin waxay la kulmaysaa caqabado dhowr ah. Iyadoo aan haysano kormeere guud oo cusub, waxaan u baahanahay guddi dugsi oo leh waayo-aragnimo qoto dheer iyo xiriir adag oo bulshada ah. Waa inaan si wadajir ah uga shaqeyno sidii aan miisaaniyaddeena u dheelitiri lahayn, ugu dagaalami lahayn maalgelinta gobolka dheeraad ah, u dhisi lahayn keydkeena, oo aan u ilaalin lahayn heerka sare ee waxbarashada anagoo taageerayna baahiyaha *dhammaan* ardayda.

Waxay qaadataa dhammaanteen oo wada shaqeynaya si carruurta iyo qoysaska ay ugu guuleystaan. Waxaan arkay waxa shaqeeya iyo waxa la horumarin karo. Waa inaan si wanaagsan u taageernaa kala-duwanaanshaha maskaxeed ee ardaydeena, aqoonsiyada dhaqankooda, iyo qaab-dhismeedka qoysaskooda si aan u taageerno caafimaadkooda maskaxeed. Ardayda iyo qoysaska leh luqado kala duwan oo afkooda koowaad ah waa in si wanaagsan loogu caawiyo adeegyada tarjumaadda. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan helo codkaaga si aan u difaaco arrimahaan.

Taageerooyinka: *Xirfadyahannada Xafiiska iyo Waxbarashada ee Northshore; Ururka Waxbarashada Washington;* Sharci -dejinta 1aad iyo Dimuqraadiyiinta Degmada Snohomish; Sen. Derek Stanford; Wakiillada Davina Duerr, April Berg, iyo Brandy Donaghy; Duqa Magaalada Mason Thompson; Agaasimaha Guddiga Dugsiga Dr. Jacqueline McGourty; waxaa lagu sii wadi doonaa webseedka.

## Agaasimaha Degmada Lr. 1

### Arun Sharma



(425) 287-0067
elect@electarunsharma.com
electarunsharma.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Injineernimada Farsamada, UW Seattle; Shahaadada Jaamacadda ee Injineernimada Farsamada, Jaamacadda Delhi, India

**Shaqo iyo Xirfad:** Farsamo yaqaan Sare (Injineer Sharaf leh) - Boeing

**Bayaanka:** Waxaan ahay injineer, macallin, u doode bulshada, iyo waalid ku faanaya laba Northshore ka qalin-jebiyay—labaduba hadda ka shaqeeya xirfadaha caafimaadka. Waxaan u tartamayaa Guddiga Dugsiga Northshore si aan u taageero horumarinta canuga oo dhan, oo ay ku jiraan barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo kuwa ardayda hibada sare leh.

Waxaan aaminsanahay in la xoojiyo dugsiyadeena dadweynaha iyada oo loo maraayo maalgelin loo siman yahay, mushaharka macallimiinta oo caddaalad ah, adeegyo caafimaadka maskaxda oo balaaran, tacliin adag, helitaan balaaran oo STEAM ah, iyo diyaarinta jaamacadda iyo xirfadaha. Waxaan u ololayn doonaa dugsiyo loo dhan yahay, ammaan ah, oo taageero leh, waxaan maalgelin doonaa macallimiin iyo shaqaale heer sare ah, waxaanan qaadan doonaa go'aanno xog ku saleysan oo ka tarjumaya qiyaamka bulshadeena.

Waxaan taageerayaa miisaaniyad mas'uul ah oo leh isla xisaabtan cad—hubinta in maalgelinta dadweynaha ay horseeddo natiijooyin arday oo la cabbirri karo, oo ay ku jiraan koriinka shucuurta iyo tacliinta, iyo diyaarinta nolosha. Waxaan sidoo kale la shaqeyn doonaa macallimiinta iyo sharci-dejiyeyaasha guud ahaan Washington si aan u dib-u-habeyno qaabka maalgelinta duugoobay ee hore ee asalka ah oo aan u balaarinno waxbarashada aasaasiga ah si ay u daboolaan baahiyaha arday kasta.

Anigoo ka faa'iideysanaayo khibraddayda hoggaamineed ee gaarka ah ee warshadaha gaarka loo leeyahay, waxbarashada sare, adeegga aan faa'iido doonka ahayn, iyo waayo-aragnimada nololeed, waxaan fulin doonaa ballanqaadkayga ah horumarinta canuga oo dhan. Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci-Dejinta 1aad; Senatarrada - Derek Stanford, Manka Dhingra iyo John Lovick; Wakiillada – Shelley Kloba, April Berg, iyo Bandy Donaghy; Xubnaha Golaha – Degmada King Rod Dembowski, iyo Degmada Snohomish Jared Mead

# Su'aalaha Soo Noqnoqda ee Codeynta

### ○ Sidee baan u codeeyaa?

Buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga ee tartan walba.

### ○ Ma waxaan isticmaalaa qalin?

Waxaad isticmaali kartaa qalin, qalin qori, qalinka kalarka, ama wax kasta oo si cad u buuxiya goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga.

### ○ Ma inaan ka codeeyaa tartan kasta?

Adiga ayay ku xiran tahay tartannada aad ka codeynayso. Waxaad ka codeyn kartaa hal tartan, laba tartan, ama dhammaan tartannada. Waxaanu xisaabin doonaa codeyn kasta oo aad samayso.

### ○ Maxaa dhacaaya haddii aan fikradayda beddelo ama aan khalad sameeyo?

Xariiq dul mari dookha aadan doonaynin. Markaa ka dib buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga saxda ah.

### ○ Ma inaan warqaddayda codbixinta saxiixaa?

Waa in aad saxiixdo xagga dambe ee bakhshadda soo celinta si warqaddaada codbixinta loo tiriyo. Saxiixaagu uma baahna inuu noqdo mid nidaamsan ama la akhrin karo, laakiin waa inuu u dhigmo saxiixyada aan ku hayno faylkaaga diiwaan gelinta codbixiyaha.

### ○ Sidee baan u soo celiyaa warqaddayda codbixinta?

Waxaad warqaddaada codbixinta ku ridi kartaa sanduuq kasta oo boostada (USPS) waxaa loo baahan yahay inay lahaato shaabadda boostada oo ah Maalinta Doorashada. Waxaad kale oo warqaddaada codbixinta ku soo celin kartaa mid ka mid ah in ka badan 80 sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta ee yaala agagaarka degmada King. Waxaan kugula talinaynaa inaad warqaddaada codbixinta ku soo dirto boostada Jimcaha ka horeeya Maalinta Doorashada ama aad isticmaasho sanduuqa lagu rido inta lagu guda jiro maalmaha ugu dambeeya ee doorashada.

## Agaasimaha Degmada Lr. 4

### Sandy R Hayes



(425) 892-4080
sandyrhayesforschoolboard@gmail.com
sandyhayesforschoolboard.wordpress.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda, University of Washington 1991, JD (Shahaadada Sharciga), University of Washington, 1994

**Shaqo iyo Xirfad:** Qareen, hadda waxaan leeyahay shaqo caddaalad soo celin ah.

**Bayaanka:** Ka shaqeynta Guddiga Dugsiga ee Northshore muddo lix iyo toban sanno ah waxay ahayd maamuuskeyga ugu weyn. In kasta oo wax badan la qabtay intii aan ku jiray guddiga, weli waxaa jira shaqo badan oo la qabanayo, oo ay ku jiraan u doodista kheyraadka dhaqaalaha ee aan u baahanahay iyo hubinta in arday kasta uu u dareemo badbaado, ixtiraam iyo qiimeyn si ay ugu guuleystaan mustaqbalka ay doortaan. Haddii aan helo taageeradiina sii socota, waxaan isku keeni doonaa codadka waalidiinta, ardayda, iyo macallimiinta si aan u hubinno in ardaydeenu ay diyaar u yihiin shaqooyin aan weli jirin, adduunyo si weyn uga duwan tan jirtay xitaa dhowr sanno ka hor. Waxaan aaminsanahay in mid kasta oo ka mid ah ardaydeena uu noqon karo oo uu noqdo xubin wax ku ool ah oo ka tirsan bulshadeena waxaanan rabaa inaan ka mid noqdo wada hadalka ku saabsan sida aan halkaas ku gaari karno.

Taageerooyinka – Ururada Waxbarashada iyo Xirfadleyaasha Xafiiska ee Northshore (Northshore Education and Office Professionals Associations), Dimuqraadiyiinta Degmada 1aad iyo 45aad

### Sehaj Dhaliwal



electsehaj@gmail.com
electsehaj.com

**Waxbarashada:** University of Washington – Cilmiga Siyaasadda iyo Siyaasadda Dadweynaha

**Shaqo iyo Xirfad:** Adeegga dadweynaha ee sharciga, urur aan faa'iido doon ahayn, daryeelka caafimaadka, maaliyadda, iyo ilaalinta haweenka.

**Bayaanka:** Dadka Mareykanka waxay inta badan ka hadlaan sida ay muhiimka u tahay in jiilka soo socda ay u kacaan oo ay ka qayb qaataan siyaasadda iyo adeegga dadweynaha. Sehaj Dhaliwal, oo kasoo baxday dugsiyada Northshore, waxay aaminsan yahay in hadda ay tahay wakhtigii, gaar ahaan marka ay timaado ilaalinta iyo xoojinta nidaamka waxbarashada.

Diiradda ugu weyn ee shaqadeeda adeegga dadweynaha waxay ahayd taageeridda dumarka ay saameeyeen ka ganacsiga dadka, iyadoo bixisa taageero soo kabasho iyo waxbarasho u gaar ah. Waxay sidoo kale ka qayb qaadataa barnaamijyada maktabadda, u doodista dhaqanka, hagidda dhallinyarada iyo dib u soo celinta deegaanka ee bulshooyinka Northshore.

Sehaj waxay keenaysaa xiriir shakhsiyeed oo qoto dheer oo ay la leedahay degmada iyo ardaydeeda. "Waxbarashadaydu waxay qaabeeysay qofka aan ahay, waxaanan doonayaa inaan hubiyo in ardayda maanta, iyo kuwa berri, ay helaan fursadaha la midka ah. Jiilkeennu waa inuu hadda miiska siyaasadda joogo maadaama go'aanno muhiim ah oo ku saabsan waxbarashada dadweynaha la samaynayo."

"Haddii ay jirto hal shay oo aan u baahanahay inaan saxno, waa waxbarashada. Mustaqbalkeena ayaa ku tiirsan," ayay tiri Sehaj. "Waxaan ogahay in degmada ay la kulmeyso cadaadis dhaqaale oo dhab ah iyo deymaha sii kordhaaya, laakiin taasi macnaheedu maaha inaan jarno waxa ugu muhiimsan. Waxaan u baahanahay inaan ilaalino dadka iyo barnaamijyada si toos ah u taageera waxbarashada ardayda - macallimiinta, adeegyada caafimaadka maskaxda, waxbarashada dheeraadka ah, iyo taageerada tacliinta. Kuwani ma aha waxyaabo dheeraad ah. Waxay yihiin kuwa lagama maarmaanka ah."

## Agaasimaha Degmada Lr. 4

### JoAnn Tolentino



(425) 485-7440
joforschoolboard@gmail.com
votejoann.com

**Waxbarashada:** Wenatchee Valley College, Seattle Pacific University, Taqasus Weyn ee Cilmiga Daaweynta Muusikada, (ka shaqeeyay Dhallinyarada Halista ku jirta)

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallinka muusikada 35 sannadood, iibinta softiweerka, hawlgab, jecel waxbarashada.

**Bayaanka:** Anigu waxaan ahay ayeeyo NSD ah oo daacad ah iyo degane muddo dheer ah, oo ku dhiirrigeliyay in la hubiyo in arday kasta uu gaaro awooddiisa nidaam ammaan ah oo dhaqaale ahaan wanaagsan. Guusha carruurteena waxay iftiiminaysaa mustaqbal dhalaalaya! Khibraddayda ku saabsan Maamulka, Khatarta, iyo U-hoggaansanaanta waa qaybta maqan ee dhammaystiraysa guddiga kala duwan ee NSD. Iyadoo NSD ay la tacaalayso $21 milyan oo deyn ah, waxaan keenni doonaa isla xisaabtan maaliyadeed, iyo kormeer, anigoo ka dhabeynaya in doolarka xaddidan ee NSD uu waxbaro carruurtiina sida ugu wanaagsan ee suurto galka ah. Diiraddeennu waa inay noqotaa heer sare oo waxbarasho oo dhan.

Waxaan taageeraa codkaaga, anigoo awood siinaya waalidiinta, macallimiinta, iyo canshuur-bixiyeyaasha si ay u sameeyaan siyaasado. Iyada oo loo maraayo go’aanno hufan oo bulshada ku saleysan, waxaan qaadan doonaa manhaj kor u qaadaya fikirka muhiimka ah iyo xirfadaha jilicsan, si ardaydu ugu diyaar garoobaan inay guuleystaan. Waa inaan taageernaa macallimiinteena waaweyn oo kor u qaadnaa dhibcaha imtixaanka tijaabada. Iyadoo $17,000 ee ardaygiiba sannadkii helayo, waxaan gaari karnaa heer sare!

Amniga waa mudnaantayda koowaad. Waxaan si geesinimo leh ula tacaali doonaa dhibaataynta iyo daroogada, anigoo abuuraya dugsiyo ay barashadu ku kobcayso. Siyaasadaha caddaalad ee ciyaaraha oo u dhexeeya (gabdho iyo gabdho, wiilal iyo wiilal) waxay ilaalin doonaan nabadgelyada iyo ixtiraamka. Himiladaydu waa in aan helo dugsiyo firfircoon oo soo dhawweyn leh halkaas oo ardaydu ay fursad u helaan inay ku koraan dhinaca waxbarashada iyo bulshada. Iyada oo daah furnaan, iskaashi, iyo tamar aan xad lahayn, waxaan ka shaqeyn doonaa inaan xoojiyo Qoyska Northshore. Tayada waxbarashada waxay ka bilaabataa codkaaga...

# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Kimberlee Kelly



(425) 780-7203
votekellyforschoolboard@gmail.com
kellyforschoolboard.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee waxbarashada, Loyola Marymount University; Shahaadada Macallinnimada; BA (Shahaadada Jaamacadda) Cilmiga Siyaasadda UCLA

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin Shahaadaysan ee K–12 iyo macallin dugsiga goorta hore, khabiir manhajka, iyo tababarre macallin

**Bayaanka:** Sida macallin leh in ka badan 15 sannad oo waayo-aragnimo iyo waalid/u doodaha arday cusub oo soo galaaya Northshore ahaan, waxaan keenni doonaa faham qoto dheer oo ku saabsan caqabadaha iyo fursadaha ay ardayda iyo qoysasku kala kulmaan dugsiyada dadweynaha.

Waxaan u sameeyay *manhajyo loo dhan yahay, adag* oo ka caawiyay ardayda inay xiraan *farqiga waxbarasho ee sannado badan* oo ku saabsan maadooyin kala duwan. Marka laga tago wax baridda, waxaan hoggaamiyey abuurista waaxda cilmiga sayniska kombuyuutarka, hormuud ka noqday hindisaha caafimaadka maskaxda, tababaray macallimiinta guud ahaan dalka oo dhan ee ku aaddan *waxbarid saamayn sare leh oo ku saleysan sinnaanta*, waxaanan ka soo shaqeeyay doorar hoggaamineed heer dugsi iyo degmo.

Ka wakiilkaaga ahaan, waxaan u ololayn doonaa siyaasadaha, dhaqamada, iyo maalgelinta hubinaaya in ardayda iyo macallimiinta Northshore ay guuleystaan—laga bilaabo fasallo yaryar iyo taageerooyinka caafimaadka maskaxda ilaa abuurista jawi waxbarasho oo loo dhan yahay oo soo dhawweynaya *dhammaan ardayda*. Waxaan si aan daal lahayn uga shaqeyn doonaa dib-u-dhiska keydka maaliyadeed anagoo adeegsanayna maalgelin waarta, ee gudaha iyo heer gobol. Waxaan ka shaqeyn doonaa hubinta in ilmo walba uu helo kheyraadka iyo fursadaha gaarka ah ee uu u baahan yahay si uu ugu guuleysto, oo ay ku jiraan helitaanka waxbarashada gaarka ah, farshaxanka, teknolojiyada, iyo xirfadaha diyaarinta jaamacadda iyo shaqada. Waxaan si xushmad leh u codsanayaa codkaaga.

Taageerooyinka: Ururka Waxbarashada Washington (WEA), *ururada shaqaalaha macallimiinta Northshore* (NSEA iyo NEOPA), Dimuqraadiyiinta Degmada 45aad, Senatar Derek Stanford, Xubin Golaha Magaalada Woodinville Michelle Evans

## Holly Muenchow



(206) 890-2074
holly.a.muenchow@gmail.com
www.hollym.org

**Waxbarashada:** Wellesley College, Leadership Eastside, Ally Skills Workshop Tababarka Fududeynta, Wax Barte Noloshiisa oo Dhan

**Shaqo iyo Xirfad:** Waalid Wakhti Buuxa ah, Qabanqaabiye Bulsho, Xubin Guddi Aan-Faa'ido Doon Ahayn, Technical PM (Maareynta Mashruuca Farsamada)

**Bayaanka:** Waxaan aaminsanahay in aan wadajir u dhisi karno waxbarashada dadweynaha meel kasta oo carruurta oo dhan ay ku barran karaan inay ku horumaraan. Dhibaatooyinka carruurteena ayaa muujiyay daciifnimooyinka nidaamka oo u baahan in loo xoojiyo dhammaan ardayda. Noqoshada waalid wakhti buuxa ah oo taageeraya qoyskayga isku dhafan waxay i tustay sida aan u horumarin karno oo aan u hal-abuuri karno si aan u daboolno baahiyaha waxbarashada qof walba.

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhiso xiriiradayda adag ee bulshada si aan uga caawiyo kormeeraha guud ee cusub ee Northshore inuu kobciyo iskaashiyo waara. Waxaan u adeegay bulshadeena anigoo ah VP ee Difaaca ee Golaha Northshore PTSA, hoggaamiye aasaasay ee Bulshada Waxbarashada Gaarka ah ee Northshore PTSA, Golaha HiCap, Madaxweynaha PTA, Guddiga La-talinta Maaliyadda, iyo in ka badan. Waxaan kumanaan arday ah barray barnaamijyada kombuyuutarka anigoo adeegsanaya IGNITE Worldwide iyo TEALS.

Waxaan sii wadi doonaa inaan ka doodo Olympia iyo meel ka baxsan maalgelinta muhiimka ah ee macallimiinteena u baahan yihiin in ay u diyaariyaan arday kasta guusha.

In ka badan 15 sanno oo aan ahaa PM Farsamo, waxaan hoggaamiyey hindisaha si loo hubiyo tayada iyo u hoggaansanaanta sharciga, badeecooyin ammaan ah oo ku yaal malaayiin kombuyuutar, iyo in la kobciyo dhaqan kala duwan oo loo dhan yahay. Waxaan keenayaa xirfadahaan—in lala xisaabtamo dhinacyada awoodda leh iyo in la dhiso kalsooni iyada oo loo maraayo wada sheekaysiyo daacad ah—ee ku aaddan guddiga dugsiga. Haddii aan helo taageeradaada, waxaan dhisi karnaa dugsiyo uu arday kasta ku leeyahay meel uu ku jiro oo uu ku horumaro. #WeAreNorthshore #EveryoneBelongs #FundPublicSchool

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

## Agaasimaha Degmada Lr. 5

### Lynda Schram



(206) 817-5394
Northshore@voteLynda.com
www.voteLynda.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Fiisigiska Université de Fribourg, Switzerland, Wheaton College, 1/2 MBA (Shahaadada Mastarka) U.Texas


Shaqada: hore: Hewlett Packard, Motorola, Texas Instruments, Macallin HS. Hadda: Xildhibaan

**Bayaanka:** Kormeeraha Guud ee Waxbarashada ee Gobolka ayaa ka soo horjeeda Xuquuqda Waalidiinta laakiin wuxuu taageersan yahay in wiilasha loo oggolaado inay galaan musqulaha gabdhaha, qolalka beddelashada iyo inay ka qayb galaan cayaaraha gabdhaha. Gobolkeennu wuxuu halis ugu jiraa inuu waayo bilyano doolar oo maalgelinta federaalka ah sababtoo ah diidmada u hoggaansanaanta Xuquuqda Ciwaanka IX ee federaalka ee nus milyan gabdhood.

Koox wadajir ah oo ka socota Waaxda Waxbarashada/DOJ ayaa hadda baaraysa OSPI-da gobolkeena arrintan ku xadgudubka. Degmooyin badan oo dugsiyo ah oo ku yaalla Washington ayaa soo sheegay in OSPI ay ku qasbeyso guddiyada dugsiyada inay ansixiyaan siyaasado u oggolaanaya ragga inay ka qayb galaan cayaaraha dumarka iyo inay isticmaalaan xarumaha khaaska ah ee dumarka, *dhammaan xadgudubyada Ciwaanka IX.*

Waalidiinta ku nool Degmada Dugsiga ee Northshore waxay leeyihiin cod awood leh iyada oo loo maraayo agaasimeyaasha guddiga dugsiga. Guddiyada maxalliga ah waxay ilaalin karaan Ciwaanka IX waxayna hubin karaan in xuquuqda gabdhaheena la ixtiraamo. Waa muhiim in waalidiintu si firfircoon uga qayb qaataan—ka qayb galaan shirarka guddiga dugsiga, wada sheekaysiyada tababareyaasha, iyo tan ugu muhiimsan gabdhihiinna.

Waxaan ahaa waalid iyo ayeeyo firfircoon oo ku nool Degmada Dugsiga ee Northshore muddo *35 sannadood*. Waxaan u ololeyn doonaa in si mas'uul ah loo maareeyo kheyraadka dadweynaha, hufnaanta iyo isla xisaabtanka sharciyada iyo siyaasadaha taageera waxbarashada tayada sare leh. *Waxaan ku weydiisanayaa Codkaaga!*




# Ku codee afka Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, ama Fiyatnamiiska!

**Waxaad isku qori kartaa inaad hesho warqaddaada codbixinta iyo dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqadda dookhaaga ah.**

Hal mar isku qor oo dhammaan doorashooyinka mustaqbalka waxaad heli doontaa:

- warqadaha codbixinta,
- buug-yaraha codbixiyeyaasha,
- warqadaha iyo isgaarsiinta,
- adeegga macaamiisha (taleefan/ iimeel), iyo
- agabyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo waxbarashada

Booqo **kce.wiki/languages** si aad isku qorto maanta!

# Agaasimaha Degmada Lr. 2

## Eric Feeny



publicoffice@feenys.net
www.feenys.net

**Waxbarashada:** Injineerinka Farsamada iyo Taariikhda, Stanford University

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxa Fulinta Horumarinta Ganacsiga

**Bayaanka:** Inaad qof wanaagsan tahay oo aad danaha ugu wanaagsan ardaydeena iyo bulshadeena qalbiga ka hayso keliya kuma filna. Waxaan daawaday siddeedii sannadood ee la soo dhaafay iyadoo xubnaha guddiga ee niyad wanaagga leh ay ku guuldareysteen inay joojiyaan hoos u dhaca diiwaan gelinta iyo tayada tacliinta.

Waxaan haystaa laba carruur ah oo ka diiwaan gashan SPS; Waxaan ku firfircoonnahay guddiyada PTA ee dhammaan dugsiyada ay carruurtaydu dhigtaan, waxaan si toos ah ula socdaa kulamada guddiga dugsiga ee oonleenka, waxaana dhowr jeer ka dhiibtay aragtidayda anigoo goobta jooga. Waxaan u naxariistay dhibaatada dhabta ah ee maalgelinta ee ka dhalatay siyaasadda gobolka ee dhacsan. Laakiin waxaan ku arkay in dhibaatooyinkeena badankood aysan la xiriirin maalgelinta, oo ay leeyihiin jihayn toos ah iyo tallaabooyin hawleed oo lagu hagaajin karo.

Waxaan xaqiijjin doonaa inaan kordhino madax-banaannida dugsiyada oo aan diiradda saarno maamulka si uu dib ugu taageero kuwa u baahan caawinaadda dheeraadka ah, halkii laga celin lahaa kuwa awooda inay hore u socdaan. Waxaan xaqiijin doonaa in dugsiyadu helaan ikhtiyaarka ah inay soo celiyaan shaqooyinka fasalka sare iyo heerarka macquulka ah ee shaqada guriga iyo shaqooyinka adag ee kor u qaada carruurteena inay koraan.

Qofna waa inaanu ku dhicin meel cidla ah; Waxaan ururin doonaa dad kooxo ficil ah oo aan ku xiri doono shaqaalaha degmada si ay u xalliyaan dhibaatooyinka. Waxaan sidoo kale ka caawin doonaa SPS inay joojiso niyad-jabka qoysaska iyadoo ku dhawwaaqaysa ogeysiisyo daqiiqadii ugu dambeysay.

Waxaan hirgelin doonaa hannaanka kor u qaadista oo wanaagsan oo loogu talagalay in lagu gaaro heer sare iyo in laga saaro caqabadaha dugsiyada kasta dib u dhigaya. Waxaan sidoo kale ka caawin doonaa degmada inay hal-abuur samayso iyadoo adeegsanaysa teknolojiyada iyo AI si ay u qabato shaqooyinka soo noqnoqda ee macallimiinta shaqada badan leh si loo fududeeyo dareenka shakhsiyadeed ee ardayda.

## Sarah Clark



(847) 828-4057
hello@sarah4schoolboard.org
www.sarah4schoolboard.org

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Adabka, CHID, University of Washington Shahaadada Mastarka ee Siyaasadda Waxbarashada, University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Siyaasadda, Seattle Metropolitan Chamber of Commerce (Rugta Ganacsiga ee Magaalo Weynta Seattle)

**Bayaanka:** Ardaydu waxay u qalmaan hoggaamiyeyaal iskuul oo dhegaysta oo firfircoon, aan ahayn kuwo falcelin ah, marka ay go'aan qaadanayaan. *Aniga ayaa ah hoggaamiyahaas*. Sida qof ka qalin jebiyay Dugsiga Dadweynaha Seattle ahaan, haweeney midab leh oo dakhli yar leh oo ahayd jiilkii ugu horeeyay ee arday jaamacad, waxaan si dhow ula socdaa caqabadaha nidaamsan ee ardaydu kala kulmaan SPS waxaanan u dagaallami doonaa guusha dhammaan ardaydeena.

Khibraddayda nolosha, ku dhaqanka Budhiisamka, waxbarashada, iyo cunsuriyadda nidaamsan iyo dhaawacyada aan ka gudbay ayaa hagaya aragtidayda waxaana shaqo xirfadeedkayga u hibeeyay siyaasadda dadweynaha si aan ugu dagaallamo sinnaanta cunsuriyadeed ee dhabta ah ee ardayda iyo macallimiinta ee gudaha nidaamyada waxbarashada. Waxaan aaminsanahay iskaashiga iyo ka-qaybgalka bulshada, waxaanan la shaqeeyay oo u shaqeeyay bulshooyin kala duwan, oo ay ku jiraan ururada siyaasadda horumarka, ururada urur aan faa'iido doonka ahayn iyo bulshada ganacsiga.

Ka dib sannado badan oo aan daawanaayay hoos u dhaca SPS, olole aan guulaysan oo ka yimid dibadda, iyo hal sanno aan ku qaatay xafiiska si aan u fahmo dhibaatooyinka dhabta ah oo aan dhegaysto bulshadeena, waxaan aaminsanahay in *anigu aan ahay musharaxa ugu fiican ee keenaaya isbeddelka ardayda iyo waalidiinta ay rabaan oo ay u baahan yihiin*. Aragtidayda, xididdada gudaha bulshadeena iyo asalka isbeddelka nidaamyada ayaa loo baahan yahay si loo beddelo SPS. Waxaan rabnaa in ardaydeenu ay helaan ammaanka goobta, iyo taageero maskaxeed iyo mid dareen oo ay mudan yihiin, helitaan siman oo barnaamijyo iyo adeegyo tacliimeed oo heer sare ah, iyo diyaar garoow ay nolosha kula qabsadaan qalin-jebinta kadib.

Xaaladda hadda jirta ayaa joogteeysay $100M oo masiibo miisaaniyadeed ah, hoos u dhac ku yimid diiwaan gelinta iyo heerka tacliinta, kordhinta sinnaan la'aanta iyo dayacnaanta amniga ardayga. *Tani waa mid aan la aqbali karin*. Waxaan la shaqeyn doonaa bulshada, soo celin doonaa daah-furnaanta, maamulka caqliga guud, maareynta maaliyadeed, iyo siyaasadaha iyo barnaamijyada mudnaanta siinaya baahiyaha ardayda. Waxaan si qushuuc leh u weydiisanayaa codkaaga.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada 36-aad, Dimuqraadiyiinta Degmada 46-aad, Dimuqraadiyiinta Degmada King, iyo xubnaha guddiga dugsiga ee hadda iyo kuwii hore Joe Mizrahi, Gina Topp, Dick Lilly, Vivian Song-Maritz, Lisa Rivera, Stephan Blanford, Peter Maier, Michael DeBell

## Agaasimaha Degmada Lr. 2

### Kathleen Smith



kathleensmithforschoolboard@gmail.com
www.smith-for-schools.com

**Waxbarashada:** PhD ee Xisaabta University of Colorado, Boulder, BS (Shahaadada Jaamacadda) ee Xisaabta iyo Kimistariga Norwich University

**Shaqo iyo Xirfad:** Saynisyahanka Xogta, Microsoft Corporation; Macallin hore, University of Colorado, Boulder

**Bayaanka:** Ka waalid leh laba arday oo cusub oo ku biiraya SPS iyo qof Washington oo jiilal badan ahaan, waxaan u heellannahay dugsiyadeena iyo macallimiinteena. Anigoo leh sannado waayo-aragnimo ah oo ku saabsan waxbaridda fasalka, waxaan keenayaa aasaas adag oo waxbarasho ah, oo ay weheliso khibrad ku saabsan xisaabta iyo sayniska xogta si loo dhabeeyo hab-dhaqan xog ku saleysan oo falanqeyn ah oo ku saabsan go’aamada guddiga dugsiga. Shaqadayda hadda waxay diiradda saaraysaa AI iyo teknoolojiyadaha soo baxaya. Waxaan arkay tusaalooyin xiiso leh oo AI si wanaagsan loo isticmaalay laakiin sidoo kale waxaan la socdaa dhibaatooyinkeeda. Haddii la i doorto, waxaan keenni lahaa aragti qiimo leh oo ku saabsan awoodda AI ee waxbarashada.

Inkastoo aan aqoonsanahay caqabadaha dhaqaale ee horyaalla degmadeena, habka hadda ee dugsiyada loo xirayo waa mid aan loo baahnayn oo wax carqaladeeya. Intaa waxaa ka sii daran, xiritaanka dugsiyada ma aysan xallin si guul leh farqiga maalgelinta magaalooyinka kale, iyo hufnaan la’aanta go’aan qaadashada ayaa wiiqday kalsoonida bulshadeena dhexdeeda. Intaa waxaa dheer, maaraynta liiska sugitaanka oo aan caddeyn waxay wiiqaysaa kalsoonida nidaamka waxayna si been abuur ah u yarayn kartaa tirada diiwaan gelinta ee loo isticmaalo in lagu caddeeyo xiritaanka dugsiyada.

Ka waalid ahaan, waxaan ogahay in ay jiraan sababo badan oo lagu sii wado dugsiyada xaafadaha. Dugsiyada loo lugeyn karo waxay dhisaan madax-banaannida carruurta, wanaagga, iyo dareenka goobta, halka yareynta taraafikada gawaarida ay hagaajiso badbaadada oo ay fududeyso ciriiriga, taasoo faa’iido u leh qoysaska iyo bulshada. Haddii xiritaanku lama huraan yahay, waxaan rajeynayaa inaan sahmiyo isku darka dugsiyada hoose iyo dhexe ee loo beddelo hey’ado K-8 ah, oo ah qaab kale oo wax ka qaban kara sababo badan oo SPS ay sheegtay oo ku saabsan xiritaanka dugsiyada.

Ka xubinta guddiga ahaan, waxaan u ololayn doonaa hab go’aan qaadasho oo furan, wada shaqeyn leh oo aan sahmin doono xalal ka baxsan xiritaanka dugsiyada. In kasta oo isbeddelka nidaamku uu qaato wakhti, waxaan aqoonsanahay xoogagga ku jira dugsiyadeena waxaanan ujeeddadayda tahay inaan ilaaliyo waxa shaqeynaya. Waxaan dhegaysan doonaa macallimiinta, waxaan ku taageeri doonaa talooyinka siyaasadda xogta, waxaanan ka shaqeyn doonaa inaan xogta wadaagno oo aan kordhiyo hufnaanta.

Bayaannada aan bixiyo waxay matalaan aragtidayda shakhsiyadeed. Waxaan u hadlayaa naftayda mana matalaayo magaca loo-shaqeeyahayga, Microsoft Corporation.

# Agaasimaha Degmada Lr. 4

## Harsimran Kaur

Sawir lama soo gudbin

(206) 595-7612
royaltyharsimrankaur@gmail.com

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

## Gloria Suella Menchaca



(206) 609-0020
gsmenchacapublic@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda Bayoolajiga Molikiyuulka; MPH ee Caafimaadka Dadweynaha & Siyaasadda (2027 la filayo), University of Washington

**Shaqo iyo Xirfad:** Musharax Guddiga Dugsiga Seattle, Macallin Labada Luuqadood, U doodaha Bulshada, & La-taliye

**Bayaanka:** Waxbarashada dadweynaha waa maalgashiga ugu qiimaha badan iyo hantida ugu weyn ee dimuqraadiyadda. Arday kasta wuxuu u qalmaa deegaan waxbarasho oo ammaan ah, taageero leh, oo sinnaanta ku saleysan. Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle waxay u baahan yihiin hoggaan geesinimo leh. Waxaan mudnaan siin doonaa badbaadada iyo wanaagga carruurteena, waxaan si firfircoon u dhegaysan doonaa qoysaska iyo macallimiinta, waxaanan u ololayn doonaa tallaabooyin xog ogaal ah oo geesinimo leh si loo xalliyo fursadaha iyo farqiga waxbarasho.

Waxaan u tartamayaa sababtoo ah waxaan aaminsanahay degmada dugsiga oo u adeegta dhammaan ardayda, gaar ahaan kuwa si taariikhi ah ay nidaamyadeenu u faquuqeen. Anigoo ah arday noloshiisa oo dhan ku qaatay waxbarashada dadweynaha, waxaan arkay labadaba awooddeeda iyo sinaan la'aanteeda. Waxaan dhex maray nidaamyada waxbarashada gaarka ah iyo caqabadaha nidaamsan waxaanan u dagaalamay inaan ka dhabeeyo in kuwa kale helaan kheyraadka iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay ugu horumaraan.

Xirfadyahan ahaan, waxaan sameeyay cilmi baaris ku saabsan neerfaha ee MIT waxaanan hoggaamiyey hindisaha wacyigelinta bulshada ee u adeegaya qoysaska danyarta ah iyo kuwa soo galootiga ah. Waxaan isku dubariday dadaallada jawaabta degdegga ah, waxaanan barray ardayda aan si fiican loo matalin ee STEM, waxaanan u ololeeyay waaraanshaha deegaanka iyo sinnaanta adeegyada dadweynaha. Khibradahan waxay i barreen sida si qoto dheer loo dhegaysto iyo sida si istiraatiiji ah loogu abaabulo kheyraadka.

Ka Agaasimahaaga Guddiga Dugsiga ahaan, waxaan u dagaalami doonaa miisaaniyad hufan, adeegyo taageero oo xooggan oo ardayda ah, iyo ka qaybgal macno leh oo lala yeesho qoysaska dhammaan bulshada. Waxaan u ololayn doonaa siyaasado awood siiya codadka bulshada, ilaalinta daacadnimada, iyo isku dubaridka qiyaamka wadaagga ah ee xalal wax ku ool ah oo dadka u dhexeeya oo u diyaariya carruur kasta mustaqbal barwaaqo leh.

Wakhtigani wuxuu u baahan yahay hoggaan ku saleysan waayo-aragnimo nololeed iyo rumaysnaanta qotada dheer ee awoodda waxbarashada dadweynaha. Waxay ii noqon lahayd sharaf inaan u adeego bulshadaan oo aan ka qayb qaato xoojinta hey'adaha taageera qiyaamka dimuqraadiyaddeena.

Waxaan si xushmad leh kuu weydiisanayaa codkaaga.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

# Agaasimaha Degmada Lr. 4

## Joe Mizrahi



(206) 745-2010
joe@joe4schools.com
www.joe4schools.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Sharciga, University of San Diego School of Law; BA (Shahaadada Jaamacadda), Brandeis University

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Guddiga Dugsiga; Xoghaye-Khasnajiga, UFCW 3000 oo matalaya shaqaalaha safka hore

**Bayaanka:** Waxaa sharaf ii ah inaan u adeego sidii wakiilkaaga Degmada 4aad ee Guddiga Dugsiga Seattle. Ka jiilka koowaad ee Mareykan ahaan, waalidka saddex arday oo dhigta Dugsiyada Dadweynaha Seattle, iyo hoggaamiye shaqaale muddo dheer ah, waxaan keenayaa ballanqaad qoto dheer oo ku saabsan sinnaanta waxbarashada, mas'uuliyadda maaliyadeed, iyo hoggaaminta bulshada ku saleysan.

Markii la ii magacaabay wakhti ay jireen caqabado miisaaniyadeed oo waaweyn, waxaan ka faa'iideystay sannado khibrad ah oo aan ku maamulaayey miisaaniyado malaayiin doolar ah si aan ugu ololeeyo istiraatiijiyado maaliyadeed oo mas'uuliyad leh oo mudnaanta siinaya barashada ardayda iyo xasilloonida. Markii la soo jeediyay xiritaanka dugsiyo si weyn u saameyn lahaa, waxaan la shaqeeyay asxaabteyda, qoysaska, iyo shaqaalaha si aan u wajahno caqabadahaas—anigoo ka caawiyay in laga hortago carqalado burburin ah oo saameyn lahaa kumanaan arday iyo qoysas.

Koritaankeyga, oo ay weheliso waayo-aragnimada waalidiintayda oo ahaa macallimiin waxbarashada gaarka ah, waxay i bartay qiimaha waxbarashada loo dhan yahay iyo muhiimadda ah in loo dagaallamo xuquuqda carruurta oo dhan inay guuleystaan. Waxaan fahamsanahay cawaaqibka dhabta ah ee dugsiyada aan si wanaagsan loo maalgelin, waxaana iga go'an inaan ballaariyo helitaanka barnaamijyo waxbarasho iyo taageero oo tayo sare leh oo loo dhan yahay guud ahaan Seattle.

Bilowgii bilaha aan ku jiray guddiga, waxaan ka shaqeeyay xoojinta hufnaanta iyo dib u dhiska kalsoonida. Waxaan mudnaanta siiyay isgaarsiinta furan ee lala yeesho qoysaska, macallimiinta, iyo bulshooyinka dugsiyada, waxaanan si qoto dheer u dhegaystay waxa ardaydeennu u baahan yihiin si ay u barwaaqoobaan.

Waxaa iga go'an inaan sii wado shaqadaas—anigoo wax ka qabanaya dhibaatada miisaaniyadda anagoo adeegsanayna xalal sinnaanta diiradda saaraya, dhisaya iskaashi xooggan oo u dhexeeya dugsiyada iyo qoysaska, ballaarinta waxbarashada loo dhan yahay, iyo u doodista maalgelinta ardaydeennu mudan yihiin. Si wadajir, waxaan u dhisi karnaa degmo ay carruurta oo dhan ku helaan agabka ay wax ku bartaan, ku koraan, kuna gaaraan awooddooda buuxda. Si xushmad leh ayaan codkaaga u weydiisanayaa si aan u sii wado u adeegidda ardaydeenna iyo bulshooyinkeena.

*Taageerooyinka: 36aad, 46aad, iyo Dimuqraadiyiinta Degmada King ; Guddoomiyaha Gobolka Ferguson; Xildhibaan Jayapal; Xubnaha Golaha Degmada Dembowski, Mosqueda, Zahilay; Qaabka Sharci-dejinta Gobolka, Reed, Berry, Scott, Macri; Guddoomiyaha Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Seattle Topp iyo Agaasimeyaasha Clark, Hersey; Shaqaalaha Degmada King, iyo ururka shaqaalaha matalaya kumanaan qoys oo shaqeeya; iyo qaar kaloo badan!*

## Bill Campbell



(564) 225-3848
bill@billforseattle.com
www.billforseattle.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Joogtaynta Harvard University, LLM (Sharciga) UDayton, LLB ULondon, Shahaadada Mastarka Hoggaaminta WGU, Shahaadada Jaamacadda ee Dhaqaalaha WWU

**Shaqo iyo Xirfad:** Mulkiile Ganacsi Taxes for Teachers, La-taliye Xisaabaadka Joogtaynta, iyo Macallin

**Bayaanka:** Waxaan ka qalin jebiyay dugsi sare oo dadweynaha ah oo ku yaal degmo dugsi Washington ah taas oo ku guul daraysatay inay ansixiso canshuurta ku dhawwaad toban sanno. Ninkayga sidoo kale waa macallin ka tirsan Dugsiga Dadweynaha ee Seattle (SPS) waxaana ka soo jeednaa qoysas qaxooti ah. Waxaan tababarre ka ahay SPS waxaanan isku dayaa inaan u shaqeeyo sida macallin beddel ah laba toddobaad sannadkii. Sidaas darteed, waxaan si qoto dheer u fahamsanahay maamul xumo joogto ah oo ka jirta nidaamyada dugsiyadeena.

Markaan dhiganayay dugsiga sare, si aan ula dagaalamo maamul xumadan waxaan ka caawiyay aasaaska guddiga dib-u-eegista miisaaniyadda muwaadiniinta ee ugu horeeyay degmada. Guddigu wuxuu horseeday 12 sannadood oo canshuuro la ansixiyay. Si cad, codka bulshada iyo ka-qaybgalka ayaa muhiim u ah guusha dugsiga iyo ardayda.

Dhibaatada ugu weyn ee SPS waa in guddiga dugsiga uu ka tanaasullay awooddiisa oo aanu bulshada ku darin go'aamada hannaanka. Guddigu wuxuu u wareegay hal kulan dadweyne bishii halkii ay ka ahaan jirtay laba kulan oo taariikhi ah, wuxuu shaqaaleysiiyay la-taliyeyaal dibadda ah oo ka yimid Texas oo leh kharashyo aad u badan si ay u hoggaamiyaan degmada, wuxuuna ku guul daraystay inuu dhegaysto baahida waalidiinta, ardayda, iyo bulshada. Tani waa dhibaatada hoose ee horseeday miisaaniyad xumo, hoos u dhac ku yimid diiwaan gelinta, iyo barnaamijyo fashilmay.

90-ka maalmood ee ugu horeeya waxaan samayn doonaa 1) inaan soo celiyo guddiga dugsiga laba kulan oo dadweyne oo dhaqameed bishii; 2) inaan aasaaso guddiga dib-u-eegista miisaaniyadda muwaadiniinta ee SPS si bulshada loogu daro sannadlaha dib-u-eegista miisaaniyadda, talooyinka, iyo canshuuraha; 3) inaan shaqada ka eryo la-taliyeyaasha Texas; iyo 4) inaan sameeyo kulamo shakhsiyadeed ugu yaraan 100 waalid, macallimiin, iyo maamuleyaal.

Marka bulshada lala tashado, tallaabada xigta waa in dib loo qiimeeyo filashooyinka tacliinta sare, habraacyada ciqaabta oo adag haddana caddaalad ah, iyo kordhinta helitaanka dugsiyada ikhtiyaarka ah.

Waxaan ku soo barbaaray saboolnimo aad u daran, laakiin dugsiyada dadweynaha ayaa noloshayda badbaadiyay. Hadda waxaan leeyahay laba ganacsi oo yaryar waxaanan leeyahay xirfad adag oo xisaabinta ah. Ardaydeena waxay mudan yihiin fursado la mid ah. Waad ku mahadsan tahay codkaaga.

## Agaasimaha Degmada Lr. 4

### Laura Marie Rivera



(425) 835-2805
drlauramarie@gmail.com
votelauramarie.com

**Waxbarashada:** Shahaadada ugu Sareysa Jaamacadda ee Waxbarashada (Doctor of Education), Seattle University; MS Ed (Shahaadada Mastarka ee Waxbarashada) Maaraynta Aan Faa'iido Doonka Ahayn, Bank Street College NYC; BA (Shahaadada Jaamacadda) UCLA

**Shaqo iyo Xirfad:** Macallin 20+ sannadood, Aasaasaha Hey'ad Aan Faa'iido Doon Ahayn, Seattle SpecEdu PTSA, Hooyo

**Bayaanka:** Waxaan fasalladayada maanta ku haynaa mustaqbalka bulshada! Qoysaska Seattle waxay mudan yihiin hoggaan dhegaysta oo ardayda mudnaanta siiya. Marar badan, go'aannada waaweyn waxaa gaara guddi aan fahmin waxa ka dhacaya fasalladayada ama guryahayaga. Kala go'aas ayaa horseeday jahwareer, kalsooni darro, iyo siyaasado aan ka tarjumayn waxa ardayda iyo qoysaska dhab ahaan u baahan yihiin. Waxaan u tartamayaa Guddiga Dugsiga si aan u beddelo dhaqdhaqaaqaas— oo aan u keeno hufnaan, isla xisaabtan, iyo fikirka ardayda ku saleysan dib ugu soo celinta mudnaanta.

Waxaan ahay Hooyo afar carruur leh, macallin, farshaxan, iyo u ololeeye noloshayda oo dhan ardayda ka fog caddaaladda waxbarasho. Waxaan khibrad u leeyahay waxbaridda fasallo ciriiri ah, taageeridda barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo kuwa luqadaha badan, la shaqeynta qoysaska la tacaalaya caqabadaha nidaamka, si joogto ah u aqoonsashada baahiyaha shakhsiyeed, iyo ilaalinta ardayda ugu nugul iyo helitaanka barnaamijyada ikhtiyaarka ah. Waxaan arkay sida go'aannada kor ka yimaadda ay ardayda uga tagi karaan oo aan ogahay in xalalka dhabta ah ay ka bilaabmaan dhegaysiga, maaha male-awaalka.

Aniga ayaa ah macallinka keliya ee tartankan ku jira. Khibradda dhabta ah ee adduunka ayaa ka maqan hoggaanka hadda jira waxaana si degdeg ah loogu baahan yahay hadda si ka badan tii hore. Aniga oo ah qof fahmaya labadaba fasalka iyo bulshada, waxaan diyaar u ahay inaan ka faa'iideysto aragtidaas si aan u weydiiyo su'aalo wanaagsan oo aan u dalbado jawaabo fikir leh oo ardayda ku saleysan.

Tallaabooyinka dhawwaan ee guddiga ayaa ka tagay bulshooyin badan oo dareemaaya amni darro, aan la maqal, oo aan la soo dhawweyn. Waxaan u baahanahay hoggaan u qorsheynaya si mas'uuliyad leh, si cad u wada xiriira, oo mudnaanta siiya wanaagga ardayda ka hor inta aan la tixgelin danaha siyaasadeed. Waxaan noqon doonaa mid xaadir ah, la yeelan doonaa wada hadallo adag, oo aan hubin doonaa in ardayda iyo qoysaska ay leeyihiin cod dhab ah oo ku saabsan go'aannada saameeya noloshooda.

Si sharaf leh waxaa ii taageeray hoggaamiyeyaasha bulshada, macallimiinta, Kormeeraha Guud ee Gobolka Chris Reykdal, NWPC/LD36/LD11/Dimuqraadiyiinta KC iyo kuwo kale. Waxay og yihiin inaan keeno hab dhaqameed loo dhan yahay iyo rikoor muujinaya inaan soo muuqdo marka ay ugu muhiimsan tahay.


Waxaan diyaar u ahay inaan ku hoggaamiyo anshax, diirad, iyo daryeel. Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

# Ma Ogtahay?

Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ee Degmada King ayaa ah habka ugu wanaagsan ee aad si toos ah warqaddaada codbixinta ugu soo celin karto Xarunta Doorashada. Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta waa ammaan, ku habboon, oo furan ilaa daqiiqadda ugu dambeysa! Warqadaha codbixinta ee lagu soo celiyo sanduuqa lagu rido Maalinta Doorashada ayaa loo dammaanad qaadaa in loo tixgeliyo inay ku yimaadeen wakhtigii loogu talagalay haddii lagu rido sanduuqa 8:00 p.m. ka hor.


- ✓ aan la faragelin karin
- ✓ midkiiba 1000 rodol
- ✓ boolal kula xiran shubka
- ✓ dab-damiye ayaa ku dhex jira
- ✓ habab qufullo oo badan
- ✓ shaabado muujinaya faragelinta




Mar ayaa iskuul bas ku dhacay mid ka mid ah sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta!

Sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta waxba ma gaarin, laakiin Agaasimaheena Doorashooyinka, Julie Wise, waxay sheegtay, "***baska iskuulka, ma ahayn mid xaalad wanaagsan ku sugnaa.***"



# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Vivian Song



(206) 821-0168
vivian@songforseattleschools.com
www.songforseattleschools.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Harvard Business School; Shahaadada Jaamacadda Dhaqaalaha, Harvard University

**Shaqo iyo Xirfad:** Xirfadyahan Maaliyadda, Waalid Dugsiyada Dadweynaha Seattle, agaasimihii hore ee guddiga dugsiga

**Bayaanka:** Waxbarashada dadweynaha ayaa noloshayda wax ka beddeshay. Waxaan waxbarashada ku bilaabay anigoo ah arday Ingiriiska u ahaa sida Luqad Labaad ahaan oo leh naafanimo maqalka ah. Mahad waxaa leh macallimiin heellan, waxaan ahay haweeneydii ugu horeysay ee qoyskayga ka mid ah ee qaata shahaado jaamacadeed. Anigoo ah waalid arday ka dhigato Dugsiyada Dadweynaha Seattle, xirfadyahan maaliyadda, iyo Agaasimihii hore ee Guddiga Dugsiga, waxaan kor ugu kacayaa si aan u adeego wakhti ay degmadu wajahayso go'aanno waaweyn oo ku saabsan Kormeeraha cusub, hoos u dhac miisaaniyadeed oo dhan $100M, iyo jihadeeda mustaqbalka.

Waxaan la imaanayaa hoggaan degan, oo khibrad leh, xirfad miisaaniyadeed iyo maaliyadeed, iyo xidid qoto dheer oo bulshooyinka dugsiyada dhexdiisa ah si aan caqabadaha uga gudubno anagoo ilaalinayna isla-xisaabtan iyo diirad saaridda natiijooyinka ardayda. Waa in aan ilaalinaa oo aan maalgelinaa barnaamijyada ka dhigaaya ardayda kuwa wax baranaaya oo mudnaanta siinaa qorsheynta mustaqbalka fog, ee ma aha gooymaha wakhtiga gaaban. Waxaan diyaar u ahay inaan u shaqeeyo adiga iyo 49,000 arday - laga bilaabo Degmada Dhexe (Central District) ilaa Montlake, Capitol Hill ilaa Leschi, iyo dhammaan xaafadaha Seattle.

Waa tan waxa aan samayn doono: *Keenista caddeyn iyo kormeer ku aaddan miisaaniyaddeena* si loo xaqiijiyo sinnaanta, isla xisaabtanka, iyo deganaanshaha. *Ilaalinta dugsiyada* laga bilaabo gooyn aan sabab lahayn iyo qorsheyaasha xiritaanka. *Raadinta heerka sare xagga tacliinta dhammaan carruurta*, waxbarasho gaar ah oo loo dhan yahay, barasho heer sare leh, dariiqooyinka xirfadeed. *Maalgelinta caafimaadka dhimirka*, ka hortagga rabshadaha hubka, iyo badbaadada dugsiyada. *Ka hortagga weerarrada Trump* ee ka dhanka ah dugsiyadeena, ardayda LGBTQ+, iyo qoysaska aniga oo kale ah oo dalkaan u yimid inay waxbarasho iyo fursado raadsadaan.

Waxaan mudan nahay dugsiyo diyaariya *ilmo kasta* si uu u gaaro awooddiisa. Anigoo leh waayo-aragnimo, xiriir bulsho, iyo aaminsanaan qoto dheer oo ku saabsan awoodda waxbarashada dadweynaha, waxaan diyaar u ahay inaan gacan ka geysto sidii aan horey noogu hoggaamin lahaa.

Sharaf bay ii ahaan lahayd inaan kasbado taageeradaada iyo codkaaga.

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada King; Hoggaamiyaha Aqlabiyadda Senatka Jamie Pedersen; Duqa Magaalada Bruce Harrell; Xubinta Golaha Magaalada Joy Hollingsworth; Xubinta Golaha Degmada Teresa Mosqueda; Guddoomiyaha Golaha SPS Gina Topp; Agaasimeyaasha Sarah Clark, Joe Mizrah; Kay Smith-Blum, Lisa Rivera (hore); ardayda, waalidiinta, bareyaasha, iyo madaxda bulshada!

## Vivian van Gelder



(360) 386-2124
vivforfive@icloud.com
vangelderforschoolboard.org

**Waxbarashada:** B.A. (Shahaadada Jaamacadda), LL.B.; Shahaadada Maaliyadda Waxbarashada

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Siyaasadda iyo Cilmi-baarista ee Isbaheysiga Waxbarashada Koonfur-bari Seattle (Southeast Seattle Education Coalition)

**Bayaanka:** Sida waalid, u doode bulsho, hoggaamiyihii hore ee PTA-ga iyo khabiirka siyaasadda waxbarashada, waan ogahay waxa loo baahan yahay in isbeddel dhab ah lagu sameeyo dugsiyadeena. Haddii la ii doorto Guddiga Dugsiga Seattle, waxaan gacan ka geysan doonaa dib u dhiska degmadeena si aan u xaqiijiyo waxbarasho tayo sare leh u ah dhammaan ardaydeena.

Hadda, degmadeenu ma buuxiso baahiyaha ardayda oo dhan. Waan beddeli karnaa nidaamkaan xumaaday. Waxaan dhawwaan daabacay warbixin si wanaagsan loo qaabilay oo tafaasiilaysa sida ay dhibaatooyinka degmadeenu u horumareen afartankii sanno ee la soo dhaafay, waxaanan abuuray khariiradda loo maro mustaqbal wanaagsan. Waxaan fahamsanahay sida aan ku gaarnay halka aan maanta joogno, waxaana ogahay niyad-jabka haysta dadka doonaya inay si wanaagsan ugu adeegaan ardaydeena ayagoo adeegsanaya nidaam aan guul loo habaynin. Waan awoodnaa waana inaan samaynaa si ka wanaagsan.

Waa wakhtigii isbeddelka. Degmadeena dugsiga waxay taagan tahay marxalad xasaasi ah, waxaanan u baahanahay dad cusub oo ku jira guddiga kuwaas oo nagu hagi kara mustaqbal rajo leh u ah dhammaan ardayda Seattle. Waxaan u baahan nahay wax ka badan musharax ujeeddo wanaagsan leh; waxaan u baahan nahay musharax aqoon u leh si uu ujeeddooyinka wanaagsan uga dhigo dugsiyo guulaysta.

Sharaf ayay ii ahaan lahayd inaan kasbado codkaaga.

# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Landon Labosky



(559) 797-5738
landonlabosky@gmail.com
landonforschools.com

**Waxbarashada:** Boise State University: Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha - Siyaasadda Gobolka iyo Deegaanka; Shahaadada Jaamacadda ee Isgaarsiinta

**Shaqo iyo Xirfad:** Maareeye, Biyaha - Magaalada Covington

**Bayaanka:** Waxaan ahay wiil ku faanaya oo ay dhalleen laba macallin oo noloshooda oo dhan wax barayay iyo qof ka soo baxay ka soo baxay dugsiyada dadweynaha—laga soo bilaabo waxbarashada goorta hore ilaa aan isa geeyay oo ka qalin jebiyay jaamacadda. Khibraddaydu waxay i tusisay qiimaha nidaam adag oo waxbarasho dadweyne leh, sidoo kale waxaan arkay cawaaqibka marka aan ku guuldarreysano maalgelinta dhallinyaradeena.

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay wajahayaan hoos u dhac dakhli miisaaniyadda oo ah $90+ milyan sannadka miisaaniyadda 2025–2026. Guddiga dugsiga ee hadda jira waxaa loo soo bandhigay fursado xaddidan: xiritaanka dugsiyada, dhimmista shaqaalaha si toos ah u taageera ardayda, ama isticmaalka xalal wakhti-gaaban ah oo iska indha-tira arrimaha nidaamka. Tani waa mid aan la aqbali karin. Bulshadeenu waxay u qalantaa hoggaan geesinimo leh, ka jawaabaya, iyo aragti xalal wakhti-dheer ah.

In ka badan toban sanno, waxaan ka shaqeynayay horumarinta dhallinyarada iyo u doodista. Waxaan maamulay miisaaniyado adag oo hoggaamiyey kooxo waxqabad sare leh iyada oo loo maraayo caqabado adag. Khibradahan waxay ii diyaariyeen inaan ka adeego Guddiga Dugsiga Seattle anigoo leh daacadnimo iyo degdeg. Waxaan mudnaan siin doonaa: Dhegaysiga ardayda iyo qoysaska ku saabsan baahidooda gaarka ah ee goob kasta oo dugsi ah. Tani waa inay noqotaa diiradda ugu weyn ee hore loo sii wado. Abuurista miisaaniyad hufan oo la fahmi karo. Bulshadeenu waxay u qalantaa caddeyn iyo isla xisaabtan ku saabsan sida doolarada dadweynaha loo isticmaalo. La shaqeynta Magaalada Seattle iyo Degmada King si loo hagaajiyo amniga dugsiyada. Arday ama waalidna waa inuusan ka cabsan amnigiisa dugsiga, shaqadanna waxay u baahan tahay iskaashi ka dhexeeya hey'adaha.

Haddii aan helo codkaaga, waxaan beddeli karnaa jihada degmada dugsigeena. Waxaan kordhin karnaa diiwaan gelinta, waxaan la kulmi karnaa baahiyaha *arday kasta*, waxaanan dhisi karnaa nidaam dugsi dadweyne oo barwaaqo ah, caddaalad ah—laakiin keligay ma samayn karo tan. Waxaan u baahan doonaa taageeradaada.

Waxaa sharaf ii ah inaan taageero goor hore ka helo LGBTQ+ Victory Fund, Freedom From Religion Foundation (Ururka Xorriyad Ka Ahaanshaha Diinta), iyo Democratic Municipal Officials (Saraakiisha Dowladda Hoose ee Dimuqraadiga). Aan wada shaqeyno si aan u dhisno mustaqbalka ay ardaydeenu u qalmaan.

## Allycea Weil



(480) 703-6359
allyceab@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Isgaarsiinta

**Shaqo iyo Xirfad:** Filim Sameeye

**Bayaanka:** Carruur kasta waxay mudan yihiin in la arko, la taageero, oo loo diyaariyo guul — ayadoon loo eegin lambarka zib-koodkooda ama asalkooda. Waxaan ahay waalid muddo dheer ku jiray Dugsiga Dadweynaha Seattle, u doode xooggan ee sinnaanta, iyo qof garanaya waxa ay tahay in lagu koro xaalad hoy la'aan ah, guryo shelefyaashiisa ay eber yihiin, iyo macallimiin sameeyay dhammaan wax walba oo beddel ah.

Waxaan u tartamayaa guddiga dugsiga sababtoo ah SPS waa mid ku jira xaalad dhibaato ah — carruurtayaduna ma awoodi karaan isbeddelka hoggaanka, khaladaadka miisaaniyadda, ama kalsoonida luntay. Qoysasku waxay dareemeen in degmada ay ku xadgudubtay oo ay dayacday. Waxay la kulmeen liisaska sugitaanka, xuduudaha isbeddelaya, hanjabaadaha xiritaanka, iyo waayo-aragnimada waxbarashada fog ee muuqaalka ah oo sii xoojisay sinnaan la'aanta. Waxaan u baahanahay hoggaan degdeg ah oo lala xisaabtami karo.

Waxaan la dagaalami doonaa in aan xasilliyo hoggaanka, barnaamijyada sinnaanta diiradda saaraya, inaan ilaaliyo jarista miisaaniyadda, oo aan keeno daah furnaan go'aannada miisaaniyadda iyo diiwaan gelinta. Waxaan la shaqeyn doonaa macallimiinta, qoysaska, dowladda, dadweynaha, iyo ardayda laftooda si aan degmada uga dhisno gudaha.

Shaqadaan aniga iguma aha mid aan macno lahayn. Waxaan ku soo noolaaday dhibicyada xogta aan uga hadalno shirarka. Waxaan carruurtayda ku socodsiiyay nidaamkan. Waan ogahay waxa khatar ku jira. Wadajir, waxaan dhisi karnaa degmo waarta, hal-abuur leh, oo si qoto dheer ugu xiran caddaaladda. Waxaan diyaar u ahay inaan shaqada bilaabo.

# Agaasimaha Degmada Lr. 5

## Julissa Sanchez



comunidad@julissaparaeducacion.com
www.julissaparaeducacion.com

**Waxbarashada:** BA (Shahaadada Jaamacadda) Daraasaadka Latin America, Laba Taqasus Yar Xuquuqda Aadanaha & Sharciga, Bulshada, & Caddaaladda ee UW

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha U Dooditaanka, Choose180; Waalid; Xubin Guddiga; Kormeeraha Kiraysteyaasha Seattle

**Bayaanka:** *Arrimaha Horyaalla Dugsiyada Dadweynaha Seattle*

Dugsiyadeena dadweynaha waxay ku jiraan marxalad isbeddel ah. Qoysaska ku nool degmadeena — oo ka kooban dhammaan jinsiyadaha, luqadaha, iyo heerarka dakhliga — waxay rabaan dugsiyo ay carruurtooda ku nabad galaan, lagu dhiirigeliyo, looguna diyaariyo mustaqbalka. Ardayda ka soo jeeda bulshooyinka soo galootiga ah, Madowga, Kafeyga, iyo kuwa ku hadla luqado badan waxay keenaan aragtiyo qiimo leh, waaayo-aragnimo, iyo xoogag dhaqan oo kobciya dugsiyadeena. Waxaan aaminsanahay in marka aan ku dhisno xoogagga dhammaan ardaydeena, waxaan abuurnaa deegaan uu carruur walba ku barwaaqoobi karo.

*Yaan ahay, Julissa Sanchez*

Waxaan u tartamayaa sababtoo ah waan garanayaa waxa ay tahay in lagu koro dugsiyadeena iyadoo aad dareemayso inaan lagu arkayn. Waxaan ahay arday hore oo ESL ah, gabadha waalid soo galooti ah iyo Mexican American Chicana, iyo qof ku nool guri kira ah oo ku soo barbaaray Degmada Dhexe (Central District).

Anigoo ah qalin-jabiye ka baxay SPS Interagency Academy, waxaan si toos ah u fahamsanahay caqabadaha ay ardaydu la kulmaan. Wiilkaygu wuxuu ka diiwaan gashan yahay Garfield HS. Doorkayga CHOOSE180, waxaan hoggaamiyaa dadaallada lagu awoodsiinayo dhallinyarada, lagu ololeynayo dib-u-habeynta siyaasadda, laguna abuurro isbeddel nidaamsan, anigoo hubinaya in dhammaan ardaydu helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan.

Sida arday badan oo maanta jira, waxaan maray nidaam dugsiyeed aan aniga ii qaabeysnayn — halkaas oo kartidayda inta badan la iska indho tiray. Waxaan u tartamayaa sababtoo ah waxaan rabaa wax ka duwan ardayda maanta: dugsiyo uu carruur walba dareemo in la arkayo, la taageerayo, lana awoodsiinayo inuu guuleysto. *Ballanqaadkayga ku aaddan Bulshada* Waxaan ka shaqeyn doonaa sidii aan u dhisi lahaa kalsoonida u dhexeysa degmada iyo bulshooyinka aan u adeego. Waxaan fahamsanahay xoogga bulshada iyo muhiimadda ay leedahay ka mid ahaanshaha iyo daah furnaanta. Waxaan guddiga u keenni doonaa hoggaamin laba-luqadood ah, laba-dhaqan ah, anigoo si firfircoon u dhegaysanaya dhallinyarada iyo qoysaska, anigoo ka dhabeynaya in degmada ay tahay mid ay ula xisaabtami karaan. Waxaan u heellan nahay in aan abuurro siyaasado ka tarjumaya codadka dhallinyarada iyo qoysaska, anigoo ka dhabeynaya in go'aan walba uu mudnaanta siiyo baahidooda. Waxaan rajeynayaa inaan kasbado codkaaga.

## Janis White



(206) 601-2448
hi@janisforseattleschools.com
www.janisforseattleschools.com

**Waxbarashada:** JD (Shahaadada Sharciga), Boston University School of Law; BA (Shahaadada Jaamacadda) ee Taariikhda, Oberlin College

**Shaqo iyo Xirfad:** U Doodaha iyo Aasaasaha Naafanimada, All Youth Belong; Qareen Maxkamadeed, Fidelity

**Bayaanka:** Dugsiyadu waa inay noqdaan meelo uu ilmo walba awood u yeesho inuu ku guuleysto. Waxaan u tartamayaa inaan loolan ku sameeyo xaaladda hadda jirta, inaan mas'uuliyiinta la xisaabtamo, oo aan dadka isu keeno si aan xalal u helno.

Waxaan wajahaynaa dhibaato miisaaniyadeed. Nasiib darro, degmada waxay horey u soo jeedisay in la xiro dugsiyo badan, oo ay ku jiraan TOPS K-8 halkaas oo carruurtaydu ay dugsiga ka dhigteen, aniguna aan u shaqeeyay ka Guddoomiyaha Golaha Goobta ahaan. Ka agaasimaheena Guddiga Dugsiga ahaan waxaan u dagaalami doonaa miisaaniyad hufan, oo diiradda lagu saarayo wada shaqeyn hore, macno leh, iyo mid joogto ah oo lala yeesho bulshooyinka ay saamaysay, si aan uga fogaanno xiritaanka dugsiyada burburka leh.

Xiritaanka barnaamijyada Guusha Sare waxay horseedayaan hoos u dhac ku yimaada diiwaan gelinta taas oo sii xumeyneysa arrimaha miisaaniyadda. Waxaan ka shaqeyn doonaa inaan dib u soo celiyo barnaamijyadaan oo aan ku sii hayo carruurta ugu badan ee suurto galka ah nidaamka dugsiyadeena dadweynaha.

1 ka mid ah 5 carruurta ku jirta dugsiyadeena K-12 waxay la halgamayaan walwal, niyad-jab iyo caqabado kale oo caafimaadka maskaxda ah. Bixinta la-taliyeyaal caafimaadka maskaxda oo badan, kordhinta helitaanka daaweynta kooxeed, iyo wax ka qabashada isticmaalka taleefannada gacanta ee dugsiyada waa mudnaanta ugu sareysa.

Anigoo ah waalid leh arday naafo ah, waxaan si toos ah u arkay sida Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle ay inta badan ugu guuldareysteen inay daboolaan baahiyaha dhammaan ardayda, ayadoon loo eegin asalkooda ama awoodahooda. Macallimiinta, shaqaalaha, iyo maamuleyaasha waxay rabaan inay sameeyaan waxa saxda ah– laakiin waxay u baahan yihiin hagitaan iyo taageero xooggan. Waxaan keenni doonaa waayo-aragnimo taageeridda carruurta naafada ah oo aad loogu baahan yahay Guddiga Dugsiga.

Haddii ay tahay sidii Guddoomiyaha Guddiga Waxbarashada Gaarka ah ee Seattle PTSA ama aasaasidda urur aan faa'iido doon ahayn si loo kordhiyo ka mid noqoshada iyo meel lahaanshaha dhallinyarada naafada ah, waxaan u dagaalamaayay ardayda iyo qoysaska Seattle in ka badan labaatan sanno. Si wadajir, waxaan u taageeri karnaa dhammaan ardayda si ay u gaaraan guul. Taageerooyinka: Dhammaan taageerooyinka ka eeg barta https://www.janisforseattleschools.com

# Agaasimaha Degmada Lr. 3

## Charles Simpson



**Waxbarashada:** Wax Ku Bartay Dugsiga Tukwila

**Shaqo iyo Xirfad:** Furaha Gawaarida

**Bayaanka:** Magacaygu waa Charles Simpson, waxaana sharaf ii ah inaan u adeego anigoo ah Madaxweyne Ku-xigeenka Guddiga Degmada Dugsiga Tukwila. Anigoo leh ballan qaad qoto dheer oo ku aaddan bulshadeena diiraddana saarayo mas'uuliyadda maaliyadeed, waxaan u heellannahay in aan hubiyo in arday kasta uu helo waxbarasho tayo sare leh oo ku jirta deegaan ammaan ah oo taageero leh.

Doorkayga, waxaan mudnaanta siiyay:

Miisaaniyad Isku Dheelitiran: Hoggaaminta degmadeena iyada oo loo maraayo caqabado dhaqaale iyadoo diiradda la saarayo joogtaynta iyo qaybinta kheyraadka oo si toos ah ugu faa'iideeya ardayda iyo macallimiinta. Hufnaan iyo Isla Xisaabtan: Kobcinta isgaarsiinta furan ee lala yeesho qoysaska, shaqaalaha, iyo bulshada si loo dhiso kalsooni loona hubiyo in go'aannada ay ka tarjumayaan qiyaamka aan wadaagno. Si wadajir, waxaan sii wadi karnaa inaan dhisno degmo dhaqaale ahaan xasilloon oo guusha u diyaariya dhammaan ardayda. Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa taageeradaada joogtada ah inta aan u shaqeynayno mustaqbal ifaaya oo u wanaagsan ardaydeena iyo bulshadeena. Si daacadnimo leh, Charles Simpson Madaxweyne Ku-xigeenka, Guddiga Degmada Dugsiga Tukwila

## Ara Papyan



(206) 941-0958
Email.Araik@gmail.com

**Waxbarashada:** Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Ganacsiga, University of Washington, Tacoma; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Seattle University

**Shaqo iyo Xirfad:** Agaasimaha Miisaaniyadda iyo Hawlgallada, Seattle University

**Bayaanka:** Waxaan ku soo barbaaray Tukwila, wax ku bartay Tukwila, welina magaaladaan ayaan ugu yeeraa gurigayga. Laga soo bilaabo dugsiga hoose ilaa Foster High, dugsiyadeennu waxay gacan ka geysteen qaabaynta qofka aan ahay. Waxaan u tartamayaa Guddiga Dugsiga si aan u hubiyo in arday kasta uu helo fursad uu ku najaxo kuna dhex jiro jawi waxbarasho oo ammaan ah, taageero leh, oo u diyaarsan mustaqbalka, anigoo samaynaya go'aanno kharash-ku-ool ah oo xoojinaaya dugsiyadeena iyada oo aan tayada la dhimmayn.

In ka badan toban sanno, waxaan hoggaaminayay istiraatijiyadda maaliyadeed iyo hawlgalka ee waxbarashada sare. Hadda waxaan maamulaa miisaaniyado malaayiin doolar ah oo ka socda Seattle University. Iyadoo dugsiyada Tukwila ay wajahayaan dhibaato weyn oo miisaaniyadeed, waxaan u baahanahay ma aha hoggaan leh khibrad xisaabeed oo keliya laakiin sidoo kale si qoto dheer u daneeya dadka ka dambeeya.

Degmadeenu waxay wajahaysaa dhibaato dhaqaale oo halis ah. Waxaan u baahanahay hoggaan xog-ogaal ah si loo soo celiyo xasilloonida, loo qaato hal-abuurka, loona dhiso waddooyin guul. Ardayda heer sare ah waxay mudan yihiin inay helaan koorsooyin adag, teknolojiyada casriga ah, iyo barnaamijyo u diyaariya jaamacadda iyo suuqa shaqada. Webseedka: Papyan.Carrd.Co

## Brandon Eastman



**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Bayaanka:** Waxaan u tartamayaa inaan matalo waalidiinta iyo qoysaska ee guud ahaan TSD. Waxaan ka soo qayb galay ku dhawwaad kulan kasta oo guddiga dugsiga ah labadii sanno ee la soo dhaafay waxaanan ka shaqeeyay inaan fahmo caqabadaha maalgelinta degmada iyo xaqiiqada miisaaniyadda. Markaan hore ugu sii dhaqaaqno dhanka dib-u-dhiska, waxaan aaminsanahay inay muhiim tahay in waalidiinta iyo ardaydu ay cod ku yeeshaan qaabaynta mustaqbalkaas.

Hadda waxaan u adeegaa sidii hoggaamiyaha Guddiga La-talinta Waalidiinta, halkaas oo aan ku matalo qoysaska oo aan la wadaago walaacooda iyo rajadooda. Anigoo leh saddex gabdhood oo yaryar, waxaan ka mid ahaan doonaa bulshada TSD sannado badan waxaana iga go'an inaan ka caawiyo abuurista mustaqbal adag, oo loo wada dhan yahay dhammaan ardayda.

Waxaan runtii bartay inaan qiimeeyo sida TSD ay u tahay mid gaar ah waxaanan ka dhigtay mudnaanta inaan taageero bulshadeeda firfircoon oo daryeelka leh, waxaana sharaf ii noqon lahayd inaan u ololeeyo anigoo ah Agaasimaha Guddiga Dugsiga.

## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Jeff Coop

Sawir lama soo gudbin

qwertyhood@yahoo.com


Wax bayaan ah lama soo gudbin.

### Travis Baker

Sawir lama soo gudbin


(206) 427-8629
travieb1@gmail.com
www.travisbakerdesign.com

Wax bayaan ah lama soo gudbin.



## Guddoomiye Jagada Lr. 2

### Juan Juarez



(253) 350-6485
Juanspolitical@gmail.com
electjuan.godaddysites.com

**Waxbarashada:** Ku daba jira B.S. (Shahaadada Jaamacadda) ee Isgaarsiinta, Western Governors University

**Shaqo iyo Xirfad:** Isgaarsiinta, Golaha Sharci-dejinta ee Gobolka Washington; Tababaraha Khudbadaha iyo Doodaha

**Bayaanka:** Sannado badan ku lug lahaa hoggaaminta madaniga ah iyo adeegga isagoo ahaa guddoomiyaha magaalada Federal Way, Juan wuxuu si toos ah u arkay sida kaabayaasha muhiimka ah iyo maamul daah furan ay muhiim ugu yihiin dhisidda bulshooyin barwaaqo ah oo qoysasku ku horumari karaan. Khibraddiisa isgaarsiinta dowladda, wacyigelinta dadweynaha, iyo hoggaaminta bulshada ayaa u diyaarisay inuu si wax ku ool ah kuugo adeego sida Guddoomiyaha Biyaha iyo Bullaacadda Lakehaven.

Ka guddoomiyehaaga ahaan, wuxuu ka dhabeyn doonaa in Lakehaven ay ilaaliso mas'uuliyaddeeda maaliyadeed iyadoo si xikmad leh u maalgelinaysa kaabayaasha keenaaya biyo nadiif ah iyo adeeg lagu kalsoonaan karo gurigaaga maalin kasta. Shaqadiisa ku aaddan turjumaadda agabka siyaasadda ayaa siisay aqoon toos ah oo ku saabsan hawlaha dowladda iyo isgaarsiincad oo u dhexeysa adeegyada dadweynaha iyo deganeyaasha.

Khibraddiisa ololaha iyo asalkiisa dhinca khudbadaha iyo doodaha ayaa xoojisay kartidiisa uu si wax ku ool ah ugu ololeeyo siyaasado faa'iido u leh bulshadeena. Maadaama uu yahay arday hadda ka tirsan Western Governors University, wuxuu fahamsan yahay maareynta mas'uuliyadda leh ee kheyraadka dadweynaha.

Iyada oo uu leeyahay waayo-aragnimo isgaarsiineed oo dowladeed, karti laba-luqadood ah, iyo u heellan matallaad hufan, wuxuu diyaar u yahay inuu ka dhabeeyo in Lakehaven ay sii waddo bixinta adeeg la isku halleyn karo oo la awoodi karo. Si wadajir ah, waxaan ku ilaalin karnaa Lakehaven xaalad dhaqaale oo adag anagoo hubinayna in deganeyaasha oo dhan ay helaan biyo nadiif ah oo ammaan ah. Dooro Juan Juarez si uu u fuliyo ballanqaadyadan.

### Ilya Kukhar



(206) 981-7569
Justheilya@gmail.com

**Waxbarashada:** Caqligal Guud

**Shaqo iyo Xirfad:** Tirtiraha Macno-darrada

**Bayaanka:** Ii codee ama haddii kale waxaad doonaysaa biyo wasakh ah.

# Guddoomiye Jagada Lr. 4

## Daniel Kukhar



d.kukhar95@gmail.com

**Waxbarashada:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

**Shaqo iyo Xirfad:** Madaxweynaha, Kukhr's Build Inc

**Bayaanka:** Waxaan u heellannahay ilaalinta tayada biyaha ee aadka u wanaagsan iyo qiimaha jaban ee bulshadeena. Dhadhanka biyaheena waa kuwo aad u wanaagsan, taasoo ka tarjumaysa shaqada cajiibka ah ee ay qabtaan shaqaalaheena xirfadda leh iyo kuwa aqoonta leh oo si xirfad leh u maamula nidaamyada biyaheena iyo bulaacaddeena. Waxay qabtaan shaqo weyn, mana lihi ujeeddo ah inaan farageliyo guushooda la xaqiijiyay. Sida qof soo galooti ahaan, si qoto dheer ayaan u fahmayaa caqabadaha ku jira kharashka nolosha oo sareeya iyo naf-hurnimada qoysaska sameeyaan marka qiimuhu kordho. Iyadoo sicir bararka uu sii kordhinayo kharashaadka qof walba, ujeeddadayda ugu weyn aniga oo ah guddoomiye waxay noqon doontaa in aan heerarka biyaha joogteeyo, anigoo hubinaaya in deganeyaasha ay sii wadaan inay helaan biyo tayo sare leh iyada oo aan lagu darin culays dhaqaale. Ii codee si aad u taageerto wax la awoodi karo, heer-sareeya, iyo koox xirfad leh ee ka dhigaaya nidaamyadeena kuwo si habsami leh u socda.

## Laura Belvin



laura@belvins.net
www.belvins.net

**Waxbarashada:** Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, California Baptist, 2019, M.S. (Shahaadada Mastarka) Injineernimada Madaniga ah, UW 1988, B.S.C.E, 1985

**Shaqo iyo Xirfad:** Guddoomiyaha Lakehaven, hore xirfadyahan injineer madani, mulkiile ganacsi aan faa'iido doon ahayn, macallin

**Bayaanka:**

Waxay ahayd sharaf inaan idiin ku adeego sida Guddoomiyahaagii Lakehaven ee shantii sannadood ee la soo dhaafay. Waxaan aad u xiiseeyaa biyaha iyo bulshada Federal Way. Waxaan keenayaa xirfado ku saabsan maamulka dadweynaha, injineernimada, hoggaaminta iyo adeegga bulshada si aan u hoggaamiyo adeegga tamarta.

Waxaan ku haynay heerarkayaga kuwa ugu hooseeya gobolka, waxaana helnay qiimeynta curaarta ee AAA oo aan u helnay anagoo dhaqan gelinay siyaasado maaliyadeed oo wanaagsan.

Adeegga tamarta wuxuu u baahan yahay hoggaan adag, caqli-gal ah, oo aqoon leh kuwaas oo fahmaya baahiyaha bulshada. Waxaan ahay xirfadyahan injineer ah oo lehleh shahaadada mastarka ee Maamulka Dadweynaha iyo Injineernimada Madaniga ah (oo diiradda saaraya haydaroolikyada iyo haydaroolaji). Injineernimada wanaagsan iyo qorsheynta waa muhiim si loo helo adeeg biyo iyo bullaacad lagu kalsoonaan karo oo aan dhammaanteen ku raaxaysanno, waxaana aragtidaan ku soo bandhigayaa guddiga.

Waxaan danaynayaa macaamiisheena, waxaanan si adag uga shaqeeyaa in aan horumariyo siyaasado buuxiya baahiyaha, oo na ilaaliya oo na wargeliya. Waxaan u adeegay bulshada sida ka guddoomiyaha Guddiga Jardiinooyinka ee Federal Way, waxaana hoggaamiyey dhowr urur bulsho oo aan faa'iido doon ahayn in ka badan 30 sannadood. Waxaan ku dhiirranahay inaan bixiyo adeeg weyn oo aan ilaalino hantideena iyadoo la adeegsanayo heerar macquul ah. Waxaan si xushmad leh u weydiisanayaa codkaaga si aan u sii wado u adeeggida Federal Way ee Guddiga Lakehaven.

# Guddoomiye Jagada Lr. 4

## Shura Grigorenko



**Waxbarashada:** Waxay Maareynta Ganacsiga & Suuqgeynta ka baratay University of Washington


**Shaqo iyo Xirfad:** Maamulka & Suuqgeynta ee halka BM

**Bayaanka:** Waxaan ahay Shura Grigorenko, waxaanan u tartamayaa inaan idiinku adeego sida Guddoomiyaha Biyaha & Bullaacadda ee Lakehaven, Jagada 4aad ee xiga ahaan. Waxaan kasoo haajiray Ukraine sannadkii 2000, ku koray aagga Federal Way/Auburn, waxaa iga go'an in aan ilaalino adeegyada muhiimka ah oo ammaan ah, la awoodi karo, oo la isku halayn karo.

Waxaan Maamulka Ganacsiga iyo Suuqgeynta ka bartay University of Washington waxaana hadda ka shaqeeyaa Maamulka & Suuqgeynta ee halka Boyko Motors ee Federal Way. Asalka shaqadayda waxaa ka mid ah waayo-aragnimo ku saabsan ilaalinta tayada, adeegga macaamiisha, iyo hoggaaminta- xirfadaha aan guddiga la imaan doono si loo hubiyo isla xisaabtanka iyo go'aan qaadashada caqliga leh.

Wixii shaqada ka baxsan, waxaan ku xirannahau bulshadeena anigoo u maraaya kaniisadda iyo dadaallada mutadacnimada ee maxalliga ah. Sida qof xaas qaba iyo aabbe ahaan, waxaan si qoto dheer u daneeyaa mustaqbalka gobolkeena waxaanan rabaa inaan ka dhabeeyo in si wanaagsan loogu diyaariyo jiilka soo socda.

Haddii la i doorto, waxaan diiradda saari doonaa: Ilaalinta tayada biyaha iyo kaabayaasha; Isticmaalka dakhliga lacag bixiyeyaasha si mas'uuliyad leh; Qorsheynta horumar waara oo mustaqbalka ah ma ihi siyaasi- Waxaan ahay deriskaaga, waxaanan diyaar u ahay inaan kuu adeego, waxay ii ahaan lahayd sharaf inaan kasbado codkaaga. U Codee Shura Grigorenko ee ku aaddan Guddoomiyaha, Jagada 4aad



## Degmooyinka Ujeeddada Gaarka ah ayaa si **Dheeraad Khaas** u ah

Doorasho kasta, codbixiyeyaasha ayaa awooda inay codkooda ka dhigaan mid la maqlo oo ku aaddan cidda ay jecel yihiin inay ku matalaan heerarka kala duwan ee dowladda. Doorashooyinka maxalliga ah ayaa siiya codbixiyeyaasha fursad ay ku doortaan cidda ku matali lahayd dowladda hoose, ka bilaabato degmada iyo xubnaha golaha magaalada, ilaa iyo duqa magaalooyinka.

Degmooyinka Ujeeddada Gaarka ah waa qaybo khaas ah oo ka tirsan dowladdeena hoose. Degmooyinkani waxay bulshooyinkeena u qabtaan hawlo gaar ah, ka bilaabato jardiinooyinka ilaa iyo korontada. Marka ay codbixiyeyaashu doortaan wakiillada Degmooyinkooda Ujeeddada Gaarka ah, waxay saamayn muhiim oo lagama maarmaan ah ku yeelanayaan bulshadooda.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Canshuurta Jardiinooyinka, Madadaalada, Waddooyinka Socodka, iyo Goobta Furan

Golaha Degmada King ayaa hirgeliyay Xeerka Lr. 19922 oo beddelaaya canshuurta jardiinooyinka ee wakhtigeedu dhammaanayso. Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay taageeraysaa jardiinooyinka degmada, magaalada, degmada jardiinka, iyo jardiinooyinka tuulada, goobta furan, iyo waddooyinka socodka; madadaalada; barkadaha dadweynaha; iyo goobaha waxbarashada iyo madaniga ah. Waxay oggolaanaysaa canshuur hanti oo lix-sanno oo dheeraad ah oo bilaabanaysa 2026 oo ah $0.2329 ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay, waxay isticmaalaysaa caddadka canshuurta ee 2026 si loo xisaabiyo kororyada sannadlaha ah ee 2027-2031 oo loo maraayo sicir bararka Degmada King oo lagu daray tusmada tirada dadka ama xaddidaadda cutubka 84.55 RCW, hadba midka ugu weyn, waxayna ka dhaafaysaa waayeellada, halyeeyadii hore, iyo dadka naafada ah ee u qalma sida waafaqsan RCW 84.36.381. Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

*Qoraalka cabbirkan oo dhammeystiran ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 98.*

Waxaad u codeynaysaa inaad
**Ansixiso ama Diido**
Soo Jeedinta Lr.1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Soo jeedinta 1 waxay oggolaanaysaa soo rogista canshuur hanti oo dheeraad ah si loogu beddelo canshuur wakhtigeedu dhammaanayso waxayna maalgelin doontaa nidaamka Degmada King ee jardiinooyinka, waddooyinka socodka, iyo meelaha furan. Dakhliga canshuurta waxaa sidoo kale loo isticmaali doonaa hawlgallada, dayactirka, iyo mashaariicda horumarinta xarumaha ee jardiinooyinka degmada, magaalada, tuulada, iyo aagga jardiinooyinka, iyo sidoo kale barnaamijyada deeqaha iyo iskaashiga bulshada guud ahaan Degmada oo taageeraya bulshooyin caafimaad qaba iyo jardiinooyin, xarumaha dabaasha, ilaalinta garoomada kubadda iyo helitaanka, adkeysiga cimilada, iyo ciyaaraha dhallinyarada iyo kuwa bilowga ah. Canshuurta waxay sidoo kale bixin doontaa maalgelinta Beerta Xayawaanka ee Woodland Park; Seattle Aquarium; Garoonka Memorial; Jardiinka Waterfront ee Seattle; Xarunta Sayniska ee Baasifigga; xarumaha madadaalada; iyo iibsashada, ilaalinta, iyo maamulidda meelaha furan iyo kaymaha oo dheeraad ah.

Canshuurta ayaa socon doonta muddo lix sanno ah laga bilaabo 2026. Qiimaha sannadka koowaad ayaa ku koobnaan doona wax xoogaa ka badan 23 senti ($0.2329) oo ka mid ah halkii kun ee doolar ($1,000) ee qiimeynta la qiimeeyay ee sannadkii ka horeeyay. Hanti leh qiimeyn la qiimeeyay oo ah $844,000, qiimaha ugu badan wuxuu noqon doonaa qiyaastii $16.38 bishii sannadka ugu horeeya. Caddadka lacagta canshuurta la soo ururiyo sannadka koowaad ayaa aasaas u noqonaysa xisaabinta kororka sannadlaha ah oo dhan ilaa 3.5% sannadaha 2027 – 2031 waxaana xaddidi doona cutubka 84.55 RCW. (1) sicir bararka Degmada King oo lagu daray tusmada dadka ee ay daabacday xafiiska falanqeynta dhaqaalaha iyo maaliyadda ee Degmada King; ama (2) xaddidaadda cutubka 84.55 RCW. Canshuurta waxay ka koobnaan doontaa ka-dhaafitaan loogu talagalay waayeellada, halyeeyadii hore iyo kuwa kale ee u qalma sida waafaqsan RCW 84.36.381 iyo qodobka guddiga kormeerka canshuurta.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Warren Jimenez**
Agaasimaha Qaybta, Jardiinooyinka
(206) 477-4527
parksinfo@kingcounty.gov

## Bayaanka lagu taageerayo

Rod Dembowski, Tracy Myers, Susan Pappalardo
www.yeskcprop1.com

Cabbirkan sharciga wuxuu cusboonaysiinayaa maalgelinta in ka badan 250 jardiinooyin, garoomo ciyaar, barkadaha dabaasha, iyo meelaha waxbarashada gacanta lagu barto, magaalo kasta iyo guud ahaan miyiga Degmada King. Codkaaga wuxuu maalgelin doonaa dayactirka muhiimka ah, cusboonaysiin musqulaha iyo garoomada ciyaaraha, balaarinta garoomada kubadda iyo maxkamadaha ciyaaraha, bixinta barnaamijyo qoysaska loogu talagalay, iyo hagaajinta amniga iyadoo lagu daraayo ilaaliyeyaasha jardiinooyinka.

*Meelo Caafimaad iyo Ammaan ah oo Lagu Ciyaaro oo Wax Lagu Barto– ee Loogu Talagalay Dhammaan:* Jardiinooyinkeena, garoomada ciyaaraha, garoomada kubadda, waddooyinka socodka iyo barkadaha dabaasha waa meelo muhiim ah oo carruurtu ku ciyaaraan, ku bartaan dabaasha, iyo bulshadeenu ku kulmaan, ku nastaan oo ku raaxaystaan jawiga dabeecadda.

*Ilaalinta Kaymaheena, Biyaha, iyo Cimilada*: Maadaama gobolkeenu sii kordhaayo, waa muhiim inaan hadda tallaabo qaadno si aan u ilaalino oo u badbaadino kaymaheena ugu dambeeya, dhulal-beereedka, goobaha furan iyo biyaha. Canshuurtaan waxay ilaalinaysaa dhulal-beereedkaan qaaliga ah, waxayna bixinaysaa tusaale ficil cimiladeed goboleed.

*Maalgelin Sinnaan ah oo ku saabsan Waddooyinka Socodka iyo Jardiinooyinka*: Codkaaga *Haa* wuxuu balaarin doonaa nidaamka waddooyinka goboleedka, wuxuu hagaajin doonaa gelitaanka meelaha caanka ah ee socodka iyo baaskiilka, wuxuuna siin doonaa kheyraad toos ah jardiinooyinka iyo garoomada ciyaaraha magaalooyinka waaweyn iyo kuwa yaryar.

*Mas'uuliyad iyo Saamayn*: Cabbirkan sharci wuxuu ku dhismi doonaa in ka badan labaatan sanno oo canshuuro guulo leh, waxayna ku kici doontaa mulkiilaha guriga celcelis ahaan qiyaastii $2.50 bishii in ka badan canshuurta hadda jirta ee ee wakhtigeedu dhammaanayso - maalgelin yar oo ku saabsan caafimaadkeena, deegaanka, iyo tayada nolosha. Maalgelinta levy-ga waxaa si madax-banaan loo baaraa si loo hubiyo mas'uuliyadda iyadoo warbixin sannadle ah laga helayo Guddiga Kormeerka Jardiinooyinka.

Cusboonaysiintaan waxaa taageeray Madaxa Fulinta Braddock iyo Duqeyda magaalooyinka ee degmada oo dhan, xubnaha golaha degmada iyo magaalada, Hey'adda Ilaalinta Dabeecadda, Kalsoonida Dhulka Dadweynaha, Ururka Waddooyinka WA, Beerta Xayawaanka ee Woodland, Aquarium-ka Seattle, Mountains to Sound Greenway, Ururka Haweenka Codbixiyeyaasha, Aasaaska Jardiinooyinka Seattle, Splash*Forward*, KC Play Equity Coalition, ururada shaqaalaha, iyo in ka badan!

## Bayaanka looga soo horjeedo

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

Bayaanka lagu taageerayo ama ka soo horjeeda cabbirka ama hindisaha warqadda codbixinta waxaa soo gudbiya guddiyo ay magacaabeen maamulka xukunka. Ma jirin cid u soo baxday inay ka mid noqdaan guddiga iyo inay qoraan bayaan mucaaradnimo. Haddii aad jeclaan lahayd inaad mustaqbalka la shaqeyso guddi fadlan la xiriir maamulka xukunka.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Canshuurta Hantida ee Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda

Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada ee Seattle ayaa ansixiyay Xeerka 127204, ee khuseeya maalgelinta loogu talagalay Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda ee Seattle.

Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay beddeli doontaa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso si loo maalgeliyo Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda ee Magaalada kaas oo musharaxiinta ka qayb qaadanaya siinaya maalgelino dadweyne oo loogu talagalay xafiisyada lasoo doorto qaarkood. Maalgelinta canshuurta waxay sidoo kale dabooli doontaa kharashaadka maamulka Barnaamijka.

Waxay oggolaanaysaa canshuur toban-sanno ah oo ururinta laga bilaabi doono 2026 oo ah $0.015/$1,000 dheeraad ah ee qiimeynta la qiimeeyay, ugu badnaan heerka wadarta guud ee canshuurta oo ah $2.27/$1,000. Caddadka canshuurta ee 2026 wuxuu noqon doonaa aasaaska canshuuraha ku xiga ee ilaa iyo 2035. Ka dhaafitaanka RCW 84.36.381 ee muwaadiniinta waayeelka iyo dadka naafada ah ayaa khuseeya.

Ma tahay in canshuurtaan la ansixiyo?

Haa

Maya

*Qoraalka cabbirkan oo dhammeystiran ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 103.*

!

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr.1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Soo Jeedinta Seattle 1, oo beddeli doonta canshuurta Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda ee wakhtigeedu dhammaanayso haddii la ansixiyo, ayaa la filayaa inay ururiso qiyaas ahaan $45,000,000 muddo toban sannadood ah oo loogu talagalay ujeeddooyinka maalgelinta Barnaamijka. Barnaamijka Foojarrada Dimuqraadiyadda ee Seattle wuxuu codbixiye Seattle walba siiyaa afar Foojarrada Dimuqraadiyadda oo min $25 doorashadii magaalada, kuwaas oo loo siin karo oo ayna furan karaan musharaxiinta u tartamaaya Duqa Magaalada, Golaha Magaalada, ama Qareenka Magaalada, kuwaas oo oggolaada xaddidaadaha kharashka ololaha iyo tabarucaadka. Lacagta laga helo canshuurtaan waxay dabooli doontaa kharashaadka la xiriira barnaamijka, sida bixinta maalgelinta tabarucaadka ololaha oo ay taageerayaan Foojarrada Dimuqraadiyadda, daabacaadda iyo dirista foojarka, shaqaalaha maamulka, wacyigelinta dadweynaha, iyo kharashaadka hannaanka foojarka.

2026, sannadka ugu horeeya ee ururinta dakhliga soo jeedintaan, lama soo saari doono wax ka badan $4,500,000. Heerka canshuurta dheeraadka ah ee la xiriira kororka soo jeedintaan ee mulkiilaha guri kasta waxa uu noqonayaa ku dhawwaad $0.015 ee ka mid ah $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay, iyo qiimaha ugu badan ee wadarta canshuurta guud ayaa noqon doona $2.27/$1,000. RCW 84.36.381 waxay canshuuraha u oggolaanaysaa in ay ku darto canshuur dhaaf hanti oo loogu talagalay muwaadiniinta waayeelka iyo dadka naafada ah. Canshuurtaan waxaa ku jirta ka-dhaafitaankaas.

Canshuuraha uu codbixiyuhu ansixiyo la'aantood, Magaaladu ayaa guud ahaan wuxuu sharciga gobolka ku xaddidaa inay kordhiso canshuuraha hantida ee sannadlaha ah oo aan ka badnayn boqolkiiba hal ka sareeya caddadka ay Magaaladu heshay sannadkii ka horeeyay. Ka dib marka canshuurtaan ay wakhtigeeda ku dhammaato ururinta sannadka 2035, boqolkiiba hal ee kororka ugu badan ayaa waxaa loo xisaabin doonaa sida in soo jeedintaan aan lasoo ansixin.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Scheereen Dedman**
Karaaniga Magaalada
(206) 684-4357
Scheereen.Dedman@seattle.gov

## Bayaanka lagu taageerayo

Teresa Mosqueda, Estevan Muñoz-Howard
www.yesonprop1seattle.org

Ku Codee *Haa* ee Soo Jeedinta 1 ee Dadka Awoodda Siiya Doorashooyinka!

Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda ee Seattle waa aalad la caddeeyay oo awood siisa deganeyaasha dhammaan heerarka dakhliga, jinsiyadaha, iyo da'da si ay u doortaan musharaxiin mas'uul ka ah dhammaanteen—ma aha oo keliya deeq bixiyeyaasha taajiriinta ah. Tan iyo markii la bilaabay, ka qaybgalka deeq-bixiyeyaasha yaryar ayaa cirka isku shareeray, waxaana hoos u dhacay qaybta doolarka ee ololaha ka yimaada deeq bixiyeyaasha lacagta waaweyn iyo kuwa ka baxsan magaalada. Maalgelinta ololaha hadda si wanaagsan ayay uga tarjumaysaa dakhliga magaalada iyo tirakoobka jinsiyadaha, waxaana musharaxiin badan—gaar ahaan haweenka, dadka midabka leh, iyo kiraysteyaasha—ay awoodaan inay tartamaan ayagoo wadaan ololeyaal ay dadku taageerayaan.

Wakhti ay jirto walaac qaran oo qoto dheer oo ku saabsan caafimaadka dimuqraadiyaddeena, Seattle waxay hoggaamin kartaa tusaale ahaan. Qiyaastii $13 sannadkii oo laga qaado mulkiilaha leh guri qiimihiisu yahay dhex dhexaad, waxaan awood siin karnaa dadka caadiga ah inay taageeraan musharaxiinta ay aaminsan yihiin— xitaa haddii aysan awoodin inay wax bixiyaan. Baabi'inta foojarrada dimuqraadiyadda waxay dib u celin doontaa horumarka aan samaynay—iyadoo bilyaneerrada ay lacag badan ku shubayaan doorashooyinka ee guud ahaan dalka.

Soo jeedinta 1 waxaa taageeraya ururo lagu kalsoon yahay oo ku baahsan magaalada, oo ay ku jiraan Ururka Haweenka Codbixiyeyaasha ee Seattle-Degmada King, LiUNA Local 242, OneAmerica Votes, Washington Bus, Ururka Magaalo Weynta Seattle, Washington CAN, iyo kuwo kale oo badan. Ku hay Seattle oo ah, dhinac taagan, oo loogu talagalay dadka. Ku Codee Haa ee Soo Jeedinta Seattle 1!

## Bayaanka looga soo horjeedo

Ari Hoffman
notovouchers@gmail.com

Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda ee Seattle waa isku day khaldan oo lagu yaraynayo saameynta lacagaha waaweyn ee maalgelinta ololaha iyadoo la adeegsanayo canshuur aan loo baahnayn oo lagu soo rogay muwaadiniinta magaalada horeba u qaali ahayd.

Keliya 4.72% ka qaybgalka sannadkii 2023, inta badan foojarrada lama isticmaalin, taasoo muujinaysa xiiso la'aan barnaamijka. Kharashaadka maamulka laga bilaabo 2016 ilaa 2023 waxay gaareen $6.4 milyan si loo qaybiyo keliya $9.4 milyan, iyada oo lacagta adag ee canshuur-bixiyeyaasha lagu khasaarinayo canshuur aan loo baahnayn. Doorashadii ugu dambeysay ee duqa magaalada, hal musharax ayaa qortay la-taliyeyaal si ay u soo ururiyaan foojarro, ayagoo soo ururiyay foojarro ka badan codadka, kuna dhammaystay kaalinta lixaad ee fog. Rasiidyada ololaha waxay muujinayaan waxyaabo aan la xiriirin ololaha sida sameecadaha, taasoo caddeynaysa in nidaamka la khiyaami karo.

Sannadka 2023, Guddiyada Ficilka Siyaasadeed waxay kharash gareeyeen in ka badan $1 milyan, taasoo ka sareysa tabarucaadka foojarka ah isla markaana wiiqday ujeeddada barnaamijka. Dacwad ahayd sannadkii 2017 ayaa muujisay walaacyo ku saabsan Qodobka Koowaad ee Dastuurka ee ku aaddan barnaamijka. Nidaamka kan marka hore yimaada, marka hore loo adeegaa wuxuu sidoo kale faa'iido u leeyahay kuwa xilka haya marka loo eego kuwa la tartamaaya.

Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda ee Seattle waa mid aan waxtar lahayn, aan si buuxda loo adeegsan, oo ku guul-daraystay inuu xakameeyo saameynta lacagta badan. Dadka Seattle waxaa lagu qasbay inay bixiyaan canshuur, magaalada horeba u ahayd mid aan la awoodi karin, si loo maalgeliyo ololaha siyaasadeed halkaasoo inta badan lacagta xitaa aan la isticmaalin. Magaaladu waa inay lacagta ku soo celisaa canshuur-bixiyeyaasha. Aan ku bilowno anagoo dhammaynayna barnaamijka.

### Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Mucaaradka barnaamijkan waa deeq bixiyeyaasha taajiriinta ah ee wada maalgelinta PAC. Seattle hadda waxay hoggaaminaysa dhammaan magaalooyinka waaweyn ee kale marka loo eego ka qaybgalka deganeyaasha iyada oo ay ugu wacan tahay foojarrada dimuqraadiyadda. Dad badan ayaa bixinaaya—oo u tartamaya xafiis—sababtoo ah barnaamijkan wuxuu yareeyaa saameynta deeq bixiyeyaasha taajiriinta ah iyo danaha dibadda.

Foojarrada dimuqraadiyadda waxaa sidoo kale maalgeliya mid ka mid ah canshuuraha ugu yar taariikhiyan. Wakhti ay dimuqraadiyaddu wajahdo khatarro aan hore loo arag, Seattle waa inay sii wadaa hoggaaminta. Haa ee Soo Jeedinta 1!

### Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Si ka duwan sheegashada taageerayaasha ee ku saabsan caan-nimada barnaamijka, Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda ee Seattle wuxuu leeyahay ka-qaybgal hoose, oo ka yar 5% sannadkii 2023. Lacagta weyn ayaa weli wax xukunta taas oo loo maraayo PAC-yada aan la xakamayn, taasoo wiiqaysa ujeeddada barnaamijka oo muujinaysa in barnaamijku uusan simin garoonka tartanka. Musharaxiinta waxay ka faa'iideystaan nidaamka, qaarna waxay aruursadaan foojarro ka badan codadka. Haddii Seattle ay rabto inay lacagta weyn ka saarto siyaasadda oo ay hubiso hufnaanta, markaa soo jeedi sharci lagu mamnuucayo lacagta PAC-yada ee doorashooyinka ama meel mari dib-u-habeyn kale.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

# Canshuur Dheeraad Hal-Sanno ah ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Shoreline Lr. 412 ayaa hirgeliyay Qaraarka 2025-7, ee khuseeya maalgelin dheeraad ah oo loogu talagalay kharashyada barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada. Soo jeedintaan waxay, iyadoo ku xiran isbeddelada sharci dejinta ee dhawwaan dhaqan galay, Degmada u oggolaanaysaa inay la jaan qaaddo baahiyaha waxbarasho ee ardaydeeda iyadoo soo rogaysa canshuuraha dheeraadka ah ee soo socda oo hal sanno ah, ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si loo taageero sannadka ugu dambeeya ee canshuurta barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee hore u jirta ee wakhtigeedu dhammaanayso dhammaadka 2026:

| Sannadka Ururinta | Qiimaha Canshuurta ee La Qiyaasay/$1,000 Qiimeynta La Qiimeeyay | Caddadka Canshuurta Dheeraadka ah |
|---|---|---|
| 2026 | $0.34 | $7,250,000 |

dhammaan sida lagu sheegay Qaraarka 2025-7. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

***Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.***

!

Waxaad u codeynaysaa
**Haa ama Maya**
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr.1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud*
*(Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))*

## Bayaanka sharaxaadda

Sharciga Gobolka Washington wuxuu u oggolaanayaa codbixiyeyaasha inay ansixiyaan canshuur dheeraad ah oo loogu talagalay barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada marka sharci-dejintu kordhiso awoodda ugu badan ee canshuuraha degmada dugsiga. Kal-fadhiga sharci dejinta ee 2025, sharci dejiyeyaasha Washington waxay ansixiyeen Sharciga Isku Duubnida Beddelka ah ee Aqalka Hoose 2049, kaas oo kordhinaaya awoodda canshuurta ugu badan degmooyinka dugsiga.

Natiijada isbeddelkaan sharci ee dhawwaan dhacay awgeed, ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1 waxay Degmada Dugsiyada Shoreline u oggolaanaysaa inay kabaan sannadka ugu dambeeya ee canshuurta barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee hadda jirta taas oo ku eg dhammaadka kalandarka sannadka ee 2026.

Haddii codbixiyeyaasha Shoreline iyo Lake Forest Park ay ansixiyaan canshuurta dheeraadka ah ee hal-sanno, canshuuraha la ururiyo sannadka 2026 waxay maalgelin doonaan qayb ka mid ah barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada ee uusan sida buuxda Gobolka Washington u maalgelin. Kuwaan waxaa ka mid ah shaqaalaha waxbarashada iyo taageerada, mushaharka shaqaalaha iyo tababarka, gaadiidka, iyo barnaamijyada sida waxbarashada gaarka ah, ciyaaraha, iyo hawlaha kale ee dheeraadka ah.

Canshuurta halka-sanno ah ee la soo jeediyay ee loogu talagalay barnaamijyada waxbarashada iyo hawlgallada waxay oggolaanaysaa ururinta canshuuraha si loo bixiyo ilaa $7,250,000 sannadka 2026. Qiimaha canshuurta ee loo baahan yahay si loo soo saaro caddadkaan ayaa lagu qiyaasay inay yihiin $0.34 oo ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay. Qiimaha canshuurta ee saxda ah iyo caddadka la ururinayo ayaa laga yaabaa in la hagaajiyo iyadoo lagu salaynaayo qiimaha dhabta ah ee qiimeynta la qiimeeyay ee hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada iyo xaddidaadyada uu soo rogay sharciga Gobolka wakhtiga canshuurta. Ka dhaafitaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Wixii macluumaad oo dheeraad ah, la xiriir Waaxda Qiimeynta Degmada King, 206-296-3920.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Rachel Belfield**
Sarkaalka Macluumaadka Dadweynaha
(206) 393-6111, kadib riix 3
public.info@ssd412.org

# Bayaanka lagu taageerayo

Jenny Skytta, Malorie Larson, Sarah Crowder
malorieann@gmail.com

Waxbarashada dadweynaha waa maalgelin wadajir ah. Xitaa haddii qoyskaaga uusan ahayn mid hore, hadda, ama mustaqbalka wax ka dhigta dugsiyada dadweynaha, dhammaanteen waxaan ka faa'iideysanaa bulsho waxbaratay. Codbixiyeyaasha Shoreline iyo Lake Forest Park (LFP) waxay leeyihiin taariikh dheer oo taageeraya waxbarashada dadweynaha. Taageeradaas waa sababta mid ka mid ah magaalooyinkeena si joogto ah u soo jiitaan qoysaska dhallinyarada ah.

Sida laga soo xigtay xogta OSPI, Shoreline SD waxay ka sareysaa gobolka heerka qalin-jebinta (91.8% vs. 82.8%) iyo celceliska jaamacadda iyo waxbarashada heerka darajada marka loo eego Ingiriiska, Xisaabta, iyo Sayniska. Shoreline SD waxay baraysaa waxyaabaha muhiimka ah waxayna sidaas samaynaysaa si ka wanaagsan inta badan.

Si kastaba ha ahaatee, degmadeenu waxay la halgamayaan inay daboolaan baahiyaha aasaasiga ah. Tan iyo 2020, farqiga maalgelinta gobolka ayaa ku kacay degmadeena $132M si loo maalgeliyo adeegyada muhiimka ah sida waxbarashada gaarka ah, adeegyada, caymiska, gaadiidka iyo shaqaalaha. Dugsiyadeena dadweynaha waxay la tacaalayaan kharashaadka sii kordhaaya ee sicir bararka, sannado badan oo hoos u maalgelin ah oo ay sameeyeen sharci-dejiyeyaasha gobolka, waxayna halis ugu jiraan inay lumiyaan doolarka federaalka.

Shoreline SD waxay wajahaysaa hoos u dhac dakhli oo ah $6.5M. Qiyaasta $7.25M ee labada sannad dugsiyeed waxay bixin doontaa taageero muhiim ah iyada oo ay jiraan caqabado dhaqaale iyo siyaasadeed. Codeyn haa ah ayaa taageeri doonta ardayda *dhammaan* oo asal kasta ah waxayna ka caawisaa ka hortagga dhimmista shaqaalaha, fasallada waaweyn, iyo yareynta waxqabadyada dheeraadka ah. Haddii la ansixiyo, qiimaha canshuurta wuxuu noqon doonaa mid sannadka 2026 ($3.13) *hooseeya* marka loo eego 2025 ($3.21) oo ka mid ah $1,000, sababtoo ah qaybinta canshuurta balaaran ee ka timaada koritaanka hantida ee Shoreline iyo LFP.

Tiro badan oo ah kormeer gudaha iyo dibadda ah oo lagu sameeyay Shoreline SD ayaa dhammaantood soo gabagabeeyay in haddii aan la kordhin dakhliga, go'aanno adag waa in la sameeyaa. Dowladeena waa inay gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah si ay u bixiyaan waxbarasho ku filan dhammaan *carruurta*. Ilaa wakhtigaas, canshuurta ayaa ah xalka ugu wanaagsan ee lagu ilaaliyo dugsiyada Shoreline iyo LFP.

# Bayaanka looga soo horjeedo

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

Bayaanka lagu taageerayo ama ka soo horjeeda cabbirka ama hindisaha warqadda codbixinta waxaa soo gudbiya guddiyo ay magacaabeen maamulka xukunka. Guddiga ka soo horjeedidda ayaa dib uga laabtay hannaanka qoritaanka bayaanka looga ka soo horjeedidda. Haddii aad jeclaan lahayd inaad mustaqbalka la shaqeyso guddi, fadlan la xiriir maamulka xukunka.

**Soo Jeedinta Lr. 1**

## Kor-U-Qaadista Canshuurta ee Adeegyada Caafimaadka

Guddiga Degmada Isbitaalka Dadweynaha ee Degmada King Lr. 2 (EvergreenHealth) ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 949-25 ee khuseeya canshuur ku rogista canshuurta hantida ee caadiga ah ee degmada. Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay bixin doontaa maalgelino dheeraad ah ee hawlgalka iyo kharashka ee EvergreenHealth si ay u bixiso adeegyada isbitaalka iyo daryeelka kale ee caafimaadka ee deganeyaasheeda iyo dadka kale ee ay u adeegto EvergreenHealth. Waxay oggolaanaysaa ugu badnaan heerka canshuurta hantida caadiga ah oo ururinta ay bilaabanayso 2026 oo ah 50 senti ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay. Qiimaha canshuurta 2026 ayaa loo isticmaali doonaa ujeeddada la xiriirta xisaabinta xaddidaadaha canshuuraha ee sannadaha ku xiga. Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

!

Waxaad u codeynaysaa inaad **Ansixiso ama Diido** Soo Jeedinta Lr.1

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 84.55.050)*

## Bayaanka sharaxaadda

Degmada Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada King Lr. 2 waxay maamushaa EvergreenHealth waxayna bixisaa adeegyada isbitaalka, adeegyada caafimaadka halka mar ah, iyo daryeellaha kale ee caafimaadka oo ay siiso deganeyaasha degmada isbitaalka dadweynaha iyo dadka kale ee ay u adeegto degmada.

Sida waafaqsan sharciga gobolka, degmooyinka isbitaalka dadweynaha waxaa loo oggol yahay inay soo rogaan canshuur hanti caadi ah oo ah heer ilaa iyo 75 senti oo ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay oo loogu talagalay ujeeddooyinka hawlgalka iyo dayactirka isbitaalka iyo xarumaha kale ee caafimaadka iyo adeegyada. Sababtoo ah sharciga gobolka wuxuu xaddidayaa caddadka canshuuraha ay kordhi karaan iyada oo aan la helin ansixinta codbixiyeyaasha, qiimaha canshuurta ee EvergreenHealth ayaa hoos u dhacay sannadihii la soo dhaafay ilaa qiyaastii 14 senti sannadka 2025.

Guddiga EvergreenHealth wuxuu go'aamiyay in ay lagama maarmaan tahay oo ay dan ugu jirto deganeyaasha ee ay u adeegto EvergreenHealth inay codsadaan oggolaanshaha soo rogitaan canshuur hanti caadi ah oo ah 50 senti oo ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay laga bilaabo 2026, taasoo noqon doonta kordhin dhan 36 senti marka loo eego qiimaha hadda jira. Canshuurtaan waxay bixin doontaa maalgelinta hawlgalka iyo dhaqaalo dheeraad ah si loo taageero u-geynta adeegyada isbitaalka iyo daryeelka caafimaadka kale oo ay ku jiraan maalgelinta lagu sii wado daryeelka badbaadinta nolosha, daryeelka ka hortagga, iyo adeegyada kale ee caafimaadka iyada oo la shaqaaleysiinayo bixiyeyaal daryeel caafimaad dheeraad ah iyo cusboonaysiinta iyo balaarinta xarumaha si loo kordhiyo helitaanka OB (Dhakhtarka dhalmada), daaweynta kansarka, adeegyada degdegga ah, wadno-xanuunka, caafimaadka dabeecadda, carruurta, caloosha iyo mindhicirka, daryeelka aasaasiga ah, iyo takhasusyo kale oo loogu talagalay bulshada ay u adeegto EvergreenHealth.

Caddadka canshuurta ee 2026 ayaa loo isticmaali doonaa ujeeddada la xiriirta xisaabinta xaddidaadaha canshuuraha Degmada ee sannadaha soo socda.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Candace Scairpon**
Iskuduwaha Maamulka Guddiga
(425) 899-2667
cmscairpon@evergreenhealthcare.org

# Bayaanka lagu taageerayo

Barb Jensen, Josh Pratt, Kevin Hanson
www.yesevergreenhealth.com

Sida kalkaaliye caafimaad, dhakhtar ka shaqeeya waaxda gurmadka degdegga iyo dab-damiye/EMT ahaan, waxaan aragnay baahiyaha daryeelka caafimaad ee bulshadeena oo sii kordhaaya sida deegaanka u koray.  Waxaan ognahay in aagga Puget Sound uu ka jiro yaraanta ba'an ee sariiraha isbitaalka ee la heli karo iyo wakhtiyada sugitaanka ballamaha daryeelka aasaasiga ah iyo takhasuska oo noqon kara kuwo dheer.  Waxaan sidoo kale aragnay tiro sii kordhaysa oo isugeynta adeegyada caafimaadka taasoo keentay adeegyo la isku geeyay iyo wakhti safar dheer oo loo galo adeegyo badan.

Soo jeedinta 1 waxay wax ka qaban doonaa caqabadahaan waxayna cusboonaysiin doonaa taageerada EvergreenHealth - isbitaalka dadweynaha ee madax-banaan ee bulshadeena - si uu ula kulmo baahiyaha Eastside ee Eastside.

*Ku codee haa si loo yareeyo wakhtiyada sugitaanka loona balaariyo helitaanka.* Soo jeedinta 1 wuxuu ka dhigan yahay dhakhaatiir iyo shaqaale caafimaad oo badan iyo helitaan balaaran oo daryeelka aasaasiga ah, degdegga ah, iyo takhasuska oo ay ku jiraan adeegyada dhalmada iyo daryeelka caafimaadka dabeecadda.

*Ku codee haa si loo joogteeyo tayada sare.* EvergreenHealth waxaa si qaran ah loogu aqoonsaday tayada daryeelkeeda iyadoo heshay shan xiddigood oo ka timid Xarunta Medicare iyo Adeegga Medicaid waxaana lagu qiimeeyay isbitaalka ugu sareeya-50 qaran ahaan ee ay bixiso Healthgrades. Soo Jeedinta 1 waxay oggolaanayaa maalgelino lagu ilaalinayo tayadan sare.

*Ku codee haa si loo ilaaliyo daryeel tayo leh oo guriga u dhow loona ilaaliyo go'aan qaadashada deegaanka.*  Soo Jeedinta 1 waxay hubinaysaa in EvergreenHealth ay sii ahaato mid madax-banaan, iyadoo laga fogaannayo baahida loo qabo in lagu biiro urur weyn oo adeegyada iyo shaqaalaha la isku geeyo oo dadka deegaanka ay u badan tahay inay adeegyo badan ugu safraan Seattle ama xarumo magaalooyin kale.

Marka qoysaskeenu u baahan yihiin caawinaad caafimaad – xaalad degdeg ah, baaritaanno joogto ah ama daryeel gaar ah – waxaan rabnaa inaan helno daryeel caafimaad oo tayo sare leh oo guriga u dhow. Ku biir dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha iyo kuwa ka jawaaba xaaladaha degdegga ah adigoo u codeynaya haa ee Soo Jeedinta 1 ee EvergreenHealth's si loo balaariyo helitaanka halkan Eastside oo loo ilaaliyo daryeelka caafimaadka ee madax-banaan, ee bulshadeena ee sidamaxalliga ah loo maamulo.

# Bayaanka looga soo horjeedo

Wax bayaan ah lama soo gudbin.

Bayaanka lagu taageerayo ama ka soo horjeeda cabbirka ama hindisaha warqadda codbixinta waxaa soo gudbiya guddiyo ay magacaabeen maamulka xukunka. Ma jirin cid u soo baxday inay ka mid noqdaan guddiga iyo inay qoraan bayaan mucaaradnimo. Haddii aad jeclaan lahayd inaad mustaqbalka la shaqeyso guddi fadlan la xiriir maamulka xukunka.

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 19922

XEER bixinaaya u soo gudbinta codbixiyeyaasha u qalma ee Degmada King ee doorashada gaarka ah ee lagu qabanayo Degmada King Agoosto 5, 2025, soo jeedin oggolaanaysa soo rogista canshuur hanti oo ah wixii ka badan xaddidaadda canshuurta ee ku jira cutubka 84.55 RCW muddo lix sanno ah oo isku xigta, halka ah heer wadar guud oo aan ka badnayn $0.2329 halkii kun oo doolar ee qiimeynta lagu qiimeeyay sannadka ugu horeeya oo xaddidaaya kordhinnada canshuurta ee sannadlaha ah iyadoo loo maraayo sicir bararka Degmada King oo lagu daray tusmada dadka ee lagu daabacay xafiiska falanqeynta dhaqaalaha iyo maaliyadda ee Degmada King, ama xaddidaadda cutubka 84.55 RCW, midka sareeya sannadaha labaad ilaa lixaad ujeeddada ilaalinta iyo hawlgelinta nidaamka goobta furan ee Degmada King; hagaajinta jardiinooyinka, madadaalada, helitaanka, iyo dhaqdhaqaaqa gudaha Degmada King iyada oo la helayo dhulal iyo sii wadidda horumarinta iyo taageeridda jardiinooyinka, xarumaha madadaalada, iyo waddooyinka socodka goboleedka; hagaajinta jardiinooyinka iyo waddooyinka socodka iyo helitaanka dhulal ay leeyihiin degmooyinka jardiinooyinka magaalo weynta, tuulooyinka iyo magaalooyinka gudaha Degmada King; maalgelinta waxbarashada deegaanka, dayactirka iyo barnaamijyada ilaalinta ee Beerta Xayawaanka Woodland; maalgelinta waxbarashada deegaanka, dayactirka iyo barnaamijyada ilaalinta ee Seattle Aquarium; maalgelinta horumarinta, dayactirka, iyo barnaamijyada Beerta Waterfront ee Seattle; maalgelinta ilaalinta deegaanka iyo cimilada iyo waxbarashada ee Xarunta Sayniska ee Pacific; maalgelinta mashruuca caasimadda ee Garoonka Memorial; iyo maalgelinta horumarinta caasimadda ee barkadaha dadweynaha, dhammaan dadka Degmada King; baabi'inta Xeerka 19914, Qaybta 1, Xeerka 19914, Qaybta 2, Xeerka 19914, Qaybta 3, Xeerka 19914, Qaybta 4, Xeerka 19914, Qaybta 5, Xeerka 19914, Qaybta 6, Xeerka 19914, Qaybta 7, Xeerka 19914, Qaybta 8, Xeerka 19914, Qaybta 9, iyo Xeerka 19914, Qaybta 10; <u>iyo ku dhawwaaqista xaalad degdeg ah.</u>

BAYAANKA XAQIIQOOYINKA:

1. Degmada King waxay leedahay oo maamushaa nidaam ka kooban jardiinooyin goboleed iyo kuwa maxalli ah iyo waddooyinka socodka oo ka kooban saddex iyo labaatan kun oo acre oo dhul jardiinooyin ah iyo in ka badan boqol siddeetan iyo shan mayl oo waddooyin socodka goboleed ah. Degmada waxay bixisaa waddooyinka socodka goboleedka, xarumaha madadaalada goboleedka, aagagga dabiiciga ah ee goboleedka, jardiinooyinka goboleedka, iyo jardiinooyinka maxalliga ah ee aagagga aan la midowga ahayn. Tusaalooyinka jardiinooyinka goboleedka iyo kuwa maxalliga ah ee degmada iyo waddooyinka socodka waxaa ka mid ah Marymoor park, Cougar Mountain Regional Wildland park, Steve Cox Memorial park, Dick Thurnau Memorial park, Xarunta Biyaha ee Weyerhaeuser King County, iyo waddada webiga Sammamish.

2. Jardiinooyinka, aagagga dabiiciga ah, iyo waddooyinka socodka waxay ku biiriyaan tayada nolosha oo sareysa. Nidaam xooggan oo jardiinooyin iyo waddooyin socodka ah wuxuu bixiyaa: faa'iidooyin jireed, bulsho, iyo maskaxeed oo loogu talagalay shakhsiyaadka; fursado dhaqaale oo loo maro madadaalada iyo dalxiiska; kobaca dhaqaalaha ee ganacsiyada gaarka ah ee u baahan inay soo jiitaan oo haystaan shaqaale xirfad leh; kordhinta adkeysiga cimilada; faa'iidooyinka deegaanka sida biyaha nadiifka ah iyo deegaanka caafimaadka qaba; iyo ilaalinta kheyraadka dhaqanka iyada oo loo maraayo ilaalinta goobaha furan. Nidaamka goobta furan ee Degmada King wuxuu bixiyaa dhammaan faa'iidooyinkaan dadka iyo ganacsiyada Degmada King.

3. Bixinta goobaha cagaaran ee magaalooyinka, iyada oo loo maraayo jardiinooyin ama maalgeshiyo kale sida geedaha waddooyinka, waa mid gaar ahaan muhiim ah si loo gaaro faa'iidooyinka kor ku xusan. Ku darista geedaha iyo dhirta meelaha magaalooyinka ee ay ku badan yihiin shubka waxay ka caawin kartaa in la yareeyo heerkulka sare ee deegaankaas, kuwaas oo la filayo inay sii xumaadaan marka isbeddelka cimilada ee bini'aadanka sababay uu sii socdo. Taas waxay ku biirisaa caafimaadka iyo tayada nolosha dadka deegaanka u dhow, marka lagu daro bixinta awood dheeraad ah oo lagu xakameeyo gaasaska aqalka lagu koriya dhirta ee kulaylka meeraha.

4. Qorshaha Kalaguurka Ganacsiga ee Jardiinooyinka ee 2002, oo ay ansixiyeen golaha degmada King oo lagu dhaqan geliyey Xeerka 14509, wuxuu noqday qorshaha lagu aasaasay nidaamka goobta furan ee goboleedka ee aan maanta haysano. Iyadoo lagu dhisayo qorshahaas, degmada waxay hirgelisay qorsheyaal goobaha furan ah, kuwaas oo bixiyay qaab-dhismeedka hagaya Degmada King ee helitaanka, qorshaynta, horumarinta, ilaalinta, dayactirka, iyo maaraynta nidaamkeeda adag ee jardiinooyinka, waddooyinka socodka goboleedka, iyo acre-yada goobaha furan. Qorshaha goobta furan ee ugu dambeeyay waxaa la cusboonaysiiyay 2022 waxaana lagu ansixiyay Xeerka 19501.

5. Marka la hirgelinayo qorshaha goobta furan, waaxda jardiinooyinka iyo madadaalada ee waaxda kheyraadka dabiiciga ah iyo jardiinooyinka waxay si guul leh diiradda u saartay khadadka ganacsiga ee jardiinooyinka goboleedka iyo waddooyinka socodka, waddooyinka miyiga, aagagga dabiiciga ah, iyo jardiinooyinka maxalliga ah ee aagagga aan la midowga ahayn ee degmada King waxayna hirgelisay dhaqamada ganacsiga ee soo saara dakhliga hantiyaasha nidaamka jardiinooyinka iyada oo la hirgelinayo ama la kordhinayo khidmadaha isticmaalaha iyo la aasaasayo iskaashiyo shirkadeed iyo bulsho oo kor u qaada adeegyada jardiinooyinka iyo ka faa'iideysiga lacagaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay si loo hagaajiyo jardiinooyinka loona kordhiyo helitaanka jardiinooyinka.

6. Iyadoo la waafajinayo talooyinka kooxaha shaqada ee hore ee la xiriira jardiinooyinka iyo guddiyada talo-bixinta bulshada, degmada waxay afar jeer raadisay canshuuraha oggolaanshaha codbixiyeyaasha: sannadkii 2003, oo lagu dhaqan geliyey Xeerka 14586, si loo bixiyo maalgelinta dayactirka iyo hawlgalka waaxda jardiinooyinka iyo madadaalada laga bilaabo 2004 ilaa 2007; sannadkii 2007, oo lagu dhaqan geliyey Xeerka 15759, si loo bixiyo maalgelinta dayactirka iyo hawlgalka iyo sidoo kale maalgelinta helitaanka goobta furan, horumarinta waddooyinka goboleedka, Beerta Xayawaanka ee Woodland Park iyo degmada King iyo magaalooyinka si ay ugu isticmaalaan helitaanka goobta furan iyo mashaariicda waddooyinka socodka laga bilaabo 2008 ilaa 2013; sannadkii 2013, oo lagu dhaqan geliyey Xeerka 17568, si loo bixiyo maalgelinta dayactirka iyo hawlgalka iyo sidoo kale helitaanka goobta furan, dayactirka iyo hagaajinta hantida, mashaariicda jardiinooyinka iyo waddooyinka socodka, Beerta Xayawaanka ee Woodland Park iyo degmada King iyo magaalooyinka si ay ugu isticmaalaan jardiinooyinkooda iyo madadaalada laga bilaabo 2014 ilaa 2019; iyo sannadkii 2019, oo lagu dhaqan geliyey Xeerka 18890, si loo bixiyo maalgelinta dayactirka iyo hawlgalka iyo sidoo kale helitaanka goobta furan, dayactirka iyo hagaajinta hantida, mashaariicda jardiinooyinka iyo waddooyinka socodka, Beerta Xayawaanka ee Woodland Park, Seattle Aquarium, xarumaha biyaha, iyo degmada King iyo magaalooyinka si ay ugu isticmaalaan jardiinooyinkooda iyo madadaalada laga bilaabo 2020 ilaa 2025. Codbixiyeyaasha waxay oggolaadeen tallaabooyinka maalgelinta dhammaan afarta jeer ee ay ku jireen warqadda codbixinta. Canshuuraha oggolaanshaha codbixiyeyaasha waxay ka caawiyeen nidaamka goobta furan inuu ahaado mid nadiif ah, ammaan ah, oo furan.

7. Qabiilooyinka ayaa wada maamula degmada si ay u maareeyaan dhulalka, biyaha, iyo kheyraadka dadweynaha ee wadaagga ah. Degmada waxay aqoonsan tahay in xiriirkan uu ku saleysan yahay oo uu hagayo xuquuqda heshiisyada, kuwaas oo qabiilo badan ay ku dhaqmaan gudaha degmada King. Waaxda kheyraadka dabiiciga ah iyo jardiinooyinka waxay qaaday tallaabooyin badan oo ay kula shaqeyso qabiillooyinka sidii wada maamuleyaal si loo xoojiyo ixtiraamka wadaagga ah, loona sameeyo isgaarsiin joogto ah oo macno leh, iskaashi, iyo wada-tashi lala yeesho saraakiisha qabiillada marka la horumarinayo oo la fulinaayo siyaasadaha gobolka iyo degmada King ee saameeya qabiillooyinka. Degmada waxay leedahay yool joogto ah oo ah in la xoojiyo xiriirka dowlad-dowladeed ee lala wadaago qabiillooyinka leh dhul iyo dano ku yaal degmada King.

8. Canshuurta beddelka ee jardiinooyinka, waddooyinka socodka, iyo goobta furan ee oggolaanshaha codbixiyeyaasha ee 2020 ilaa 2025 waxay bixisaa qiyaastii boqolkiiba shan iyo siddeetan miisaaniyadda hawlgalka ee waaxda jardiinooyinka iyo madadaalada, iyadoo qiyaastii boqolkiiba shan iyo toban laga soo saaro hawlaha ganacsiga iyo dadaallada hal-abuurka ah. Taageerada sanduuqa guud ee degmada King ee waaxda jardiinooyinka iyo madadaalada waa la joojiyay laga bilaabo 2011.

9. Barnaamijka iskaashiga bulshada iyo deeqaha oo lagu dhaqan geliyey Xeerka 14509 wuxuu kor u qaadaa adeegyada jardiinooyinka iyada oo lala kaashanayo ururada jardiinooyinka iyo madadaalada. Tan iyo biloowgii barnaamijka iskaashiga bulshada iyo deeqaha sannadkii 2003, in ka badan toddobaatan mashruuc oo matalaya in ka badan toddobaatan milyan oo

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 19922

doolar oo ah adeegyo cusub, la xoojiyay, ama la ilaaliyay oo madadaalada dadweynaha ah ayaa la dhammaystiray, iyadoo keliya labaatan iyo laba milyan oo doolar oo ah maalgelinta caasimadda degmada King la isticmaalay.

10. Beerta Xayawaanka ee Woodland Park waxay ka heshay qaybinta saddexdii canshuur ee hore ee oggolaanshaha codbixiyeyaasha si ay u taageerto dakhliga hawlgalka xayawaanka ee barnaamijyada waxbarashada iyo ilaalinta, beeraha iyo dayactirka, iyo hagaajinta caasimadda. Dakhliga canshuuraha loo qaybiyay xayawaanka ayaa bixiyay waxbarashada deegaanka, barnaamijyada iyo gaadiidka diiradda saaraya helitaanka aagagga aan loo adeegsan, waxay taageereen kumanaan arday ah sannad kasta, waxayna ka faa'iideysteen dadka degan degmada King oo dhan. Dakhliga canshuuraha ayaa sidoo kale bixiyay ilaalinta iyo daryeelka xayawaanka ee noocyada halista ku jira ee Waqooyiga Galbeed ee Baasifigga.

11. Seattle Aquarium waxay ka heshay qaybinta canshuuraha oggolaanshaha codbixiyeyaasha ee hore si loogu bixiyo kharashaadka caasimadda ee mashruuca Ocean Pavilion si loo xoojiyo dadaallada ilaalinta caalamiga ah ee aquarium-ka iyadoo la keenayo booqdeyaasha si toos ah ula kulmaan noocyada kulaylaha ee asal ahaan ka soo jeeda Coral Triangle iyo iyadoo la dejinayo qiyaastii saddex kun iyo shan boqol oo kalluun kulaylaha ah iyo xayawaano kale oo si waara loo soo saaray, oo ay ku jiraan rays, sharks, mangroves, iyo ilaa soddon nooc oo kooral ah.

12. Mashruuca Memorial Stadium wuxuu abuuri doonaa xarun hal-abuur leh oo loogu talagalay ardayda iyo bulshada ee dhacdooyinka ee Seattle Center. Mashruuca isbeddelka leh waxaa hoggaamin doona Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle iyo magaalada Seattle, iyadoo la siinayo goob la hagaajiyay oo loogu talagalay ciyaaraha maxalliga ah iyo kuwa goboleedka iyo dhacdooyinka.

13. Ka saarista Alaskan Way Viaduct waxay siisay fursad aan horey loo arag oo lagu abuurro goob cagaaran oo cusub bartamaha Seattle. Jardiinka waterfront ee ka dhalatay waa goob dadweyne oo labaatan-aakar ah oo ka socota Belltown ilaa Pioneer Square, iyadoo siinaysa gobolka oo dhan faa'iidooyin dhaqaale, bulsho, iyo deegaan oo waara. Beerta Waterfront ee Seattle waxay isku xiri doontaa meelaha caanka ah oo ay ku jiraan Beerta Farshaxanka Olympic, Suuqa Pike Place, Aquarium-ka Seattle, Terminalka Feeriga Colman Dock, Pioneer Square, garoomada, iyo xaafadaha ku hareeraysan.

14. Tuulooyinka iyo magaalooyinka Degmada King waxay heleen maalgelin ka timid saddexdii canshuur ee codbixiyeyaashu ansixiyeen ee hore. Intii u dhexeysay 2008 ilaa 2013, tuulooyinka iyo magaalooyinka waxay isticmaali kareen dakhliga canshuurta goobaha furan iyo iibsashada dhul dabiici ah iyo horumarinta mashaariicda waddooyinka socodka ee tuulooyinka ama magaalooyinka kuwaas oo taageeraya isku xirka nidaamka waddooyinka socodka goboleedka iyadoo qaybinta ay ku xirnaan doonto wax ku biirinta lacag la mid ah ama ka badan oo ka timaada tuulada ama magaalada qaata mashruuca isku midka ah. Intii u dhexeysay 2014 ilaa 2019 iyo 2020 ilaa 2025 canshuuraha, noocyada isticmaalka qaybinta loogu talagalay tuulooyinka iyo magaalooyinka Degmada King waa la balaariyay si loo bixiyo dabacsanaan iyo si wanaagsan loogu daboolo baahiyaha jardiinooyinka iyo madadaalada ee magaalooyinka.

15. Guddiyada kormeerka canshuurta jardiinooyinka ayaa la aasaasay si ay u kormeeraan kharashaadka dakhliga laga helay canshuuraha 2004 ilaa 2007, 2008 ilaa 2013, 2014 ilaa 2019, iyo 2020 ilaa 2025. Dib-u-eegista guddiga sannadlaha ah waxay soo gabagabeysay in degmada ay u hoggaansan tahay dhammaan shuruudaha canshuuraha.

16. Intii lagu jiray xilliyada canshuuraha 2008 ilaa 2013, 2014 ilaa 2019, iyo 2020 ilaa 2025, habka loo sameeyo, dib-u-eegista, iyo soo-jeedinta mashaariicda iibsashada canshuuraha mustaqbalka ilaalinta iyo canshuuraha jardiinooyinka ayaa kordhiyay iibsashada goobaha furan, dhul dabiici ah, iyo xuquuqda waddooyinka socodka goboleedka sababtoo ah ujeeddooyinka isku midka ah ee barnaamijyada iibsashada canshuuraha mustaqbalka ilaalinta iyo canshuuraha jardiinooyinka. Maalgelinta goobta furan ee canshuurta jardiinooyinka ee loo qaybiyey degmada King waa qayb muhiim ah oo ka mid ah isku-darka codsiyada degmada ee maalgelinta canshuurta mustaqbalka ilaalinta. Hannaanka loogu talagalay canshuurta mustaqbalka ilaalinta ee lagu qeexay K.C.C. 26.12.010 waxay ilaalisaa hufnaanta, helitaanka, iyo joogtaynta qaybinta canshuurta mustaqbalka ilaalinta iyo maalgelinta helitaanka canshuurta ee jardiinooyinka dadweynaha, kooxaha daneeyayaasha, hey'adaha dowladda, iyo saraakiisha.

17. Degmada King ayaa si degdeg ah u koraysa sidii gobol. Sannadkii 2024, tirada dadka Degmada King ayaa korodhay in ka badan soddon kun oo qof; tobankan sanno ee soo socda, degmada waxaa la filayaa inay ku soo kororto laba boqol iyo konton kun oo qof kale. Warbixinno isbeddel cusub ah ayaa muujinaya in ka-qaybgalka madadaalada dibadda uu sii kordhaayo, iyadoo uu kordhay in ka badan afar boqolkiiba guud ahaan dalka sannadka 2023. Dad badan iyo dad badan ayaa isticmaalaya jardiinooyinka iyo waddooyinka socodka ee degmada King, taas oo cadaadis weyn saaraysa nidaamka. Sida horumarku u kordhaayo si loo daboolo kororka dadka, khatarta ah in la waayo goobta furan, oo ay ku jiraan meelaha cagaaran ee magaalooyinka oo dhan degmada, way sii kordhaysaa. Dhulkaas qiimaha leh wuxuu ka qayb qaataa tayada nolosha ee dadka degmada King. Qiimaha dhulka si loo dejiyo koritaankaas loona ilaaliyo goobaha furan ayaa sidoo kale kordhaaya. Maanta waa wakhti ku habboon in wax laga qabto baahiyaha mustaqbalka ee deganeyaasha iyadoo la maalgelinayo jardiinooyinka iyo waddooyinka socodka iyo dardargelinta ilaalinta goobta furan.

18. Gudaha Degmada King, bulshooyin badan ayaa la kulmay taariikh ah maalgashi aan sinnayn oo xaddidan oo goboleedka ah oo ku saabsan jardiinooyinka, madadaalada, iyo goobta furan, taasoo xaddidaysa awoodda dadka deegaanka inay ku noolaadaan nolol caafimaad leh. Ku dhawwaad shan boqol oo kun oo deganeyaasha degmada King ayaa ku nool iyaga oo aan si fudud u heli karin jardiinooyinka, madadaalada, iyo goobaha furan. Waxaa jirta baahi loo qabo in wax laga qabto kala duwanaanshaha helitaanka jardiinooyinka, madadaalada, iyo goobta furan ee loogu talagalay meelaha iyo bulshooyinka si dhaqameed aan si wanaagsan loo adeegsan, oo ay ku jiraan dadka naafada ah. Xeerkan wuxuu siinayaa fursad lagu xalliyo baahiyaha jardiinooyinka iyo madadaalada ee meelaha iyo bulshooyinka si dhaqameed aan loo adeegsan, oo ay ku jiraan dadka naafada ah.

19. Iyadoo la aqoonsanayo kororka tirada dadka, isticmaalka sii kordhaaya ee jardiinooyinka iyo waddooyinka socodka iyo baahida loo qabo in wax laga qabto kala duwanaanshaha, si loo diyaariyo canshuurta 2026 ilaa 2031, waaxda jardiinooyinka iyo madadaalada waxay sameysay wacyigelin si ay u hesho jawaab celin ku saabsan nidaamka jardiinooyinka ee hadda jira iyo baahiyaha mustaqbalka ee jardiinooyinka iyo madadaalada dhammaan dadka degmada King. Bishii Maarso iyo Abriil 2024, shaqaalaha waaxda jardiinooyinka iyo madadaalada waxay qabteen labaatan iyo hal dhacdo oo bulshada lala falgalayo oo fool-ka-fool ah iyo kuwo oonleenka ah, waxayna martigeliyeen laba sahamin oonleenka ah oo ku qoran siddeed luqadood. Ka-qaybgalayaasha waxay ka socdeen dhammaan gobollada juqraafiyeed ee degmada oo ay ku jiraan tuulooyinka iyo magaalooyinka, ganacsiga, madadaalada, bulshada, iyo danaha deegaanka. In ka badan afar kun iyo siddeed boqol oo qof oo ka kala yimid dhammaan sagaalka degmo ee Golaha Degmada King ayaa ka qayb qaatay sahannada. Shaqaalaha qaybta jardiinooyinka iyo madadaalada ayaa sidoo kale la kulmay tuulooyinka iyo magaalooyinka, degmooyinka jardiinooyinka, iyo la-hawlgalayaasha muhiimka ah si ay u helaan jawaab celin dheeraad ah oo ku saabsan canshuurta.

20. Jawaab celinta laga helay dhacdooyinka isdhexgalka, sahannada internetka, iyo shirarka ayaa muujisay taageerada nidaamka goobta furan ee degmada King iyo cabbirrada lagu qeexay guusha. Afar mawduuc ayaa soo baxay oo ah mudnaanta ugu sareysa: amniga iyo ka mid noqoshada; jardiinooyinka cusub, waddooyinka socodka, madadaalada, iyo kaabayaasha; sinnaanta, matallaadda, ka mid noqoshada, iyo helitaanka; iyo dayactirka, hagaajinta, iyo shaqaaleynta. Fikradaha ayaa taageeray maalgelinta barnaamijyada jardiinooyinka iyo madadaalada ee tuulooyinka iyo magaalooyinka Degmada King; balaarinta nidaamka waddooyinka socodka goboleedka; iyo ilaalinta dhulalka dabiiciga ah.

21. Laga bilaabo Janaayo ilaa Julaay 2024, shaqaalaha waaxda jardiinooyinka iyo madadaalada waxay isugu yimaadeen Guddiga La-talinta Bulshada oo loo xilsaaray inay soo jeediyaan sida loo ilaaliyo nidaamka goobta furan ee Degmada King ee jardiinooyinka, waddooyinka socodka, aagagga dabiiciga ah, iyo dhulalka kheyraadka ka dib marka

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 19922

canshuurta 2019 ilaa 2025 ay dhammaato. Guddiga La-talinta Bulshada ayaa sidoo kale la taliyay shaqaalaha sida ugu wanaagsan ee loo dabooli karo baahiyaha sii kordhaaya ee jardiinooyinka iyo madadaalada ee Degmada King iyo deegaanka. Matallaadda Guddiyada Degmada King, magaalooyinka, ururada aan faa'iido doon ahayn, danaha bulshada iyo deegaanka, ganacsiyada, iyo isboortiga, Guddiga La-talinta Bulshada ayaa kulmay sagaal jeer si ay u bixiyaan hagitaan ku saabsan horumarinta canshuurta 2026 ilaa 2031.

22. Madaxa fulinta ee Degmada King wuxuu tixgeliyey macluumaadka laga helay wada-shaqeyntan, kororka tirada dadka ee gobolkaan, isticmaalka sii kordhaaya ee jardiinooyinka iyo waddooyinka socodka ee degmada King, iyo yaraanta jardiinooyinka, madadaalada, iyo goobaha furan ee qaar ka mid ah bulshooyinka, wuxuuna soo bandhigay xeerka tani oo aqoonsanaya isbeddelka muuqaalka iyo baahida loo qabo in la balaariyo nidaamka goobaha furan si loola jaanqaado baahida goboleedka. Xeerkan sidoo kale waa mid waafaqsan yoolalka iyo mudnaanta kooxaha shaqada ee canshuurtii hore.

23. Qorshahaan wuxuu ka dhaafi lahaa waayeelka dakhligoodu hooseeyo, halyeeyada naafada ah, iyo dadka kale ee naafada ah kordhinta caadiga ah ee canshuurta guryaha ay degan yihiin ee ka dhalatay lacag ururin loo oggolaaday xeerkan haddii loo oggolaaday ka dhaafitaan hoos yimaada RCW 84.36.381.

HA NOQOTO MID AY AMARTAY GOLAHA DEGMADA KING:

QAYBTA 1. **Natiijooyinka:**

A. Abriil 15, 2025, golaha degmada ayaa hirgeliyay Xeerka 19914 si loo gudbiyo codbixiyeyaasha doorashada gaarka ah ee lagu qaban doono degmada King Agoosto 5, 2025, soo jeedin oggolaanaysa soo rogitaan canshuur hanti oo ka badan xaddidaadda soo rogitaanka ee ku jirta cutubka 84.55 RCW. Waxaa si caadi ah loogu yeeraa "Canshuurta Jardiinooyinka," haddii ay codbixiyeyaashu ansixiyaan, kharashaadka canshuurta ee xaqa u leh waxaa ka mid noqon doona qaybinta tooska ah ee magaalooyinka, tuulooyinka, iyo degmooyinka jardiinooyinka ee dowliga ah.

B. Xeerka 19914, sida loo dhaqan geliyey, waxa uu ku jiray tixraac khaldan oo ku jira Qaybta 4.I.3.c. taas oo ka hor istaagi lahayd qaybinta qiyaas ahaan sagaashan iyo kow milyan oo doolar, inta lagu jiro nolosha canshuurta, tuulooyinka iyo magaalooyinka, taas oo ka soo horjeeda ujeeddada golaha, waxaana ku jiray tixraac khaldan oo ku jira Qaybta 7.B. taas oo keeni lahayd in la dayaco shuruud warbixin oo la damacsanaa.

C. Si waafaqsan RCW 29A.04.321, si loo soo gudbiyo soo jeedinta canshuurta codbixiyeyaasha ee doorashada gaarka ah ee lagu qaban doono degmada King Agoosto 5, 2025, xeerka waxtarka leh waa in loo gudbiyaa waaxda doorashooyinka degmada ugu dambeyn May 2, 2025.

D. Si loo gaaro wakhtiga kama dambeysta ah, goluhu waa inuu tallaabo ka qaado xeerka si degdeg ah si loo hubiyo in codbixiyeyaashu ay fursad u helaan inay ka fiirsadaan soo jeedinta canshuurta saxda ah ee loogu talagalay doorashada gaarka ah ee Agoosto. Haddii soo jeedinta canshuurta la ansixiyo codbixiyeyaasha, dakhliga ka soo baxa canshuurta wuxuu sii wadi doonaa oo balaarin doonaa taageerada nidaamka goobta furan ee degmada King, laakiin sidoo kale jardiinooyinka, waddooyinka socodka, goobta furan, iyo barnaamijyada madadaalada dhammaan magaalooyinka iyo tuulooyinka degmada, iyo sidoo kale qaar ka mid ah degmooyinka jardiinooyinka ee dowladaha hoose, iyo sidoo kale maalgelinta waxbarashada deegaanka, Beerta Xayawaanka ee Woodland Park, Seattle Aquarium, jardiinka Waterfront ee Seattle, Xarunta Sayniska ee Pacific, iyo dhismaha Garoonka Xusuusta ee dib loo cusboonaysiiyay.

E. Xeerkan wuxuu baabi'inayaa oo beddelayaa Xeerka 19914. Marka laga reebo sixitaanka tixraacyada isdhaafka ah ee ku jira qaybaha hoose ee hadda ah Qaybta 5.I.3. iyo Qaybta 8.B. ee xeerka, iyo ku darista qaybta Natiijooyinka, qaybta la laalay, iyo bayaanka degdegga ah, xeerkan waa mid la mid ah Xeerka 19914.

QAYBTA 2. **Qeexitaannada.** Qeexitaannada qaybtaan ku jira ayaa khuseeya dhammaan qaraarkan ilaa in mawduuca si gaar ah qaab kale loogu qeexo mooyaane. Kuwo ka mid ah qeexitaannada halkan ku jira ee ka kooban erayo aan la qeexin laakiin ay ku jiraan tixraac ku saabsan Qorshaha Goobta Furan ee 2022 oo ay hirgelisay Xeerka 19501, ama qodobbada Xeerka Maareynta Kobaca, cutubka 36.70A RCW, markaa qeexitaanka ama kala soocidda laga helay dukumentiga la tixraacay ayaa lagu dabaqi doonaa.

A. "Barnaamijka deeqaha xarumaha biyaha" wuxuu loola jeedaa barnaamijka ay Degmada King ku bixiso lacagaha barkadaha lagu dabaasho ee ay dadweynuhu leeyihiin si loogu taageero: kharashka mashaariicda horumarinta, oo ay ku jiraan qorshaynta, daraasadaha suurtagalnimada, diyaarinta kahor dhismaha iyo naqshadeynta, iyo dhismaha; iyo mashaariicda dayactirka waaweyn ama beddelka.

B. "Barnaamijka deeqaha helitaanka iyo ilaalinta garoomada kubadda" waxay ka dhigan tahay barnaamijka ay Degmada King ku bixiso lacagaha hey'adaha xaq u leh si loo kordhiyo gelitaanka dadweynaha ee garoomada kubadda.

C. "Barnaamijka iskaashiga bulshada iyo deeqaha" wuxuu ka dhigan yahay barnaamijka ay Degmada King ku bixiso lacagaha kooxaha ku jihaysan madadaalada, ururada ciyaaraha, iyo ururada ku salaysan bulshada si ay u fuliyaan isku darka horumarinta, hawlgelinta, ama dayactirka xarun madadaalo ama jardiin dadweyne oo ku yaal aagagga aan la midowga ahayn ee degmada King iyo tuulooyinka iyo magaalooyinka Degmada King ee faa'iidada dadweynaha.

D. "Ilaalinta" waxay ka dhigan tahay ilaalinta aagagga dabiiciga ah, sida lagu qeexay qorshaha goobta furan ee degmada, dhulalka kheyraadka dabiiciga ah, oo lagu kala saaray RCW 36.70A.170, laga hor istaagayo horumarinta iyada oo loo maraayo helitaanka khidmad ama xuquuq, soo celinta shaqooyinka dabiiciga ah, iyo maamulka dhiirigelinta mulkiileyaasha dhulka ee si iskood ah u ilaaliya goobta furan.

E. "Barnaamijka canshuuraha mustaqbalka ilaalinta" wuxuu ka dhigan yahay barnaamijka lagu qeexay cutubka 26.12 ee K.C.C.

F. "Goobaha waxbarashada iyo madaniga ah" waxay ka dhigan yihiin Beerta Xayawaanka Woodland, Seattle Aquarium, Memorial Stadium, Beerta Waterfront ee Seattle, iyo Xarunta Sayniska ee Pacific.

G. "Barnaamijka deeqda noqo mid firfircoon/ku joog firfircooni" wuxuu ka dhigan yahay barnaamijka ay Golaha Degmada King ku bixiyaan abaalmarinnada deeqaha golaha ee loogu talagalay hawlaha isboortiga dhallinyarada ama kuwa hiwaayadda ah ama xarumaha.

H. "Barnaamijka deeqaha bulshada caafimaadka leh iyo jardiinooyinka" wuxuu loola jeedaa barnaamijka ay Degmada King ku bixiso lacagaha hey'adaha xaqa u leh si loo gaaro fursado iyo helitaan loo siman yahay oo ku saabsan jardiinooyinka iyo madadaalada aagagga iyo bulshooyinka si caadi ah aan loo adeegsan, oo ay ku jiraan dadka naafada ah, oo ku yaal aagagga aan la midowga ahayn ee Degmada King iyo tuulooyinka iyo magaalooyinka Degmada King.

D. "Canshuurta" waxaa loola jeedaa canshuurta hantida ee caadiga ah ee loogu talagalay ujeeddooyinka gaarka ah iyo muddada lagu sheegay xeerkan oo ay oggolaadeen codbixiyeyaasha sida waafaqsan sharciga gobolka.

E. "Lacagta Canshuurta" waxaa loola jeedaa caddadka ugu muhiimsan ee lacagta ay soo ururisay canshuuraha, dakhli kasta oo dulsaar ah oo ka soo gala lacagta, iyo dakhliga ka soo baxa maalgelin kasta oo ku meel gaar ah ka dib oggolaanshaha canshuurta.

K. "Qodobka xaddidaadda" waxay ka dhigan tahay sicir bararka ugu dambeeyay ee la daabacay ee xafiiska falanqeynta dhaqaalaha iyo maaliyadda ee degmada King oo lagu daray tusmada dadka, ama xaddidaadda ku jirta cutubka 84.55 RCW, midka sareeya.

L. "Nidaamka goobta furan" wuxuu ka dhigan yahay qaybaha nidaamka goobta furan ee degmada King ee jardiinooyinka, oo ay ku jiraan madadaalada iyo goobaha isticmaalka badan, waddooyinka socodka goboleedka, aagagga dabiiciga ah, iyo dhulalka kheyraadka dabiiciga ah. "Nidaamka goobta furan" sidoo kale waxaa ku jira dhismeyaal ama guryo ay leeyihiin ama si kale hoos ugu jira maamulka waaxda jardiinooyinka iyo madadaalada ee waaxda kheyraadka dabiiciga ah.

M. "Goobta furan" waxay ka dhigan tahay dhul kasta oo lagu qeexay qayb ka mid ah nidaamka goobta furan ama nidaamka jardiinooyinka degmada, tuulooyinka, ama nidaamka jardiinooyinka magaalada.

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 19922

N. “Degmada jardiinooyinka” waxay ka dhigan tahay magaalo weyn oo firfircoon oo jardiinooyinka degmada ah oo hoos yimaada cutubka 35.61 RCW iyo aagagga adeegga jardiinooyinka iyo madadaalada oo hoos yimaada cutubka 36.68 RCW ee Degmada King.

O. “Nidaamka jardiinooyinka tuulo ama magaalo” waxay ka dhigan tahay dhisme kasta ama qaab kale oo la xiriira jardiinooyinka ama madadaalada; jardiinooyinka, waddooyinka socodka, aagagga dabiiciga ah, dhulalka kheyraadka dabiiciga ah, iyo hanti kale oo jardiinooyin ama madadaalo ah oo ay leedahay ama si kale ugu jirta maamulka tuulo ama magaalo ku dhex taalla degmada King.

QAYBTA 3. **U soo gudbinta canshuurta codbixiyeyaasha.** Si loo bixiyo lacagaha lagama maarmaanka u ah ujeeddooyinka ku xusan qaybta 5-aad ee xeerkan, golaha Degmada King waa inuu u soo gudbiyaa codbixiyeyaasha u qalma ee degmada soo jeedin oggolaanaysa canshuurta guryaha ee caadiga ah ee ka badan xaddidaadda canshuurta ee ku jira cutubka 84.55 RCW oo ah lix sanno oo xiriir ah, iyada oo ururinta ay bilaabanayso 2026, oo ah qiimo aan ka badnayn $0.2329 oo ka mid ah halkii kun doolar ee qiimeynta la qiimeeyay sannadka ugu horeeya ee muddada canshuurta. Caddadka doolarka ee canshuurta sannadka koowaad wuxuu noqon doonaa saldhiga lagu xisaabinaayo caddadka canshuurta sannadka labaad ilaa lixaad. Sida waafaqsan RCW 84.55.050, soo rogitaanka canshuurtaan waxay noqon doontaa soo rogitaan canshuur hanti oo caadi ah oo ku xiran qodobka xaddidaadda.

QAYBTA 4. **Dabaajiga dakhliga canshuurta.** Dakhliga canshuurta waa in lagu shubaa sanduuq hoosaad heellan oo ka tirsan maalgelinta jardiinooyinka iyo madadaalada, ama beddelkeeda.

QAYBTA 5. **Kharashyada u qalma.** Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyaasha u qalma ee degmada, dakhliga canshuurta waxaa loo isticmaali doonaa ujeeddooyinka soo socda:

A. Kharashaadka ay degmada ku bixisay ee la xiriira doorashada gaarka ah ee loogu yeeray qaybta 6 ee xeerka tan iyo sidoo kale doorashooyinka mustaqbalka ee jardiinooyinka, madadaalada, waddooyinka socodka, iyo goobta furan.

B. Qaybinta goobaha waxbarashada iyo madaniga ah, oo ku kooban xarumaha soo socda:

1. Ilaa afartan milyan oo doolar oo loogu talagalay in loo qaybiyo Woodland Park Zoological Society (Bulshada Deegaanka) taas oo loo isticmaali doono keliya: waxbarashada deegaanka oo diiradda lagu saaray helitaanka meelaha iyo bulshooyinka caadiyan aan si wanaagsan loo adeegsan, oo ay ku jiraan dadka naafada ah; beeraha iyo dayactirka dhismayaasha iyo dhulalka; ilaalinta noocyada khatarta ku jira; iyo horumarinta istiraatiijiyadaha ilaalinta iyo waxbarashada si loo yareeyo saameynta xayawaanka iyo deegaanada ka dhalanaysa isbeddelka cimilada;

2. Ilaa laba iyo toban milyan oo doolar oo loogu talagalay qaybinta Seattle Aquarium, taas oo loo isticmaali doono keliya: waxbarashada deegaanka oo diiradda lagu saaray helitaanka meelaha iyo bulshooyinka aan caadiyan loo adeegsan, oo ay ku jiraan dadka naafada ah; dayactirka dhismayaasha iyo dhulka; ilaalinta noocyada khatarta ku jira; iyo horumarinta istaraatiijiyadaha ilaalinta iyo waxbarashada si loo yareeyo saameynta xayawaanka iyo deegaanada ka dhalanaysa isbeddelka cimilada;

3. Ilaa laba milyan iyo shan boqol oo kun oo doolar oo loogu talagalay in loo qaybiyo magaalada Seattle, taas oo loo isticmaali doono keliya kharashaadka raasamaalka ee mashruuca Memorial Stadium;

4. Ilaa lix milyan oo doolar oo loogu talagalay qaybinta Pacific Science Center, kaas oo loo isticmaali doono keliya ujeeddooyinka maalgelinta ama hawlgalka iyo dayactirka ee la xiriira ilaalinta deegaanka iyo cimilada iyo waxbarashada; iyo

5. Ilaa lix milyan oo doolar oo loogu talagalay in loo qaybiyo ururka 501(c)(3), oo ka diiwaan gashan xoghayaha gobolka ee Washington lambarka 1133863 oo loo yaqaan Friends of Waterfront Park ama ururkiisa beddelka ah ee 501(c)(3) oo ka diiwaan gashan xoghayaha gobolka ee Washington, kaas oo loo isticmaali doono keliya jardiinooyinka Waterfront ee Seattle, waxaana loo isticmaali doonaa keliya: helitaanka jardiinooyinka ee meelaha iyo bulshooyinka aan caadiyan loo adeegsan, oo ay ku jiraan dadka naafada ah; taageeridda deegaanka nadiif ah oo ammaan ah; barnaamijyada farshaxanka, dhaqanka, caafimaadka, iyo madadaalada oo bilaash ah dhammaan booqdeyaasha; iyo horumarinta iskaashiga bulsho ee loo dhan yahay;

C. Shan iyo labaatan milyan iyo shan iyo labaatan kun oo doolar loogu talagalay qaybinta maalgelinta jardiinooyinka degmada iyo goobta furan ee loo gudbiyo tuulooyinka iyo magaalooyinka gudaha degmada King si ay ugu shaqeeyaan nidaamka jardiinooyinka tuulooyinkooda ama magaalooyinkooda iyo maalgelinta mashaariicda horumarinta. Lacagahan waxaa loo qaybin doonaa iyadoo lagu salaynaayo tirada dadka ee 2025 iyo jiritaanka aagagga fursadaha sida ku qeexan K.C.C. 26.12.003.J.1., sida soo socota:

1. Algona iyo Pacific – laba boqol iyo konton kun oo doolar midkiiba;

2. Enumclaw – shan boqol oo kun oo doolar;

3. Tukwila, SeaTac, Des Moines, iyo Burien – hal milyan oo doolar midkiiba;

4. Auburn, Federal Way, Renton, iyo Kent – hal milyan sagaal boqol iyo konton kun oo doolar midkiiba;

5. Seattle – laba milyan iyo siddeed boqol oo kun oo doolar;

6. Skykomish, Beaux Arts Village, Hunts Point, Yarrow Point, Milton, Carnation, Medina, Clyde Hill, Normandy Park, Black Diamond, North Bend, iyo Duvall – boqol iyo shan iyo labaatan kun oo doolar midkiiba;

7. Lake Forest Park, Newcastle, Woodinville, iyo Snoqualmie – laba boqol iyo konton kun oo doolar midkiiba;

8. Covington, Kenmore, Mercer Island, Maple Valley, Bothell, Issaquah, Shoreline, iyo Sammamish – shan boqol oo kun oo doolar midkiiba; iyo

9. Redmond, Kirkland, iyo Bellevue – sagaal boqol toddobaad iyo shan kun oo doolar midkiiba.

D. Ilaa lixdan iyo siddeed milyan oo doolar loogu talagalay xarumaha biyaha, oo ku kooban kuwa soo socda:

1. Ilaa lixdan iyo afar milyan oo doolar barnaamijka deeqda xarumaha biyaha; iyo

2. Ilaa labaatan iyo laba milyan oo doolar loogu talagalay Xarunta Biyaha ee Weyerhaeuser Degmada King si loogu fuliyo mashaariic waaweyn oo dayactir ah;

E. Ilaa toban milyan oo doolar oo loogu talagalay barnaamijka deeqda Get Active/Stay Active (Noqo Mid Firfircoon/Ku Joog Firfircooni), oo si siman loogu qaybin doono sagaalka degmo ee golaha;

F. Ugu yaraan soddon milyan oo doolar oo loo qaybiyo hey’adaha xaq u leh barnaamijka deeqaha ee bulshooyinka caafimaadka qaba iyo jardiinooyinka;

G. Ilaa laba iyo toban milyan iyo shan boqol oo kun oo doolar oo loogu talagalay in loo qaybiyo hey’adaha xaq u leh barnaamijka iskaashiga bulshada iyo deeqaha;

H. Ilaa saddex iyo toban milyan iyo shan boqol oo kun oo doolar oo loo qaybiyo hey’adaha xaq u leh barnaamijka deeqda gelitaanka iyo ilaalinta garoomada kubadda;

I. Inta soo hartay ee dakhliga canshuurta loogu talagalay ujeeddooyinka soo socda:

1. qiyaastii afartan boqolkiiba dakhliga canshuurta ee dayactirka iyo hawlgallada nidaamka goobta furan ee Degmada King;

2. konton boqolkiiba dakhliga canshuurta loogu talagalay:

a. Helitaanka, ilaalinta, iyo maamulidda goobta furan oo dheeraad ah, oo ay ku jiraan goobaha cagaaran ee magaalooyinka, aagagga dabiiciga ah, dhulalka kheyraadka dabiiciga ah, iyo xuquuqda waddooyinka ee waddooyinka socodka goboleedka;

b. Helitaanka xuquuqaha waddooyinka iyo horumarinta waddooyinka socodka goboleedka iyo kuwa kale ee ay dadweynaha leeyihiin; iyo

c. Kharashka mashaariicda horumarinta iyo dayactirka waaweyn ee hagaajinta ama beddelka kaabayaasha nidaamka goobta furan, kaabayaasha nidaamka jardiinooyinka tuulooyinka iyo magaalooyinka, iyo xarumaha madadaalada ee ay leedahay ama ay maamusho urur aan

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 19922

faa'iido doon ahayn 501(c)(3);

3. Toban boqolkiiba dakhliga canshuurta ee loo qaybiyo tuulooyinka, magaalooyinka, iyo degmooyinka jardiinooyinka ee Degmada King si ay u maamulaan nidaamyada jardiinooyinka tuulooyinkooda ama magaalooyinkooda iyo mashaariicda horumarinta caasimadda, oo qadarkaasi ka mid ah:

a. Todobaatan iyo shan kun oo doolar ayaa sannad walba loo qaybin doonaa tuulo kasta iyo magaalo kasta, iyo mid kasta oo ka mid ah degmooyinka jardiinooyinka ee inta badan u adeega aagagga aan la midowga ahayn ee degmada King: Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Fall City; Degmada Jardiinka Magaalo Weynta ee Si View; iyo Degmada Jardiinka ee Vashon;

b. Shan iyo konton kun oo doolar oo dheeraad ah ayaa sannad walba loo qaybin doonaa tuulooyinka iyo magaalooyinka leh dadweyne ka badan afar kun; iyo

c. Inta ka hartay dakhliga canshuurta, ka dib qaybinta loo sameeyay sida waafaqsan qayb-hoosaadka I.3.a. iyo b. ee qaybta, lixdan boqolkiiba waa in loo qaybiyo si waafaqsan tirada dadka ee tuulooyinka ama magaalooyinka, afartan boqolkiibana waa in loo qaybiyo si waafaqsan qiimeynta hantida ku jirta tuulooyinka ama magaalooyinka;

4. Qayb ka mid ah dakhliga canshuurta ee loo qaybiyo hey'adaha aan ahayn degmada King, qayb ayaa lagu hayn doonaa degmada si loogu isticmaalo kharashaadka la xiriira maamulka qaybinta dakhliga canshuurta. Kharashaadka maamulka ee xaq u leh waxaa ka mid noqon doona dhammaan kharashaadka iyo lacagaha lagu soo dalaco waaxda jardiinooyinka iyo madadaalada ama degmada ee la xiriira ama loo aaneynayo ujeeddooyinka ku xusan qaybtaan iyo sidoo kale qaybaha 7 iyo 8 ee xeerka.

<u>QAYBTA 6.</u> **Ku baaq doorasho gaar ah.** Sida waafaqsan RCW 29A.04.321, golaha degmada King wuxuu halkan ku baaqayaa doorashada gaarka ah in lagu qabto iyadoo lala socdo doorashada hordhaca ah ee Agoosto 5, 2025, si loo tixgeliyo soo jeedin oggolaanaysa soo rogitaan canshuur hanti joogto ah ujeeddooyinka lagu sharxay xeerkan. Agaasimaha Doorashooyinka Degmada King waa inuu sababo ogeysiis in la siiyo xeerkan sida waafaqsan dastuurka gobolka iyo sharciga guud iyo in uu u gudbiyo codbixiyeyaasha degmada ee u qalma, doorashada gaarka ah ee degmada ee la sheegay, soo jeedinta hadda ka dib hore loo wado. Karaaniga goluhu waa inuu soo jeedintaan si muhiim ah ugu xaqiijiyaa agaasimaha doorashada ee Degmada King qaabkan soo socda, oo ay la socoto wax ku daris, ka tirtirid ama wax ka beddelka soo jeedinta ku xusan halka hoose ee uu u baahnaan karo qareenka dacwad oogaha:

Degmada King

Soo Jeedinta Lr. 1

Canshuurta Jardiinooyinka, Madadaalada, Waddooyinka Socodka, iyo Goobta Furan

Golaha Degmada King ayaa hirgeliyay Xeerka ______ oo beddelaaya canshuurta jardiinooyinka ee wakhtigeedu dhammaanayso. Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay taageeraysaa jardiinooyinka degmada, magaalada, degmada jardiinka, iyo jardiinooyinka tuulada, goobta furan, iyo waddooyinka socodka; madadaalada; barkadaha dadweynaha; iyo goobaha waxbarashada iyo madaniga ah. Waxay oggolaanaysaa canshuur hanti oo lix-sanno oo dheeraad ah oo bilaabanaysa 2026 oo ah $0.2329 ka mid ah $1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay, waxay isticmaalaysaa caddadka canshuurta ee 2026 si loo xisaabiyo kororyada sannadlaha ah ee 2027-2031 oo loo maraayo sicir bararka Degmada King oo lagu daray tusmada tirada dadka ama xaddidaadda cutubka 84.55 RCW, hadba midka ugu weyn, waxayna ka dhaafaysaa waayeellada, halyeeyadii hore, iyo dadka naafada ah ee u qalma sida ka xusan RCW 84.36.381. Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyay _

Diiday _

<u>QAYBTA 7.</u> **Qaybinta.** Ka hor inta aan loo qaybinin dakhliga canshuurta hay'ad aan ahayn Degmada King, hey'adda qaadata iyo degmada waa inay si buuxda u fuliyaan heshiis qeexaya shuruudaha iyo xaaladaha, oo ay ku jiraan ujeeddada ama ujeeddooyinka xaqa u leh ee lagu aqoonsaday qaybta 5 ee xeerka, kaas oo hey'addu ku helayso qaybinta dakhliga canshuurta.

<u>QAYBTA 8.</u> **Guddiga kormeerka ee jardiinooyinka la aasaasay.**

A. Haddii soo jeedinta ku jirta qaybta 6 ee xeerka lagu ansixiyo codbixiyeyaasha u qalma ee degmada King, guddiga kormeerka canshuurta jardiinooyinka waa in uu magacaabo madaxa fulinta. Guddigu wuxuu ka koobnaan doonaa sagaal xubnood. Marka la gaaro Maarso 31, 2026, xubin kasta oo golaha ka tirsan waa inuu soo magacaabaa musharax u tartamaaya guddiga oo ku nool degmada xubinta golaha. Haddii, Maarso 31, 2026, madaxa fulinta uusan magacaabin qofka uu soo magacaabay xubin golaha, madaxa fulinta waa inuu codsadaa in xubin golaha uu, Juun 30, 2026, soo magacaabo musharax kale si loo magacaabo. Xubnaha waxaa ansixin doona golaha. Xubnaha noqon karaan saraakiil lasoo doortay ama la magacaabay oo ka tirsan xubin kasta oo dowladeed, marka laga reebo shakhsiyaadka u adeegaya awood madani oo ka tirsan guddiga maxalliga ah ama guddi waxay xaq u leeyihiin inay ka shaqeeyaan guddiga kormeerka canshuurta jardiinooyinka.

B. Guddigu waxay dib u eegi doonaan qaybinta dakhliga canshuurta iyo horumarka lagu gaarayo ujeeddooyinka soo jeedintaan. Ka hor ama Diseembar 31, 2027, guddigu waa inay dib u eegis ku sameeyaan oo warbixin u gudbiyaan Madaxa Fulinta Degmada King, Golaha Degmada King iyo guddiga siyaasadda goboleedka ku saabsan kharashaadka dakhliga canshuurta ee 2026. Intaas ka dib, guddigu waa inuu dib u eego oo warbixin siiyo madaxa fulinta degmada King, golaha degmada King iyo guddiga siyaasadda goboleedka sannad walba. Warbixinta kasta waa inay ku jirtaa xisaabinta kharashaadka canshuuraha ee golaha degmada King iyo ZIP Code, oo loo kala saaray ujeeddooyinka lagu sharxay qaybta 5.B. ilaa I.3. ee xeerka. Warbixin kasta oo loo gudbiyo golaha degmada King qaybtaan waa in si elektaroonig ah loogu gudbiyaa xafiiska xoghayaha golaha, kaas oo hayn doona nuqul elektaroonig ah oo siin doona nuqul elektaroonig ah dhammaan xubnaha golaha, madaxa shaqaalaha golaha, iyo madaxa siyaasadda. Guddigu wuxuu dhacayaa Diseembar 31, 2032.

<u>QAYBTA 9.</u> **Ka-dhaafitaanka.** Canshuuraha dheeraadka ah ee joogtada ah ee hantida ma guurtada ah ee uu oggolaaday xeerka waxaa lagu dari doonaa wax kasta oo ka dhaafitaan canshuurta hantida ma guurtada ah ee uu oggolaaday RCW 84.36.381.

<u>QAYBTA 10.</u> **Ansixinta.** Shahaadaynta soo jeedinta ee karaaniga golaha Degmada King ee ku socota agaasimaha doorashooyinka sida waafaqsan sharciga ka hor doorashada Agoosto 5, 2025, iyo falal kasta oo kale oo waafaqsan maamulka iyo ka hor taariikhda dhaqan gelinta xeerkan ayaa halkan lagu ansixiyay oo lagu xaqiijiyay.

<u>QAYBTA 11.</u> Kuwa soo socda dib ayaa looga noqday:

A. Xeerka 19914, Qaybta 1;

B. Xeerka 19914, Qaybta 2;

C. Xeerka 19914, Qaybta 3;

D. Xeerka 19914, Qaybta 4;

E. Xeerka 19914, Qaybta 5;

F. Xeerka 19914, Qaybta 6;

G. Xeerka 19914, Qaybta 7;

H. Xeerka 19914, Qaybta 8;

I. Xeerka 19914, Qaybta 9; iyo

J. Xeerka 19914, Qaybta 10.

<u>QAYBTA 12.</u> **Kalagoynta.** Haddii wax kasta oo ka mid ah xeerkan ama isticmaalkiisa uu qof ama xaalad uu yahay mid aan ansax ahayn, inta ka hartay qaanuunka ama ku-dhaqanka qaybahaee ku aaddan dadka kale ama xaaladaha saamayn kuma laha.

<u>QAYBTA 13.</u> Golaha degmada wuxuu xaqiiqo ahaan u arkaa oo ku dhawwaaqayaa in xaalad degdeg ah ay jirto iyo in xeerkan uu lagama maarmaan u yahay ilaalinta degdegga ah ee nabadda dadweynaha, caafimaadka ama badbaadada ama taageeridda dowladda degmada iyo hey'adaha dadweynaheeda ee jira.

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127204

XEER khuseeya ololeyaasha doorashada ee ay dadweynahu maalgeliyaan; oo u oggolaanaya in loo gudbiyo codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada doorashada lagu qaban doono Agoosto 5, 2025, soo jeedin u oggolaanaysa Magaalada inay ku soo rogto canshuuraha hantida caadiga ah muddo ilaa toban sanno ah oo ka badan xaddidaadda canshuuraha ee cutubka 84.55 RCW ujeeddada maalgelinta kharashka iyo maamulka Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda ee Magaalada iyo ujeeddooyin kale oo Magaalada ah; oo qeexaya habka loo tixgelinayo isbeddelada barnaamijka; oo lagu dabaqayo ka-dhaafidda muwaadiniinta waayeellada iyo dadka naafada ah ee canshuurtaas sida ku xusan RCW 84.36.381; iyo ansixinta iyo xaqiijinta falal hore oo gaar ah.

HALKA AY, Nofeembar 2015, codbixiyeyaasha Seattle ay ansixiyeen Hindisaha 122, hindise dadweyne oo loogu talagalay in lagu dhiso "doorashooyin daacad ah Magaalada... iyadoo: la siinayo dad badan fursad ay codkooda ku maqlaan dimuqraadiyaddeenna"; iyo

HALKA AY, Hindisaha 122 sidoo kale uu abuuray "barnaamijka maalgelinta dadweynaha ee ololaha Kuubanka Dimuqraadiyadda...si loo ballaariyo tirada musharaxiinta xafiisyada magaalada iyo si loo ilaaliyo xakamaynta dadweynaha ee habka doorashada ee Seattle"; iyo

HALKA AY, canshuurta taageeraysa barnaamijka maalgelinta dadweynaha ee ololaha Kuubanka Dimuqraadiyadda ay bilaabatay 2015 oo ay socotay muddo toban sanno ah; iyo

HALKA AY, barnaamijka Kuubanka Dimuqraadiyadda uu ahaa mid guuleystay oo caan ah, iyadoo in ka badan 105,000 oo reer Seattle ah ay isticmaaleen Kuubannada Dimuqraadiyadda si ay ugu deeqaan musharaxiinta xafiisyada Magaalada tan iyo markii barnaamijku bilowday; iyo

HALKA AY, Seattle ay ka mid ahayd meelaha ugu badan ee dadka ay ku deeqaan musharaxiinta maxalliga ah dalka tan iyo markii barnaamijku bilowday; iyo

HALKA AY, Magaalada Seattle ay damacsan tahay inay soo bandhigto soo jeedin canshuur ah doorashada hordhaca ah ee Agoosto 5, 2025, si loogu beddelo canshuurta dhammaanaysa ee taageertay barnaamijka Kuubanka Dimuqraadiyadda, si loo sii wado taageerada dhaqaale ee barnaamijka tobankii sanno ee soo socda; iyo

HALKA AY, kadib toban sanno oo isticmaal ah, isbeddelo lagu sameeyo barnaamijka maalgelinta dadweynaha ee ololaha Kuubanka Dimuqraadiyadda laga yaabo inay loo baahdo; iyo

HALKA AY, sharcigan uu codsanayo Madaxa Fulinta, Golaha Magaalada, iyo Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka inay bilaabaan habka wada-tashiga dhinacyada daneynaya sannadka 2026 (kadib doorashada guud ee Nofeembar 2025) si loo tixgeliyo isbeddel kasta oo suurtagal ah oo lagu sameeyo barnaamijka maalgelinta dadweynaha ee ololaha Kuubanka Dimuqraadiyadda, iyo inay soo jeediyaan talooyin ku saabsan isbeddeladaas Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada;
HADDABA, SIDAAS DARAADDEED,

**HA NOQOTO MID AY AMARTAY MAGAALADA SEATTLE SIDA SOO SOCOTA:**

Qaybta 1. Qeexitaannada. Sida loogu isticmaalay xeerkan:

"Magaalada" waxay ka dhigan tahay Magaalada Seattle.

"Maalgelinta barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda" waxay ka dhigan tahay oo aan ka yarayn $45,000,000 oo ka mid ah kororka caddadka canshuurta ee tobankii sanno ee ka dhalatay ansixinta soo jeedinta.

"Dakhliga canshuurta" waxay ka dhigan tahay qaybtaas canshuuraha hantida caadiga ah ee la soo rogay oo la ururiyey sida ay u oggolaadeen codbixiyeyaasha iyadoo la raacayo xeerkan, iyo dhammaan dulsaarada iyo dakhliga kale ee ka soo baxa, iyo, haddii Magaalada ay soo saarto curaar, qoraallo, ama amaahyo gudaha ah, ama caddeymo kale oo deyn ah oo si buuxda ama qayb ahaan looga bixinayo canshuuraha dheeraadka ah ee xeerkan oggol yahay, sida ku xusan Qaybta 4 ee xeerkan, markaa "dakhliga canshuurta" sidoo kale waxaa ku jira dakhliga curaartaas, damaanaddaas, ama amaahdaas gudaha ah, ama caddeymaha kale ee deynta.

Qaybta 2. Soo jeedinta canshuuraha hantida caadiga ah. Magaalada waxay u gudbineysaa codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada soo jeedin sida ku xusan RCW 84.55.050 si loo dhaafo xaddidaadda canshuuraha hantida caadiga ah ee ku xusan RCW 84.55.010 ee canshuuraha hantida ee la soo rogay 2025 ilaa 2034 si loogu ururiyo 2026 ilaa 2035 siday u kala horreeyaan. Soo jeedinta waa in lagu xaddidaa si Magaalada aysan u soo rogin heerka canshuurta guud ee ka badan $2.27 halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay sannadka ugu horreeya, taasoo ka dhigan heerka canshuurta dheeraadka ah ee $0.015 halkii $1,000 ee qiimaha la qiimeeyay sannadka ugu horreeya. Soo jeedinta waxaa la filayaa inay soo saarto qiyaastii $45,000,000 guud ahaan tobankii sanno ee loogu talagalay ujeeddooyinka maalgelinta barnaamijka Kuubanka Dimuqraadiyadda. Lacagta canshuurta ee sannadka ugu horreeya waa in loo isticmaalo in lagu go'aamiyo xaddidaadda canshuuraha caadiga ah ee sannadaha xiga iyadoo la raacayo cutubka 84.55 RCW. Lacagaha ka badan lacagta loogu talagalay maalgelinta barnaamijka Kuubanka Dimuqraadiyadda waxaa loo heli karaa ujeeddooyin kale oo Magaalada ah oo loogu talagalay in lagu dabaqo canshuurta caadiga ah ee Magaalada. Iyadoo la raacayo RCW 84.36.381 iyo RCW 84.55.050, Magaalada waxay ka dhaafaysaa waayeelka, halyeeyada naafada ah, ama dadka kale ee naafada ah ee u qalma sida ku xusan RCW 84.36.381 lacagta canshuurta kordhay ee ka dhalatay ansixinta soo jeedinta. Sida ku cad RCW 84.55.050(4), canshuuraha hantida joogtada ah ee ugu badan ee la qaadi karo sannadka 2035 si loogu ururiyo sannadka 2036 iyo sannadaha dambe waa in loo xisaabiyaa sidii xadka canshuuraha joogtada ah aan loo kordhin marka la cuskado xeerkan.

Qaybta 3. Dabaajiga dakhliga kasoo gala cashuurta. Haddii aan si kale loogu amrin amar, maalgelinta barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda waa in lagu shubaa Sanduuqa Election Vouchers si loo maalgeliyo barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda. Dakhliga canshuuraha waa in si ku meel gaar ah loogu shubaa ama loo maalgeliyaa hab kasta oo sharci u ah maalgashiga lacagta Magaalada, dhammaan dakhliga maalgashiga ee maalgelinta barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda waa in lagu shubaa Sanduuqa Election Vouchers. Agaasimaha Maaliyadda waxaa loo oggol yahay inuu abuuro akoonno kale oo ku jira Sanduuqa Election Vouchers haddii loo baahdo ama ay ku habboon tahay hirgelinta ujeeddooyinka xeerkan.

## Qoraalka buuxa ee Qaraarka Lr. 127204

Qaybta 4. Curaarta iyo Damaanadda. Ilaa inta uu sharcigu oggol yahay, Magaalada waxay soo saari kartaa curaarta, damaanadda, ama caddeymo kale oo deyn ah oo si buuxda ama qayb ahaan lagu bixinayo canshuuraha dheeraadka ah ee lagu oggolaaday xeerkan, waxayna ku ballanqaadi kartaa oo ku bixin kartaa canshuurahaas lacagta asalka ah, dulsaarka, iyo lacagta dheeraadka ah (haddii ay jirto) ee curaartaas, damaanaddaas, ama caddeymaha kale ee deynta iyo kharashaadka la xiriira.

Qaybta 5. Isticmaalka dakhliga cashuurta. Lacagta maalgelinta barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda waa in loo isticmaalaa oo keliya barnaamijka maaliyadda dadweynaha ee Foojarka Dimuqraadiyadda ee ku saleysan qaybaha ku jira Qaybta 6 ee xeerkan iyo sida waafaqsan RCW 84.55.050. Haddii ururinta canshuuraha ay dhaafto lacagta maalgelinta barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda, lacagta dheeraadka ah waxaa loo heli karaa ujeeddooyinka Magaalada ee loogu isticmaali karo canshuurta joogtada ah ee Magaalada.

Qaybta 6. Barnaamijka maaliyadda dadweynaha ee Foojarka Dimuqraadiyadda. Barnaamijka maaliyadda dadweynaha ee Foojarka Dimuqraadiyadda wuxuu ka kooban yahay kharashaadka maamulka barnaamijka iyo sidoo kale kharashaadka taageeridda tabarucaadka ololaha ee ay taageerayaan Foojarka Dimuqraadiyaddas. Kharashaadka maamulka waxaa ka mid ah waxyaabo sida daabacaadda iyo dirista vouchers, shaqaalaha, wacyigelinta, iyo kharashaadka farsamaynta vouchers ee Doorashooyinka Degmada King.

Qaybta 7. Hannaanka koox shaqo. Madaxa Fulinta, Golaha Magaalada, iyo Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka waxaa laga codsanayaa inay abaabulaan koox shaqo horraanta sannadka 2026 si ay ugu soo jeediyaan Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada horumarinta barnaamijka maaliyadda dadweynaha ee Foojarka Dimuqraadiyadda, oo ay ku jiraan wax ka qabashada saameynta Guddiyada Waxqabadka Siyaasadeed ee doorashooyinka Magaalada. Hannaanka daneeyayaasha waa inuu ka mid noqdaa talooyinka musharrixiinta, shaqaalaha ololaha, la-taliyayaasha xirfadlayaasha ah ee doorashooyinka, taageerayaasha dawladda wanaagsan, iyo Agaasimaha Fulinta iyo xubnaha Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka.

Qaybta 8. Warbixinta. Agaasimaha Fulinta ee Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka wuxuu diyaarin doonaa oo u gudbin doonaa Golaha Magaalada iyo Duqa Magaalada warbixin horumarineed oo ku saabsan kharashaadka canshuuraha iyo u-geynta mashruuca iyo barnaamijka kadib sannad kasta oo barnaamijka voucher-ka loo isticmaalo doorasho.

Qaybta 9. Ciwaanka warqadda codbixinta ee doorashada. Golaha Magaalada wuxuu farayaa in Xoghayaha Magaalada uu fayl gareeyo xeerkan Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada King, Washington, isagoo ah kormeeraha doorashooyinka ee xafiiska, isagoo codsanaya in Agaasimaha Doorashooyinka uu ku dhawaaqo oo qabto doorashada gaarka ah ee Magaalada iyadoo lala kaashanayo doorashada hordhaca ah ee la qaban doono Agoosto 5, 2025, ujeeddada loo gudbinayo codbixiyeyaasha u qalma ee Magaalada soo jeedinta ku xusan xeerkan. Xoghayaha Magaalada waxaa loo farayaa inuu u caddeeyo Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada King ciwaanka warqadda codbixinta ee uu ansixiyay Qareenka Magaalada iyadoo la raacayo waajibaadka Qareenka Magaalada ee hoos yimaada RCW 29A.36.071. Ciwaanka warqadda codbixinta ee soo socda oo ka kooban bayaanka mowduuca iyo sharaxaad kooban ayaa loo gudbiyay Qareenka Magaalada si loo tixgeliyo:

MAGAALADA SEATTLE

SOO JEEDINTA LR. 1

Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada Seattle waxay ansixiyeen Xeerka XXXX, oo ku saabsan beddelidda maalgelinta barnaamijka maaliyadda dadweynaha ee ololaha Foojarka Dimuqraadiyadda ee Seattle.

Haddii la ansixiyo, soo jeedintan waxay beddeli doontaa canshuurta dhammaanaysa si loo maalgeliyo barnaamijka maaliyadda dadweynaha ee ololaha Foojarka Dimuqraadiyadda ee Magaalada, oo ay ku jiraan kharashaadka maamulka barnaamijka.

Waxay oggolaanaysaa canshuur toban-sanno ah oo ururinta laga bilaabi doono 2026 oo ah $0.015/$1,000 dheeraad ah ee qiimeynta la qiimeeyay, ugu badnaan heerka wadarta guud ee canshuurta oo ah $2.27/$1,000. Caddadka canshuurta ee sannadka 2026 ayaa noqon doona aasaaska xisaabinta canshuuraha ee soo socda ilaa iyo 2035. Ka dhaafitaanka RCW 84.36.381 ee dadka muwaadiniinta waayeellada iyo naafada ayaa khuseeya.

Ma tahay in canshuurtaan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qaybta 10. Ciwaannada qaybaha. Ciwaannada qaybaha waa ujeeddooyin tixraac fudud oo keliya mana beddelaan ama xaddidaan qoraalka qaybta.

Qaybta 11. Kalagoynta. Qodobbada xeerkan waxaa lagu dhawaaqay inay kala gooni yihiin oo la kala saari karo. Ansax la'aanta qodob, jumlad, faqrad, qayb, qayb, ama qayb ka mid ah xeerkan, ama ansax la'aanta codsigeeda qof ama xaalad, ma saameyneyso ansaxnimada inta kale ee xeerkan ama ansaxnimada codsigeeda dadka kale ama xaaladaha kale, oo ay ku jirto ansaxnimada oggolaanshaha canshuuraha dheeraadka ah ee canshuurta.

Qaybta 12. Ficil kasta oo waafaqsan awoodda xeerkan oo la sameeyo ka dib ansixintiisa iyo ka hor taariikhda uu dhaqan galayo waa la ansixiyay oo la xaqiijiyay.

Qaybta 13. Qaybaha xeerkan ee bixiya soo gudbinta warqadda codbixinta ee codbixiyeyaasha waxay dhaqan galayaan oo ku jiri doonaan xoog 30 maalmood ka dib marka uu ansixiyo Duqa Magaalada, laakiin haddii aan la ansixin oo aan dib loogu soo celin Duqa Magaalada toban maalmood gudahood ka dib marka la soo bandhigo, waxay dhaqan galaysaa sida ku cad Qaybaha Xeerka Degmada Seattle 1.04.020 iyo 1.04.070. Qaybaha xeerkan ee ku xiran ansixinta codbixiyeyaasha ee warqadda codbixinta la sheegay waxay dhaqan galayaan si waafaqsan sharciga khuseeya.

# Qorshe codeyn! Samayso.

**Bisha(Billaha):** *Julaay & Agoosto*

**Hadafka(Hadafyada):** *Codeeyo oo aan codkayga ka dhigo in la maqlo!*

**Xasuusin:** *Maalinta Doorashada waa Agoosto 5, 2025*

Codbixiyeyaasha Degmada King ayaa si toos ah boostada ugu hela warqadahooda codbixinta ku dhawwaad laba asbuuc ka hor Maalinta Doorashada! Waxaan kugula talinaynaa inaad wakhtigaas u isticmaasho inaad baaritaan ugu samayso musharaxiinta iyo arrimaha, oo aad u samaysato Qorshe Codeyn.

## Qorshahayga Codeynta Doorashada Hordhaca ee Agoosto!

*Goorma ayaad calaamadayn doonta warqaddaada codbixinta? Dooro taariikh!*

*Dadka qaarkood waxay ka codeeyaan miiska jikada, qaar kalena kafateeriyaha xaafadda. Halkee ayaad ka codeyn doontaa?*


Halkan ku sawir


Halkan ku qor

*Halkee ayaad ka heli doontaa macluumaadka kaa caawin doona inaad samayso doorashadaada? Tusaalooyinka waxaa ka mid ah wararka deegaankaaga, xisbiyada siyaasadeed ee deegaankaaga, iyo Ururka Codbixiyeyaasha ee Haweenka.*

*Warqaddaada codbixinta ma ku soo celin doontaa boostada, mise waxaad isticmaali doontaa sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta?*


Goobaabi Mid








* Haddii aad qorshaynayso inaad isticmaasho boostada, waxaan si heer sare kugula talineynaa inaad warqaddaada codbixinta boostada ku soo dirto ugu dambeyn Jimcaha ka horeeya Maalinta Doorashada.





*Haddii aad isticmaalayso sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta, sanduuqa lagu rido midkee ayaad isticmaali doontaa?*

Booqo **kce.wiki/DropBox** si aad u aragto khariiradda dhammaan goobaha oo dhan.





*Waxaad codeyn kartaa adigoo isticmaalaya qalin qori, qalin, ama qalinka kalarka! Ma leedahay qalin aad ugu jeceshahay oo aad ku codeyn doonto?*

**Ma fikiraysaa in Qorshahaaga Codeynta uu si gaar ah u wanaagsan yahay? Nagu taag-garee qoraalladaada baraha bulshada @kcelections**

# Runtu waa muhiim




**Inta u dhexeysa dooda xisbinimo ee halka dhinac raacsan iyo xogta khaldan, mararka qaarkood dariiqa loo maro runta ayaa noqon kara mid aan caddeyn. Waxaad halkan ka heli kartaa qaar ka mid ah talooyinka loo maro sidii aad u heli lahayd xaqiiqooyinka:**




## Su’aal xogta.

Haddii aad oonleenka ku aragto wax jahawareer ah ama aad ka maqasho saaxiib, xubin ka mid ah qoyskaaga, ama qof wax isla wadaagtaan, daqiiqad qaado si aad u ogaato halka macluumaadka uu ka yimid. Ogaanshaha in xogta la yaqaano oo la aaminni karo waxay kaa caawini kartaa inaad ogaato in xogtu run tahay iyo in kale.




## Si maskax leh uga fikir.

Waxay noqon kartaa mid waxtar leh (gaar ahaan marka aad shay si xooggan dareen ugu hayso) inaan daqiiqad qaadano oo aan ku dabaqno xiisaha xaaladda. Is celi si aad uga fiirsato dhowr su’aalood oo fudud: Yaa soo gudbinaaya macluumaadkan? Waa maxay sababtu? Goorma ayaa markeedii ugu horeysay la daabacay? Maxaa kale oo iga caawini kara inaan ogaado?



## Raadso fikrado kala duwan.

Raadinta macluumaadka laga helo ilo leh aragtiyo iyo asallo kala duwan waxay ka caawin kartaa inaad hesho waddada ugu cad ee loo maro macluumaadka runta ah.




## Anaga na weydii!

Shaqaalaha Doorashooyinka Degmada King waxay u heellan yihiin inay adiga iyo codbixiye kasta siiyaan doorashooyin sax ah, la heli karo, oo daah furan. Si wadajir ahaan ah, waxaan u leenahay khibrad boqolaal sanno ah. Naga soo wac taleefanka 206-296-VOTE (8683) ama iimeel noogu soo dir halka **elections@kingcounty.gov**.

Abdullahi, Bedria 47
Abdullah, Saudia 36
Alberson, James 45
Alvarado, Emily 19
Armstrong, Ry 50
Backus, Nancy 30
Baker, Travis 86
Balducci, Claudia 21
Barbon, Marie 34
Belvin, Laura 88
Bernhardt Nielsen, Gina 63
Bliss, Clinton 52
Boosman, Cameron 33
Brown, Pahaliyah 28
Campbell, Bill 80
Chartrand, Derek 22
Chung, Chris D. 36
Chunn, Jeanie 57
Clark, Cobi 32
Clark, Sarah 77
Clymer, Mary 46
Coop, Jeff 86
Corner, Ahmad 27
Davison, Ann 54
Dhaliwal, Sehaj 73
Ducksworth, Adonis 56
Eastman, Brandon 85
Enninful, Shirley-Nita 66
Espinoza, Damarys 65
Evans, Erika 55
Evans, Logan 39
Fackler, Jamie 57
Fain, Steffanie 26
Feeny, Eric 77
Fernandez, Claudio 33
Fernandez, Gabriel 35
Ferrell, Jim 36
Fister, Zac 68
Fleming, Yuval 31
Foster, Dionne 61
Garcia, Hugo 33
Grant, Victoria 42
Gregory, Teresa 67
Grigorenko, Shura 89
Hall, Cooper 58
Harrell, Bruce 51
Hayes, Sandy R 73
Henderson, Angela 25
Hirt, Bill 21
Ho, Jane 63
Honda, Susan 36
Hosea-Mimms, Gwendolyn 45
Ingram, Amiya 20
Ivey, Jessica 33
Jacobson, Mia 62
James, Bryce 42
James, Jesse A. 58
Jensen, Laura 69
Jeyaraj, James 32
Jones, Darryl 17
Juarez, Juan 87
Kaur, Harsimran 79
Kelly, Kimberlee 75
Kemp, Ken 65
Kukhar, Daniel 88
Kukhar, Ilya 87
Kwon, Peter 27
Labosky, Landon 83
Lee, Jamie 40
Lin, Eddie 56
Lisowski, Rashell 34
Lott, Brian 31
Mallahan, Joe 50
Mann, Krysteena 63
Mann, Raman 46
McCallum, Max 63
McCarter, RoseLynne P 38
McDaniel, Paul 37
McIrvin, Ryan 25
Menchaca, Gloria Suella 79
Méndez, Sam 34
Mizrahi, Joe 80
Molloy, Joe 53
Moore, Martin A. 37
Moore, Sarah 35
Morgan, Ronnie 30
Muenchow, Holly 75
Nash, Connor 61
Nelson, Sara 62
Obras, Edwin 18
Orth, Nathan J 37
Orwall, Tina L. 16
O'Sullivan, Rory 54
Oyefeso, Tod 39
Papyan, Ara 85
Quiñones, Starre 38
Riddle, Semra 42
Rinck, Alexis Mercedes 59
Rivera, Carmen 46
Rivera, Laura Marie 81
Rivers, Don L 22
Rogers, Ray A. 60
Rouse, Nathan 55
Sanchez, Julissa 84
Sanderson, Carson 71
Sanford, Michael 47
Savage, Rachael 59
Schilling, Kevin 17
Schram, Lynda 76
Sharma, Arun 72
Sheridan, Megan 43
Shoker, Sharn 41
Simpson, Charles 85
Skeen, Jamie Jo 35
Smith, Jane 69
Smith, Kathleen 78
Song, Andy 40
Song, Vivian 82
Stirgus, Lisa M. 32
Thomas, Brianna K. 19
Tolentino, JoAnn 74
Tomas, Erica 31
Travis, Brian 71
Trout, Yolanda 30
van Gelder, Vivian 82
Van, Kim-Khanh 26
Vengadasalam, Maya 29
von Reichbauer, Pete 28
Weil, Allycea 83
Westgaard, Michael 45
West, Marianne 47
Whelan, Thaddeus 52
Whitaker, Steve 43
White, Bruce 44
White, Janis 84
Williams, Laura 70
Williamson, Rebecca 23
Willoughby, Isaiah 51
Wilsie-Kendall, Carolyn 67
Wilson, John 20
Wilson, Katie 53
Zahilay, Girmay 23

King County
Department of Elections
919 SW Grady Way, Ste 100
Renton, WA 98057-2906

OFFICIAL ELECTION MAIL
Authorized by the U.S. Postal Service

NON PROFIT ORG
US POSTAGE
PAID
SEATTLE, WA
PERMIT NO 1455

Dhammaan codbixiyeyaasha ku nool halka:

# Daabacaadda 1aad

**Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo ah qaab kale.**

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.

Nala soo xiriir si aad u hesho agabkaaga codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.

206-296-VOTE(8683) | elections@kingcounty.gov | kingcounty.gov/elections